# SHIR SANADEEDKA
## GARSOORKA SOOMAALIYA
المؤتمر السنوي للسلطة القضائية
## ANNUAL JUDICIARY CONFERENCE

# CILMI-BAARISYADA SHIRKA GARSOORKA
# 2024

**KAALINTA GARSOORKA EE MAAMUL WANAAGGA IYO LA-DAGAALANKA MUSUQMAASUQA**

THE ROLE OF THE JUDICIARY IN GOOD GOVERNANCE AND ANTI-CORRUPTION

# TUSMAHA GUUD


**HORDHAC:** . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . **3**

**XOGTA CILMI-BAAREYAASHA OO KOOBAN:** . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . **4**

**KAALINTA GARSOORKA EE DAWLAD-WANAAGGA.** . . . . . . . . . . . . . . . . . **7**

Garsoore Maxamed Cumar Axmed . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . .7

**KAALINTA GARSOORKA EE ILAALINTA HANTIDA GUUD** . . . . . . . . . . . **27**

Dr Ahmed Ali M. Khayre, PhD. . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . .27

**ILAALINTA MADAXBANAANIDA HAY'ADAHA GARSOORKA** . . . . . . . . . **60**

Qore:- Dr. Xuseen Cabdi Cilmi. . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . .60

**U-SINAANTA IYO DAAHFURNAANTA QAADASHADA SHAQAALAHA RAYIDKA EE DOWLADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA** . . . . . . . . . . . . **98**

Avv. Arafat Ali Mohamed . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . .98

**HANNAANKA BAARISTA DENBIYAD MAALIYADEED (FINANCIAL CRIMES INVESTIGATION)** . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . **148**

GARSORE: CALI SH.AADAN YUSUF (CALI SOMALI). . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 148

## HORDHAC:

Shirka Garsoorka waa shir sannadle ah oo la qabto sannad kasta marka uu dhammaado si waafaqsan Qodobka 30aad ee Xeerka Nidaamka Garsoorka ee 1962. Shirka waxaa ka soo qayb-gala dhamaan bahda garsoorka Soomaaliyeed heer federaal iyo heer dowlad goboleed, waxaana lagu gorfeeyaa xaaladaha garsoorka dalka. Shirka waxaa lagu soo bandhigaa shaqada sannadkaas la qabtay, guulaha la gaaray, caqabadaha hortaagan arrimaha garsoorka dalka iyo talo ku wajahan sida loo xalin lahaa.

Sidoo kale, shirka waxaa lagu soo bandhigaa cilmibaarisyo lagu falanqeeyo doodaha sharci ee taagan iyo hadba caqabada haysta garsoorka iyo sidii loo xalin lahaa. Buuggan hortiinna yaalla waxaa lagu soo bandhigayaa cilmibaarisyo dhowr ah oo ka farcamay hal-kudhigga shirka oo ah “Kaalinta Garsoorka ee Maamul Wanaagga iyo La-dagaallanka Musuqmaasuqa". Cilmibaarisyada lagu soo bandhigayo shirka garsoorka sannadkan waxa ay ka kooban yihiin shan cilmi-baaris oo lafaguraya arrimo muhiim ah oo ay ka mid yihiin:

- Kaalinmta Garsoorka ee Dowlada Wanaagga.
- Kaalinta Garsoorka ee Ilaainta Hantida Guud.
- Ilaalinta Madax-bannaanida Hay'adaha Garsoorka.
- U-sinaanta iyo Daah-furnaanta Qaadashada Shaqalada Dowladda.
- Baarista Dembiyada Maaliyadda.

Waxaan rajaynaynaa in soo jeedinta cimli-baarisyadan muhiimka ah, doodaha ay abuurayaan iyo talooyinka ay soo jeedinayaan ay horseedaan xal u helidda caqabadaha la tilmaamay, dhaliyaanna hormar uu garsoorka Soomaaliyeed ku tallaabsado.

**DR.ABUBAKAR AXMED CALI {GAZAALI}**
Gudoomiye Guddi Q/Shirka Garsoorka

## XOGTA CILMI-BAAREYAASHA OO KOOBAN:



### Maxamed Cumar Axmed:

Garsoore Maxkamadda Sare ee Soomaaliya 2018- illaa hadda.

Wuxuu muddo 10 sano ahaa bare sare, oo ka dhiga maaddooyinka sharciga Jaamacadaha dalka qaarkood.

Xubin ka tirsan Golaha Sare ee Garsoorka Puntland (2016-2018).



### Dr.Axmed Cali M. Khayre

waxa uu shahaadada PhD ee qaanuunka ka qaatay Kulliyadda Qaanuunka ee Birkbeck College ee University of London. Shahaadada MA ee qawaaniinta Eupoe iyo kuwa caalamiga ah ayuu ka haystaa Utrecht University ee dalka Netherlands. Kulliyadda Waxbarashada Lafoole ee Jaamacadda Umadda Soomaaliyeed ayuu ka qaatay shahaadada koowaad. Dr Axmed Khayre waa la-taliye sare ee Machadka Tababbarka Garsoorka. Waxa uu ka soo shaqeeyey dalka gudihiisa iyo bibadda, isaga oo la shaqeeyey ururro aan dowli ahayn, urur goboleedyo iyo kuwo caalami ah iyo hay'ado dowladeed. Sidoo kale, Dr Ahmed Khayre waxa uu wax ka dhigay jaamacado dalka guduhiisa iyo dibaddiisa. Cilmibaarisyada Dr Khayre waxaa lagu daabacay joornaallo cilmiyeed oo ay soo saaraan jaamacado ay ka mid yihiin Edingbrough iyo Amsterdam.

**Email**: ahmedkhayre@jti.gov.so, **Tel**: +25612496603



## Dr. Xuseen Cilmi

waa khabiir dhanka dastuurka, lehna khibrad 20 sano ka badan gaar ahaan Qaanuunka Dastuurka oo uu ka heysto darajada PhD.

Waa lataliye sare ee dhanka dastuurka, sharciga maamulka, sharciga xuquuqul insaanka, garsoorka, xeer dhaqameedka. Inta badan khibraddiisu waxay la xiriirtaa horumarinta hay'adaha dawladda.

Dr. Xuseen wuxuu PhD ka haystaa Qaaanuuka Dastuurka iyo Nidaamyada Siyaasadda, Waxa uu soo noqday Wasiir ku xigeenka Wasaaradda Arrimaha Dastuurka XFS 2017 -2021. Waxa uu noqday xubin ka tirsan Golaha Shacbka BFS 2009-2011 iyo 2016-2021, Waa bare daraasaadka sare ee Jaamacadda Benaadir iyo Jaamacadda Caalamiga ah ee Afrika ee Khartuum, Sudan.

Waa Cilmi-baare ka tirsan Xarunta Cilmi-baarista iyo Daraasaadka Siyaasadda Carabta Doxa Qadar, Waa La-taliye sare ee dhanka sharciga iyo Cilmi-baarista lana soo shaqeyay hay'ado Dowli ah iyo Shirkado Caalami ah, sidoo kale waa qoraa leh dhowr buug oo daabacan lagna heli karo maktabadaha.

**Tel**: +252615795111

**Email**- dr.husseinelmi@gmail.com



## Arafat Ali Mohamed

waa xubin Ururka Qareennada Soomaaliyeed, sidoo kale xubin ka ah Ururka Macallimiinta Soomaaliyeed. Kuxigeen hore ee Xoghayaha Guud ee Golaha Shacabka BJFS. Wax ka qora arrimaha dastuurka, federaalka, garsoorka iyo cadaaladda. qoraa sharci, bare sharci iyo lataliye sharci. Guddoomiye kuxigeenka Xarunta Cilmi ee Adeegyada Sharciga iyo Ganacsiga.

**Cinwaannada xiriirka: tel**: +252626440411.

**Email**: arafat.a.m@outlook.com. website: www.arafaatonline.com



## CALISH.ADAMYUSUF"CaliSomali"

is a legal searcher and professional lawyer, LLM in public law at Africa International University, LLB in law at Mogadishu University, legal professional Certificate at MLCC. He has worked in the legal field as an advocate, Trainer, drafter, Legal Advisor and Judge with both international and government institutions.

He has authored and published number of books, including "The conflict of power and law in Somalia" legal: Mogadishu (V. I), 2018"; and published a number of papers on Somali legal studies among them are; series program on "Somalia's Laws: An inside Look 2016- Mogadishu center for research and studies" He is a member of several research institutions.

1

# KAALINTA GARSOORKA EE DAWLAD-WANAAGGA

Garsoore Maxamed Cumar Axmed

# TUSMO


**NUXURKA DIRAASADDA (ABSTRACT)** . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . **9**

**HORDHACA** . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . **10**

**1. . . QEEXITAANKA DAWLAD-WANAAGGA IYO HALBEEGYADIISA:** . . . **12**

**2. . . HALBEEGYADA DAWLAD WANAAGGA** . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . **13**

**3. . . CAQABADAHA HOR TAAGAN DAWLAD WANAAGGA** . . . . . . . . . . **15**

**4. . . SHURUUCDA LA XIRIIRA DAWLAD WANAAGGA EE SOOMAALIYA** . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . **16**

4.1.Shareecada Islaamka: . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . .16

4.2.Dastuurka . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . .16

4.3.Heshiisyada Caalamiga . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . .17

**5. KAALINTA HAY'DAHA GARSOORKA EE DAWLAD WANAAGGA** . . . . **18**

5.1.QAADISTA IYO XUKUMIDDA DACWADAHA DASTUURIGA . . . . . . . . . . . . . .19

QAADISTA IYO XUKUMIDDA DACWADAHA MAAMULKA . . . . . . . . . . . . . . . . .19

5.3.DACWADAHA CIQAABTA. . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . .21

5.4.QAADISTA IYO XUKUMIDDA DACWADAHA MADANIGA . . . . . . . . . . . . . . . 24

**6. . . GABAGABO IYO TALOOYIN** . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . **24**

## NUXURKA DIRAASADDA (ABSTRACT)

Cilmi-baaristan waxay ay ka duulaysaa in aysan Soomaaliya hore uga hana qaadin dhaqan dawlad wanaag, oo sal adag leh, waxa ayna ka gaabisay astaamaha aasaaska u ah ku dhaqanka dawlad wanaagga, taas oo aafaysay dhammaan qaybaha kala duwan ee hay'adaha Dawladda si isdaba joog ah ayaa Hay'adaha qiimeeya hufnaanta ay ugu aqoosanayeen dal kaalinta 1aad kaga jira dhanka musuqa.

Ujeeddada diraasaddan ayaa ah in ay ifiso kaalinta uu Garsoorku ka qaadan karo in la helo dawlad wanaag. Si taas loo gaaro diraasaddu waxay dib ugu noqotay cilmi baarisyada laga sameeyay mawduucan caalamka iyo dalkaba, waxay kale oo diraasaddu u noqotay kaalinta Garsoorka iyo Dacwadaha kala duwan ee lagu dagaallamayo musuqa. Si taas loo gaaro diraasaddu waxay u qaybsantaa shan qaybood, oo kala ah: qeexidda Dawalad wanaagga, astaameheeda, caqabadaha hor taagan, sharciyada saldhigga u ah, halka qaybta ugu danbaysa ay falanqaynayso kaalinta Hay'adda Garsoorka ee xaqiijinta Dawladwanaagga iyo ka hortagga musuqa.

Cilmi baaristu waxay ku doodaysaa in kaalinta hoose ee Soomaaliya kaga jirto xakamaaynta musuqa, deganaansho la'aanto siyaasadeed, iyo dhaqan siyaasadeed dalka ee ku dhisan ku danaysiga hay'adaha dowladda waxa ay markhaati u yihiin in aan ku jirno xaalad ku suntan dawalad xumo, balse ay jiraan dadaallo dawladdu u gashay sanadihii ugu dambeeyay hir galinta dawlad-wanaagga iyo la daalanka musuqa.

Gunaanadka diraasaddu waxay soo jeedisay talooyin ay saldhig u tahay in la xoojiyo madax bannaanida hay'adaha Garsoorka, lana dhiso hay'addii arrinkaas xaqiijin lahayd oo ah Golaha Adeegga Garsoorka.

**Ereyo furayaal ah**: **Dawlad-wanaag, Musuq, Garsoorka**

## HORDHACA

Soomaaliya hore ugama hana qaadin dhaqan dawlad wanaag, oo sal adag leh, haddana waxa ay aad uga liidataa oo ay ka gaabisay astaamaha aasaaska u ah ku dhaqanka dawlad wanaagga, kuwaas oo kala ah, ku dhaqanka sharciga, waxtarka dawladda, xasiloonida siyaasadda, buuxinta kaalinta bulshada, isla xisaabtanka, hufnaanta, iyo xakamaynta musuqmaasuqa. Marka loo eego xaaladda siyaasadeed, wada shaqaynta foolaadka (haldor) siyaasadda ayaa mar walba burbura oo dawladda federaalka Soomaaliya iyo dawladaha xubnaha ka ah fadderaalka ayaa khilaafoodu cirka isku sii shareeraa[1].

Dawlad xumada astaameheeda sare lagu sheegay waxa ay aafaysay dhammaan qaybaha kala duwan ee hay'adaheeda, si isdaba joog ah ayaa Hay'adda Transparency International ay ilaa sanadii 2006 ugu aqoonsanaysay dal kaalinta 1aad kaga jira dhanka musuqa. Bankiga adduunka ayaa asna warbixinta masuuliyadda gaancsiga ee 2019 uu ku qiimeeyay 190 dal dhanka masuuliyadda ganacsiga waxay Soomaaliya noqotay dalka ugu liita fududaynta masuuliyadda ganacsiga, meelaha ugu daran ee musuqu halakeeyay waxaa ka mida ; siyaasadda ,maaliyadda, Garsoorka, laamaha amniga , ciidamada , socdaalka, bixinta dhulka ,bixinta adeegyada, shaqaalaysiinta shaqaalaha dowladda, deeqaha caalamiga ah, canshuurah , bixinta qandaraasyada iyo heshiisyada la xiriira khayraadka dabiiciga.3 arrimaha muhiimmadda gaarka ah iyo hortabinta inoo leh waa in nolosha iyo badqabka muwaadiniinta Soomaaliyeed oo dhan kor looga soo qaado meeshii ay joogtay sannadihii ku suntanaa dibu dhaca iyo rajo beelka. Maxaa yeelay boqolkiiba 80 muwaadiniinta Soomaaliya waxa ay ku nool yihiin ama ka hooseeyaan marxaladda saboolnimada. Arrinta muhiimadda ugu weyn lihi waa in dalku leeyahay xeebta ugu dheer Afrika, xoolo tiro badan, dhul beereed, kuwaas oo haddii dalku helo maamulkiisa saxda ah, uu si fudud haqabbeel u gaadhsiin karo Geeska Afrika. Shaqo la'aanta dhallinyaradu waxa ay hadda maraysaa 67%.

Waxbarashada aasaasiga ahi waxa ay noqotay mid gaar loo yeeshay oo si weyn looga beec-mushtaro, taas oo sababtay in aanay saddex milyan oo

1 - https://8v90f1.p3cdn1.secureserver.net/wp-content/uploads/2021/03/Caqabadaha-hortaagan.pdf

carruur ahi dugsiyada dhiganin[2]. Horumarka dawlad wanaaggu waa mid daciif ah, hab-dhaqanka siyaasadduna waa hardan iyo xifaaltan. Dadka caadiga ahi lama ay jaanqaadin faa'iidooyinka dawladnimada curdan ka ah, taas oo muwaadiniinta gayeysiiyey in ay siyaasadda nacaan, kaliya lama ay colloobin ka hadalkeeda, balse waxa ay ka quusteen dalbashada qodobbo wax ku ool ah oo ku salaysan dawlad wanaagga. Waxaa intaa dheer, siyaasiyiinta Soomaaliya ma raadsadaan wax la isku waafaqsan yahay, bulshadana kuma dhiirrigeliyaan ka qaybgalka siyaasadda[3].

Musuqa baahsan ee ka jira dalka waa khatarta ugu wayn ee xasiloonida, caddaaladda iyo horumarka dalka, wuxuuna leeyahay khatar wayn oo dhaqaale, bulsho iyo siyaasadeed.

Sababta ugu way ee loo aaneeyo musuqa baahsan ee dalka ka jira waxaa lagu tilmaamaa dhaqan siyaasadeedka gaamuray oo ku dhisan "ka macaashka siyaasadda" iyadoo dadka masuuliyadda hayaa ula dhaqmaan dowladnimada hab la kiraysto oo xafiisyada dowladda loogu shaqeeyo dano gaara iyo ka taajirid xaaraan ah , ama loo fahmo xafiiska dowladda inuu yahay meel si shakhsi ah looga hodmo.

Waxaa xusid mudan inay jiraan dadaallo Soomaaliya u gashay sanadihii ugu dambeeyay hirgalinta dawlad-wanaagga iyo la daalanka musuqa ,iyada oo wax badan laga qabtay nidaamka maamulka maaliyadda , ayna jiraan sharciyo soo baxay oo lagu xoojinayo dawlad-wanaagga sida xeerka la dagaalanka lacag dhaqidda iyo maalgelinta argagixisad oo la ansixiyay sanadii 2016, abuurdidda Guddiga Qaranka ee La-dagaallanka lacag Dhaqidda iyo hay'adda ama xarunta warbixinta maaliyadda, ansixinta sharciyada la dagaallanka musuqa ee Qarammada midoobay ((UNAC), kan Jaamacadda Carabta, iyo kan Afrika[4].

Dowladda Federaalku Soomaaliya ayaa sidoo kale bilowday in ay beegsato dembiilayaasha musuqa, si loo xakameeyo waxyeellada uu ku hayo dalka, labdii xilli dawladeed ee ugu danbaysay waxaa jira shaqsiyaad badan oo loo xiray musuqa waxaa ka mid ah saraakiil ka tirsan wasaaradaha Arrimaha

---

2 - Ibid (=in the same source)

3 Ibid

4 - Saalim Saciid Saalim, KAALINTA GARSOORKA EE LA DAGAALANKA MUSUQMAASUQA, cilmi baaris lagu soo bandhigay Shirka sannadeedka Garsoorka 2020-kii.

Bani-Aadamnimada iyo Maareynta Musiibooyinka, Maaliyadda, qaar ka mid ah howl wadeenada dekedda,iyo Airportka . dadaalladaas ka dhanka ahaa waxaa ka mid ahaa in Ra'iisul-Wasaarahii xukuumaddii hore uu shaqada ka joojiyo Wasiir ku-Xigeenka arrimaha dibadda iyadoo laga jawaabaayo eeydeemo musuq oo isaga ka dhan ahaa[5].Masuuliyiinta qaarna la qabtay oo la Maxkamadeeyay qaarna ayaga oo maqan Maxkamaddooda la qaaday, waxaa dadwaynaha Soomaaliyeed ula socdeen Maxkamadayntooda si toos ah xilliga ay dhacayso taas oo abuurtay dareen iyo baraarug, sidoo kale kor u qaadday ku kal soonida Garsoorka.

Ujeeddada diraasaddan ayaa ah in ay ifiso kaalinta uu Garsoorku ka qaadan karo in la helo dawlad wanaag. Si taas loo gaaro diraasaddu waxay u qaybsantaa shan qaybood, tan koowaad waxay qeexaysaa Dawalad wanaagga, qaybta labaad waxay ifinaysaa astaamaha lagu garan karo dawlad-wanaagga, halka qaybta saddexaad ay diiradda saarayso caqabadaha hor taagan Dawlad-wanaagga, qaybta Afaraad waxay taabanaysaa sharciyada saldhigga u ah Dawlad-wanaagga, ayadoo qaybta shanaad ay falanqayn ku samaynayso kaalinta Hay'adda Garsoorka ee xaqiijinta Dawladwanaagga iyo ka hortagga musuqa. Diraasaddu waxay ku soo gunaanadaysaa gaba gabo iyo talooyin.

## 1. QEEXITAANKA DAWLAD-WANAAGGA IYO HALBEEGYADIISA:

“Dawlad wanaag” ayaa ah afebnad naahayreb مصطلح ) mreT) darag-.addasaayis awuk oyi agimlic ahsaayaraagaf yahdrok ugu daa asiigisgeeda

Dawlad wanaagga waxaa saldhig u ah ilaalinta xuquuqda aadanaha aasaasiga ah. Taasna waxaa lagu xaqiijin karaa in la helo Garsoor leh tayo . Dawladdu waa hay'adda qaadanaysa go'aammada, fulinaysa siyaasadda si loo hormariyo bulshadaas dhan walbaba. Maanta su'aasha ugu wayn waxay ka taagan tahay, kaalinta uu ku yeelan karo Garsoorku gaaritaanka “Dawalad-wanaag” iyo ka furdaaminta musuqa iyo dawlad xumada[6].

---

5 - https://www.linkedin.com/pulse/la-dagaalanka-musuqmaasuqa-soomaliya-wajahaad-abdideck-ibrahim/

6 - Hyder, M., & Iraqi, K. THE ROLE OF JUDICIARY IN GOOD GOVERNANCE. Sattar, B. (2012). The Role of Judiciary in Good Governance. In International judicial conference.

Marka laga hadlayo Maamulka dowladda (Public Sector), Bangiga Adduunku 'dawlad wanaagga' waxa uu ku qeexay " caadooyinka hay'adaha ee lagu maamulo awoodda guud ee waddanka." Marka lagu saleeyo qeexitaankan, kobaca iyo horumarka dhaqaale ee ay ku tallaabsadaan xarumaha gaarka loo leeyahay laguma fasiro in ay ka mid yihiin tilmaameyaasha dawlad wanaagga. Muhiimadduna waxa ay daaran tahay hufnaanta hay'adaha dawladdu in ay ku bixiyaan adeegyo muwaadiniintu u siman yihiin iyo ku baahinta gobollada. Dawlad xumada Soomaaliya ka jirtaa waxa ay ka timid waxqabad la'aanta hay'adaha dowladda. Falanqeyn ahaan, Barnaamijka Horumarinta ee Qaramada Midoobay (UNDP), waxa uu dawlad wanaagga ku sifaynayaa nidaam kor loogu qaadaya arrimahan soo socda: "dhiirrigelinta shaqaalaha, tababarka shaqaalaha rayidka ah, maamul daadajinta iyo baahinta maaliyadda iyo waliba wadahadal ka dhaxeeya dowladda iyo bulshada rayidka ah."

Xiriirka ka dhexeeya Dawlad-wanaagga iyo horumarka dhaqaale ayaa ah mid aan caad saarnayn, xoghayahii Qaramada Midoobay ee Koof Anan, ayaa yiri sidan: "dawlad wanaaggu waa lafdhabarta dabargoynta saboolnimada iyo kor u qaadista horumarka,"[7] muhiimaddu se waa in uu dhaqanka dawlad wanaaggu ka yimaaddo bulshada gudaheeda, oo uu noqdo yool qaran. Marka loo eego dhinacyada dhaqaalaha iyo siyaasadda, Soomaaliya ma laha rabitaan gudaheeda ka yimaadda oo bulsho iyo siyaasad dawladeed oo qaabaysan. Dhanacyada siyaasadda iyo dhaqaalaha, Soomaaliya waxa ka maqan siyaasad jaangoysa dawlad wanaagga ka yimaadda bulshada dhexdeeda. Arrintani waxa ay xannibtay jiritaanka hay'ado leh maamuldaadajin dadweyne oo shaqaynayaa[8].

## 2. HALBEEGYADA DAWLAD WANAAGGA

Bankiga Adduunka waxa uu ku qeexay halbeegyada lagu cabbiro Dawlad-wanaagga (Good Governance) lix qodob oo kala ah: (1) Talinta Sharciga, oo loola jeedo in sharcigu ka sarreeyo (2) Xakamaynta Musuqa, (3) Isla xisaabtan iyo cod dheer, (4) Xasillooni Siyaasadeed, (5) Hawl karnimada

7 - fle:///C:/Users/Envy14/Downloads/SPAS_7_43.pdf

8 - https://8v90f1.p3cdn1.secureserver.net/wp-content/uploads/2021/03/Caqabadaha-hortaagan.pdf

dawladda, (6) tayada sharciyada iyo nidaaminta.[9].

Hay'adda Qarammada Midoobay u qaabilsan ilaalinta Xuquuqda Aadanaha ayaa ku qeexday tilmaamayaasha Maamul wanaagga: Daah-furnaan, xilkasnimo, isla xisaabtan, ka qayb galka baahsan, iyo u heellanaanta ka jawaabidda baahiyaha bulshada[10].

Sida ku timi tusaha Bangiga Adduunka (World Bank's indices) sarraynta sharciga iyo ku dhaqankiisa qodobbadiisa waxaa ka mid ah cadaaladnimada tallaabooyinka Garsoorka, madax banaanida Garsoorka, dhex dhexaadnimada nidaamka caddaaladeed, fulinta go'aammada, iyo deg degga nidaamka Maxkamadaynta[11].

Halbeegyadaas dhammaantood Soomaaliya way ku hoosaysaa, gaar ahaan qodobka ugu horreeya uguna muhiimsan oo ah talinta sharciga.

Diraasadda aan Sare ku tilmaannay ee ay soo saartay Xarunta Heritage ayaa tilmaantay in saamilayda siyaasadeed aysan ku kala bixin sharci, heer kasta oo ay yihiin, sidoo kale jirin marjic ay isula noqdaan Marka ay is khilaafaan. Taas baddalkeeda ay xeer jajab iyo xoog adeegsadaan, ayada oo waddanku wali uusan lahayn Maxkamad Dastuuri ah oo ay murannada ula noqdaan. Dadkii ay diraasaddaasi waraysatay ayaa ku tilmaamay habdhaqanka daneeyeyaasha siyaasadeed in ay la mid yihiin :"dugaag is ugaarsanaysa oo xero la isugu ooday." Si kale haddii loo eego waa mid aan xuduud lahayn, iyaga oo uu dhaqma sidii in uu sharcigu ka hooseeyo. Hay'adaha Dawladeed ee hadda jira ayaa ah kuwo nugul oo aan awood u lahayn in ay xakameeyaan dhibaatooyinka awood maroorsiga. Kolka sharcigu shaqaynayo haddii waax dawladda ahi ay hawlgabto ama dhibaato ku dhacdo, hay'adaha kale ee dawladdu ayaa ka howl gala sidii ay u shaqayn lahayd, sharcigana ugu hoggaansami lahayd si loo xalliyo khilaafaadka.

Marka sharcigu shaqaynayo muwaadinku waxa uu ka nabad gala awood sheegasho shakhsiyeed, ku takri falkaas oo hadda Soomaaliya aad uga

---

9 - Kim, J. (2007). The Judiciary's Role in Good Governance in Korea. Policy and Society, 26(2), 15-32.

10 https://www.ohchr.org/en/good-governance/about-good-governance (accessed on 23 December 2023)

11 - - https://8v90f1.p3cdn1.secureserver.net/wp-content/uploads/2021/03/Caqabadaha-hortaagan.pdf

jira. Intii dib loo yagleelay hay'adaha Dawladda waxaan oran karnaa saammilayda siyaasaddu horumar kooban ayey ka sameeyeen in dalka laga soo hayaamiyo nidaamkii sharci maroorsiga ahaa ee burburka ka horreeyay si loo dhaqangaliyo dastuurka ku meelgaarka ah. Tixgalin la'aanta ku shaqanka sharcigu, waxa ay muujineysa in siyaasiyiinta iyo saraakiisha dowladda ee heerarka kala duwani, ay inta badan raadiyaan, "dhaqaale ay dhaafsadaan sharciga. Haddii ay dabaqadda siyaasaddu jabiso ku dhaqanka sharciga, dadweynuhu waxa ay raadsanayaan meel ay caddaalad ka helaan oo aan rasmi ahayn[12].

## 3. CAQABADAHA HOR TAAGAN DAWLAD WANAAGGA

Diraasadda ay samaysay xarunta Cilmi-baarista Heritage ee ku suntan :" Caqabadaha hor taagan Dawlad-wanaagga Soomaaliya" ee la soo saaray bishii Maarso, 2021, waxa ay ku sheegtay in ay yihiin caqabadahaasi: 1- Tixgalin la'aanta ku dhaqanka sharciga, 2- Xasillooni darrada siyaasadda, 3- Isla xisaabtan la'aanta, 4- Hufnaan yaraanta, 5- Musuqa Baahsan, 6- Waxtar yarida Dowladda.

Caqabadaha Sare lagu soo sheegay ee halista ku ah Dawlad-wanaagga Soomaaliya, waxaa ugu khatarsan xasillooni darrida amni iyo tan siyaasadeed, waayo, xasilloonida waxaa loo aqoonsaday in ay tahay hooyada dhasha dhammaan tilmaamayaasha dawlad wanaagga, halka xasilooni darrada dawladnimada loo arko," in ay keenaan rabshadahu".

Tuseyaasha dawlad-xumada, waxa ka mid ah dilalka siyaasadaysan, xarigga, dhibaateynta dadka ka soo horjeeda ama loo arko in ay mucaarad ku yihiin xukuumadda iyo awood maroorsiga, dhammaantoodna waxa sababa xasilooni darrada siyaasadda. Si kale haddii loo dhigo, heerka nabadgalyada, awoodda dowladda iyo tayada hay'adahu waxa ay ku tiirsan yihiin dal kastaaba heerka uu ka joogo xasiloonida siyaasadda.

Soomaaliya gudaheeda, xasilooni darrada siyaasaddu waxa ay ku soohan tahay qaab dhismeedka dowladnimo ee daciifa ah. Jiritaan la'aanta 'tiirarka kala dambaynta" Meesha aanu ka jirin nidaam siyaasadeed oo kala danbayn lihi, ku tagrifalka adeegsiga sharciga dawladda qiil baa loo helayaa. Si kooban, xasilooni darrada siyaasadeed iyo hoos u dhaca ku

12 - https://8v90f1.p3cdn1.secureserver.net/wp-content/uploads/2021/03/Caqabadaha-hortaagan.pdf

yimid kalsoonida ka dhexeysa daneeyayaasha siyaasadda Soomaaliya.

Haddii la doonayo in la horumariyo dowlad-wanaagga, xasiloonida siyaasadeed iyo ku dhaqanka sharciga, "waa in si wadajir ah loo kobciyaa.' Taasi waxa ay awood siineysaa bulshada rayidka ah iyo muwaadiniinta ay khuseyso si ay u sii saadaaliyaan fcillada iyo hab-dhaqanka saamilayda siyaasadda. Haddii si kale loo dhigo, dariiqyada anshaxa iyo sharciyada dajisan, si dhakhso ah ayaa loo aqoonsadaa, waxaana la helaa qaabab sharciyeed oo lagu xalliyo khilaafaadka. Halka uusan ka jirin xukun dawladeed oo la isku hallayn karo, laguna kalsoon yahay dhibaatooyinka lama wada aqoonsan karo, maxaa yeelay xasillooni darrada siyaasadeed ayay ku soo dhex dhuumataa[13].

# 4. SHURUUCDA LA XIRIIRA DAWLAD WANAAGGA EE SOOMAALIYA

## 4.1. Shareecada Islaamka:

Shareecada Islaamku waxay xambaarsan tahay mabaadi guud, oo xoojinaya Dawlad-wanaagga sida mabda Alle ka baqa, xajinta amaanada, naxariista, caddaaladda, mabaadiidaas oo loo adeegsan karo la dagaallanka nooc kasta oo musuq ah. Xilligii Nabiga NNKH waxaa jiray hawlo dawladeed oo u baahnaa maamulid sida hoggaaminta jihaadka, maamulidda magaalooyin fog, soo uruurinta Sakada iyo arrimo kale, Waxa uu Nabigu SCW si adag u diiday in shaqaalaha dawladdu ay qaataan hadyadda, waxaa dhacay in nin loo diray in uu soo uruuriyo Sakada markii uu yimi lala xisaabtamay. Kolkaas ayuu yiri :"intaan idinkaa leh, tanna aniga ayaa la ii soo hadyeeyay" Nabigu taas wuu diiday, wuxuuna yiri:" haddii aad run sheegaysid, guriga hooyada iyo aabbaha fadhiiso, aad aragtid in wax laguu soo hadyeeyo". Ka dibna inta uu khudbad jeediyey ayuu ka digay dhaqanka musuqa asaga oo yiri ninkii xoolo xaq darro ku qaata maalinta qiyaame ayuu keenin asaga oo dusha ku walwaalaya[14].

Haddana ayada oo shareecadu saldhigtay mabaadi la ifsan karo, waxay noo

13 - https://8v90f1.p3cdn1.secureserver.net/wp-content/uploads/2021/03/Caqabadaha-hortaagan.pdf

14 - Waxaa soo saaray imaam Bukhaari (6979) Muslim (1832).

dhaaftay in aan hindisi karno hannaan, & tabo lagu hir galinayo Dawlad-wanaagga, laguna baajinayo musuqa, maadaama Dawlad wanaagga iyo musuquba yihiin arrimo la jaan qaadaya is bad baddallada waayaha.

### 4.2. Dastuurka

Dastuurka Federaalka ee KMG ee la ansixiyaay 2012-kii waxaa gundhig u ah in la helo hannaan dowladnimo oo ku dhisan kala soocnaanta awoodaha dowladda[15] (speration of power) si loo helo daahfurnaan, isla xisaabtan iyo sarraynta sharciga (eeg Qod.3(4)) .. Sidoo kale dastuurku waxa uu si faahfaahsan uga hadlayaa xuquuqaha asaasiga ee muwaadinka oo ku jiraan xaqa muwaadinka u leeyahay inuu helo garmaqal maxkamadeed oo caddaalad ah (Eeg Qod.33 iyo 34), sixid ama magdhaw bedel ka ah gabood falada lidka ku ah xuquuqda aadanaha qofka (Qodobka 39aad) oo ka midyihiin dhibta muwaadinka kasoo gaari karta denbiyada musuqmaasuqa. Dastuurka wuxuu amrayaa abuurista hay'ado dhawra oo qaabilsan dabagalka maaliyadda sida xafiiska hanti dhawrka guud (Qod.114) Guddiga la dagaalanka musuqmaasuqa (Qod.111C) iyo Bankiga dhexe (Qod.123 (2))

### 4.3. Heshiisyada Caalamiga

Waxaa jira in ay Soomaaliya xubin ka tahay dhammantoodna waxay ku waajibanaya cidda qaybta ka ah in ay dadaal dhab ah u gasho xaqiijinta dawlad wanaagga taas oo fure u ah horumarka bulsho ay gaarto dhinac kastaba.

**4.3.1**. Heshiiska Qaramada midoobey ee la dagaallanka musuq maasuqa, taas oo ansixiyeen Golaha guud ee Qarammada Midoobey Newyork 31 Oct, 2003-dii, waxayna dhaqan gal noqotay 14-Dec,2005-tii, Soomaaliyana waxay saxiixday oo sharcigeeda ka mid noqday, markii uu Baarlamaanka Soomaaliya meel meel mariyey Sharci Lr.38 oo lagu magacaabo Ansixinta Sharciga Heshiiska Qaramada Midoobey ee La-Dagaallanka Musuq-maasuq oo la ansixiyey 31/12/2020-kii.

15 Kala saarnaanta hay'adaha sharci dejinta, fulinta iyo garsoorka waxaa faahfaahinaya cutubka 6 ilaa 9aad iyo cutubka 10aad ee ka hadlaya guddiyada madaxa bannaan iyo kaalintooda kor joogtayn.

Heshiiskaan waxa uu ka kooban yahay 71 qodob, iyo shan cutub oo kala ah: Hal beegyo ka hortagitaan, macluumaad, Danbiyeynta iyo Fulinta Sharciga, Iskaashiga Caalamiga ah, soo celinta hantida muuqata,, caawimaad heer sare iyo xog is-weydaarsi.

**4.3.2.** Heshiiska Carbeed ee la dagaallanka Musuq maasuqa, ee lagu gaaray Qaahira 21, Dec, 2010-kii, Soomaaliyana ay ku biirtay 2020-kii xilligaas oo Baarlamaanka Soomaaliya uu ansixiyey Heshiiska Waddammada Carabta ee la dagaallanka Musuq maasuqa, oo ah Sharci Lr.37 oo soo baxay 31/12/2020-kii.

**4.3.3.** Heshiiska Midowga Afrika ee la dagaallanka Musuq maasuqa, ee lagu gaaray Mabuuto 11, Luuliyo, 2003-dii, Soomaaliyana ay ku biirtay 2020-kii xilligaas oo Baarlamaanka Soomaaliya uu ansixiyey Heshiiska Midowga Afrika ee la dagaallanka Musuq maasuqa, oo ah Sharci Lr.36 oo soo baxay 31/12/2020-kii.

**4.4.** Shuruucda iyo hab baarista la xiriirta denbiyada Musuqa waxaa la dhihi karaa dhammaan sharciyada waddanka loo sameeyo ee ka soo baxa hay'adda Sharci dajinta yoolalkooda ugu muhiimsan waxaa ka mid ah in la xaqiijiyo maamul wanaag, ayada oo la astaynayo awoodaha, iyo xuquuqda iyo waajibaatka hadba cidda sharcigu khuseeyo, waxay sahlayaan isla xisaabtanka, waxay meesha ka saarayaan awood marooqsiga iyo tallaabo kasta oo sharciga ka soo horjeedda.

Marka baarayaasha denbiyada musuqa helaan xaqaa'iqa denbiga dhacay, waxay u baahanyihiin inay xadididaan qodobada sharci ee denbiga ku xadgudbay. Marjaca ugu muhiimsan ee xeer ilaaliyaha ama baaraha uu ugu noqdo qodobada sharci ee musuqmaasuqa xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed ee 1962 , gaar ahaan buuga labaad ee denbiyada Qaybtiisa[16].

---

16 - Saalim Saciid Saalim, KAALINTA GARSOORKA EE LA DAGAALANKA MUSUQMAASUQA, cilmi baaris lagu soo bandhigay Shirka sannadeedka Garsoorka 2020-kii.

## 5. KAALINTA HAY'DAHA GARSOORKA EE DAWLAD WANAAGGA

Garsoorku maadaama uu yahay laanta saddexaad ee Dawladda, waxaa jirta aaminaad dadwayne oo ah kol haddii uu jiro Garsoor awood leh, khaladaadka labada waaxood ee kale ay galaan (sharci dajinta & Fulinta) waxaa toosh ku ifinaya oo saxaya Garsoorka[17].

Waxaa sidoo kale jira Cilmi-baarisyo fara badan oo tilmaamaya in dawlad-wanaaggu ku leedahay kaalin muhiim ah hor marka waddanka[18].

Haddaba su'aasha is waydiinta mudan ayaa ah tabaha kala duwan ee Garsoorku ku hir galin karo Dawlad wanaagga asaga oo kabaya laamaha kale ee Dawladda. Sida la ogsoon yahay Garsoorku waxa uu ka garnaqaa Muran ku qotoma Maslaxad ama xaq uu qof waayay, dacwaddaas markii ay tahay mid la xiriirta Maslaxadda Guud ee Dawladda waxaa soo ooga Xafiiska Xeer ilaalinta, Haddii ayse tahay xaq iyo Maslaxad ruux ama koox gaar ah ay leeyihiin Sharcigu waxa uu siinayaa in ciddaasi ay leedahay xaqqa dacwadda. Ayada oo Qod. 39/4 ee Dastuurka JFS uu oggolaanayo cid kale in ay bilaabi karto dacwad danta guud xiriir la leh.

Taas macneheedu waxaa weeye Garsoorku waxa kaliya ee laga fili karaa waa in uu ka garnaqo murannada & Cabashooyinka ay horkeenaan muwaadiniinta ama Xeer ilaaliyaha Guud. Garsoorka dalku ma siin karo awaamiir, mana soo saari karo hagayaal ku socda laamaha kale ee Dawladda.  Sidaas darteed hannaanka uu Garsoorku uga qayb qaadan karo Dawlad-wanaagga ayaa ah hannaan dadban, mana aha awood bilow ah oo uu wax kaga baddali shaqo maalmeedka labada hay'adood ee kale. Taas baddalkeeda Garsoorku waxa uu sameeyaa ka daba tag, go'aammada uu soo saarana waxa ay noqdaan digniin ku socota laamaha Dawladda, haddii ay tallaabadaas qaadaan in aysan socon doonin, marna ay ku mudan karaan ciqaab ama magdhaw, amase go'aankooda oo la buriyo. Noocyada dacwadaha ee lagu xaqiijin karo Dawlad-wanaagga waxaa ka mid ah, kuwa soo socda:

---

17 - Bobai, P. A. (2022). THE ROLE OF THE JUDICIARY IN THE PROMOTION OF GOOD GOVERNANCE IN NIGERIA. Irish International Journal of Law, Political Sciences and Administration, 6(5).

18 - Kim, J. (2007). The Judiciary's Role in Good Governance in Korea. Policy and Society, 26(2), 15-32.

## 5.1. QAADISTA IYO XUKUMIDDA DACWADAHA DASTUURIGA

Maxkamadda qaabilsan dhegaysiga dacwadaha dastuuriga waa ilaaliyaha dastuurka iyaga oo hubiya in dhammaan shuruucda dalka noqdaan kuwa waafaqsan axkaamta iyo nuxurka dastuurka. Maxkamadahani waxay si aan toos ahayn uga qaybqaataan la dagaalanka musuqmasuqa iyagoo dhegaysta dacwadaha loo soo gudbiyo ee ku saabsan xeerarka aan dastuurka ahayn eee golayaasha dowladda kasoo baxa kuwaasoo looga golleeyahay in lagu fushado ama lagu fududeeyo musuqmaasuqa. Tusaale, xeeer lasoo saaray oo ay wada ansixiyeen labada gole ee dowladda kaas oo Xafiiska Hanti Dhawrka Guud ku amraya inuu hoos tago xafiiska MW, uuna warbixinada siiyo xafiiskaas , iyada oo ay jirto in dastuurku ka madax bannaynayo xafiiska hay'adda fulinta waxay maxkamadda dastuurku kasoo qaadi kartaa mid kasoo horjeeda dastuurka oo sidaas wax kama jiraan u ah.

## 5.2. WQAADISTA IYO XUKUMIDDA DACWADAHA MAAMULKA

Dacwadaha maamulka waxay kaalin mug leh ka qaataan dawlad wanaagga iyo la dagaalanka musuqa, waana habka ugu muhiimsan ee Garsoorku ku xaqiijin karo ilaalinta xuquuqaha asaasiga ah ee muwaadiniinta , ilaalinta sarraynta sharciga iyo kor joogtaynta hawlaha maamulka dowladda . Habka dacwadaha maamulka oo ay dhegaysato Maxkamadda sare qaybteeda mamulka waxay kula dagaalantaa musuqa qaabab dhawra oo ka mid yihiin:

1. Burinta go'aamada ay ka muuqato adeegsiga ku takrifal awoodeed (Abuse of power).

2. Burinta go'aamada aan sharciga waafaqsanayn (illegality) ee kasoo baxa hay'adaha fulinta ee looga golleeyahay musuqa iyo wax isdabamarin. Tusaale, magacaabis ama qorid shaqaale oo khilaafsan hannaanka sharcigu u dejiyay in loo maro qorista ama magacaabidda shaqaalaha ama bixin qandaraas oo dowladdu u martay hab khilaafsan habraacyada xeerka iibka iyo qandaraasyada. Dacwadaha Idaariga ah ee Maxkamadda Sare ka garnaqday aad ayay u badan yihiin dhowr tusaale hadii laga soo qaato waxaa waxaan la xusi karaa 5-taan tusaale:

1. Dacwad idaar Lr. MS/I/03/2021-BX, ee Tr. 02/01/2021, dacwaddaan oo ka dhexeysa 5 xubnood oo ka mid ahaa shaqaalaha Hanti-dhwaraha Guud LID Hanti-dhowraha Guud ee Qaranka, oo uu matalayo Garyaqaanka Guud ku-xigeenkiisa, xukunka Maxkamadda ayaa aqbalay cabashada isla markaana buriyey go'aanka Hanti-dhowruhu uu shaqada uga joojiyey ku xigeenkiisa 4-ta kalana kaga eryay, waxay kale oo u xukunta xuquuqda shaqaale ee kaga baaqatay go'aankaas.

2. Dacwad Idaari Ref MS/I/07/2021-BX ee soo baxat Tr. 24/08/2021 kaas oo u dhexeeyay Jaamacadda Hope oo uu wakiil u ahaa Najiib Shiikh Cabdikariim Maxamed LID Maamulka Gobolka Banaadir oo uu matalayay Xafiiska Garyaqaanka Guud. Dacwaddaan oo Maxkamaddu ay burisay Go'aankii uu soo saaray Duqa Caasimadda.
3. Dacwad idaari Lr. MS/I/28/2021-BX, ee Tr. 18/09/2021, dacwaddaan oo ka dhexeysa Dr. Amiin Maxamed Xuseen oo uu matalayo Qareen Daahir Maxamed Cali & Isxaaq C/llaahi Xasan LID Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed oo uu matalayo Garyaqaanka Guud ee Dawladda. Ayada oo Maxkamaddu xukuntay in go'aanka cabashada laga soo qaatay uusan lahayn wax ceeb sharci ah, sidaas darteed ay diidday Cabashadii Cabtaha.
4. Dacwad idaar Lr. MS/I/29/2021-BX, ee Tr. 18/09/2021, dacwaddaan oo ka dhexeysa Cabdullaahi Xuseen Aadan oo uu matalayo Qareen Isxaaq C/llaahi Xasan LID Wasaaradda Ganacsiga iyo Warshadaha XJFS oo uu matalayo Garyaqaanka Guud ee Dawladda. Ayada oo lagu baabi'iyay go'aankii wasiirka iyo wixii tallaabo ah ee ka dhashay isla markaana loogu xukumay muwaadinka wixii xuquuq shaqaale ah ee sharcigu siiyay.
5. Dacwad idaar Lr. MS/I/26/2021-BX, ee Tr. 18/09/2021, dacwaddaan oo ka dhexeysa Maxamed Xuseen Cali, Xuseen Xasan Calasow & C/Naasir Maxamed Xasan LID Xafiiska Hanti Dhawrka Guud, uuna matalayo Garyaqaanka Guud ee Dawladdu. Maxkamaddu waxay go'aamisay in goaanka cabashada laga soo qaatay ee uu gaaray Hantidhowraha Guud in uusan waafaqsanayn sharciga, waxayna baabi'say go'aankaas iyo wixii raad ah ee ka dhashay iyo in Cabtayaasha wixii xuquuq ah ee ay ku waayeen go'aanka la buriyey la siiyo.

Haddaba marka la eego dacwadaha ay gashay Maxkamadda Sare ee dalka oo Maxkamadda ikhtisaaska u leh in ay gasho dacwadaha idaariga ah, waxaa cad in inta badan la buriyay go'aammadii ka soo baxay hay'adda Fulinta ee taabanayay xuquuqda muwaadinka, taas oo ifinaysa illaa xad madaxbannaanida Hay'adda Garsoorka.

## 5.3. DACWADAHA CIQAABTA.

Marka laga hadlayo hannaanka dacwadaha denbiyada, Xeerka Nidaamka Garsoorka ee 1962[19] waxa uu siinayaa Xafiiska Xeer Ilaalinta awoodaha korjoogtaynta baaritaannada boolisku samaynayo, in uu bilaabo baaritaanka dambiyda si toos ah, ama u xilsaaro saraakiisha booliiska sharcigu u ogolyahay inay denbi baaris samayn karaan. Sidaas awgeed , baaritaanka denbiyada musuqa waxaa bilaaba booliiska kuwaas oo baarista ka dib dhaqso ugu dira galka dacwadda iyo warbixinta Xafiiska Xeer Ilaalinta (AGO) iyada oo ay la socdaan a) xusuus qorka baaritaanka b) dokumeentiyada la xiriira baaritaanka qalabka ama walxaha lagu qabtay baaritaanka[20].

Ka dib marka Xeer Iaalinta hesho warbixinada denbiyada oo ka mid yihiin kuwa la xiriira musuqa, wuxuu sida ku xusan Xeerka Habka Ciqaabta (X.H.C) uu awood u siinayaa xeer ilaaliyaha saddexda khiyaar (options) ee ku xusan Qodobka 71aad inuu mid qaato:

1. Inuu ku qanco in caddayma ku filan loo hayo denbiga, oo uu sidaa ku diyaariyo eedaynta, una gudbiyo maxkamadda awoodda u leh.

2. In aanay jirin caddaymo ku filan oo loo hayo denbiga oo uu amro xeer ilaaliyuhu baaritaan dheeraad ah.

3. In aysan jirin caddaymo ku filan in danbi la galay ama uu eedaysanaha galay jiirin ama sabab kale jirto, waxa uu ka codsan karaa xeer ilaaliyahu Maxkamadda awoodda u leh in la xiro dacwadda[21]. Go'aankan xiridda dacwadda waxaa xaqiijinaya XafiiskaXeer Ilaalinta

19 - Qodobka 8aad ee Xeerka .

20 - Eeg Qodobka 26(2) & 26 (3) (b) ee Xeerka Habka Ciqaabta Soomaaliyeed.

21 - Saalim Saciid Saalim, KAALINTA GARSOORKA EE LA DAGAALANKA MUSUQMAASUQA, cilmi baaris lagu soo bandhigay Shirka sannadeedka Garsoorka 2020-kii.

Guud si waafaqsan Xeerka Habka Ciqaabta[22]. Kiiska dib ayaa loo furi karaa hadii cadeymo cusub la helo.

Waxaa jira dacwad Ciqaabeed lagu soo oogay saraakiil Dawladeed 5-tii sano ee ugu danbaysay ayna ugu caansanaayeen:

1. Dacwadihii musuqa ee lagu eedeeyay wasaaradda Caafimaadka 2020-kii xilligii uu socday COVID-19. Qabashada Masuuliinta loo haysto musuqa ayaa bilaabatay 04-tii bisha Aprill 2020-kii, Xukunnada Maxkamadda Gobolka Banaadir ay ka soo saartay waxaa ka mid ahaa xukunka sum. Tahay MGB/DDL/148/2020 ee Tr.24/08/2020-kii, kaas oo lagu wada xukumay Afar Eedaysane oo uu ka mid ahaa Agaasimihii Guud ee Wasaaradda Caafimaadka C/llaahi Xaashi Cali[23] iyo saddex eedaysane oo kala ah Maxamuud Buulle Maxamuud[24] oo ah Agaasimihii maaliyadda ee isla Wasaaradda, Mahdi Abshir Maxamed[25], iyo Bashiir Cabdi Nuur[26]. Waxayna ku kala xukuntay sida ay qoraalkan ugu kala horreeyaan 9 sano, 18 sano, 12 sano, iyo 3 sano. Saddexda eedaysane ee hore waxaa midkiiba lagu ganaaxay lacag dhan 59,173,000 Sh.So (Konton Iyo Sagaal Malyan, Boqol Toddobaatan Iyo Saddex Kun, Shilin Soomaali), una dhiganta $2,366 Dollar, halka eedaysanaha afaraad lagu ganaaxay 29,575.000 (Laabatan Iyo Sagaal Malyan, Shan Boqol Toddobaatan Iyo Shan Kun Shilin Soomaali), una dhiganta $1,183 Dollar. Balse markii ay racfaan ka qaateen, waxay Maxkamadda Racfaanku ka soo saartay Xukun summad. MRGB/52/2020 ee Tr. 04/03/2021. kaas oo wax ka baddalay xukunkii Maxkamadda Gobolka ayada oo labada eedaysane ee hore ku xukunta min 2 sano oo xarig ah kaliya, halka labada eedaysane ee danbe ay sheegtay in ay ku waysay Qodobbada lagu soo eedeeyay, ayna xorriyaddooda u celisay.

22 - Eeg Qod. 70 (1) (b) (ii) iyo Qod.72-X.H.C).

23 - ku eedeysan qodobada 241 iyo 363 XC

24 - ku eedaysnaa Qod. 241,363,366 iyo 375 XC

25 - ku eedeysnaa qodobada 241,363, iyo 375 XC

26 - ku eedeysnaa qodobka 241 XC

2. Dacwadihii hawl wadeennada Maaliyadda Garoonka Diyaaradaha, Bankiga dhexe, iyo laanta Socdaalka ee 2023-kii. Dacwadahaas oo dhagaysigooda shacabka Soomaaliyeed ay kala socdeen TV-yada iyo Baraha Bulshada ku xiriirto, qaybtaan danbe waxa ay xukunkooda ku dhawaaqday Maxkamadda Gobolka Banaadir Tr. 28/09/2023, Galka dacwaddaas oo summaddiisu ahayd MGB/DCL/938/2023.

Eedaysanayaashan oo tiradoodu gaaraysay 11, isuguna jirey kuwa joogay iyo kuwa maqane Dacwaddooda lagu dhagaystay, waxay 5 ka mid ah ku waysay dhammaan qodobbadii lagu soo eedeeyay, halka 6-dii kale ay ku heshay qodobbadii uu Xafiiska Xeer ilaalintu ku soo eedeeyay, kulligood ama qaarkood, Qodobbadaas oo ku jira Xeerka Ciqaabta, sharciga lacag dhaqista iyo la dagaallanka maal-galinta Argagixisada, iyo sharciga maaraynta Maaliyadda Guud. Waxayna ku xukunta xukunna u dhexeeyay hal- illaa 9 sano, qaarkoodna loogu sii daray in aysan hadda ka dib qaban karin xafiis dawladeed.

Waxaan shaki ku jirin in Maxkamadayntaas dhacday xilliyada is daba jooga, ay abuurtay dareen digtooni shaqaalaha dhexdiisa, ayna sababtay in uu wiiqmo musuqii hore u xarga goostay, ee ka dhex jiray hay'adaha Dawladda[27], sidaas oo ay tahay waxaa cad in Musuqu uu u baahan yahay qorshe qaran oo intaas ka sii xoog badan, ayna hoggaaminayaan xafiisyada ugu sareeya ee Dawladda, taas oo soo celinaysa kalsoonida dadwaynaha, marka ay arkaan hay'ado kala madax bannaan oo shaqadooda u gudanayo si sharciga waafaqsan iyo Madaxda oo u hoggaansanan sharciga.

## 5.4. QAADISTA IYO XUKUMIDDA DACWADAHA MADANIGA

Dacwadaha Madaniga waxay qayb ka qaadan kartaa xoojinta dawlad wanaagga iyo la dagaallanka musuqa ayada oo xaq loo siinayo cid kasta oo dhibaato ka kasoo gaarto falalka denbi ee musuqa inay xeraystaan dacwado madani ah oo ay ku raadinayaan magdhaw laga siiyo dhibaatadii

27 - qoraagu waxa uu ku ogaaday qiimayntaas waraysiyo iyo tagitaan goobaha adeegga ayada oo ay muuqato is baddalka shaqada ee jira, sida Xarunta Hay'adda Socdaalka iyo jinsiyadaha, Xarunta CID, iyo Dawladda Hoose ee Gobolka Banaadir, Maxkamadaha Gobolka Banaadir iyo tan Sare oo laga joojiyey in ay lacag qabtaan, marka laga reebo wax sharcigu fasaxayo maahane, wixii ujuuro/khidmad ahna ay qaaddo Wasaaradda Maaliyadda oo kaliya, taas oo keentay is baddal la dareemi karo.

ka soo gaartay falka musuqa, waxaana maxkamadugu u cuskanayaan dhagysiga noocaan ah qodobada sharci ee kala ah: Qodobka 34 iyo 39 ee Dastuurka Kumeel gaarka ah. Sidoo kale Qodobka 160 ee xeerka madaniga Soomaaliyeed, iyo Qodobka 176 ee xeerka Madaniga Soomaaliyeed marka musuqa ka dhex dhaco dad aan shacab ahayn.

## 6. GABAGABO IYO TALOOYIN

Waraaqdu waxay ku soo gunaanadaysaa in dawlad wanaagga iyo musuqu yihiin shilinka labadiisa dhaban, haddii Dawlad wanaag la helo Musuqa ayaa meesha ka baxay, haddii Dawalad wanaaggu liitana waxaa xarga goosanaya musuqa. Sidoo kale waxaa cad xiriirka tooska ah ee ka dhexeeya Dawlad wanaagga iyo hormarka.

Kaalinta hoose ee Soomaaliya kaga jirto xakamaaynta musuqa, deganaansho la'aanto siyaasadeed, nidaamka awood qaybsiga siyaasadda, taagdarada hay'adaha dowladda iyo dhaqan siyaasadeed dalka ee ku dhisan ku danaysiga hay'adaha dowladda waxa ay markhaati u yihiin in aan ku jirno xaalad ku suntan dawalad xumo. Waxaa jira shuruuc iyo hay'ado dawladeed oo loogu talagalay hagaajinta dawlad wanaagga kuwaas oo badi ah hay'ado dastuuri ah oo madaxbannaan, waxaana hay'adahaas ugu muhiimsan hay'adda Garsoorka oo iyadu u xilsaaran amridda soo qabashada, baarista, dacwad kusoo oogista iyo maxkamadaynta dadka gaysta musuqa. Sidoo kale waxaa jira Heshiisyo dawli ah iyo kuwa goboleed ay Soomaaliya qayb ka tahay sida Heshiiska Qaramada Midoobay ee la dagaalanka musuqmaasuqa (UNAC) ,kan Midawga Africa iyo kan Jaamacadda Carabta iyada oo qodobada ku xusan heshiisyadaan loo adgeegsanayo dib u habaynta shuruucda dalka ee quseeya dawlad-wanaagga. taas oo jirta , haddana waxaa jira habacsanaan iyo taagdaro wali ka muuqata hay'adaha dowladda e u qaabilsan xoojinta Dawlad-wanaagga iyo xakamaynta musuqa ,gaar ahaan Garsoorka , si taas looga gudbana waxay daraasaddu ku talinaysaa in la qaado tallaabooyinka soo socda :

- Si loo adkeeyo sarreynta sharciga, loona xoojiyo madax bannaanida hay'adaha Garsoorka (Xeer ilaalinta iyo Maxkamadaha) waa in la dhiso hay'addii arrinkaas xaqiijin lahayd oo ah "Golaha Adeegga Garsoorka" kaas oo la kala diray sannadkii 2016-kii dibna aan loo dhisin.

- In laga haqabtiro Garsoorka baahiyaha qalab, tababar, dhaqaale iyo farsamo ee ugu baahanyihiin baarista, dacwad ku oogista iyo xukumidda denbiyada musuqa, taasina waxay ku iman kartaa in loo kordhiyo Miisaaniyadda taas oo ah mid leh hortabin iyo mudnaan.
- Si loo ilaaliyo xuquuqda dustuuriga ah, loo baajiyo musuqa nooca waawayn ee laga dhex sameeyo hay'adaha dawladeed waa in la dhiso Maxakamadda dastuuriga, lana abuuro waddooyin kale oo lagu xallinayo khilaafaadka.
- Abuuridda hab cabasho oo heer xafiis kasta oo dowladeed ah kaas oo shaqaalaha dowladda iyo muwaadiniintuba kusoo gudbin karaan cabashooyinka ay qabaan ee la xiriira denbiyada la xiriira musuqa.
- Xoojinta awoodda iskaashiga ee hay'adaha Garsoorka la leeyihiin dhigooda heer gobol iyo heer caalami si loo xoojiyo awoodda hay'adahaasi u leeyihiin soo qabashada iyo ka taba taga dadka lagu tuhunsanyahay denbiyada la xiriira wax isdaba marinta.
- Xoojinta awoodda ay Maxkamadda sare ee dalku u leedahay qaadista dacwadaha maamulka iyo dastuurtiga si loo xoojiyo awoodda dul joogtayn ee Garsoorka iyo sarraynta sharciga.
- Si loo xoojiyo daahfurnaanta iyo helista meesha musuqu ka jiro, waxay diraasaddu ku talinaysaa in la joojiyo ku shaqaynta gacanta "Manual" loona wareego habka Danabaysan "Degital /Electronic Government" gaar ahaan xafiisyada maaliyadda, taas oo kaabaysa hufnaanta.

## ILAHA XOGTA DIRAASADDA

1. Saalim Saciid Saalim, KAALINTA GARSOORKA EE LA DAGAALANKA MUSUQMAASUQA, cilmi baaris lagu soo bandhigay Shirka sannadeedka Garsoorka 2020-kii.

2. Heritage Institute, Caqabadaha Hortaagan Dawlad wanaagga Soomaaliya, Maarso, 2021. Eeg mareegtan: https://8v90f1.p3cdn1.secureserver.net/wp-content/uploads/2021/03/Caqabadaha-hortaagan.pdf

3. Hyder, M., & Iraqi, K. THE ROLE OF JUDICIARY IN GOOD

GOVERNANCE. Sattar, B. (2012). The Role of Judiciary in Good Governance. In International judicial conference.

4. Mollah, M. A. H. (2008). Judiciary and good governance in Bangladesh. South Asian Survey, 15(2), 245-262.
5. Bobai, P. A. (2022). THE ROLE OF THE JUDICIARY IN THE PROMOTION OF GOOD GOVERNANCE IN NIGERIA. Irish International Journal of Law, Political Sciences and Administration, 6(5).
6. https://www.ohchr.org/en/good-governance/about-good-governance =United Nations High Commissioner for Human Rights,page.
7. U noqoshada Xusuus-Dhawrka Maxkamadda Sare si loo helo Xukunno Maamul iyo kuwo Ciqaab oo Maxkamaddu soo saartay.

***** DHAMMAAD*****

2

# KAALINTA GARSOORKA EE ILAALINTA HANTIDA GUUD

Dr Ahmed Ali M. Khayre, PhD.

La-taliye Sare, Machadka Tababbarka Garsoorka

# TUSMO


**NUXURKA.** . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . **29**

**1. . . HORDHAC** . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . **30**

1.1 Habraaca Loo Maray Diyaarinta Qoraalka . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 32

1.2 Baaxadda iyo Xaddidaadaha . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 32

**2. . . HANTIDA DANTA GUUD IYO QAYBAHEEDA** . . . . . . . . . . . . . . . . . **33**

2.1.Dhulka . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 36

2.2.Khayraadka Dabiiciga ah . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 37

2.3.Goobaha iyo Dhaxalka Taariikhiga ah . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 39

**3. . . HAY'ADAHA SIDA GUUD UGU XILSAARAN ILAALINTA HANTIDA GUUD** . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . **41**

**4. . . DIIWAANGELINTA HANTIDA DAWLADDA.** . . . . . . . . . . . . . . . . . **44**

**5. . . SARKAAL GUUD IYO MASUULIYADDA ILAALINTA HANTIGA GUUD** . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . **46**

**6. . . GUUDMAR KU SAABSAN NIDAAMKA GARSOORKA EE SOOMAALIYA** . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . **48**

6.1Awoodda Garsoorka ee Ilaalinta Hantida Guud. . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 50

6.2Iskaashiga Garsoorka Caalamiga ah. . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 55

**7. . . GUNAANAD** . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . **58**

**8. . . TALO SOOJEEDIN** . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . **58**

## NUXURKA.

Qoraalkan waxa uu baarayaa dowrka muhiimka ah oo garsoorku ka ciyaaro ilaalinta hantida guud ee Soomaaliya, oo ah dal ku dadaalaya inuu dib-u dhiso-qaab-dhismeedkiisa sharci iyo maamul. Qoraalku waxa uu marka hore qeexayaa hantida guud iyo qaybaheeda iyo qawaaniinta khusaysa. Daraasaddu waxa ay bixinaysaa falanqeyn faahfaahsan oo ku saabsan qaab-dhismeedka garsoorka ee hadda ka jira ee Soomaaliya, iyadoo diiradda la saarayo sharciyada iyo xeerarka la xiriira ilaalinta hantida guud iyo hay'adaha u xilsaaran. Qoraalku waxa kale oo uu si faahfaahsan u dul istaagi doonaa awoodda garsoorka ee ku aaddan ilaalinta hantida guud, iyada oo la falanqeyn doonno kaalinta iskaashiga garsoorka caalamiga ah.Gunaanadka, qoraalku waxa uu soo jeedinayaa talooyin loogu talagalay in lagu xoojiyo nidaamka garsoorka ee Soomaaliya iyo doorkiisa ilaalinta hantida guud.

# 1. HORDHAC

Soomaaliya, oo ah dal ka soo kabanaya tobannaan sano oo colaado ah, waxaa horyaalla hawl aad u ballaaran oo dib-u-dhis ah oo la xiriirta kaabayaasheeda dhaqaalaha, hay'adaheeda dawladda, iyo dib-u-habaynta qawaaniinta.[1] Dib-u-dhiska waxaa kaalin mug leh ku leh maamulka, maaraynta iyo ilaalinta hantida guud oo la rabo in loogu adeego dadweynaha, waana udub-dhexaadka dawlad shaqeyneysa iyo tiir-dhexaadka horumarka waara.[2]

Guud ahaan hantida waxaa loo kala saaraa laba qaybood, hanti guud iyo mid gaar loo leeyahay. Tan koowaad waa hanti gaar ah oo uu leeyahay qof ama dad isku duuban oo u haysta hab iyo sabab sharci. Hantidaan waxay noqon kartaa hanti kasta oo gaar loo leeyahay oo sharcigu oggol yahay in gaar loo yeesho, sida guri , beer ama xoolo nool oo uu qofku leeyahay. Xaqa lahaanshaha iyo isticmaalka hantida gaarka ah waa xaq qofku leeyahay kuna salaysan shuruucda dalka iyo heshiisyo caalami ah. Qodbka 26aad ee Dastuurka KMG ayaa siinaya qof kasta xaqa in uu yeesho, ku naalloodo hanti, isaga oo iska gadi kara ama iska wareejin kara marka uu doono.[3]

Hantida guud waxaa iyana loo kala saaraa laba nooc.[4] Tan koowaad ee hantida guud waa hanti dan guud oo waa hanti qaran ama hantida dowladaha hoose oo loogu talo galay in loo isticmaalo adeegga dadweynaha. Hantidaan waxaa ka mid ah xeebaha, dekedaha, webiyada, balliyada ama meeshii kale oo biyo qabad ah oo aan gaar loo lahayn. Waxaa kale oo kamid ah waddooyinka aan gaarka loo dhisan, gegooyinka

---

1 Andres Schipani, Somalia Rebuilds: 'The Glass is Now Half Full', Financial Times, 16 April 2023: https://www.ft.com/content/0b968db2-2b34-482b-8ab0-946c2d2cceb4.

2 National Development Plan 9(NDP9), Ministry of Planning, Investment and Economic Development, 2020-2024: https://mop.gov.so/wp-content/uploads/2022/07/Somali-National-Development-Plan-9-2020-2024.pdf.

3 Qodobka 26aad, faqradda 1aad ee Dastuurka KMG, 2012; Qodobka 17aad ee Baaqa Caalamiga ah ee Xuquuqda Aadanaha, 1948.

4 Sharciga Qaybinta Dhulka Magaalooyinka, Sharci Lam.41 ee 13 Sebteembar 1973, Qodobka 2aad, faqradda 1aad.

diyaaradaha ee magaalooyinka, iyo goobaha taariikhiga ah.[5] Tan labaad ee hantida guud waa dhammaan hantida kale ee dowladda ee gaarka ah. Hantidaas waxaa kamid ah hantida aan cid kale lahayn, dhammaan goobaha macdanta laga qodo, saldhigyada milatariga, iyo qalabka difaaca qaranka.[6]

Garsoorku waxa uu door muhiim ah ka ciyaaraa nidaam kasta oo sharci ama caddaaladeed.[7] Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, garsoorku waxa uu leeyahay kaalin muhiim ah oo dastuurka iyo qawaaniinta dalku siiyeen.[8] Shaqadiisa ugu weyn waa fasiraadda iyo dabbaqidda sharciga, xallinta khilaafaadka, ilaalinta xuquuqda muwaadiniinta isagoo xaqiijinaya in cadaaladda la gaaro arrimaha maamulka, madaniga ah iyo kuwa ciqaabta.[9] Garsoorku waxa uu si madax-bannaan uga garab shaqeeyaa laamaha sharci-dejinta iyo fulinta, taas oo ah mabda' loo yaqaan kala soocidda awoodaha, kaas oo muhiim u ah ilaalinta xukunka sharciga iyo difaaca xuquuqda iyo xorriyadaha shaqsiyaadka.[10] Ilaalinta garsoorka ee hantida guud waa difaaca ka hortagga isticmaalka khaldan, lunsashada, iyo ka faa'iidaysiga sharci darrada ah ee hantida guud, iyada oo la hubinayo in hantidaasi u adeegto danaha dadweynaha iyo inay ka qayb qaadato horumarka dalka.

Qoraalkan waxa uu isku dayayaa inuu baaro doorka garsoorka ee ilaalinta hantida guud. Qaybta hordhaca ah oo ay ku jirto habraaca loo maray

---

5 Sharciga Qaybinta Dhulka Magaalooyinka, Qodobka 3aad.

6 Sharciga Qaybinta Dhulka Magaalooyinka, Qodobka 4aad.

7 Piersol,LL, The Role of the Judiciary in a Democratic Society, 52 S.D.L Review (2007); Kavanaugh, BM, The Role of the Judiciary in Maintaining the Separation of Powers, The Heritage Foundation Lecture, 25 October 2017.

8 Cutubka 9aad ee Dastuurka Federaalka KMG, 2012; Legislative Decree 12 June 1962, No.3, Organisation of the Judiciary.

9 Kaalinta Caddaaladda ee Dawlad-dhiska, fiiri, Rebuilding Somalia's Broken Justice System: Fixing the Politics, Policies and Procedures, Heritage Institute for Policy Studies, January 2021: https://8v90f1.p3cdn1.secureserver.net/wp-content/uploads/2021/01/Justice-Report-Jan-6-1-1.pdf.

10 Qodobka 106aad Dastuurka Federaalka KMG.

qoraalka iyo baaxadda iyo xaddidaadda ku gadaaman diyaarinta qoraalka ayaa ugu horreynaysa qoraalka. Qaybta labaad waxa ay falanqayn doontaa hantida danta guud iyo qaybaheeda kala duwan, diiwaan gelinta hantida guud iyo saraakiisa dawladda oo u xilsaaran. Qaybta saddexaad waxay guudmar guud ku samayn doontaa hay'adaha u xilsaaran ilaalinta hantida danta guud. Waxa kale oo qoraalku guudmar ku samayn doonaa nidaamka garsoorka Soomaaliya iyo awooddiisa qaanuun ee ilaalinta hantida guud. Qaybta xigta waxaa lagu falanqeyn doonaa qaybo kamid ah hantida guud iyo ilaalintooda. Waxaa qoraalka lagu soo gebagabayn doonaa gunaanad iyo talo soo jeedin ku aaddan xoojinta ilaalinta hantida guud.

### 1.1. Habraaca Loo Maray Diyaarinta Qoraalka

Diyaarinta qoraalkan waxaa loo maray in la daraaseeyo qawaaniin badan oo ay ku jiraan qawaaniinta dalka iyo kuwo caalami ah , warbixinno dowladeed iyo qoraallo daraasad cilmiyeed ah. Daraasaddu waxa ay ku tiirsan tahay dokumiinti aas'aasi ah iyo kuwo aan asal ahayn. Waxa kale oo waraysiyo aan qaabaysnayn lala yeeshay dad khubaro ah oo ka tirsan bahda garsoorka iyo qareenno. Warbixinno iyo heshiisyo siyaasadeed kalana waa la daraaseeyey.

### 1.2. Baaxadda iyo Xaddidaadaha

Qoraalkan cilmiyeed, waxaan si taxadar leh u baaraynaa "Kaalinta Garsoorka ee Ilaalinta Hantida Guud," waxaanna halkan ku caddeynaynaa baaxaddiisa iyo xaddidaadaha ku gedaaman. Baaxadda qoraalkan ayaa ugu horreyn diiradda saareysa hantida guud iyo qaybaheeda, qaab-dhismeedka sharciyeed, iyo faahfaahinta awoodda iyo kaalinta garsoorka ee ilaalinta hantida guud. Tani waxa ay ku jirtaa falanqaynta sharciyada khuseeya, iyo hannaanka maamulka ee fududeeya ama hor-istaaga ilaalinta hantida guud. Qoraalku waxa kale oo uu baarayaa sharciyada khuseeya qaybaha kala duwan ee hantida guud. Si kastaba ha ahaatee, waxaa jira xaddidaado ku saabsan falanqayntan. Tan koowaad, mowduuca ilaalinta hantida guud iyo kaalinta garsoorka waa mid aad u ballaaran oo aan waqtiga loo cayimay lagu soo koobi karin. Sidaas daraadeed, daraasaddaan waxa ay noqonaysaa mid billow ah oo u baahan dabaggal kale. Tan labaad, cinwaanka iyo arrimaha la xiriira ee Soomaaliya wax macno leh lagama qorin, mana jirin tixraac la isticmaali karo. Midda kale, kiisas badan oo arrinkan ku saabsan go'aan kama gaarin garsoorka Soomaaliyeed, inta

dhacdayna majirto meel laga heli karo kiisaskaas oo tixraac laga dhigan karo. Intaa waxaa dheer, inkasta oo qoraalku tixraacayo heerarka iyo qawaaniinta caalamiga ah, haddana waxa uu inta badan diiradda saarayaa doorka garsoorka gudaha ee dalka iyada oo aan la sameyn falanqayn isbarbardhig ah ee nidaamyada sharciyeed ee kale.

## 2. HANTIDA DANTA GUUD IYO QAYBAHEEDA

Hantida Guud waxa ay ka duwan tahay hantida gaarka loo leeyahay. Kala soocidda hantida guud iyo hantida gaarka loo leeyahay waa muhiim sharci ahaan. Hantida guud waxaa loogu talagalay in loo adeegsado faa'iido guud iyo isticmaalka bulshada, waxaana xukuma sharciyo iyo xeerar gaar ah.[11] Qawaaniinta xeerinaysa hantida guud waxa ay guud ahaan u kala saarayaan laba qaybood. Qaybta koowaad oo ah hanti dawladdu leedahay oo aan shaqsi yeelan karin iyo qaybta labaad oo ah qayb dawladda iyo shaqsiyaadkuba yeelan karaan. Sida uu xeerinayo Qodobka 50aad, faqradda labaad (b) ee Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud, qaybta koowaad waxaa kamid ah:[12]

i. Xeebaha badaha, dekedaha, gacan-biyoodyada yaryar, marsada, kaabiga, kannaalka badda, biyaha qooriga oo ku furan badda;

ii. Harooyinka dabiiciga ah, Wabiyada iyo dooxyada oo ay ku jiraan kuwa dhulka hoostiisa mara;

iii. Kheyraadka Macdanta

iv. Xerooyinka Ciidamada iyo kaydka hubka

v. Qalcadaha, dekedaha iyo garoomada diyaaradaha ciidamada iyo

---

11 Sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud, Sharci Lam.17 ee 25/12/2019; Sharciga Habka Maamulka Hantida Dawladda, Sharci Lam. 42 ee 7 Juunyo 1975; Xeerka Nidaamka Maaliyadeed iyo Xisaabaadka Dawladda ee 29 Diseembar 1961; Decree No.2, 29 December 1961, Financial and Accounting Procedure of the State; Xeer Lr. 41 ee 13 Sebtembarr 1973 – Qaybinta Dhulka Magaalooyinka.

12 Sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud, Sharci Lam.17 ee 25/12/2019, Qodobka 50aad, Faqradda 2aad(b), Xeerka Nidaamka Maaliyadeed iyo Xisaabaadka Dawladda ee 29 Diseembar 1961, Qodobka 1aad, Faqradda 1aad.

goobaha loo dhisay difaaca Qaranka; iyo

vi. Hantida ma guurtada iyo shay kasta oo Dawladda Federaalku u aqoonsato in uu yahay shay taariikhi ah, ama raad taariikheed ah (aasaar), ama farshaxanka qadiimiga ah ee qaranka qiimo u leh.

Qaybta labaad ee hantida guud waa mid dawladduna yeelan karto, shaqsiyaadna yeelan karaan. Sida uu xeerinayo Qodobka 50aad, faqradda 2aad (t), hantida faqraddanu sheegayso waxaa isla leh dawladda haddii aan cid kale(shaksi ama shaqsiyad qaanuuni ah) u haysan milkiyad sharci ah. Hantida qaybta labaad waxaa kamid ah[13]:

i. Kiliyada iyo goobaha gacan-ku-sameyska ah ee biyaha;

ii. Ilaha biyaha dabiiciga ah, ceelasha, meelaha wax lagu warraabiyo, togagga iyo tubooyinka biyaha tuura;

iii. Wadooyinka, Dariiqyada, fagaareyaasha bulshada, laamiyada waa weyn ee xawaaraha lagu maro, gegida-diyaaradaha madaniga ah, isgaarsiinta iyo rakibaadda aaladaha bilaa-xarkaha ah, telefoonka iyo rakibaadda radio teleefoonada, dariqyada iyo Waddooyinka lagu safro ee caamka ah, meelaha safarka iyo xooluhuba joogsadaan, qabuuraha iyo Suuqyada; iyo.

iv. Hantida maguurtada ah, shayga taariikhiga ah, ama aasaar ah, ama qiimo Farshaxan leh marka laga reebo kuwa ku xusan farqada 2aad xarafka (vi).

Waxaa jira qayb saddexaad oo ayna caddeyn in shaqsi ahaan loo yeelan karo iyo in kale.Sida uu xeerinayo Qodobka 51aad ee Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud, waxaa jirta hanti kale oo ay dowladdu leedahay sida "hanti maguurto ah oo aan cid lihi jirin, dhismayasha dowladda iyo hantida dhextaalla ee ay leedahay una isticmaasho fulinta adeegyada iyo hanti kasta oo dawladdu ku yeelatay sida sharcigu qabo, dhaxashay ama la

13 Sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud, Qodobka 50aad, Faqradda 2aad(t); Xeerka Nidaamka Maaliyadeed iyo Xisaabaadka Dawladda ee 29 Diseembar 1961, Qodobka 1aad, Faqradda 2aad.

wareegtay, haddiyo ahaan loo siiyey,iib ama wareejin".[14] Sida uu xeerinayo Qodobka 3aad, farqaddiisa 1aad ee Sharciga Ilaalada Bulshada iyo Ka-hortagga Dembiyada Culus Qaarkood oo Ka-dhanka ah Nolosha, Amniga, Hantida iyo Shaqsiyaadka, " Dhammaan dhulka, ilaha biyaha oo ku yaalla Jamhuuriyadda Soomaaliya oo ayna lahayn hay'ado dowladeed ama shaqsiyaad caadi ah ama kuwo qaanuun waa hanti guud oo uu leeyahay qaranka.[15]

Waxa aad mooddaa in Sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud uu abuurayo jahawareer marka laga hadlayo hantida guud oo shacabku yeelan karo iyo qaabka lagu yeelan karo. Xeerka Nidaamka Maaliyadeed iyo Xisaabaadka Dawladda ee 29 Diseembar 1961 ayaa si ka waadaxsan uu u muujinayey una kala calaamadeynayey hantida shaqsiyaadku yeelan karaan iyo tan dawladda gaarka u ah oo aan shaqsi ama shaqsiyaad yeelan karin.[16] Midda kale, Qodobka 63aad oo ka hadlaya dhaqangalka Sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud waxa uu leeyahay in sharcigu dhaqan galyo "si aan hakad lahayn ka dib taariikhda lagu faafiyo Faafinta Rasmiga ah." Isla faqradda 2aad ee qodobka ayaa xeerinaysa " Inta laga meel-marinayo Sharcigan, Xeerarka Lam.2 ee 29 Diseember 1961 iyo Xeerka Lam.317 ee 17 Diseember 1962 ayaa sii shaqeyn doona." Ma cadda sida lagu hubinayo meelmarinta sharciga, iyo farqiga u dhaxeeya dhaqangalka sharciga iyo meelmarintiisa. Waxa kale oo aan caddeyn sababta looga tagay xeer-nidaamiyaha labaad Xeer Lam.318 ee 18 Diseembar 1962 oo isna la socda Xeer Lam.2 ee 29 Diseembar 1961.

Qodobka 7aad ee Xeerka Qaybinta Dhulka Magaalooyinka waxa uu sheegayaa in dhulka Jamhuuriyadda Jamhuuriyadda Soomaaliya yahay hanti dawladeed iyadoo aan loo eegin cidda isticmaasha.[17] Maamulka iyo kormeerka hantida guud waxaa iska leh hay'adaha ilaalinta hantida

---

14 Sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud, 25/12/2019, Qodobka 51aad

15 Law No.67 of 1st September 1970, The Social Protection and for the Preventions of Certain Serious Crimes against Life, Safety, Property of Individuals, Article 3, paragraph 1.

16 Fiiri Qodobka 50aad, faqradda 1aad(b)(t) ee Sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud , waxa aad barbar dhigtaa Qodobka 1aad ee Xeerka Nidaamka Maaliyadeed iyo Xisaabaadka Dawladda ee 29 Diseembar 1961.

17 , Qodobka 7aad, Qaybinta Dhukja Magaalooyinka ,Xeer Lr.41 ee 13 Sebtembar 1973.

dawladeed oo awood u leh inay sii hayaan ama qaybiyaan.[18]

Maddaama dalka Soomaaliya ka soo kabsanaya colaado waqti dheer socday,oo qaybo badan oo hantida guud ee kor lagu xusay ku burburtay xilliyadii dagaallada sokeeye, qaybta hoose waxaan ku xusaynaa dhowr qaybood oo kamid ah hantida guud oo u baahan ilaalin. Qaybaha hoose ayaa si faahfaahsan loogu falanqayn doonaa hantida guud, ilaalinteeda iyo kaalinta garsoorka. Hase yeeshee qaybtan xigta waxaan uga hadli doonnaa dhowr qaybood oo hantida guud ah oo ay muhiim tahay in la ilaaliyo.

### 2.1. Dhulka

Qodobka 7aad, faqraddiisa 1aad ee dastuurka ayaa sheegaysa in gobannimada Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya(JFS) koobeyso "dhulka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya oo idil, oo ay ku jiraan berriga, badaha, jasiiradaha iyo uurkooda hoose, hawadooda sare iyo geyi-qaaradeedka iyo dhul iyo biyo-goboleed kasta oo ku soo biira Jamhuuriyadda Soomaaliya, si waafaqsan sharci uu Baarlamaanka Qaranku ansixiyo."[19] Qodobka 43aad ee Dastuurka ayaa sheegaya in dhulku yahay kheyraadka koowaad ee Soomaaliya iyo saldhigga nolosha dadka. Faqradda labaad ayaa amraysa in dhulka loo haysto, loo adeegsado, loona maamulo si caddaalad ah, wartar leh, wax soosaar waarana leh. Xukuumadda waxaa kale oo saaran masuuliyadda in ay dejiso siyaasad guud oo dhulka.[20]

Marka laga soo tago dastuurka, waxaa jira shuruuc kale oo xeerinaya arrimaha dhulka ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya[21]. Sida uu

18 Tixraaca kore, Qodobka 6aad.

19 Qodobka 7aad , Dastuurka KMG.

20 Qodobka 43aad, Dastuurka KMG

21 Amar Maamul, Lam.12 Maamulka Wasaayada Talyaaniga ee Soomaaliya, 1 Agoosto 1955; Law No.67 of 1970, The Social Protectionand for the Prevention of Certain Serios Crimes Against Life, Safety and Property of Individuals; Sgarciga Qaybinta Dhulka Magaalooyinka, Sharci Lam.41 ee 13 Sebteembar 1973; Sharciga Dhulka Beeraha , Sharci Lam.73 ee 21 Oktoobar 1975; Sharciga Horumarinta Dhulka Daaqa, Sharci Lam.3, 14 Janaayo 1979; Maamulka Dhulka Dhismaha ee G.Banaadir, Sharci Lam.10 ee 17 Diseembar 1980; Xeer Madaxweyne Hab

qorayo Qodobka 3aad, farqaddiisa 1aad ee Sharciga Ilaalada Bulshada iyo Ka-hortagga Dembiyada Culus Qaarkood oo ka Dhanka ah Nolosha, Amniga, Hantida iyo Shaqsiyaadka, " Dhammaan dhulka, ilaha biyaha oo ku yaalla Jamhuuriyadda Soomaaliya oo ayna lahayn hay'ado dowladeed ama shaqsiyaad caadi ah ama kuwo qaanuun waa hanti guud oo uu leeyahay qaranka[22]. Qodobka 4aad ee xeerkan waxa uu jideynayaa in aan qofna ku yeelan karin hantida dawladda xeer iyo qoraal. Hantida dowladda oo Qodobka koowaad tixraacayo waa mid aan la wareejin karin[23]. Sidoo kale, Qodobka 7aad ee Xeerka Qaybinta Dhulka Magaalooyinka waxa uu xeerinayaa in dhulka Jamhuuriyadda Jamhuuriyadda Soomaaliya waa hanti dawladeed iyadoo aan loo eegin cidda isticmaasha[24].

Burburii dowladdii dhexe ee Soomaaliya ka bacdi, maamulka iyo isticmaalka dhulka waxaa ka jirto dhibaato aad u ballaaran. Maxkamadaha waxaa harqiyey kiisas dhulal la isku haysto. Dhul badan oo hanti guud ayaa si gaar ah loo isticmaalay dalka oo dhan. Maaddaama dalka uu ka dhaqangalay nidaam federaal ah, weli lama samayn shuruuc iyo siyaasado lagu maamulo dhulka oo la jaanqaadi kara nidaamka dowladeed ee dalku qaatay[25]. Waxaa kale oo muhiim ah in dib-u-eegis ballaaran lagu sameeyo xeerarka khuseeya dhulka. Waxaa kale oo muhiim ah in la dhiso Guddi Qaran ee Dhulka oo ka masuul ah dejinta siyaasad qaran ee maamulka iyo maareynta arrimaha dhulka iyo xal u hellidda khilaafyada dhulka oo daka oo dhan ka shaqeeya.[26]

## 2.2. Khayraadka Dabiiciga ah

Qodobka 25aad ee Dastuurka oo ka hadlaya deegaanka iyo khayraadka

---

Maamulka iyo Qaybinta Dhulka G.Banaadir, Lam.48/bis ee 1 Sebteembar 1981; Sharciga Ku Fidin Dalka JDS Sharciga Lam10 ee 18.12.1980, Sharci Lam.61 ee 10 Nofeembar 1981.

22 Law No.67 of 1st September 1970, The Social Protection and for the Preventions of Certain Serious Crimes against Life, Safety, Property of Individuals, Article 3, paragraph 1.

23 Tixraaca kore, Qodobka 3aad

24 Xeer Lr.41 ee 13 Sebtembar 1073, Qaybinta Dhulka Magaalooyinka, Qodobka 7aad

25 Waraysi xubno sare oo ka tirsan garsoorka iyo ururka qareennada, Diseembar 2023.

26 Waraysi xubin sare oo garsoorka ah, Diseembar 2023.

dabiiciga ah oo labaduba qayb ka ah hantida guud oo u baahan ilaalada. Faqradda 1aad waxa ay qof kasta oo ku nool Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya siinaysaa xaqa " inuu helo deegaan aan waxyeello u lahayn caafimaadkiisa iyo baraarihiisa nololeed oo laga ilaaliyey wasakhda iyo waxyaalaha halista ah." Faqraddan waxa ay waajibinaysaa ka ilaalinta deegaanka wasakhda iyo waxyaalaga halista ah." Waxyaabahaan halista ah waxaa ka mid ah in badda lagu shubo haraadiga qashinka nukliyeerka, iyo in loo isticlaamo khayraadka si waxyeelaysa deegaanka. Faqradda 2aad waxa ay qof kasta xaq u siinaysaa "in uu wax ka helo kheyraadka dabiiciga ah ee dalka, iyadoo laga ilaalinaayo ka faa'ideysi xad-dhaaf ah oo deegaanka waxyeello u geysan kara.". Tusaale arrinkan deegaanka waxyeellada u geysan kara waxaa noqon kara kalluumaysiga xad-dhaafka ah ama sida aan munaasibka ahayn loo kalluumaysanayo.Sidoo kale, Qodobka 45aad ayaa xeerinaya in Xukuumadda Federaalku mudnaan siiso ilaalinta, keydinta iyo dhawrista deegaanka, iyada oo laga ilaalinayo wax kasta oo wax u dhimaya. Faqradda 2aad ayaa dhammaan dadka ku nool JFS ku waajibinaya ilaalinta iyo kobcinta " ka-qaybgalka horumarinta, fulinta, maareynta, xannaanaynta iyo dhawrista kheyraadka dabiiciga ah iyo deegaankaba".[27]

Qodobka 44aad ee Dastuurka KMG ah ayaa faraya in qaybsiga khayraadka dabiiciga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ka wada xaajoodaan Dowladda Federaalka ah iyo Dowlad Goboleedyada, si waafaqsan dastuurka.[28] Iyada oo la tixraacayo qodobkan dastuuriga ah ayaa taariikhdu markii ay ahayd 5tii Juun 2018, Dowladda Federaalka iyo Dowlad Goboleedyada dalka waxa ay gaareen "Heshiiska Lahaanshaha, Maamulka iyo Wadaagga Dakhliga Khayraadka Dabiiciga ah ee Dalka (Shidaalak iyo Macdanta)".[29] Qodobka 1aad ee heshiiska ayaa qoraya in khayraadka macdanta iyo shidaalka ee laga helo badda iyo berriga Soomaaliya ay leeyihiin shacbka Soomaaliyeed, oo ay wakiil uga yihiin

27 Qodobka 45aad, Dastuurka KMG.

28 Qodobka 44aad, Dastuurka KMG.

29 Heshiiska Lahaanshaha, Maamulka iyo Wadaagga Dakhliga, Khayraadka Dabiiciga ah ee Dalka ( Shidaalka iyo Macdanta), 5 Juun 2018, laga heli karo: https://icric.gov.so/wp-content/uploads/2023/11/Heshiiska-lahaanshaha-Kheyraadka-dalka-1.pdf .

Dowladda Federaalka iyo Dowlad Goboleedyada."[30] Qaybta heshiiska ee ku saabsan khayraadka batroolka waxaa laga soo saaray sharci. Madaxweynaha JFS ayaa 8 Febraayo saxiixay Sharciga Batroolka JF Soomaaliya.[31] Qodobka 4aad ee sharcigan ayaa caddeynaya in khayraadka batroolka yahay" hanti qaran oo ay wada leeyihiin dhammaan shacabka Soomaaliyeed, oo ay wakiil uga yihiin Dawladda Federaalka Soomaaliya iyo Dawladaha xubnaha ka ah Dawladda Federaalka".[32] Sida uu xeerinayo Qodobka 49aad ee Sharciga Batroolka, shirkadaha iyo hay'adaha kale ee qaanuuniga ah oo gala gadgudub ka dhan ah sharcigan waxaa lagu soo oogi karaa dacwad ciqaabeed. [33] Waxaana halkaas ka muuqata kaalinta garsoorku ku leeyahay ilaalinta arrimaha sharcigan xeerinayo.

Ilaalinta hantida guud waxaa kamid ah sida qandaraasyada doawladdu dhanka ka tahay ama hanti guud lagu kala iibinayo la raaco qawaaniinta oo laga fogaado khiyaano iyo musuqmaasuq. Qodobka 16aad ee Sharciga Iibka iyo Qandaraaska Qaranka ayaa xeerinaya in dhammaan dhinacyada ilaaliyaan "heerarka ugu sarreeya ee anshaxa inta lagu gudo jiro habraaca qandaraaska iibka iyo fulinta heshiiska." Ujeeddada waa in saraakiisha guud, tartamayaasha, edeeg bixiyayaasha , qabdaraaslayda iyo kuwa ka hoos shaqeeya iyo cid kasta oo lug ku leh ka fogaadaan musuq maasuq, dhagar, fududeyn, khiyaano , ishortaag, qasbid iyo faa'iido saarasho.[34]Haddii tartame uuna ku qanacsanayn qaabka qandaraaska iyo iibka ama uu aaminsan yahay in khiyaano ama musuqmaasuq dhacay, waxaa uu xaq u leeyahay dib u eegisyo kala duwan oo kala dambeeya oo ay samaynayaan, sarkaalka xisaabiyaha hay'adda qandaraaska iibka, Guddiga Madaxa-bannaan ee Qandaraaska Iibka, iyo ugu dambayn dib-u-

---

30 Tixraaca kore, Qodobka 1aad.

31 Sharciga Batroolka JF Soomaaliya. Sharci Lam.19 ee 8 Febraayo 2020, Qodobka 3aad, faqradda 4aad.

32 Tixraaca kore, Qodobka 4aad.

33 Tixraaca kore, Qodobka 49aad.

34 Sharciga Iibka iyo Qandaraaska Qaranka, Sharci Lam.22, 09/08/2016, Qodobka 16aad oo ka hadlaya khaqaano iuo musuqmaasuq.

eegis maxkamadeed.[35]

Sida uu xeerinayo Qodobka 57aad, faqradda 1aad ee Sharciga Maaraynta Maagliyadda Guud, dakhliga ka soo xarooda khayraadka dabiiciga ah ee Jamhuuriyadda Federaalak Soomaaliya waa in ay ku jiraan "dhammaan dakhliga Dawladda ee ka soo baxa bixinta shatiyada, Canshuuraha ama ka faaideysi kasta oo kale sida Kaluumeysiga, Macdanta iyo dakhliga Shidaalka."[36]

## 2.3. Goobaha iyo Dhaxalka Taariikhiga ah

Dal kasta waxa uu leeyahay taariikh iyo dhaxal dhaqan oo ay muhiim tahay in uu ilaashado. Dhaxalka dhaqanka(cultural heritage) waxaa kamid ah goobaha taariikhiga ah oo loo baahan yahay in la ilaaliyo. Sida uu xeerinayo Qodobka 50aad, faqradda 2aad(vi) ee Sharciga Maamulka Maaliyadda, goobaha taariikhiga ah waxa ay qayb ka yihiin hantida guud oo ay dowladdu masuulka ka tahay oo ay ka mid yihiin " hantida ma guurtada iyo shay kasta oo Dawladda Federaalku u aqoonsato in uu yahay shay taariikhi ah, ama raad taariikheed ah (aasaar), ama farshaxanka qadiimiga ah ee Qaranka qiimo u leh."[37]

Qodobka 1aad ee Axdiga Ilaalinta Hantida Dhaqanka Xilliga Dagaallada ee1954 waxa uu hantida dhaqanka ku fasirayaa iyada oo aan la eegayn asalka ama lahaanshaha:

> hantida guurtada iyo ma guurtada oo muhiimka u ah dhaxalka dhaqameed ee qowmiyad kasta, sida taallooyinka naqshadaha, farshaxanka ama taariikhda, ha ahaato diimeed ama caalami; goobaha qadiimiga ah; dhismayaal kooxeedyo oo, guud ahaan, leh xiiso taariikhi ama farshaxan; farshaxanno; gacmo-qoraallo, buugaag iyo walxaha kale ee xiisaha leh ee farshaxan, taariikhi ama qadiimiga; iyo sidoo kale ururinta sayniska iyo ururin muhiim ah oo

---

35 Sharciga Iibka iyo Qandaraaska Qaranka, Sharci Lam.22, 09/08/2016, Qodobbada 113(5), 163, 165 iyo 165.

36 Sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud, 25/12/2019, Qodobka 57aad , Faqradda 1aad.

37 Sharciga Maamreynta Maaliyadda Guud, Qodobka 50aad, faqradda 2aad(vi)

buugaag ama kayd ama soo-saarisyo hantida kor lagu qeexay. [38]

Faqradda (b) ee isla qodobkan ayaa xeerinaysa in hantida dhaqanka ay ka mid yihiin " dhismayaasha ujeeddadooda ugu weyn iyo tan dhabta ah ay tahay inay ilaaliyaan ama soo bandhigaan hantida dhaqameed ee guurtada ah ee lagu qeexay faqradda (a) sida matxafyada, maktabadaha waaweyn iyo kaydinta kaydka, iyo meelaha loogu talagalay inay ku gabbaadsadaan, xilliyada dagaalka hubaysan, hantida dhaqameed ee guurta ah ee lagu qeexay far-qoraalka (a)". Hantida dhaqameedka oo ah dhaxalka bulshada waxa lagu tirinayaa hantida guud oo loo baahan yahay in la ilaaliyo.

Waxaa kale oo jira Axdiga Khuseeya Ilaalinta Dhaqalka Dhaqanka iyo Dabiiciga oo soo baxay 1972, oo . Soomaaliya waxa ay axdigaan qayb ka noqotay 23dii Luulyo 2020.[39] Qodobka 4aad ee Axdigan ayaa dalalka qaybta ka ah ku waajibinaya in ay hubiyaan, " aqoonsiga, ilaalinta, soo bandhigidda, u gudbinta jiilalka mustaqbalka ee dhaxalka dhaqanka iyo dabiiciga ah ee lagu xusay Qodobbada 1aad iyo 2aad kuna yaalla dhulkeeda, oo dalkaas leeyahay."[40] Waxaa qodobkan dalalaka heshiiska qaybta ka ah, sida Soomaaliya, ku waajibinayaa in ay qaadaan tallaabo kasta oo macquul ah oo lagu ilaalinayo hantidaas dhaqan iyo daciiciga ah oo ay ku jirto mid sharci.[41] Axdigu waxa uu fursad siinayaa dalalka in ay soo gudbiyaan goobaga dhulkooda ku yaalla oo ay u arkaan in ay soo buuxin karaa shuruudaha in lagu daro dhaxalka adduunka.[42]

Soomaaliya oo leh goobo badan oo hanti dhaqameed iyo dabiici ah, meelna uguma jirto liiska dhaxalka dhaqanka iyo dabiiciga adduunka.[43]

---

38 1954 Convention for the Protection of Cultural Property in the Event of Armed Conflict and its Two Protocols, oo laga heli karo: https://en.unesco.org/sites/default/files/1954_Convention_EN_2020.pdf . Soomaaliya qayb kama aha axdigan.

39 Convention Concerning the Protection of the World Cultural and Natural Heritage , Paris, 16 November 1972, laga heli karo: https://whc.unesco.org/archive/convention-en.pdf

40 Tixraaca kore, Qodobka 4aad ee Axdiga.

41 Tixraaca kore, Qodobka 5aad ee Axdiga.

42 https://whc.unesco.org/en/criteria/.

43 https://whc.unesco.org/en/list/ .

Waxa muuqata in aan xil gooni ah la iska saarin loona baahan yahay in la calaamadeeyo, la diyaariyo qawaaniintii ilaalin lahayd iyo hirgelinta qawaaniintaas. Kaalin mug leh ayuu ku yeelanayaa Xaasiiska Xeer-ilaalinta Qaranka iyo Garsoorka guud ahaan ilaalinta hantida guud ee ah dhaxalka dhaqanka iyo dabiiciga.

## 3. HAY'ADAHA SIDA GUUD UGU XILSAARAN ILAALINTA HANTIDA GUUD

Dawladda laamaheeda kala duwan ayaa leh masuuliyadda ilaalinta hantida guud, iyada oo hay'ad kasta ay gudanayso waajibka dastuurka iyo qawaaniinta kale saareen. Kaalinta garsoorka ee ilaalinta hantida guud waxaa lagu falanqayn doonaa qaybo kale. Golaha Wasiirrada ee Xukuumadda Federaalka Soomaaliya ayaa leh masuuliyadda guud ee maamulka iyo maareynta dalka iyo ilaalinta hantida guud. Qodobka 99aad (F) ee Dastuurka KMG ayaa si gaar ah awood ugu siinaya " dhaqangelinta shuruucda, su]gidda nabadgelyada dalka iyo ilaalinta danaha dawladda."[44] Golaha Wasiirrada waxa ay leeyihiin masuuliyadda guud ee maamulka, maaraynta iyo ilaalinta hantida guud.

Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya ayaa isna leh awoodda ilaalinta hantida guud isaga soo saaraya sharciyo lagu maamulayo laguna ilaalinayo hantida qaranka.[45] Qodobka 55aad, faqradda 2aad ee Dastuurka KMG ah ayaa siinaysa golayaasha baarlamaanka gudashada masuuliyadda sharci-dejinta si waafaqsan dastuurka.[46] Qodobka 69aad, faqradda 2(b) ayaa Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Soomaaliya siinaysa awoodda "la-xisaabtanka iyo kor-joogteynta hay'adaha dawladda heerka qaran, gaar ahaan dhinaca hubinta dhaqan-gelinta sharciyada dalka."[47] Kaalin muuqata ayuu golayaasha baarlamaanku ku leeyihiin ilaalinta hantida guud sida ku cad qodobbada dastuuriga ah ee kore.

---

44 Qodobka 99aad(f) ee Dastuurka KMG, 2012.

45 Cutubka 6aad ee Dastuurka Federaalka KMG.

46 Qodobka 55aad, farqadda 2aad ee Dastuurka KMG.

47 Qodobka 69aad, faqradda 2aad (b) ee Dastuurka KMG.

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaalia waxa uu leeyahay awoodda ilaalinta iyo horumarinta mabaad'iida aasaasiga ah ee dastuurka sida uu xeerinayo Qodobka 87aad, faqradda 1aad (c) ee Dasruurka Ku-meel-gaarka ah (KMG).[48] Qodobka 3aad, faqradda 4aad ee Dastuurka KMG ayaa tilaamaysa in mabaad'iida la rabo in madaxweynuhu ilaaliyo, hormariyana ay ka mid yihiin "talinta sharciga, shuruudaha guud ee xeerarka caalmaiga ah caddaaladda, xukuumad loo dhan yahay oo ku dhisan wadatashi, kala-soocidda awoodaha sharci-dejinta, fulinta iyo garsoor madaxbanaan, iyagoo leh hannaan ku dhisan isla-xisaabtan iyo hufnaan ka jawaabaya danaha dadweynaha."[49] Sida muuqata madaxweyanaha waxa uu kaalin mug leh ku leeyahay ilaalinta hantida guud.

Xaafiisyo iyo hay'ado kale oo badan oo dowladda ah ayaa masuul ka ah ilaalinta iyo dhawridda hantiga guud, oo aan dhammaantood kalkaan lagu soo koobi karin. Hankan waxaan ku xusaynaa kuwa ugu muhiimsan. Xaafiisyada masuuliyaddu ka saaran tahay ilaalinta hantida guud waxaa kamid ah Xaafiiska Hanti Dhawraha Guud oo ay saaran tahay masuuliyadda ilaalinta hantida dawladda. Qodobka 5aad ee Sharciga Xafiiska Hantidhawrka Guud ee JFS ayaa sheegaya in mid ka mid ah ujeeddooyinka Xafiiska Hantidhawrka Guud yahay "in uu sameeyo hantidhawris madax-bannaan si loo ilaaliyo hantida dawladda federaalka Soomaaliya iyo in uu bixiyo talooyin lagu xoojinayo isla xisaabtanka, daah-furnaanta, nidaamka maamulka maaliyadda iyo dawladda."[50] Waajibaadka saaran Xaafiiska Hantidawrka Guud waxaa kale oo kamid ah ilaalinta iyo dhawrista ku dhaqanka Sharciga Maamulka Maaliyadda iyo miisaaniyadda dawladda, arrinkaasna wadashaqeyn kala yeesho dhinacyada ay khusayso oo dhan. Waxa kale oo uu Hantidhawraha Guud baarayaa dhammaan xisaabaadka iyo akoonnada dawladda iyo arrimaha maaliyadda xiriirka la leh oo dhan.[51]

48 Qodobka 87aad, faqradda 1aad (c) ee Dastuurka KMG.

49 Qodobka 3aad, faqradda 4aad ee Dastuurka KMG.

50 Qodobka 5aad, faqradda 1aad, Sharciga Xafiiska Hanti-dhawrka Guud ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, Sharci Lam.14 ee 10 Sebteembar 2023; Fiiri, Qodobka 11aad, faqradda 1aad(b) ee Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud, Sharci Lam.17 ee 25 Diseembar 2019 oo isla awooddaan sheegaya.

51 Tixraaca kore, faqradda 3aad iyo 6aad.

Xafiiska Hantidhawraha Guud waxa uu diiwaangelinayaa "dhammaan qandaraasyada, heshiisyada, shuruucda, xeerarka, deeqaha, deymaha, dammaanadaha kala wareejinta miisaaniyadda iyo dikreetooyinka Madaxweynaha iyo Ra'iisul Wasaarada Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.[52]

Xafiisyada ay masuuliyadda ka saaran tahay ilaalinta hantida guud waxaa kamid ah Xaafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda. Qodobka 3aad, faqradda 2aad, ee Sharciga Dhismaha iyo Qaabka Xafiiska Garyaqaanka Guud ayaa u xilsaaraya xafiiska "in uu daryeelo oo ilaaliyo xuquuqda iyo danta guud ee dawladda gaar ahaan, b)daafacaadda dawladda iyo xubnaha dawladda maxkamadaha hortooda dhinaca dacwadaha madaniga, idaariga iyo maaliyadda dalka gudihiisa iyo dibaddiisa."[53] Ilaalinta iyo daryeelidda danta guud ee Xafiiska Garyaqaanka Guud u xilsaaran yahay waxaa kamid ah ilaalinta hantida guud.

Qodobka 20aad ee Sharciga Ka Hortagga Lacag-dhaqidda iyo La-dagaallanka Maalgashiga Argagixisada, ayaa waxa uu aasaasaya Xarunta Warbixinta Maaliyadda. Sidoo kale Qodobka 24aad ee isla sharcigaas ayaa dhisaya Guddiga La-dagaallanka Lacag-dhaqidda iyo Ka Hortagga Maalgelinat Argagixisada. Xarinta iyo guddiga sharcigan yagleeyay waxa ay kaalin ku leeyihiin ilaalinta hantida guud.[54]

## 4. DIIWAANGELINTA HANTIDA DAWLADDA

Diiwaangelinta hantida dawladda oo ah hanti guud waxaa masuul ka ah Wasiirka Maaliyadda waana in uu ilaaliyo diiwaannada cusub ee hantida maguurtada ah ee dawladda. Waxaa kale oo waajib ah in Wasiirka Maaliyaddu joogteeyo sidoo kalena cusbooneysiiyo diiwaanka hantida maguurtadda ah ee qaranka.[55] Sidoo kale, wasiir kasta waxa uu masuul ka

52 Tixraaka kore, Faqradda 8aad

53 Qodobka 3aad, faqradda 2aad ee Sharciga Dhismaha iyo Qaabka Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda, Sharci Lam.18 ee 29 Janaayo 1976.

54 Qodobbada 20aad iyo 24aad ee Sharciga Ka Hortagga Lacag-dhaqidda iyo La-dagaalanka Maalgashiga Argagixisada, Sharci Lam.01, 2016.

55 Sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud, 25/12/2019, Qodobka 50aad, faqradda 1aad(j)

yahay ilaalinta diiwaanka kaydka dawladda ee wasaaraddiisa loo xilsaaray.[56] In kasta oo uuna xeerku faahfaahin ka bixinayn nooca hantida, haddana Qodobka 6aad ee Xeerka Nidaamka Maaliyadda iyo Xisaabaadka Dawladda waxa uu sheegayaa in hantida maamulkeeda loo xilsaaray Madaxweynaha iyo Golaha Shacabka ay leeyihiin ilaalinta diiwaannada la xiriira hantidaas awooddaasna ay leeyihiin.[57]

Hantida maaliyadeed iyo deymaha dawladda oo ah hanti guud waa in si hufan loo diiwaangeliyaa. Sida uu xeerinayo Qodobka 40aad ee Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud "dhammaan amaahda, deymaha kale ee maaliyadeed, hantida maaliyadeed io damaanadaha ee Khasnadda Mideysan ee Qaranka waa in lagu qabtaa Xaasiiska Xisaabiyaha Guud, laguna diiwaan geliyaa Xaafiiska Hanti-dawrka Guud, laguna soo daraa xisaab xirka sanadllaha ah ee qasnadda mideysan ee qaranka".[58] Hantida dawladda waxaa caadiyan maamulaya Wasiirka Maaliyadda. Laakiin haddii aan sharci si kale u dhigin, hantida dawladda oo loo asteeyey adeeg gaar ah, waxaa maamulaya wasiirka adeeggaas masuulka ka ah.[59]

Maaddaama burbur ku yimid hay'adihii dowladda xilligii dagaallada sokeeye, diiwaannadii hantida dawladdana meesha ka baxeen waxaa muhiim ah in la abuurro diiwaanno wax ku ool ah oo hantida dawladda lagu diiwaan geliyo. Waxaa kale oo muhiim ah in hay'adaha ku shaqada leh la xoojiyo si ay u gutaan waajibkooda sharci. Hase yeeshee waxa aad mooddaa in Xukuumadda Federaalka Soomaaliya ay raadinayso qaab waddo gaaban oo diiwaanka hantida guud qaar lagu hirgeliyo. Tusaale, iyada oo ay jiraan qawaaniin xeerinaya maamulka, maaraynta iyo soo celinta hantida qaranka, waxaa xukuummadihii kala dambeeyey magacaabayeen guddiyo loo xilsaaray tira-koobka, qiimeynta, diiwaangelinta iyo soo-celinta hantida qaranka. Ra'iisul Wasaarahii Xukuumadda Federaalka ayaa taariikhdu markii ay ahayd 9kii Janaayo 2019 magacaabay guddi ka kooban

56 Decree No.2, 29 December 1961, Financial and Accounting Procedure of the State, Article 2, Qodobka 5aad.

57 Tixraaca kore, Qodobka 6aad

58 Sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud, 25/12/2019, Qodobka 40aad.

59 Qodobka 4aad, Law No.67 of 1st September 1970, The Social Protection and for the Preventions of Certain Serious Crimes against Life, Safety, Property of Individuals.

xubno Golaha Wasiirrada, Hantidhawraha Guud, Xeer-ilaaliyaha Guud iyo Guddoomiyaha Gobolka Banaadir.[60] Waxaa guddiga loo xilsaaray in ay soo tiro koobaan hantida wasaarradaha, hay'adaha hoos-yimaada iyo xaafiiskayad madaxa-bannaan ee dastuuriga ah ay leeyihiin. Waajibaadka guddiga waxaa kale oo ka mid ahaa soo gudbinta xogta  iyo soo celinta dhulka iyo gaadiidka dawladda ee sida sharci darrada ah loo haysto.

Guddigaas ma qaban shaqadii loo xilsaaray, mana soo gudbin tirakoobka hantidii loo xilsaaray.  In ay shaqadii guddiga waxba ka hirgelin waxaa muujinaya, Raiisul Wasaaraha Xukuumadda Federaalka  ayaa 13kii Maajo 2023 mar kale magacaabay guddi ka kooban xuno Golaha Wasiirrada, Garyaqaanka Guud iyo Guddoomiyaha Gobolka Banaadir. Guddigii Ra'iisul Wasaarihii hore kuma jirin Garyaqaanka Guud ee waxaa ku jiray Xeer-iaalaiyaha Guud iyo Hantidhawrka Guud, halka guddiga cusub ay ka maqan yihiin Xeer-ilaaliyaha Guud iyo Hanti-dhawrka Guud. [61] Lama caddeyn sababta xubnahaas looga reebay iyo sababta hay'adaha masuuliyaddaas sharcigu siiyey loo isticmaali waayey. Ma muuqato wax shaqo ah oo ay qabteen guddiga la magacaabay illaa hadda iyo warbixin ay soo saareen.

Dhawr arrimood oo arrinkan magacaabidda guddiyada ku gadaaman ayaa jira. Tan koowaad, waxaa la dhinac maray shuruucdii iyo hay'adihii u xilsaarnaa tirakoobka iyo diiwaangelinta hantida dawladda. Waxaa habboonaan lahayd haddii xitaa ay tabar yarhihiin hay'ada awoodda sharci u leh baaritaanka hantida dawladda  in la dhiso oo la xoojiyo si waafaqsan qawaaniinta dalka. Tan labaad, hantiga dawladdu oo guddiyada loo sameeyey waa waa  Gobolka Banaadir oo keli ah, halkii lala imaan lahaa siyaasad guud oo khusaysa hantida dawladda ee dalka oo dhan iyo sidii loo maareyn lahaa iyada oo lala tashanayo maamullada dalka oo dhan.[62]

---

60 Xafiiska Ra'iisul Wasaaraga, Magacaabid Guddi, Tixraac:XRW/0.103/01/2019, 09 Janaayo 2019: https://www.facebook.com/HassanAliKhaire/posts/waxa-aan-magacaabay-guddiga-badbaadinta-iyo-soo-celinta-hantida-qaranka-oo-waaji/2232610303621842/

61 https://radiomuqdisho.so/raiisul-wasaare-xamse-oo-magacaabay-guddi-soo-tira-kooba-hantida-qaranka/

62 Waraysi sarkaal sare ee garsoorka ka tirsan, Diseembar 2023.

# 5. SARKAAL GUUD IYO MASUULIYADDA ILAALINTA HANTIGA GUUD

Sida uu xeerinayo Qododobka 1aad ee Sharci Lam.11 ee 5/12/2006, Sarkaal waxaa loola jeedaa madax hay'ad dawladeed oo sharci lagu dhisay hase yeeshee aan wasaaradna hoos imaanin.[63] Sharciga Iibka iyo Qandaraasyada Qaranaka waxa uu sarkaal guud ku macnaynayaa qof haysta ama ku sime ka ah xafiis adeegga guud oo mushaari ah, waxaana ka mid ah saraakiisha heerka dawlada hoose.[64] Qodobka 12aad ee Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud waxa uu jideynayaa in hay'ad, mashruuc ama wakaalad kasta oo dawladeed loo magacaabayo sarkaal idman oo ah sarkaalka masuulka ka ah hay'adda ama mashruuca, waana in loo maraa habraaca qorista saraakiisha dowladda.[65] Faqradda labaad ee qodobkan ayaa caddeynaysa in sarkaal kasta oo idman ee hay'ad ama shirkad dawladeed oo faqradda kore lagu xusay uu masuul ka noqonayo dhammaan "arrimaha la xiriira maamulka lacagaha dadweynaha, hantida iyo qaamaha hay'adaha dawladda ee uu mas'uulka ka yahay."[66] Xeerka Ciqaabta marka ay khuseyso,sida uu xeerinayo qodobka 240 , xarafka (a), sarkaal dawladeed waxaa loola jeedaa "qof kasta oo si joogto ah

63 Sharciga Shaqaalaha Rayidka ah, Sharci Lam.11 ee 5 Diseembar 2006; Qeexidda madax hay'adeed, fiiri Qodobka 1aad ee isla sharcigaan. Sharcigaan qodobbadiisa uma habaysna sidii sharci, waana adag tahay is si wanaagsan loo tixraaco.

64 Qodobka 3aad, faqradda 28aad, Sharciga Iibka iyo Qandaraaska Qaranka, Sharci Lam.22, 09/08/2016

65 Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud, Sharci Lam.17, 25 Diseembar 2019, Qodobka 12aad, faqradda 1aad, saraakiisha idman oo faqraddani taxayso waxaa kamid ah: b) Agaasimaha Guud ee Xafiiska Madaxweynaha Qaranka. t) Agaasimaha Guud ee Xafiiska Ra'iisal Wasaaraha Jamhuuriyadda Federaalka Somaaliya. j) Agaasimaha Guud ee Wasaaradaha Federaalka; x) Xoghayaha Guud ee Golaha Shacabka. kh) Xoghayaha Guud ee Aqalka Sare d) Agaasimaha Guud ee Maxkamada Sare. r) Hanti Dhowraha Guud ee Qaranka. s) Xisaabiyaha Guud ee Qaranka; sh) Agaasimaha Iibka Qaranka; dh) Agaasimayaasha Guud ee Guddiyada Qaranka; c) Agaasimayaasha Guud ee Hay'adaha iyo Shirkadaha Dawladda.

66 Qodobka 12aad, faqradda 2aad ee Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud, 2019

ama waqtiyeysan oo mushaar, gunno ama abaalgud ama tabaruc ama waajib saaran dartii u gudanaya hawl guud oo xeer-dejineed, maamul ama garsoor ama danta qaranka ah ama hay'ad kale oo dawladeed".[67] Qodobka 2aad,Faqradda 23aad ee Sharciga Batroolka JF Soomaaliya ayaa sarkaal dowladeed ku qeexaya "shaqaalaha madaniga ah ee dowladda ama shaqsi u dhigma xubnaha baarlamaanka, xukuumadda, iyo garsoorka ama garyaqaanka guud ama shaqsi ka tirsan Hay'adda Batroolka Soomaaliya."[68]

Sarkaalka idman ee masuul ka ah hay'd dawladeed waxaa saaran masuuliyad shakhsi ah,waana qofka leh masuuliyadda ugu dambaysa haddii uu kharash dheeraad ahi ka baxo ama lacag ay si khaldan oo sharci darro ah ay uga baxdo hay'adda dawladda.[69] Sida uu xeerinayo Qodobka 52aad, faqraddiisa 2aad ee Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud, "sarkaalka idman ayaa loo raacanayaa dib u soo celinta lacagihii si qaldan ama sharci darro ah ku baxay, illaa iyo inta dawladdu ka helayso qiimo u dhigma lacagihii baxay."[70] Haddii ay dhacdo in madaxa hay'adda ama Wasiir Dawladda Federaalka uu sarkaalka idman siiyo amar ah in uu lacag ku bixiyo sifo khilaafsan sharciga iyo xeernidaamiyayaashiisa, sarkaaku waa in uu inta aanu amarka fulin madaxa amarka siiyey qoraal ahaan ugu sheegaa aragtidiisa ku aaddan in amarku keeni karo lacag bixin sharci darro ah.[71]

Hantida dawladda ee sida qaladka ama sharci darrada ku baxa waxaa muhiim ah in lasoo celiyo. Saraakiisha hay'adaha dawladda waxaa saaran masuuliyad in ay diiwaangeliyaan lacagaha habka qaldan ku baxay sida ay qabaan xeernidaamiyayaashu.[72] Haddii ay lacag ama hanti guud si

67 Qodobka 240(a) ee Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed , 16 Diseembar 1962, xarfaha (b) iyo (c) waxa ay qeexayaan shaqsi lagu aaminay adeegga dadweynaha iyo shaqsi qabta shaqo lagama maarmaan ah. Sida uu xeerinayo Qodobka 241 ee Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed, labada hore waa saraakiil dawladeed oo qodobkan khuseeyo.

68 Sharciga Batroolka JF Soomaaliya, Sharci Lam.19 ee 8 Febraayo 2020.

69 Sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud, Sharci Lam.17 ee 25/12/2019, Qodobka 52aad, Faqradda 1aad.

70 Tixraaca kore, Qodobka 52aad, Faqradda 2aad

71 Tixraaca kore, Qodobka 52aad, Faqradda 3aad.

72 Sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud, 25/12/2019, Qodobka 54aad, 2aad

qaldan ku baxdo, sarkaalka idman ee hay'ad kasta ee dawladda waa in uu "qaado tallaabooyinka ku habboon ee dib loogu soo celinayo dhammaan lacagihii ay lahayd dawladda oo qandaraasluhu si qaldan u qaatay isaga oo aan gudan ama aan dhammaystirin waajibkiisii shaqo iyo hawshii lagula heshiiyey ama si qaldan ku qaatay lacag dheeraad ah."[73]

## 6. GUUDMAR KU SAABSAN NIDAAMKA GARSOORKA EE SOOMAALIYA

Qodobka 105aad ee Dastuurka KMG ah ayaa xeerinaya in awoodda garsoorka ay maxkamadaha u xilsaaran yihiin.Qodobka 106aade ee Dastuurka ayaa isna sheegaya in garsoorku "ka madax bannaan yahay laamaha dawladda ee sharci-dejinta iyo fulinta marka ay gudanayaan xilkooda. Xubnaha garsoorkuna u hoggaansamayaan oo keliya sharciga."[74] Dastuurka KMG ah ayaa sheegaya in garsoorka dalka uu noqonayo saddex heer oo kala ah: maxkamadda dastuurka, maxkamadaha heer Dawlad Federaal iyo maxkamadaha dawlad goboleedyada. Qodobka 108aad , faqradda 1aad ( c) ayaa tilmaamaysa "Maxkamada ugu saraysa dalka ee heer federaal waa Maxkamadda Sare ee Federaalka, iyadoo Dawladaha Xubinta ka ah Dawladda Federaalka iyaguna yeelanayaan Maxkamad Sare ee heer Dawladaha Xubinta ka ah federaalka oo iyaga u gaar ah."[75]

Qodbka 105aad, faqradda 2aad ee Dastuurka ayaa caddeynaysa in qaabdhismeedka garsoorka uu Baarlamaanka Federaalka xeer ka soo saarayo.

Baarlamaanka Soomaaliya weli xeer cusub oo khuseeya nidaamka garsoorka ma soo saarin. Sharciga Nidaamka Garsoorka ee 1962 ayaa hadda dalka dhaqangal ka ah.[76] Qodobka 1aad ee xeerkan waxa uu

73 Sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud, 25/12/2019, Qodobka 54aad, Faqradda, 3aad.

74 Qodobbada 105 iyo 106 ee Dastuurka KMG, 2012.

75 Qodobka 108aad ee Dastuurka KMG.

76 Sharciga Nidaamka Garsoorka, Shharci Lam. 3, ee 12 Juunyo 1962; Waxaa la laalay Sharciga Nidaamka Garsoorka, Sharci Lam.34 ee 22 Sebtembar 1974, fiiri, Sharciga Dhisidda Golha Adeegga Garsoorka, Sharci Lam.28 ee 8 Luulyo 2014, Qodobka 31aad.

sheegayaa in maxkamadaha dalka ay ka kooban yihiin maxkamadda degmada, maxkamadda gobolka, maxkamadda rafcaanka iyo maxkamadda sare.[77] Qodobka 7aad ee Xeerka Nidaamka Garsoorka ayaa xeerinaya in garsoorka Soomaaliya ka kooban yahay Garsoorayaasha, iyo Xeer-ilaaliyaha Guud iyo ku-xigeennadiisa. Kaaliyayaasha iyo gaarsiiyayaasha waay taageerayaan xubnaha garsoorka.[78]

Nidaamka garsoorka dalka weli lama federaalayn oo sharciyada dhaqangalka ah ee khuseeya nidaamka garsoorka waxa ay ku salaysan yihiin nidaamkii awooddu aruursaneed. Dowlad Goboleedyada Xubnaga ka ah Dowladda Federaalka ah, waxa ay leeyihiin nidaam garsoor oo ay isticmaalaan. Iskudayo badan ayaa la sameeyey si looga heshiiyo qaab-dhismeedka nidaamka garsoorka dalka. Tusaale, biskii Janaayo 2018kii, Doawladda Federaalka iyo Dowladaha Xunaha ka ah ayaa gaaray Heshiis Siyaasadeed ee Hannaanka Caddaaladda iyo Asluubta oo tilmaamayey qaab-dhismeedka maxkamadaha dalka.[79] Heshiiskaas waxaa la isla qaatay in dalku yeesho nidaamka garsoorka isku dhafan. Muddo kooban ka bacdi, dowladda federaalka ayaa heshiiskaas ka biyo diidday isbeddelna ku samaysay arrimo lagu heshiiyey.[80]

Golaha Wadatashiga Qaranka ayaa heshiis ay gaareen 28 Diseembar 2022 oo cinwaankiisu ahaa " Heshiiska Hannaanka Federaalaynta Garsoorka", waxay isla qaateen in nidaamka garsoorka dalku noqdo hannaanka isku-dhafka ah oo an mid isku xiraya garsoorka dalka.[81] Qaab-dhismeedka maxkamadaha dalka ayey isku raaceen in ay noqdaan, maxkamadaha darajada koowaad, maxkamadaha rafcaanka dowlad goboleedyada, maxkamadaha sare ee dawlad goboleedyada, maxkamadda sare ee

---

77 Qodobka 1aad, Sharciga Nidaamka Garsoorka, 1962.

78 Qodobka 15aad, faqradaha 1aad iyo 3aad, Xeerna Nidaamka Garsoorka 1962.

79 Heshiis Siyaasadeed ee Hannaanka Caddaaladda iyo Asluubta Soomaaliya, Jowhar, Hirshabeelle, 23-24 Jannaayo 2018.

80 Mowqifka Dowladda Fedraalka Soomaaliya ee ku aaddan Heshiiska ee Hannaanka Caddaaladda iyo Asluubta Soomaaliya, 6 Agoosto 2018.

81 Heshiiska Hannaanka Federaalaynta Dalka, Golaha Wadatashiga Qaran, 28 Diseembar 2022, Qodobka 1aad.

federaalka oo xarunteedu tahay Muqdisho, iyo maxkamadda dastuurka oo hal ah xarunteeduna tahay Muqdisho.[82] Heshiiskan waxa kale oo uu qorayaa in uu jiri doono hal Xeer Nidaam Garsoor oo nidaaminaya "qaab-dhismeedka xudduudaha, darajooyinka iyo awoodaha maxkamadaha" heer federaal iyo heer dawlad goboleed. Waxa kale oo uu heshiisku sheegayaa in uu jiri doono hal Gole Sare ee Garsoor ay xubno ka yihiin garsoorka heer federaal iyo heer dawlad goboleed. Golaha Wadatashiga Qaran waxa ay heshiiska ku sheegeen in qodobbada heshiiska ay galayaan Dastuurka JFS marka dib-u-eegista lagu samaynayo.[83] Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya ayaa iska leh ansixinta wax-ka-beddelka dastuurka si waafaqsan Dastuurka KMG, welina ma cadda in baarlamaanku aqbali doonaan soojeedintan iyo isbeddelka la soo jeediyey. Hase yeeshee, maaddaama hadda Dastuurka KMG ah iyo Xeerkna Nidaamka Garsoorka 1962 dalka dhaqangal ka yihiin, falanqaynta qoraalkan iyaga ayey ku saleysnaan doontaa.

## 6.1. Awoodda Garsoorka ee Ilaalinta Hantida Guud

Qawaaniinta dalka ayaa garsoorka Soomaaliya siinaya awoodda ilaalinta iyo soo celinta hantida guud ee dalka. Sida uu xeerinayo Sharci Lam.6 ee 4/1/1975 ee wax-ka-beddelka Xeerka Habka madaniga oo kordhiyey awoodda garsooraha, Qodobka 80aad Bis, faqraddiisa 1aad waxa uu dhigayaa " dacwooyinka dawladda iyo wakaaladaha madaxa-bannaan ay dhinaca ka yihiin , garsooraha waxaa waajib ku ah in uu xaqiijiyo, daryeelo oo uu si xilkasnimo ku jirto u difaaco danta guud." Faqradda 2aad ee qodobkan waxay xeerinaysaa in garsooraha laga doonayo "in uu ku dadaalo xoolaha dawladda iyo wakaaladaheeda madaxa-bannaan si aan marna si sharci darro ah xuquuqdooda loo dhaafsiin maxkamadaha hortooda xitaa haddii aysan si habsami ah u difaacin xubnaha wakiilka u ah dawladda, marwalbana waa in garsooruhu si iskiis ah u ilaaliyo danaha guud isaga oo dhawraya sharciga."[84] Masuuliyadda qodobkan saarayo garsooraha waxa ay su'aal gelin kartaa dhex-dhexaadnimada garsoorka oo ay dastuurka iyo

82 Tixraaca sare, Qodobka 3aad.

83 Tixraaca kore, Qodobka 10aad.]

84 Sharci Lr.6 , 4 Janaayo 1975, Xeerka Habka Madaniga ah Buugga I, Qaybta V, Awoodda Garsooraha Qodbkiisa 80 oo la Kordhiyey, Qodobka 80 Bis.

xeerarka iyo halbeegyada caalamiga tilmaamayaan.[85] Qodobka 106(1) ee Dastuurka Federaalak KMG, waxa uu si cad u sheegayaa in "garsoorku ka madax-bannaan yahay laamaha dawladda ee sharci-dejinta iyo fulinta marka ay gudanayaan xilkooda."[86] Dhanka kale, waxaa muuqata in ay jirto cabsi wakiillada dawladda laga qabo in ayna si fiican u difaacin hantida dawladda. Hase yeeshee, maaddaama laga rabo garsooraha in uu ka hortago in aan hantida dawladda sifo sharci darro ah lagu qaadan, waxa lagu doodi karaa in ay soo hoos gelayso waajibaadka guud ee harsoorka ee kun aaddan ilaalinta sharciga.

Xeerar kala duwan ayaa garsoorka siinaya awoodda ilaalinta hantida guud. Tusaale, xeerarka maaliyadda ayaa garsoorka siinaya awoodda soo oogidda dacwadaha ciqaabta iyo go'aan ka gaaridda. Qodobka 32aad ee Sharciga Baarista iyo La-dagaallanka Xadgudubyada Xeerarka Maaliyadda, ayaa Maxkamadda Gobolka si gaar ah u siinaya awoodda ugu sarreysa dembiyada maaliyadeed oo ka dhaca dhulka ay ikhtisaaska u leeyihiin.[87] Marka la eego dembiyada ku qeexan xeerarka canshuurta tooska ah , dacwadaha ciqaabta ah waa in la furo kadib marka canshuurta si kama dambays ah loo qiimeeyo oo la xaqiijiyo waajibaadka bixinta canshuurtaas.[88] Sidoo kale, Xadgudubka ka dhanka ah Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud ee 25/12/2019 iyo xeer-nidaamiyayaasha ka farcamaya ama la xiriira, waxa lagu mutaysanayaa ciqaab waafaqsan Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed.[89] Qodobka 3aad ee Xeerka Baarista iyo La-dagaallanka Xadgudubyada Xeerarka Maaliyadda, waxa dembiyada maaliyadda qeexayaa xadgudub kasta oo ku saabsan qodob ku jira xeerka maaliyadda kaas oo ciqaabtiisu tahay dembi ama xadgudub xeerka ciqaabtu qabo,

---

85 Basic Principles on the Independence of the Judiciary, UN General Assembly Resolutions 40/32 of 29 November 1985 and 40/146 of 13c December 1985.

86 Qodobka 106(1) Dastuurka Federaalka KMG.

87 Qodobka 32aad, faqradda 1aad, Sharci Lr. 12 ee 1da Agoosto 1966 — Baarista iyo la Dagaallanka Xadgudubyada Xeerarka Maaliyadda.

88 Sharci Lr. 12 ee 1da Agoosto 1966 — Baarista iyo la dagaallanka xadgudubyada Xeerarka Maaliyadda, Qodobka 32aad, faqradda 2aad.

89 Sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud, 25/12/2019, Qodobka 55aad, Faqradda 1aad.

waa inuu noqdaa dembi maaliyadeed.[90] Qodobka 6aad ee isla xeerka ayaa xeerinaya ciqaabta dembiyada maaliyadda oo iskugu jira xabsi iyo ganaax, isaga oo caddeynaya in marka la adeegsanayo ciqaabya maxkamaddu qiimeyn doonto culayska dembiga, tixraacaysana qodobka 110 ee Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed.[91]

Xaafiiska Xeer-ilaaliyaha Guud ee Qaranka oo ah qayb kamid ah garsoorka Soomaaliya  ayaa kaalin mug leh ku leh ilaalinta hantiga guud. Qodobka 8aad ee Xeerka Nidaamka Garsoorka ayaa Xaafiiska Xeer-ilaaliyaha Guud ee Qaranka awood u siinaya in uu hubiyo ixtiraamka sharciga iyo ilaalinta xuquuqda qaranka, iyo hay'adaha dawladda. Si uu taas u xaqiijiyana waxa uu baaritaan ku samaynayaa, si toos ah, isaga oo adeegsanaya ku xigeennadiisa ama booliska baarayaa , dacwo demiyeedna ku soo oogayaa. Si waafaqsan Qodobka 8aad, faqradiisa 1aad(b) markasta oo dan guud meesha soo gasho waxa uu waxa uu soo faragelin karaa ama wadi karaa dacwadaha madaniga ah.[92] Masuuliyadda ah hubinta ixtiraamka sharciyada waxa ay daboolaysaa dhammaan sharciyada dalka oo ay ku jiraan kuwa xeerinaya hantida guud iyo ilaalinteeda oo iskugu jirta ka hortagga , dacwo oogidda dembiyada ka dhanka ah hantida guud, iyo soo celinta hantidaas.

Shariga Maamulka Dakhliga Lam.13 ee 27 Oktobar 2019  oo ujeeddadiisu tahay maamulka dakhliga Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ayaa isna garsoorka siinaya dhagaysiga iyo go'aan ka gaaridda arrimaha ku saabsan dakhliga. Qodobka 55aad oo isla sharcigaas ayaa siinaya Maxkamadda Sare ee Federaalka dib-u-eegista go'aamada diidmada ee ay dhigayaan sharciyada dakhliga.[93] Hubinta hirgelinta sharciyada canshuurta iyo dakhli ururinta kaalin weyn ayuu ku leeyahay garsoorku. Tusaale, canshuurta waajibtay oo aan la bixin waxa ay isku beddelaysaa deyn ka maqan Dawladda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. Sida uu xeerinayo

90 Sharci Lr. 12 ee 1da Agoosto 1966 — Baarista iyo la dagaallanka xadgudubyada Xeerarka Maaliyadda, Qodobka 3aad.

91 Sharci Lr. 12 ee 1da Agoosto 1966 — Baarista iyo la dagaallanka xadgudubyada Xeerarka Maaliyadda, Qodobka 6aad.

92 Tixraaca kore, Qodobka 8aad, faqraddiisa 1aad(b).

93 Sharci Lam.13 , 27 Oktobar 2019,Sharciga Maamulka Dakhliga, Qodbka 55aad.

Qodobka 62aad ee Sharciga Maamulka Dakhliga, Wasaaradda Maaliyaddu waxa ay qofkii canshuur ku baaqatay ku dacweyn kartaa kagana soo qaadi kartaa maxkamad kasta oo awood u leh qaadista dacwaddaas iyada oo la raacayo habraaca hantida qaranka loo difaaco.[94] Haddii uu qof bixin waayo canshuur ku waajibtay,Wasaaradda Maaliyadda waxaa u furan in ay rahmato hantida uu leeyahay canshuur bixiyahaiyada oo aan la eegayn in hantidaas gacan ugu jirto iyo in kale.[95] Sida uu xeerinayo Qodobka 65aad Sharciga Maamulka Dakhliga  si waafaqsan Qodobka 64aad , Wasaaradda Maaliyadda waxa ay iibin kartaa hantidaas si waafaqsan qawaaniinta dalka.[96] Iyada oo adeegsanaysa awoodaheeda baarista arrimaha muujin kara in uu dhacay fal-dembiyeed la xariira sharci dakhli , Wasaaradda Maaliyaddu waa in ay in ay booliska ilaalinta canshuuraha wargelisaa siisaana macluumaadka macluumaadka dembiga oo loo baahan yahay.[97]

Marka la helo macluumaadka fal-dembiyeedka, Xeer-ilaaliyaha Guud ayaa leh masuuliyadda dembi ku soo oogidda dembiyada la xiriira sharciyad] a  dakhliga. Hase yeeshee marka uu qof qirto in uu galay dembi la xiriira sharci dakhli, wasaaraddu waxa ay oogidda dacwada ugu beddeli kartaa lacag uu bixiyo.[98] Qofkii ay wasaaraddu dacwo oogidda ugu beddesho lacag bixin , laguma soo oogayo ciqaab ama dembi ku oogis fal-dembiyeed oo la xiriira dembigaas. Ujeeddadu waa in aan qofka laba ciqaabood la iskugu darin.[99] Hase yeeshee, awoodda wasaaradda ay dembi oogidda ugu beddeli karto lacag bixin waa xaddidan yahay. Tusaale, lacag laguma beddeli karo dembiyada la xiriira habdhaqanka sarkaal dakhli ama sarkaal dowladeed oo ku shaqaynaya awood dowladeed.Xeer-ilaaliyaha isna

94 Shariga Maamulka Dakhliga Lam.13 ee 27 Oktobar 2019 , Qodobka 62aad.

95 Shariga Maamulka Dakhliga Lam.13 ee 27 Oktobar 2019 , Qodobkan 63aad, Faqradda 1aad.

96 Shariga Maamulka Dakhliga Lam.13 ee 27 Oktobar 2019 , Qodobka 65aad.

97 Shariga Maamulka Dakhliga Lam.13 ee 27 Oktobar 2019 , Qodobka 97aad., Qodobka 4aad iyo 46aad; Qodobka 29aad ee Sharciga Baarista iyo Xakamaynta. ku Xadgudbidda ,Sharci Lam.12, 1 Agoosto 1966.

98 Sharciga Maamulka Dakhliga, Qodobka 97aad, Faqradda 3aad.

99 Sharciga Maamulka Dakhliga, Qodobka 97aad, Faqradda 4aad.

waxa uu awood u leeyahay in uu ka horyimaado in aan dembi oogidda lacag bixin lagu beddelin.[100]

Sidoo kale, Xaafiiska Hantidhawrka oo awood u leh in uu baaro dhammaan xisaabaadka iyo akoonnada dawladda iyo arrimaha maaliyadda, haddii ay u soo baxdo fal-dembiyeed waxa uu u gudbinayaa Xaafiiska Xeer-ilaaliyaha Guud si uu u sameeyo baaritaanno, una soo oogo dacwad ka dhan ah saraakiisha la tuhunsanyahay. Arrimaha xeer-ilaaliyhu baarayo waxaa kamid ah been-abuurka, wax-is-dabamarinta iyo khayaano kasta oo lagu sameeyo maamulka maaliyadda dawladda.[101]

Sharciga Ka Hortagga Lacag Dhaqidda iyo La Dagaallanka Maalgashiga Argagixisada ayaa isna garsoorka siinaya awood uu ku maxkamadeeyo, hantidana uga soo celiyo qofkii gala mid kamid ah fal-dembiyeedyada ku xusan Qodobka 2aad ee sharcigan. Qoodbka 32aad, faqradda 1aad ee Sharciga Ka Hortagga Lacg Dhaqidda, ayaa qoraya markii qof lagu eedeeyo fal-dembiyeed ama lagu helo oo ay jiraan sababo maangal ah in qofkaas uu fal-dembiyeedkaas ka helay dheef ama uu hayo lacag loo isticmaalay in lagu galo dembi, xeel-ilaaliyaha guud waxa uu codsan karaa in lacagtaas la qabto si waafaqsan sharcigan.[102] Sharciga Ka Hortagga Lacag Dhaqidda waxa kale oo uu Xaafiiska Xeer-ilaaliyaha siinayaa awoodda maareynta hantida inta lagu jiro qabashada si uu uga hortago qiimodhac ku yimaada hantida inta aan lala wareegin. Xeerilaaliyaha Guud waxa kale oo sharcigan awood u siinayaa in uu aasaaso Xaafiska Maareynta Hantida.[103] Xeer-ilaaliyaha waxa uu u baahan yahay in maxkamadda ka helo amar la wareegis hantida laga faa'iiday dal-dambiyeed ama loo adeegsaday in lagu gaysto fal-dambiyeed.[104]

Sharciga Badda Soomaaliyeed ayaa isna garsoorka awood u siinaya

100 Qodobka 97aad, Farqadda 3aad(a).

101 Qodobka 3aad, Faqradda 7aad, Sharciga Xafiiska Hanti-dhawrka Guud ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, Sharci Lam.14 ee 10 Sebteembar 2023.

102 Qodobbada 2aad,32aad ee Sharciga Ka Hortagga Lacag Dhaqidda iyo La Dagaallanka Maalgashiga Argagixisada, Sharci Lam.01 ee 21 Febraayo 2016

103 Tixraaca kore,Qodobka 33aad, faqradaha 1aad iyo 2aad.

104 Tixraaca kore, Qodobka 35aad iyo 34aad.

"dhammaan ku xadgudubka sharciga badda, xeernidaamiyaha iyo rukhsadaha ama xadgudubka nabadgelyada, caafimaadka, badbaadada, sharafta, canshuuraha ama kheyraadka badda ee ku jira soohdinta xeebaha,biyaha gudaha, badda dalka, xadka ku xiga xadka dhaqaalaha ama xadka badda hoosteeda oo ay leedahay Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya."[105]Sidoo kale, Sharciga Dembiyada Maraakiibta Shisheeye ayaa garsoorka siinaya awood u siinaysa dacwadaha hoos yimaada sharcigan.[106]

### 6.2. Iskaashiga Garsoorka Caalamiga ah.

Marka ay dhacdo in hanti guud loola baxdaso dalka dibaddiisa, ama qof dambiile ama tuhmane ama eedaysane ah ay u fakadaan, ama caddeymo iyo wadashaqayb looga baahdo dalka dibaddiisa. Garsoorka Soomaaliya iyo hay'adaha caddaaladda waxa ay adeegsan karaan iskaashi garsoor oo caalami ah. Iskaashiga garsoorka ee caalamiga ah qaybo badan ayuu ka kooban yahay, waxaana ka mid ah: la wareegidda iyo hakinta hantida,xiridda iyo isku wareejinta maxaabiista, iskaashida sharci iyo isku-celinta dembiilayaasha iyo eedaysanayaasha, is-dhaafsida dokumiintida, caddeynaha ee dalalka.[107] Kaalinta garsoorka ee ilaalinta hantida guud waxaa kamid ah in ay iskaashi garsoor caalami ah la sameeyaan dalalka kale si hantidii lala baxsaday ama shaqsigii fakada uuna uga dhuuman gacanta caddaaladda.[108]

Qawaaniinta Soomaaliya si kala firirsan ayey u xeerinayaan iskaashiga garsoorka caalamiga ah. Qaybaha sida tooska ah loogu xeeriyey waxaa ka mid ah, isku celinta eedaysanayaasha iyo dembiilayaasha, aqoonsiga

---

105 Sharciga Badda Soomaaliyeed, Sharci Lam.5 ee 25 Janaayo 1989, sidoo kale fiiri qodobbada 192-199 ee isla sharcigan.

106 Qodobka 5aad, Sharciga Dembiyada Maraakiibta Shisheeye, Sharci Lam.6, ee 1 Janaayo 1974.

107 Muhimadda iyo lagama maarmaannimada iskaashiga garsoorka ee caalamaiga, fiiri, Georgeta Modiga, Importance and Necessity of International Judicial Cooperation, AGORA International Journal of Judicial Sciences, No.1(2014),pp.98-103.

108 Faahfaahin ku saabsan Iskaashiga Garsoorka Caalamiga Arrimaha Ciqaabta, fiiri, Anton Girginov, Judicial Cooperation of Somalia With Other Countries in the Penal Field: Legal Hurdles and Gaps, Somali Studies, Vol. 4, Issue 2019 (31 Dec. 2019), pp.72-99.

go'aannada maxkamadda dibadda, isku-celnta eedaysanayaasha iyo dembiilayaasha, iskaashiga sharciga(MLA). Tusaale ahaan, Qodobka 36aad ee Dastuurka Ku-Meel-Gaarka oo xeerinaya iskucelinta eedaysanayaashha iyo dembiilayaasha keliya kamana hadlayo qaybaha kale ee iskaashiga garsoorka caalamiga ah.Faqradda 1aad waxa ay xeerinayaa in iskucelinta eedaysanayaasha iyo dembiilayaasha lagu oggolaan karo oo keli ah si waafaqsan sharciga, iyo in uu jiro heshiis isu-celin ah oo Soomaaliya dhinac ka tahay iyo heshiis caalami ah oo ku waajibinaya Dawladda Federaalka Soomaaliyeed celinta eedaysanaha ama dembiilaha.[109] Faqradda 2aad ee qodobkan ayaa qoraysa in isku-celinta eedaysanayaasha iyo dembiilayaasha noqoto mid waafaqsan sharciga,iyo Baarlamaanka Federaalkana soo saaro sharci lagu maamulayo isku celinta eedaysanayaasha iyo dembiilayaasha.[110] Baarlamaanka Soomaaliya weli ma soo saarin sharci maamulaya iskaashiga garsoorka caalamiga ah. Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka ayaa wadda dadaallo lagu qorayo sharci khuseeya iskaashiga sharciga ee dalalka (MLA) iyo isku celinta eedaysanayaasha iyo dembiilayaasha.[111]

Waxaa jira dhowr sharci oo xeerinaya qaybo kamid ah iskaashiga caalamiga ah oo ay kamid yihiin, Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed (XCS), Xeerka Habka Ciqaabta Soomaaliyeed(XHCS) , Sharciga Ka Hortagga Lacag Dhaqidda iyo Maalgelinta Argagixisada, Sharciga La Dagaallanka Argagixisada. Buugga 5aad ee Xeerka Habka Ciqaabta ayaa ku saabsan xiriirka garsoor ee hay'adaha shisheeye ayaa qodobbada 275-286 ku xeerinaya arrimo badan oo khuseeya iskaashiga caalamiga oo ay kamid yihiin isku-celinta eedaysanayaasha iyo dembiilayaasha, warqadaha khuseeya kiisaska ciqaabta oo lagu aqoonsanayo go'aannada maxkamada bibadda, lagu dalbanayo caddeymo dalal shisheeye looga baahan yahay iyo qaabka loom marayo, warqadaha ka yimaada hay'adaha garsoorka shisheeye, awoodda Wasaaradda Caddaalada ee arrimaha iskucelinta eedaysanayaasha iyo dembiilayaasha iyo arrimo kale oo khuseeya iskaashiga garsoorka

109 Qobobka 36aad, farqadda 1aad ee Dastuurka KMG.

110 Qodobka 36aad, faqradda 2aad ee Dastuurka KMG.

111 Waraysi hawlwadeen ka tirsan Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka ee JFS, Diseembar 2023.

caalamiga ah.[112] Qodobbada 10aad iyo 11aad ee XCS ayaa xeerinaya aqoonsiga go'aannada maxkamaha dibadda ee kiisaska ciqaabta iyo isku-celinta eedaysanayaasha iyo dembiilayaasha iyo habraaca loo marayo.[113] Sidoo kale, Qaybta Siddeedaad ee Sharciga Ka Hortagga Lacag-dhaqidda iyo La-dagaallanka Maalgashiga Argagixisada ayaa Qodobbada 36-51 ka hadlaysa Iskaashiga Caalamiga ah, xeerinayana arrimo ay kamid yihiin codsiga iskaashi sharci, diidmada fulinta codsiyo, codsiyada tallaabooyin baaritaan, codsiga tallaabooyin ku-meel-gaar ah, codsi la-waraagid hanti, baaritaan wadajir ah, isku dhiibidda eedaysanaasha iyo arrimo kale.[114]

Sidoo kale, Soomaaliya waxa ay qayb ka tahay dhow heshiis oo caalami ah oo fursad u siinaya in iskaashi garsoor oo caalami ah dhexmaro. Heshiisyadaas waxaa kamid ah, Heshiislka Carabta ee Riyadh oo khuseeya iskaashiga garsoorka, Heshiisyada Qaramada Midoobay, Midowga Afrika iyo Jaamacadda Carabta ee la dagaallanka musuqmaasuqa.[115] Xeshiisyadaan waxa ay Soomaaliya u oggolaanayaan in ay iskaashi sharci iyo isku-celin eedaysanayaal iyo dambiilayaal la yeelato dalalka qaybta ka ah heshiisyadaas iyada oo aan Soomaaliya heeshis laba dhinacle ah la lahayn. Tusaale, Qodobka 1aad, faqradda (b) ee Xeshiiska Qaramada Midiobay ee La-dagaallanka Musuqmaasuqa waxa uu sheegayaa in mid ka mdi ah ujeeddooyinka heshiiska tahay horumarinta, fududeynta iyo taageerada iskaashiga caalamiga ah ee ka hortagga muqumaasuqa , oo ay ku jirto hanti soo celinta. [116]Waajibaadyo badan oo ay heshiisyadaas dalka Soomaaliya

112 Xeerka Habka Ciqaabta Soomaaliyeed, Xeer. Lam.1 ee 1 Juun 1963, Qodobbada 275-286.

113 Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed, 3 Abriil 1964, Qodobdaab 10aad iyo 11aad.

114 Sharciga KA Hortagga Lacag-dhaqidda iyo Ladagaallanka Maalgashiga Argagixisada, Sharci Lam.01 ee 21 Febraayo 2016, Qodobbada 36aad illaa 51aad.

115 League of Arab States, Riyadh Arab Agreement for Judicial Cooperation, 6 April 1983; UN General Assembly, United Nations Convention Against Corruption, 31 October 2003, A/58/422; African Union, African Union Convention on Preventing and Combating Corruption, 11 July 2003.

116 UN Convention Against Corruption, Article 1(b).

saareen weli lama hirgelin.[117] Waxaa muhiim ah Soomaaliya sidoo kale qayb ka noqoto Heshiiska Qaramada Midoobay ee La-Dagaallanka Dembiyada Abaabulan ee Xudduudaha Ka Gudba, oo iyana Soomaaliya ka caawin lahaa in ay iskaashi la yeelato waddamo badan arrimaha ku saabsan dembiyada abaabulan oo uu heshiiskaas xeerinayo.[118]Golaha Wasiirrada Soomaaliya ayaa ansixiyey Heshiiska La-dagaallanka Dembiyada Abaabulan ee Xudduudaha ka Gudba.[119] Golayaasha Baarlamaanka ayaa laga sugayaa ansixinta heshiiskaas iyo saddexdiisa habraac. Waxaa kale oo loo baahan yahay in la diyaariyo hal sharci oo xeerinaya iskaashiga garsoorka caalamiga ah.Intaas ka bacdi waxaa muhiim ah in tababbar ballaaran la siiyo garsoorayaasha iyo xeer-ilaaliyayaasha sidii ay fursadahaas uga faa'iidaysan lahaayeen kuwaas oo baahi weyn loo qabo.[120]

## 7. GUNAANAD

Soomaaliya oo ah dal dadaal baaxad leh ku bixinaya dib-u-dhiska dalka iyo dowladnimada, maareynta maamulka iyo ilaalinta hantida guud muhiimad weyn ayey u leedahay. Ilaalinta hantida guud iyo qaybaheeda kala duwan waxaa khuseeya qawaaniin iyo hay'ado badan. Doorka garsoorka ee ilaalinta hantida guud ee Soomaaliya waa mid aad u muhiim ah, waxaana xeerinaya dastuurka, iyo qawaaniinta kale. Awoodda garsoorka ee ku aaddan sharciyada, xaqiijinta isla xisaabtanka, iyo ka hortagga musuqmaasuqa ayaa muhiim u ah ilaalinta hantida guud iyo abuurista jawi horseedaya horumar waara iyo caddaalad bulsho. Sidoo kale, garsoor adag oo aan dhinac u janjeerin ma aha oo kaliya ilaaliyaha hantida guud, laakiin waa tiir dhexaad u ah soo kabashada iyo horumarka Soomaaliya, taas oo fure u ah mustaqbal ay sharciyaddu ka taliso halkaasoo kheyraadka dabiiciga ah loo isticmaalo faa'iidada guud ee Soomaalida oo dhan. Qoraalkan waxa

117 Fiiri tusaale ahaan, Qodbka 6aad, faqradda 1aa; Qodobka 14aad ee Heshiiska Qaramada Midoobay ee La-dagaallanka Muquqmaasuqa.

118 UN General Assembly, United Nations Convention against Transnational Organized Crime : resolution / adopted by the General Assembly, 8 January 2001, A/RES/55/25.

119 https://shabellemedia.com/golaha-wasiirada-oo-ansixiyay-axdiga-qm-ee-la-dagaallanka-dambiyada-abaabulan/

120 Warayi xubno sare oo garsoorka iyo qareennada ka tirsan.

uu iftiimisay qaybaha hantida guud iyo kaalinta garsoorka ee ilaalinteeda.

## 8. TALO SOOJEEDIN

1. Casriyeynta shuruucda jirta si ay ula jaanqaadaan heerarka casriga ah islamarkaana ay si buuxda ugu daboolaan dhinacyada kala duwan ee ilaalinta hantida guud.

2. Kor u qaadida awoodda farsamo iyo sharci ee garsoorayaasha iyo xeer-ilaaliyayaasha si ay u maareeyaan kiisaska adag ee la xiriira hantida guud, oo ay ku jiraan dhinacyada caalamiga ah ee soo qabashada hantida iyo iskaashiga garsoorka caalamiga ah.
3. In Soomaaliya qayb ka noqoto Heshiiska Debiyada Abaabulan ee Xudduudaha ka Gudba si ay u suurtogasho in wax laga qabto xadgudubyada ka dhanka ah qaybo kamid ah hantida guud iyo in ay fududaato iskaashiga garsoorka caalamiga ah ee dalalka kale. Sidoo kale, waxaa muhiim ah dhiirrigelinta ka qeybgalka firfircoon ee heshiisyada caalamiga ah iyo qaab-dhismeedka iskaashiga si loola dagaallamo dembiyada maaliyadeed ee caalamiga ah ee saameeya hantida guud.
4. Hubinta in garsoorku si madax-bannaan u shaqeeyo, isla markaana si cad uga madax-bannaan yahay saameynta fulinta, si uu ugu dhaqangeliyo shuruucda ilaalinta hantida guud si dhexdhexaadnimo leh. Arrinkani waxa uu muhiim u yahay in xadgudubyada ka dhanka ah hantida guud, marka aan baaritaanka ku sameeyaan hay'adaha masuulka ka ah, garsoorku si madax-bannaan uga gudan karo waajibaadkiisa dastuuriga ah.
5. Kordhinta daahfurnaanta maamulka hantida guud iyo wacyigelinta dadweynaha ee ku saabsan hababka sharci ee ilaalinta hantidan.
6. In dib loo yagleelo laba awoodeeyo haysaha qawaaniinta maaliyadda tilmaamayaan oo u xilsaaran maareynta maaliyadda iyo ilaalinta hantida guud.
7. Waxaa muhiim ah in la calaamadeeyo lana diiwaangeliyo goobaha taariikhiga ah oo noqon kara dhaxal dhaqameed, lama sameeyo qawaaniintii ilaalin laahayd oo ay ku caddahay xadgudubyada ka

dhanka ah iyo kaalinta garsoorka ee ilaalinta hantidaas guud. Sidoo kale waxaa muhiim ah in hawlwadeennada garsoorka la siiyo tababbar khuseeya ilaalinta dhaxal dhaqameedka iyo doorka ay ku leeyihiin.

***** DHAMMAAD*****

3

# ILAALINTA MADAXBANAANIDA HAY'ADAHA GARSOORKA

Qore:- Dr. Xuseen Cabdi Cilmi

Xildhibaan Iyo Wasiir ku-xigeen hore

# TUSMO

NUXURKA DARAASADDA. . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . .62

HORUDHAC. . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . .63

ARAR . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . .64

QEYBTA 1AAD: GARSOORKA IYO XEERARKII HORE EE SOOMAALIDA. 64

QEYBTA 2AAD: AWOODDA GARSOORKA . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . .72

QEYBTA 3AAD: MADAX-BANAANIDA GARSOORKA IYO XAQIIJINTA ISU-DHEELITIRKA AWOODAHA DAWLADDA. . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . .73

QEYBTA 4AAD: QIIMEYNTA MADAX-BANAANIDA IYO AWOODDA GARSOORKA. . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . .82

QEYBTA 5AAD: TIIRARKA MADAX-BANAANIDA GARSOORKA IYO XAL U HELIDDA ISKU DHEELI TIR LA'AANTA AWOODAHA. . . . . . . . . . . . . . .87

GUNAANAD IYO TALO-SOOJEEDIN . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . .94

## NUXURKA DARAASADDA.

Ilaalinta madax-banaanida hey'adaha garsoorka iyo isu-dheellitirka awoodaha hey'adaha dowladda ayaa ah saldhigga dammaanadda xuquuqda iyo xorriyaadka dadka iyo xaqiijinta caddaalad bulsho, waana masu'liyad saaran dowladda hirgalinta ku dhaqanka sharciga iyo ilaalinta madax-banaanida garsoorka si uu u guto garsooruha waajibaadkiisa dastuuriga ah, isaga oo ka madax-banaan cadaadis kaga yimaada dhinacyada dacwadu ka dhaxeysa ama dhinaca hey'adaha dowladda.

Dastuurrada iyo xeerarka caalamiga ah ayaa si cad u qeexay awoodda iyo madax-banaanida garsoorka in ay tahay mabda'a dastuuri ah, iyadoo daraasadu ay qiimeyn ku sameysay awoodda iyo madax-banaanida garsoorka xiliyadii kala duwanaa tan iyo markii la aasaasay dawladnimada casriga ah 1960. Maadaama xeerarka caalamiga iyo dasaatiirta ay si cad u tilmaameen madax-banaanida hey'adaha garsoorka, hadana mahelin dhaqan galin buuxda ilaalinta mabaadi'daas aasaasiga ah ee ku saabsan awoodda iyo madax-bannaanida garsoorka. Sidoo kale daraasadan waxa ay diiradda saartay sooyaalka fikir ee dowladnimada iyo madax-banaanida garsoorka waqtiyadii hore ee dunida iyo isbadelada xiliyadii dhexe iyo waliba kuwa casriga ah.

Nidaamka garsoorka Soomaaliya waxa uu soo ifbaxay xilligii xornimada la qaadanayay inkastoo xeerarka lagu dhaqmi jiray xilligaas ay ahaayeen xeerarka ciqaabta dalalka Hindiya iyo Talyaaniga, halka soomaalidii hore ay laheeyd xeerar iyo nidaam xukun oo soo jiray xilligii guumeystaha ka hor, xeerkaas oo lahaa illo ama meelo laga soo xigto,waxaana ka mid ahaa shareecada Islaamka iyo dhaqannada soo jiray ee beelaha soomaaliyeed, balse lama tixgalin sooyaalkii soomaalida, waayo soomaalidu waxay laheeyd hannaan dhaqan-dhaqaale ee bulshadu ku dhaqmi jirtay, garsoor madax-banaan iyo waliba xeerar soojireen ah oo ay isku xukumi jirtay marka wax la isku qabto.

Dastuurradii soomaaliya 1960, 1990, 2012KMG iyo xeerka nidaamka garsoorka Soomaaliya 1962dii, ayaa tilmaamay awoodda garsoorka iyo ka madax-banaanida laamaha kale ee dowladda iyo inuu u hoggaansamo sharciga oo keliya. Halka dastuurkii 1979kii, uu ka aamusay awoodda hey'adda garsoorka in Maxkamadaha keliya leeyihiin iyo in garsoorku ka madax-bannaanyahay laamaha kale ee dowladda, taasoo keentay in

hey'adda fulinta ku yeelato hagida go'aanada golaha sare ee garsoorka dalka, isla markaana madaxweynaha ugu sarreeya golaha sare ee garsoorka. Tani waa caqliyad soo jireen ah haddana ay la dhismi la yahiin hey'adaha gasroorka dalka.

Soomaaliya in ay yeelato garsoor madax-banaan waa himilo ay caqabada badan ku gadaaman yahahiin xiliga lagu jiro dowlad dhiska, sababtoo ah waxaa horyaalla madax-banaanida hey'adaha garsoorka caqabado siyaasadeed, dhaqaalo, maamul,amni iyo kuwo bulsho oo ku yeeshay saameyn hannaanka caddaalada dalka. Intaa waxaa sii dheer in wali aan la federaaleynin garsoorka dalka lana dhameystirin dhismaha hey'adda garsoorka muhiimka u ah iyo dib-u-eegista dastuurka oo noqotay faanoole faru-kama qodna. Tani waxa ay sababtay in hey'adda fulinta iyo sharci-dejinta si toos ah faragalin ugu sameeyaan garsoorka markeey doonaan. Sidaa aawgeed daraasadan waxa ay soo jeedisay in ay lagama maar-maan tahay dhameystirka arrimahaas si loo xaqiijiyo madax-banaanida hey'adaha garsoorka oo ah waajib dastuurku tilmaamay mudana dhaqan galin, mana jiri karto sarreeyn iyo ku dhaqan sharci iyadoon la helin heya'd garsoor oo dhameystiran lehna awood dastuuri ah oo madax-banaan kana soocan awoodaha kale ee hey'adaha Dowladda.

## HORUDHAC

Marka laga hadlayo hey'adaha garsoorka iyo madax-banaanidooda, waxaa lagama maar-maan ah in la eego sooyaal ahaan fikirka dowladnimada, waqtiyadii hore ee dunida. Garsoorku waxa uu hoos tagi jirey rabitaan shakhsiyadeed ama wadaado diimeed ama maslaxado yar yar oo kooxo gaar ahi ay ku maamuli jireen habab qallafsan. Markaa kadib waxaa isbadaley fikraddii dowladinimada xilliyadii hore, kuwii dhexe iyo kuwii dambaba, waxaana kobcay xididdeysiga mabda'a dowladnimada ku saleysan iyo qaanuunka.

Dowladnimadu waxa ay noqotey mid ku qotonta kala saaridda qofka madaxda ah iyo nidaamka dowladnimo, sidoo kale adkeynta mabaadi'da hey'adaha dowladda iyo kala nidaamintooda ayaa ah mid ku hagaya dowladnimada sharciyad qaanuuni ah iyo kala madax-banaani hey'adeed.

Waayo-aragnimada horseedday nolosha shucuubta iyo nidaamyada maamulka ee hababka lagu gaari karo yoolka la hiigsanayo ee madax-

bannaanida Garsoorka iyo isbeddelka Garsoorka waa laba kelmadood oo tilmaamaya xaqiiqo la taaban karo oo ka jirta dunida, hadday tahay ka shaqaynta garsoorka shaqsi ahaan ama hey'ad garsoor ahaan iyo qalab ahaanba. Dadka Soomaaliyeed waxay ku caan bexeen nidaam xukun kaasoo jiray xilligii gumaystaha ka hor, wuxuuna ahaa xeer dadka lagu dhaqo oo aan qornayn, balse loo cuskan jiray wixii laga bartay xeerarkii jiray oo ku saabsanaa heshiisyada la xiriira kala iibsashada ama ku saabsanaa xeer ciqaabeedka falalka dambiyada[1]..

Hadaba waxaa lagama maar-maan ah marka aanu rabno in aan ka hadalno madax-banaanida hey'adaha garsoorka, marka hore waa in aan is weydiinaa; waa maxay madax-banaani garsoor? Mabaadii'da hagta garsoorka iyo muhumada ay leedahay madax-banaanida hey'adaha garsoorka? qeexida aragtida dasaatiirta iyo shurrucda tilmaameysa madax-banaanida garsoorka iyo waliba mabaadi'da caalamiga ah ee saldhiga u ah madax-banaanida garsoorka, sidoo kale tiirarka madax-banaanida garsoorka iyo ugu danbeyn xal u helidda isku dheeli-tir la'aanta awoodaha hey'adaha dowladda.

قال الله تعالى { -- وَإِنْ حَكَمْتَ فَاحْكُم بَيْنَهُم بِالْقِسْطِ إِنَّ اللَّهَ يُحِبُّ الْمُقْسِطِينَ } سورة المائدة اية «٢٤»

## ARAR

Daraasaddan waxaa looga goleeyahay in lagu falanqeeyo madax-banaanida garsoorka, muhiimadda madax-banaanida hey'adaha garsoorka iyo cawaaqibta ka dhalan karta ku xad-gudubka madax-bannaanida garsoorka. Sidoo kale waxa ay qeexaysaa nidaamka garsoorka iyo waxtarka uu u leeyahay kala saarida awoodaha hey'adaha dowladda. Cilmi baaristan waxa ay diirada saareysaa tiirarka madax-bannaanida garsoorka iyo aragtida Dasaatiirta, shuruucda dalka iyo mabaadi'da caalamiga ah ee haggta madax-bannaanida hey'adaha garsoorka. Fikradda ilaalinta madax-banaanida hey'adaha garsoorka Soomaaliya, ayaa waxa tilmaamay Dastuurka KMG [2]' ah ee jamhuuriyadda federaalka Soomaaliya, dastuurku wuxuu qeexayaa qaabka guud ee hey'adaha garsoorka dowladda,

1 . Dr. Abddullahi Mohamed Hassan.why we chose scienctific socialism. The ministry of Information and national guidance Somali democratic republic mugadishu 1975 pg.66.

2 Qodobka 106aad ee dastuurka KMG August 1, 2012

awoodaha madaxbanaanida iyo qaab dhismeedka maxkamadaha.

Ugu-danbeyn daraaseynta hey'adaha garsoorka Soomaaliya iyo fikradda ilaalinta madax-banaanida garsoorka, xilligan waxaa lagama maar-maan ah in aysan ku ekaan qeexitaanka nooca garsoorka oo kaliya, balse daraasadda waa in lagu qaadaa dhigaa falsafadda iyo soo yaalka bulsho, dhaqaale, siyaasad iyo dhaqan gelinta shuruucda dalka.

## QEYBTA 1AAD: GARSOORKA IYO XEERARKII HORE EE SOOMAALIDA.

### Waa maxay garsoor?

Garsoorku waa hey'ada u qaabilsan ka garnaqida khilaafka u dhaxeeya dadweynaha ama mid kamid ah heya'daha dowladda lehna awoodda fasiraadda iyo dhaqangelinta sharciyada, isla markaana ilaalisa sarreynta sharciga. Sidaa datreed arsoorku waa in uu helaa madax-banaani ku filan, gaar ahaan dhanka heya'dda fulinta[3]. Garsoorku waa laan ka mid ah qeybaha ugu muhiimsan saddexda awoodood ee nidaamka dowliga ah (Sharci-dejinta, Fulinta iyo Garsoorka). Garsoorku wuxuu ka kooban yahay maxkamado, garsoorayaal, xeer ilaalin, kaaliyayaal, shaqaalaha maamulka iyo hey'adaha u xilsaaran dhowrista madax-bannaanida garsoorka. Waxayna ka shaqeysaa ku dhaqanka iyo fasiraadda sharciyada, xallinta khilaafaadka iyo helitaanka caddaal[4].

### Waa maxay madax-banaanida garsoorka?

Erayga madax-banaanida garsoorka, mararka qaar waxaa loo adeegsadaa dareen caadi ah si loo tixraaco nooca madax-banaanida ay tahay in maxkamadaha iyo garsoorayaashu yeeshaan.

Madmadowgaas macnihiisa ku jira ereyga madax-bannaanida garsoorku waxa uu sii kordhiyey muranno iyo jahawareer jira oo la xiriira qeexiddiisa saxda ah, taas oo keentay in culimada qaanuunka qaarkood ay su'aal ka keeneen in fikraddu u adeegayso ujeeddooyinka laga leeyahay cadaaladda iyo in kale. Guud ahaan waxaa jira fahan micnaha qeexitaanka madax-

---

3 د. ماجد راغب الحلو. الدولة في ميزان الشريعة, دار الجامعة ,القاهرة ٢٠٠٨ ص٢٣٣-٢٣٤

4 . Qodobka106 ee Dastuurka 2012.

banaanida garsoorka ay culimada qaanuunku ku qeexeen waana sidan[5]:-

1. Madax-banaanida Garsoorku:- waa kartida uu garsoorka kaga garnaqi karo arin kastaa oo khilaaf ka taagan yahay isagoo ka madax-banaan cadaadis kaga imaada dhinacyada dawcwadu ka dhaxeysa, una gutaa waajibaadkiisa si xor ah oo aan saamayn ku lahayn hey'adaha dowladda ama shakhsiyaad gaar ah.

2. Aragtida madax-bannaanida garsoorku waa in garsoore kastaa awood u yeesho inuu go'aan ka gaari karo dacwadaha iyo khilaafyada loo soo gudbiyo si caddaalad oo dhex-dhexaadnima ah, aana eex lahayn uuna u gaaro go'aankiisa iyadoo cidina soo faragelinayn, ha noqoto garsoore kale ama shakhsiyaad amaba hey'ado.

3. Madaxbanaanida garsoorku:- waxay damaanad qaadaysaa helitaan cadaalad iyo garsoor dhex-dhexaad ah isagoo ku salaynaya go'aankiisa cadaymaha la horkeenay iyo sharciga, kana cabsi qabin fara galin lagu maamulo go'aanka uu gaari doono.

Howlaha garsoorka iyo ilaalinta madax-banaanidiisa waxaa u xilsaaran Golaha Sare ee Garsoorka oo ilaaliya arrimaha Garsoorayaasha iyo Maxkamadaha kana shaqeya horumarinta danaha hey'adaha garsoorka isla markaana ka madax-bannaan faragelin dhinac kasta, waxaana lagu ilaaliyaa dammaanad ku habboon si loo gaaro arrimahan[6]:

(a) Magacaabista garsoorayaal si waafaqsan halbeegyada kartida iyo hufnaanta.

(b) Bixinta dammaanad gaar ah oo ku saabsan dallacaadaha iyo beddelka garsooraha.

(c) Ka ilaalinta wax kasta oo dacwa ah oo lagu ciqaabayo, waxaana waajib ah in la marsiinayo baaris ku habboon iyo habka sharcigu tilmaamay.

**Waa maxay Cadaalad?**

---

5 صباح فرج سعد ماضى. استقلال القضاء ووسائل حمايته دراسة في ضوء الشريعة الإسلامية والدستور الليبي: رسالة دكتورة غير منشورة , جامعة ملايا كوالالمبوررة.

سنة ٢٠١٧ ص ٤٤-٥٦

6

Caddaaladdu waa:- ujeeddada ugu muhiimsan ee dowlad iyo bulsho ay tiigsato in lagaaro. Caddaaladu waa:- aasaaska habdhaqanka nidaamsan ee aadanaha dhexdooda ku dhaqmaan, waxayna ilaalisaa sharciga iyo sinnaanta muwaadiniinta iyagoo aan la kala soocin qof walbana uu helo waxa uu xaqa u leeyahay sida shaqada, waxbarasho, nolol iyo amni, waana muhiimada koowaad ee aragtida siyaasadeed ee dowlad kastaa ku xusto Dastuurkeeda, maxaa yeelay caddaaladu waa tiirka u taagan in qof walbaa uu helo caddaalad loo siman yahay sharciga hortiisa[7].

Garsoorka Soomaaliya waxa uu soo ifbaxay xilligii xornimada la qaadanayay inkastoo xeerarka lagu dhaqmi jiray xilligaas ay ahaayeen xeerarka ciqaabta dalalka Hindiya iyo Talyaaniga, oo shaqaalaha garsoorka waxay ka cabanjireen in ay aad u yarayd dadka u carbisan ama u qalma shaqadan iyo in ay yartahay waxyaabaha fududaynaya in go'aamo laga gaaro kiisaska, oo loola jeedo helista xafiisyo iyo hoolal wanaagsan iyo tixraacyo buugaag qoran, luqadda la adeegsan jirayna waxay ahayd luqadda Talyaaniga[8].

Soomaaliya waxa ay soo martey tajaabooyin adag oo ku aaddan geeddi socodka dhismaha dowladnimo casri ah, iyadoo dhammaan xukuumadihii kala geddisnaa ee soo maray dalka, ay aaminsanaayeen aragtiyo kala duwan oo ku aaddan dowlad dhiska iyo xoojinta hey'adaha dastuuriga ah ee dowladnimda soomaaliya aasaaska u ah.

Garsoorka Soomaaliya wuxuu ahaa mid mideysan oo ka madax-bannaan laamaha sharci-dejinta iyo fulint marka la eego Dastuurkii 1960kii[9], waxa uu dhigayay in garsoorku mid yahay oo aan la sameyn Karin maxkamado aan caadi aheyn. Halka Dastuurkii 1979 kii, uu dhigayay sidan "Garsoorka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya waa mid mideysan"[10]. Waxaa kaloo la mid ah Qodobka 109aad ee Dastuurkii 1990 ee aan dhaqangelin. Axdigii 2004 iyo wax-ka-beddalkii lagu kordhiyay wuxuu dhisay nidaam garsoor oo madaxbannaan oo leh maxkamado ku-meel-gaar ah.Hey'adda

---

7 . Eeg Qod. 2,19,20 ee Baaqa Caalamiga ah ee Xuquuqda Aadanaha ee 1948.

8 . د. حمدي الطاهري : قصة الصومال . القاهرة , مطابع دار الشعب, سنة ١٩٧٧ ص٥٩-٢٣ .

9 . Qodobka 95 ee Dastuurka 1960.

10 . Qodobka 97 ee Dastuurka 1979.

garsoorku waa hey'adda leh awooda go'aan ka gaadhista khilaafyada la horgeeyo maxkamadaha, waxayna u xilsaaran tahay garsoorka iyo maxkamadaha dalka. Sidoo kale waxay u xil-saaran tahay sidii loo heli lahaa caddaalad, waxayna masuul ka tahay hannaanka shaqada garsoorka iyo kalsoonida lagu kalsoonaan karo; Xeerarka ay ku dhaqmaan, mabda'a madax-bannaanida garsoorku waxaa nidaamiya xeerarka hey'adaha garsoorku.

Garsoorku waxa uu hiigsanayaa in uu xaqiijiyo ku dhaqanka sharciga, ilaalinta xuquuqda muwaadiniinta iyo in la helo caddaalad bulshada dhexdeeda ah.

Garsoorayaasha ayaa u xilsaaran in ay gaaraan go'aamo garsoor oo madax-bannaan oo ku saleysan shuruucda iyo Dastuurka dalka.

Awoodaha Garsoorka waxaa ka mid ah dib-u-eegista sharciyada, ilaalinta shuruucda iyo bixinta caddaaladda marka la hor koono qadiyadaha madaniga, dembiyada iyo maamulka. Sidoo kale awoodda garsoorka waxaa ka mid ah ilaalinta xuquuqda shakhsiyaadka iyo in la hubiyo in xukunnada garsoorku ay la socdaan mabaadi'da guud ee caddaaladda iyo sharciyada lagu dhaqmo si loo xaqiijiyo isu-dheellitirka awoodaha, ilaalinta xuquuqda muwaadinka, loona helo caddaalad. Garsoorayaasha waa la soo xulaa, la magacaabaa, waxaana lagu qiimeeyaa waxqabadkooda iyadoo la raacayo habraacyo sharci oo u gaar ah iyo halbeegyo si loo hubiyo dhexdhexaadnimada iyo madax-bannaanida go'aannada garsoorka.

## Xeerarkii hore ee Soomaalida.

Soomaalidii hore waxay laheyd xeerar iyo nidaam xukun kaasoo jiray xilligii guumeystaha ka hor, wuxuuna ahaa xeer dadka lagu dhaqo oo aan qorneyn, balse wuxuu ahaa mid la xifdisanyahay oo ku salaysan dhacdada markaas taagan, go'aamada la dajiyo waxaa lagu dhex baahin jiray dadka. Xeerka inta badan waxaa lagu dejin jiray geedaha waawayn ee ka agdhaw ceelasha biyaha oo ay isugu yimaadaan dadka iyo xoolaha, xeerkaasna wuxuu qaadan jiray magaca goobta lagu ansixiyay isagoo lagu caddaynayo sannadkii uu soo baxay[11].

11 . Dr. Abddullahi Mohamed Hassan.why we chose scienctific socialism. The ministry of Information and national guidance somali democratic republic mugadisho. 1975 Pg:66.

Baare: /Cass Nell wuxuu sheegay in qarniyo farabadan ay soomaalidu adeegsan jireen nidaamyo qaanuun oo ku dhisan dhaqannadooda iyo caadada beelohooda, waxaana lagu magacaabaa (Xeer), wuxuuna u egyahay dastuur ama Axdi-heshiiseed bud-dhigyadiisu badan yihiin, oo aanay dejinin wakaalad ama hey'ad cayiman sida Baarlamaanka oo kale. Waxaa dejinjiray guddiyo ay beeshu leedahay kuwaas oo xaddidaya xukunkii munaasabka u ahaa kiiska iyo qaabka loo fulinayo[12].

Xeerku waa nidaam qaanuuni ah oo ka unkamay geeska Afrika lagasoo billaabo qarnigii todobaad ee miilaadiga, mana jiro wax tusinayo in laga keenay xeerar ajnabi ah ama laga yaqiinay meelo kale oo ka baxsan gayiga soomaalida, taasna waxaa caddayn u ah in xeerka soomaaliga uu ka maranyahay erayo ajnabi ah uuna yahay xeer u gaar ah bulshada soomaaliyeed[13].

Wuxuu u baahanyahay xeerku nuuc khibrad ah, sidaa darteed waxaa kala duwan dadka fulinaya xeerka ama u fadhiista garta, Waxaa jira odayaal, Xeer-beegti, Guurti, Markhaatiyaal iyo Waranley oo u taagan shaqada Booliska, koox walbaba waxay leedahay shaqo gaar ah oo ay qabato. Haddaan isku dayno in aan micneyno xeerka waa mabaadi' qaanuuni ah aanan la badali karin oo u egg xeerarka caalamiga ah[14].

**Tusaalooyin ku saabsan mabaadi'da xeerka:**

Markaan ka hadalno sameynta xeerka waxaa lagu sameeyay qaab ay ku dheehantahay xalinta arrimaha maskaxda (Psychological) iyo kuwa dhaqan-wanaag ku dheehantahay, waxaa ka mid ah mabaadi'da xeerku in diyo laga bixiyo dambiyada laga galo dadka sida ceebeyn-fagaare, xatooyada, falalka dadka loogu xadgudbo sida kufsiga, dilka, waxaa lagu caawiyaa dhibbanayaasha caawinaad maaddi ah iyo mid macnawi oo soconaysa ilaa xili xadidan.

Waxaa kamid ah mabaadi'da xeerka in laysku boorriyo samaynta xiriir

12 . Lee V. CASS Nell: the shaping of Somali social reconstruction the history of a pastoral people. 1600-1900. University of pennsylvania press philadelphia 1982, Pg 92.

13 شيخ موغي ديرر سمتر: العيسى شعب والتاريخ, القاهرة , دار النسر و الطباعة سنة ١٩٩٦ ص١٦١- ١٦٣ . .

14 نفس المرجع ص ص ١٦٣. .

wanaagsan iyo walaaltinimo beesha dhexdeeda iyo beelaha kale, sida in haweenka qaab wanaagsan loola dhaqmo, iyo in lala xaajoodo ergooyinka beelaha kale ka socda qaab niyad wanaag ku dheehantahay, sidoo kale in la ammaan galiyo dadka taagta daran sida caruurta, haweenka, la sharfana culimada, abwaannada iyo martida.

Waxaa ka mid ah mabaadi'daas xilka qoysaska sida in la bixiyo maharka xilliyada guurka iyo in la ganaaxo gadoodka qoyska, in la nidaamiyo xeerka khayraatka dabiiciga ah sida daaqa iyo ceelasha, in la gacanqabto haweenka guurka ama dhalmada ku cusub. Xukunnadii garsoorka ee xeerarkii hore waxay ahaayeen xeerar la xifdiyo oo ay kala dhaxlaan qabiillada, soomaalidii hore waxay u sameyn jireen wax walba xeer kala ilaaliya kala duwanaanshaha dhaqannada, sidoo kale xeerka ayaa kala lahaa xeerar kala duwan oo ukala baxsan sidaan[15].

- Xeer magaalo.

- Xeerka beeraleyda.

- Xeerka gadisleyda (ganacsatada).

- Xeerka reer guuraaga.

- Xeerka geelleyda.

- Xeerka lo'leyda.

- Xeerka arileyda.

- Xeerka colaadda.

- Xeerka fardooleyda.

- Xeerka guurka iyo xididka.

- Xeerka suugaanta.

Intaas oo xeer waxay hoos imaanayaan laba qeybood[16]:

1. Xeerka ciqaabta: oo lagu xukumayo qofkii fal dambiyeed gaysta,

---

15 · Isla tixraaci hore, Pg: 11.

16 . Axmed Sheikh Cali Axmed: Xeerkii Soomaalidii Hore, Wasaaradda hiddaha iyo tacliinta sare 1977, Pg: 3-5.

sida: dilka, xatooyada, boobka hubaysan, afduubka, kufsiga, iyo wixii la midka ah.

2. Xeerka madaniga ah oo lagu kala saaro dadka is-hasyta ama mid ka mid ah uu deeymoobo.

**Ilaha xeerarkii hore ee Somaalida.**

Qaanuun walba wuxuu leeyahay ilo lagasoo xigto, xeerka soomaalida waxaa lagasoo xigtay caadooyinka iyo dhaqannada soo jireenka ah ee bulshada soomaaliyeed, waxay u laaban jireen xukunnadii garsoorka ahaa ay horay u rideen, kuwaasoo xiriir la leh shareecada Islaamka oo meelaha qaar iska waafaqsanaayeen sida diyada, dhaxalka, nikaaxa, furriinka, iyo wixii lamid ah waxaana oran-karnaa ilaha xeerka soomaalida wuxuu ka koobanyahay sidatan[17]:

1. Shareecada Islaamka.
2. Dhaqannada soo jiray ee beelaha.
3. Xeerka dadka waxgaradka ah.
4. Xeerka dagaalka (colaadda).

**Qaabka dacwooyinka loo qaadi jiray**

Soomaalida waxay lahaan jirtay qaab ay dadka is-haysta ukala saari jirtay, balse aanan qornayn oo waa la xifdin jiray. Ma aysan jirin dacwad qoran oo uu soo gudbiyo dacwoodaha markii laga reebo tan afka ah mooyee, wuxuuna iman jiray fadhiga garta lagu kala qaato isagoo wata marqaatiyaal iyo caddaymo, waxaa ku dhexjira dadka fadhiga jooga qof dhageysta hadalkiisa oo la yiraahdo "Halhaye"[18]. Markaa kadib ayaa hadalka la siin jiray eedaysanaha si uu isku difaaco ama u qirto, markii uu hadalka dhamaado ayuu "Hadal-haye-hu" akhrinjiray intii la yiri oo dhan oo ku saabsanayd labada dhinac ee dacwadda ka dhaxeyso si kooban oo qeexan. Markaa ka dib baa la magacaabi jiray guddiga garsoorka si loo afjaro kiiska, inta

17 . Dr. Maxamed Cali Tuuryare: Qaanuunka dawliga guud, daabacadda Rooma 1982, Pg: 34-35.

18 حسن محمد جوهر: الصومال. القاهرة, دار المعارف سنة ١٩٦٥ ص ٧٠-٧١ .

badan guddigu tiradoodu kor uma dhaafaan sagaal "9" qofood waxaana lagu xulaa waaya-aragnimo iyo dhexdhexaadnimo[19].

**Mushqaayadda iyo habka garnaqidda xeerka:**

Soomaalidu waxay bixin jireen Mushqaayadda garnaqidda xeerka oo ah xoolo lagu bixiyo garqaadista, inta badan waxay ka koobnayd xoolo nool ama lacag ama dhar kuwaas oo aanan xaddidnayn, waxaana isla bixin jiray labada dhinac ee dooddu ka dhaxayso, Afsoomaaliga waxyaabo badan baa loogu magac-daraa waxaa ka mid ah" Agabare"[20].

Inta badan dhaqannada iyo caadooyinka soomaalida waxay ku tiirsantahay awoodda bulshadu ay leedahay, waayo waa tijaabooyinkeeda ku aaddan caddaaladda iyo hannaanka ay isku raaceen bulshada, raalinna ay isaga noqdeen, waa dhaqanno aan laga bixi karin ama la hareer-mari karin, ciddii khilaaftana la ciqaabi jiray, waxaana ugu yar ciqaabta in la gooyo qofkaas.

Sidaa darteed garsoorka qabiilka bulshada soomaaliyeed wuxuu ku tiirsanyahay gar-naqidda oo aasaas u ah in la helo garsoore dhaqameed xaliya qadiyadda laysku haysto. Islaamku wuu caddeeyay arrinkan oo waxaa kusoo arooray aayado Qur'aan ama axadiis nabi SCW, waxaa ka mid ah hadalkii Eebbe ee ahaa:

**{فلا وربك لا يؤمنون حتّى يحكّموك فيما شجر بينهم ثم لا يجدُوا في أنفسهم حرجا مما قضيتَ ويسلّموا تسليما**[21].

Micneheeda:"Rabbigaada baan ku dhaartee ma rumaynayaan inta ay kaaga xukuntamaan wixii dhexmaray kadibna aysan ka dhex-helin naftooda dhib wixii aad xukuntay oo ay u hoggaansamaan hogaansi dhab ah".

## QEYBTA 2AAD: AWOODDA GARSOORKA

Inta badan garsoorku waxaa lagu yaqaanaa in uu ka madax-banaanyahay awoodaha kale ee dowladda, sida Sharci-dejinta iyo Fulinta. Shaqada ugu

19 محمود يوسف موسى: القبلية وأثرها في السياسة الصومالية في الفترة (١٩٦٠-١٩٩٧) ص ٥١. .

20 Axmed Sheekh Cali, jookha jookha: Dowladdii jiniga ee Geeska, OP Pg: 24-27.

21 Eeg Aayadda 65 ee Suuratu Alnisaa.

muhiimsan ee uu qabto Garsoorku waa in uu kala saaro labada awoodood ee fulinta iyo sharci-dejinta hadday is-qabtaan, iyo sidoo kale mawqifyada kale uu ka qaadanayo arrimaha dacwadaha dadweynaha.

Xilligii kacaanka waxaa soo baxay xeerka hagaajinta garsoorka, waxay xukuumaddu diyaarisay 100 qof oo ku takhasusay garsoorka kuwaasoo lagusoo biiriyay hey'adda garsoorka, sidoo kale waxaa la keenay buugaag ka hadlaysa garsoorka iyo qaanuunka, waxaana la diyaariyay xafiisyo u qalma. Waxay dowladdu Maxkamado ka furtay gobolada dalka kuwaasoo ku wareegi jiray dhammaan gobolada iyo degmooyinka dalka si ay u ogaato kiisaska jira.

Dastuurkii 1979kii, wuu ka aamusay awoodda hey'adda garsoorka in Maxkamadaha keliya leeyihiin iyo in garsoorku ka madax-bannaanyahay laamaha kale ee dowladda, sidoo kale makala saarin awaadda hey'adda garsoorka iyo awoodda hey'adda fulinta taasoo keentay in wasiirka caddaaladda uu shir-guddoomiyo golaha sare ee garsoorka dalka isla markaana madaxweynaha ugu sarreeya golaha sare ee garsoorka, taasoo u jeedku yahay in Maxkamadaha iyo Xeer-ilaalinta ilaaliyaan nidaamka Hantiwadaagga iyo qaab-dhismeedka bulsho ee Dowladda ee ku saleysan Nidaamka Hantiwadaagga[22].

Hadaba markaan eegno Dastuurka 1979, waxa uu baal marsan yahay ujeedka iyo mabaa'dida caddaalada iyo shaqada Garsoorka oo ah dhowridda xuquuqda iyo xorriyaadka Aadanaha, ilaalinta mabaadi'da aasaasiga ah ee ku saabsan awoodda iyo madax-bannaanida garsoorka.

Dastuurrada 1960, 1990 iyo 2012KMG, waxa ay tilmaameen awoodda garsoorka, madax-banaanida, sharafta iyo hufnaanta garsooruhu in ay tahay saldhigga dammaanadda xuquuqda iyo xorriyaadka dadka iyo caddaaladda, Garsoorkana uu ka madax-bannaanyahay laamaha kale ee Dowladda; Sharci-dajinta iyo Fulinta uuna u hoggaansamo sharciga oo keliya[23].

Hadaba awoodda garsoorka; waa kartida uu gorsoorku kaga garnaqi karo

22 Qod. 96 Dastuurka 1979.

23 Eeg qodobada. 92, 93 ee Dastuurka 1960 iyo Qod. 106 Dastuurka 1990. sidoo kale Dastuurka 2012KMG qodobada. 42, 105 iyo 106).

arin kastaa oo khilaaf ka taagan yahay isaga oo ka madax-banaan cadaadis kaga imaada dhinacyada dadweynaha ee dawcwadu u dhaxeyso ama dhinaca hay'adaha dawladda sida uu tilmaamay dastuurka.

# QEYBTA 3AAD: MADAX-BANAANIDA GARSOORKA IYO XAQIIJINTA ISU-DHEELITIRKA AWOODAHA DAWLADDA.

## 3.1. Aragtida Dasaatiirta iyo Mabaadi'da Caalamiga ee Madaxbanaanida Garsoorka.

Shucuubta dunida ayaa ku caddeeyay Axdiga Qaramada Midoobay, go'aankooda ah inay abuuraan xaalado ay caddaaladu ku shaqeyn karto iyo in la helo iskaashi caalami ah oo dhinaca horumarinta iyo dhiirigelinta ixtiraamka xuquuqda aadanaha iyo Mabaadi'da aasaasiga ah ee ku saabsan madax-bannaanida garsoorka iyo dhaqangelinta shuruucda iyo habraacayada lagu maamulo arrimaha garsoorka, dawlad kastaana waa in ay ku caddeysaa Dastuurka ama sharciga dalka, waxaana waajib ku ah dhamaan heya'daha dowladda ilaalinta mabaadi'da iyo ixtiraamka madax-banaanida garsoorka[24]. Sidoo kale marka la eego xeerka baaqa Caalamiga ah ee Xuquuqda Aadanaha ee uu ansixiyay Golaha Guud ee Qaramada Midoobay 1948, ayaa dhigaya in "qof kastaa uu xaq u leeyahay sinnaan buuxda si uu u helo dhegeysi cadaalad ah oo ay bixiso maxkamad madax-bannaan oo dhexdhexaad ah, go'aaminta xuquuqdiisa iyo waajibaadka iyo waliba dacwad kastaa oo dambi ah oo isaga lagu soo eedeedo[25]. intaa waxaa dheer in Axdiga Caalamiga ah ee Xuquuqda Madaniga iyo Siyaasadda inuu dhigayo in "dadka oo dhan ay u siman yihiin maxkamadaha, garsoorka iyo waajibaadka dacwadda sharciga ah, qof kastaa wuxuu xaq u yeelanayaa dhageysiga dadweynaha kiiskiisa si cadaalad ahna go'aan uga soo saarto maxkamad madax-bannaan oo dhexdhexaad ah awoodna u leh sida sharcigu dhigayo. [26]."

---

24 Eag Qaraarka Golaha Qaramada Midoobay 29-November-1985 iyo 13-December-1985.

25 See article 10 of the Universal Declaration of Human Rights. 2 See article 14/1.

26 Ee Axdiga Caalamiga ah ee Xuquuqda Madaniga iyo Siyaasadda ee 1966. Soomaaliyana ku biirtay 24-01-1990.

Madax-banaanida garsoorku waa fikrad ku cusub wadamada aduunka sadexaad maadaama waagii gumaystaha aysan jirin wax ixtiraam iyo tixgalin ah oo lasiin jiray garsoorka, mana lahayn madax-banaani amaba xuquuqda aasaasiga ah ee garsoore. wuxuuna ahaa mid lagu aqoonsan karo inuu u hiilinayo gumaysiga, oo ah aalad lagu xakameynayo muwaadinka caadiga ah, sidaas darteedna ixtiraam yar ma lahayn. Nasiib-darro hab-dhaqankaas isma beddelin madax-bannaanidii kadib, waayo dalal badan oo dunida saddexaad ka mid ah ayaa awooddii garsoorka waxaa si joogta ah u maroorsaday siyaabo kala duwan una maamulay iyadoo wali socoto.

Madax-banaanida garsoorka waxaa lagu qeexaa ineey tahay Awoodda uu gorsoorku kaga garnaqi karo kiis uu khilaaf ka jiro isagoo ka madax-banaan cadaadis kaga yimaada dhinacyada dawcwadu khuseeysa ama dhinaca heya'daha kale ee dowlada. Sidaa darteed garsoorayaashu waa in ay xor u ahaadaan in ay tarjumaan kuna dhaqmaan sharciga iyaga oo aan ka cabsaneyn cadaadis siyaasadeed ama xoog. Tani waxay xaqiijineysaa in sharciyada si joogto ah oo caddaalad ah loo dabaqo isla markaana waxay kor u qaadi u sinnaanta sharciga hortiisa iyo xoojinta mabda'a aasaasiga ah in qofna ka sarreeyn sharciga[27].

Dowladdu waxay ku dhisantahay saddex awoodood oo mid walbaa qabaneyso shaqooyin kala duwan oo dastuurku u cayimo, shaqooyinkaas waxay isugu jiraan sharci-dejin ,fulin iyo garsoor. Mararka qaar way is dhex galayaan marna way kala baxayaan taasoo u adeegeyso shaqo wanaagga dowlad-nimada, sarreynta sharciga iyo ilaalinta xuquuqaha xuriyaadka, sidoo kale dastuurada waxay dhigaan in la kala saaro awoodaha dawladda[28], basle masaafada u dhaxeeysa kala saaritaankaas marna waa ciriiri marna waa waasac, tusaale ahaan nidaamyada baarlamaaniga kala saarista waxay noqotaa mid dhex-dhexaad ah oo awoodaha saddexda ah way kala madax-banaan yihiin, iyaga oo isa-saameenayaan ama wada shaqeeynayaan, tusaale ahaan hey'adda sharci-dejinta xaq waxay u leedahay in ay kalsooni

---

27 .

https://www.britannica.com › topic › judicial-indepen.

28 د.عادل الطبطبائي : الحدود الدستورية بين السلطتين التشريعية والقضائية , الكويت ,مجلس النشر العلمي جامعة الكويت ط ١ سنة ٢٠٠٠ ص١٠٦

siiso hey'adda fulinta (xukuumadda) ama in ay kala laabato kalsoonida, sidoo kale hey'adda garsoorka waxay dhaqan gelisaa xeerarka iyo kala saaridda is qab qabsiga, sidoo kale waxay korjoogteysaa xeerarka in ay yihiin kuwa dastuurka waafaqsan iyo inkale.

Sidaa darteed garsoorku wuxuu ka mid yahay hey'adaha dowladda, wuuna ka madax-bannaanaan yahay awoodaha Golayaasha fulinta iyo sharci dejinta, wuxuuna xaliyaa arrimaha dowladda iyo qeexidda shaqooyinka ay hey'ad walba leedahay, isagoo u maraya awoodda sharciga in hey'adda garsoorka ay ka madax-baanaan tahay sharci-dejinta iyo fulinta, xubnaha garsoorkana ay u hoggaansamayaan sharciga kaliya[29] .

Nidaamka garsoorka ee jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya wuxuu ka kooban yahay sida uu tilmaamay dastuurka KMG ah qodobka 108 saddex heer, sidoo kale Dastuurka wuxuu dhiirri-gelinayaa xuquuqda Aadanaha, talinta sharciga, shuruudaha guud ee xeerarka caalamiga ah, kala-soocidda awoodaha sharci-dejinta, fulinta iyo garsoor madax-banaan, iyagoo leh hannaan ku dhisan isla-xisaabtan iyo hufnaan ka jawaabaya danaha dadweynaha[30].

Hadaba in la helo garsoor ku dhisan hannaan caddaalad iyo hufnaan loona siman yahay ee ku saleysan hannaanka federaalka, islamarkaana ilaaliya xuquuqda muwaadinka iyo nidaamka dowliga ayaa ah baahida asaasiga ah ee ugu weyn xiliga lagu jiro dowlad dhiska soomaaliya, waxaana looga fadhiyay dowladda federaalka in ay dhameystirto dhismaha hey'adaha garsoorka, oo wali aan lagu guuleysan in loo dhiso si dhameys tiran ! In kastoo marar badan madaxda dalka ku celceliyaan in ay xooga saarayaan dhameystirka hey'adaha garsoorka. Sidaa aawgeed waxaa lagama maarmaan ah in la helo dhameystirka tiirka Dawladnimada aasaasiga u ah ee ka maqan, taasoo ah awoodda seddexaad (dhameystirka dhismaha hey'adda garsoorka), waayo si dawladnimo loo helo waa iney jiraan dhamaan tiirarka seddexda awoodood ama dhardhaar ee dowladda. Sidaa darteed Dowladda federaalka waxa ay ku bixisay dadaal badan dib-u-habeynta heya'daha garsoorka, iyadoo wax badan ay ka hirgaleen waxnna wali dhiman yahiin.

29 · Eeg Qodobada. 92, 93 ee Dastuutka 1960 iyo Qod. 106aad ee Dastuurka KMG 2012.

30 · Eeg Qodobka 3 (4) ee Dastuurka KMG 2012.

Marka laga hadlayo madax-banaanida iyo dhismaha heya'dda garsoorka, waa in la eegaa hannaan siyaasadeedka Soomaaliya, maadaama dowladu tahay federaal garsoorkuna waa inuu ku saleysnaadaa mabaadi'da federaalka, sida uu dhigaya Dastuurka KMG ah, Qodobkiisa 3 (3)"Mabaadi'da asaasiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxay ku dhisan yihiin mabaadi'da asaasiga ah ee awood qeybsiga Nidaamka Federaalka" awooddaas la qeybinayo waa midda ku sheegan faqradda 4aad ee isla qodobka 3aad ee kala-soocidda awoodaha "separation of power" sharci-dejinta, fulinta iyo garsoorka. Saa darteed qodobka 108aad ee Dastuurka KMG, wuxuu qeexayaa qaab-dhismeedka Maxkamadaha qaranka in ay noqonayaan saddex heer, kuwaas oo kala ah:

a) Maxkamadda Dastuuriga ah.

b) Maxkamadaha heerka Dawladda Federaalka.

c) Maxkamadaha heer dawlad-goboleedyada xubnaha ka ah Dawladda Federaalka.

Maxkamadda ugu sarraysa ee heer Federaal waa Maxkamadda Sare ee Federaalka, halka Maxkamadda ugu sarraysa ee heer Dawlad Goboleedyadu ay noqon doonto Maxkamadda Sare ee Dawladaha xubinta ka ah Dawladda Federaalka.

Waxaa xusid mudan in Dowladda Federaalka iyo Dowlad Goboleedadu ay heshiis ka gaareen hannaanka federaalaynta garsoorka dalka "28 December 2022. Inkastoo ay golaha wadatashiga qaran(GWQ) gaareen heshiiska hannaanka federaalaynta Garsoorka, hadana wali lama dastuureyn si loo xaqiijiyo madax-banaanida maamulka hey'adaha garsoorka iyo maareeynta hannaaka cadaaladda ee dalka.

Hadaba halkan waxaan kaga hadli doonaa xiriirka ka dhaxeeya hey'adda garsoorka iyo hey'adda sharci-dejinta iyadoo lagu saleynaya mabaadi'da aasaasiga ah ee ku saabsan madax-bannaanida garsoorka

### 3.2 Hey'adda garsoorka iyo ka madax-banaanidda Hey'adda Sharci-dejinta:

Marka la dhaqan galinayo mabda'a madax-banaanida garsoorka waxaa loola jeeda awoodda sharci-dejinta ama adood kale in aysan soo fara-gashan shaqada garsoorka, fara-gelin la'aanta waxaa loola jeedaa faragelin aan

dastuurka u oggolayn, waayo dastuurka wuxuu u kala nidaamiyaa hey'adda garsoorka qaab kooban isaga oo faafaahinta u dhaafaya sharci-dejiyaha. Haddii ay soo fara-geliso hay'adda sharci-dejinta iyadoo oggolaanshahaas hayasta fara-gelinteedu mid wanaagsan ayay noqoneysaa, balse midda aan la ogoleyn waa fara-gelinta wax u dhibeysa madax-banaanida garsoorka, waana in ay hey'adda sharci-dejinta dhawrtaa mabaadi'da dastuuriga ah ee ku qeexan dastuurka iyo kuwa guud ee uu xambaarsan yahay dastuurka iyo damiiirka insaaniga ah[31].

Hadaba waxaa khasab ah in uusan dhaafin sharci-dejiyahu xadkiisa uuna wax u dhimin mabda'a madax-banaanida garsoorka. Waxaa tusaale u noqon kara xadkiisa in uu dhaafo in uu sameeyo dib u habeyn aan loola jeedin hagaajinta garsoorka, balse loola jeedo in laga fogeeyo garsoorayaasha xilalkooda.

Dastuurkan KMG 2012, wuxuu tilmaamay in golaha shacabka jideeyo hab u socodka howlaha garsoorka, sida uu qodobka 105aad faqradiisa 2aad ee dhigaysa in Baarlamaanka Federaalka jideeynayo xeerarka lagu dhisayo hey'adda garsoorka. Balse Baarlamaanka ma uusan dejin ilaa iyo hadda xeerar lagu nidaaminayo shaqooyinka hey'adaha garsoorka iyo xeerarka kale ee dalku leeyahay ee la xiriira hannaanka nidaanka federaaleynta dalka iyo kuwa kala ee nidaaminaya nolosha bulshada iyo waliba xiriirka ka dhaxeeyo dowladda federaalka iyo dowlad-gobaleedyada.

Gunaanadka hadalka waa in hey'adda sharci-dejinta aysan fara-gelin shaqada hey'adda garsoorka, maadaama aysan u banaanayn loolanka garsoorka ama ay fara-geliso go'aamada garsoorka uu ka soo saaro kiisaska uu xukmay.

Tusaale waxaan usoo qadan karnaa fara-gelinta garsoorka in uu guddoomiye ku xigeenkii koowaad ee golaha shacabka usoo gudbiyay dacwad dastuuri ah Maxkamadda sare ee dalka 20 bishii may 2010, markaa kadib iyadoo Maxkamadda sare ay go'aan ku soo saartay in dib loo dhigo doorashada guddoonka golaha shacabka[32]. Sidoo kale Madaxweynaha ayaa soo saaray 30 may 2010 in dib loo dhigo, balse doorashadii waxaa la qabtay waqtigii golaha shacabka ugu talgalay iyadoo maxkamada sare ay cabasho u soo

31 د. عادل الطبطبائي: مرجع سابق ص ١١٨-١١٩

32 · Eeg Go'aankii Maxkamadda sare ee soo baxay Ref:XGMS/5/2010 Date: 01/6/2010.

dirtay golaha shacabka oo ahyed inaan la fara-gelin shaqada garsoorka, balse looma joojin!

Tusaalooyinka fara-gelinta lagu hayo garsoorka waxaa ka mid ah in Xildhibaanada Golaha shacabka ee Baarlamaanka Federaalka ay diideen go'aankii ka soo baxay Maxkamadda sare ee dalka[33], ee ku saabsanaa in dib loogu noqdo doorashada 8-dii kursi ee muranka ka taagnaa, uuna Baarlamaanka difaacay xubnahaas kuna tilmaamay go'aankii Maxkamadda sare ee dalka mid sharci darro ah.

Go'aanka Baarlamaanka waxa uu muujinayaa dhowris la'aanta sareeynta sharciga, ku takrifal awoodeed iyo ku xad-gudubka madax-banaanida garsoorka iyo waliba mabda'a kala saaridda awoodaha, iyadoo garsoorku yahay hey'ad ka madax-banaan hey'adda sharci-dejinta.

Hadaba doodeenu lama xiriirta saxnimada go'aanka maxkamadda sare ama ikhtisaas ahaan ma u leedahay go'aamada noocaas oo kala ah. Balse waa in hey'adaha dawladdu ixtiraamaan go'aanada maxkamadaha dammaanad qaadaana madax-bannaanida garsoorka, sida uu farayo dastuurka iyo shuruucda kale ee dalka, waana waajib saaran dhammaan hey'adaha dawladda iyo kuwa kaleba inay ixtiraamaan oo dhawraan madax-bannaanida garsoorka iyo sareeynta sharciga.

Sidaa darteed ujeedada madax-banaanida shaqada, macneheedu waa madax-bannaanida garsoorka oo ah heybad iyo shaqo, waxayna si toos ah uga timaaddaa mabda'a kala-soocidda awoodaha, sidoo kale madax-banaanida hawleed macneheedu waa in garsoorku leeyahay awood gaar ah oo ku saabsan dhammaan arrimaha la xiriirta dabeecadda garsoor. Tani waa waxa uu tilmaamayo Mabaadi'da aasaasiga ah No.3 ee Qaramada Midoobay. Dhanka kale, fulinta[34], iyo awoodaha sharci-dejinta midkoodna ma faragelin karo shaqada garsoorka, sidoo kale qodobka 6aad ee Bayaanka Singhvi wuxuu dhigayaa in xeer-dejin ama sharci fulin uusan dib u saameyn karin go'aanka garsoorka iyadoo beddeleysa jihada ama is beddel maxkamadda saamayn ku yeesho go'aankeeda. Go'aannada garsoorku ma burin karto ama ma beddeli karto hey'ad aan garsoor

33 · Eeg Go'aankka Maxkamadda Sare Ref:MS/DH/09/ 2017 Tr. 16/5/2017.

34 · Eeg cutubka 5-i ee Baaqa Singhvi ee ku saabsanaa madaxbanaanid garsoorka ee la ansaxiyay 1985.

ahayn[35].

Sharci-dejiyuhu wuxuu ilaalo ka yahay kaligi-talisnimada, waayo kaligi-talisnimadu waa cudur waxayna aasaas u tahay musuq-maasuq iyo balo kasta, shacabkana waxay ka dhigtaa tirooyin ama wax aan dareen, rabitaan iyo karaamo lahayn. Murtida la soo guuriyay waxaa ka mid ah kaligi-talisnimadu waa fasahaad asalkiis. Waxaa kalo la yiri: kaligi-talisnimada haddii ay ahaan lahayd qof abtirsada wuxuu oran lahaa: “anigu waxaan ahay shar, dulmigana waa aabbahay, xumaantana waa hooyadeey, dhagartuna waa walaalkeey, dullinimaduna wa walaasheey, dhibaatadana waa adeerkeey, saboolnimadu waa wiilkeeyga, shaqo la’aantuna waa gabadheeyda, burbrukana waa wadankeyga, jaahilnimada waa qabiilkeyga[36].

## 3.3 Hey’adda garsoorka iyo ka madax-banaanideeda hey’adda fulinta:

Inkastoo aan horay u soo sheegnay in mabda’a madax-banaanida garsoorka uu yahy mabda’ dastuuri ah oo dastuurada dunida ka jira ay dhigayaan in la kala saaro awoodaha, balse ma ayasan diidin in hay’adda fulinta ay fara-gashato ama saameyso garsoorka, gaar ahaan xubnaha garsoorka ama shaqadooda. Waxa ka mid ah arrintaas inay iyada magacawdo garsoorayaasha oo qof u qalama garsoornimada ay u diido isaga oo buuxiyay shuruudaha qaanuuniga ah ama qof aan u qalmin u magacawdo.

Magacaabista garsoorayaasha markii la eego nidaamyada dastuuriga ee dunida ka jira wuxuu maraa hababka soo socda[37]:

b) In garsoorayaasha ay soo doortaan muwaadiniinta, waana hannaan ka jira dalalka qaar, wuxuuna xaqiijinayaa ka madax-banaanida garoorka hey’adda fulinta, balse ceebaha uu leeyahay waxaa ka mid ah dadka dooranaya ma ay kala saari karaan u qalmidda jagada garsoor, waayo-aragnimadiisa iyo aqoontiisa, sidoo kale garsooruhu wuxuu isku dayyi karaa dadka dooranaya inuu qanciyo si ay dib ugu doortaan mar kale.

---

35 · Eeg dib-u-eegista ku saabsan sharciga Maxkamadda Yurub ee Xuquuqda Aadanaha (CEDH) 25 Febraayo. 1997, Findlay c/ Royaume-Uni, Rec. 1997 iyo qodobka 4aad ee Mabaadi’da aasaasiga ah ee Qaramada midoobay.

36 د. حسين عبد علمى: العلاقة بين السلطتين التشريعية والتنفيذية في الصومال, القاهرة ,دار الفكري العربي ط ١ سنة ٢٠٠٨ ص١٦٥ .

37 د. ماجد راغب الحلو: مرجع سابق ص ٢١١.

t) In garsooraha laga soo doorto hey'adda garsoorka iyo garsoorayaasha. Qaabkaan ceebaha uu leeyahay waxaa ka mid ah in doorashada lagu koobo saaxiibtinimo iyo Qaraabonimo ama maslaxa gaar ah.

j) In laga soo magacaabo garsooraha hey'adda fulinta waana hababka ugu badan ee laga isticmaalo dunida, ceebaha uu leeyahay habkan waxaa ka mid ah burinta mabda'a kala saaridda awoodaha. Sidaa darteed dawladuhu waxay ku dadaalaan inay fududeeyaan saameyntaas iyagoo u maraya habab kale oo uga muhiimsan in loo dejiyo magacaabista garsoorayaasha shuruudo aan hey'adda fulinta ka bixi karin ama in hey'adda garsoorka(Golaha Sare ee Garsoorka) ay soo diyaariso liiska magacyada u sharaxan magacaabista, ka dib madaxweynuhu ama hey'adda fulinta ay digreeto ku soo saarto magacaabistaas.

Waxay hey'adda fulinta saameyn kartaa shaqada garsoorka  oo waxay u jeedin kartaa hal dhinac, taas waxa ka mid ah in qof dawladda ka mid ah uu soo saaro amar garsoor oo aan saameyntiisu caddeyn ama waxaa lagu khasbayaa maxkamdaha iyo garsoora-yaasha in ay kala shaqeeyaan wasaaradda cadaaladda dacwadaha madaniga ama fal-dambiyeed loo haysto shakhsiyaad muhiim ah markaasi wasiirka cadaaladda uu kiiska u weeciyo meelo kale, taasina waxay noqotay wax laga yaqaano Soomaaaliya! Waxayna kasoo horjeedaa madax-banaanida garsooorka ee uu qeexay dastuurka KMG.

Marka laga hadlayo madax-banaanida garsoorka waa in ay jirtaa awood  uu kaga garnaqi karo kiis kastaa oo khilaaf ka taagan yahay isaga oo ka madax-banaan cadaadis kaga yimaada dhinacyada dawcwadu ka dhaxeysa ama dhinaca heya'daha kale ee  dowladda gaar ahaan fulinta (Xukuumadda).

Mabda'a madax-banaanida garsoorka oo damaanad u ah xuquuqda, xurriyaadka, sarreynta sharciga iyo xaqiijinta caddaaladda wuxuu noqondoonaa wax iska qoran hadduusan helin  dammaanad lagu dhaqan galinyo mabda'a kala saarida awoodaha, damaanadaasna waxaa ugu muhiimsan dhismaha Maxkamadda Dastuurka  iyo Golaha Adeegga Garsoorka oo ah hey'adaha aasaaska u ah  dhaqan galka Sharciga  iyo madax-bannaanida garsoorka[38]. Maqnaanshaha labadaas hey'adood ayaa sababtey in hey'adda fullinta ku yeelato saameeyn garsoorka iyadoo soo

38 · Eeg qodobada. 109A iyo 109B ee Dastuurka KMG 2012 .

magacaawda garsoorayaal kuwa kalana ku sameysa shaqo joojin. Waxaa xusud mudan in la tilmaamo dastuuradii hore ee Soomaaliya ilaa kan hadda ee 2012KMG, way ka marnaadeen dammaanadaas, inkastoo qaarkood ay qeexeen mabda'a madax-banaanida garsoorka, balse mabd'aasi waxa uu noqonayaa fikrad kaliya oo ku xusan qoraallada dastuurka oon helin dhaqan galin.

### 3.4 Habka ka garnaqida dacwadaha.

Dacwad-qaadistu waxay u furan tahay dhegeysiga dadweynaha si daah furnaan ah[39], hase yeeshee maxkamaduhu waxay go'aansan karaan in dacwadda lagu dhegeysto qol ka xiran dadweynaha sababo la xiriira anshaxa, nabadgelyada qaranka, badbaadinta markhaatiga iyo haddii dacwaduhu khuseeyaan dhallaan ama kufsi[40], sidoo kale go'aan maxkamadeed lama gaari karo hadii aan la siinin dhinacyada fursado isku mid ah oo ay ku soo bandhigaan doodahooda, go'aan kasta oo maxkamadeed waa inuu ku qotomo sababo sharciyeed[41]. Sidaa darteed garsooraha waa inuu awood u leeyahay dhammaan arrimaha dabeecadda garsoor, wuxuuna yeelanayaa awood gaar ah oo uu ku go'aamiyo haddii arrinta loo soo gudbiyay go'aankeeda ay tahay mid awoodda ama ikhtisaaska maxkamadda ah sida sharcigu qeexay[42]. Sidoo kale qof kastaa oo la soo eedeeyay wuxuu xaq u leeyahay in la horgeeyo maxkamad caadi ah lana marsiiyo xuquuqda iyo habraaca sharci ee loo dejiyay dacwadaha isla markaana ku saleysnaadaa mabda'a madax-bannaanida garsoorka xaqiijinta dacwadaha in ay si caddaalad ah u socdaan lana ilaaliyo eedeysanaha[43].

Waxaa jira go'aanada maxkamadaha ay ka gaaraan dacwdaha in badan oo ka mid ah in aysan helin fulin. Sababahaas fulin la'aanta oo xiriir la leh arrima ammni ama gaabin ka timid xaga hey'adaha fulinta ku shaqada leh, iyadoo dacwadahaas intooda badan ay yahiin daacwadaha madaniga ah gaar ahaan kuwa la xiriira dhulalka. Hadaba fulin la'aanta go'aanadda

39 · Eeg Qod.96 XHCS.

40 · Eeg Qod. 96 XHC iyo 107 Dastuurka KMG JFS.

41 · Eeg Qod.92 XHMS

42 · Eeg Qodobada 2,4,5,6,7,8 XHCS.

43 · Eeg Qod34 iyo 35 ee Dastuurka KMG JFS .

garsoorka ayaa ah sharci darro iyo danbi laga galaya bulshada, waana in xal loo helaa si hey'adaha garsoorka u gutaan si habsami ah shaqadooda iyagoo madaxbanaan.

### 3.5 Anshax-marin iyo Shaqa ka joojin ama shaqa ka saarid.

Garsooruhu waa inuu lahaadaa sir xirfadeed ku saabsan doodaha iyo xogta sirta ah ee la xiriirta inta uu garsooraha ku guda jira waajibaadka shaqo. Dacwad kastaa oo ka dhan ah garsooraha awoodiisa garsoore iyo mid xirfadeed waa in si degdeg ah oo caddaalad ah looga baaraan degaa habka ku haboon. Garsooruhu wuxuu leeyahay xasaanad iyo heybad uu siiyay sharciga wuxuuna xaq u leeyahay inuu helo dhageysi caddaalad ah.

Garsoorayaasha waxaa shaqada looga cayriyaa ama looga qaadi karaa kaliya sababo karti-darro ama hab-dhaqan ka dhigaya kuwo aan u qalmin inay gutaan waajibaadkooda sida sharciga tilmaamay[44]. Sidaa darteed dhammaan dacwadaha anshax-marinta, ka-hakinta ama ka saarista shaqada waa in lagu go'aamiyaa si waafaqsan heerarka hab-raacyada loo dejiyay garsoorka, sidaa si lamid ah go'aannada edbinta, ka joojinta ama dacwadaha ka saarista waa inay hoos yimaadaan dib u eegis madax-bannaan. Mabda'aani ma khuseeyo go'aamada maxkamada sare iyo kuwa sharci dejinta ee xil ka qaadista ama dacwadaha la midka ah[45].

Ugudan-danbeyn madax-banaanidu waxay u baahan tahay in la hubiyo in garsoorayaasha laga ilaaliyay faragelin ama cadaadis kasta oo lagu sameeyo, haddii ay tahay caga-jugleyn iyo wax kastaa oo go'aanka garsoorka saamey ku yeelan kara.

## QEYBTA 4AAD: QIIMEYNTA MADAX-BANAANIDA IYO AWOODDA GARSOORKA.

Waxay ahayd in awoodda garsoorku iyo saamayntiisa siyaasadeed iyo kan dastuuriga ah uu noqdo mid muuqda, waayo dastuurku ayaa dhigaya in garsoorku iyo xubnaha xeer-ilaalinta ay yihiin kuwa u madax-banaan

---

44 · Eeg Qod 24 Xeerka Nidaamka Garsoorka 1962.

45 Shirweynihii toddobaad ee Qaramada Midoobay ee ka hortagga dembiyada iyo daawaynta dembiilayaasha oo lagu qabtay Milan 26 Agoosto ilaa 6 Sebtember 1985.

shaqadooda oo aanay jirin awood ka sarreysa tan sharciga mooyee, mana la casili karo xaaladaha qaanuunka ku cad maahane. Iyadoo sidaasi ay jirto haddana garsoorka soomaaliya ma noqon marnaba mid madax-banaan awood ahaan iyo dhaqaale ahaanba, waayo madax-banaannida lagu qeexay qoraallada dastuurka wuxuu ku xadidanyahay qaabka uu ula jaanqaado siyaasadda dalka oo gacanta ugu jirto awoodda fulinta (xukuumadda), waxaana xilligii Dowladdii kacaanka matali jiray awoodaas wasiirka caddaaladda kaasoo maamulaya golaha sare ee garsoorka[46].

In lagu xaddido madax-banannida garsoorka qaanuun aan muuqan dhaqan galintiisa! Waa wax-yaabaha hannaanka sharciga soomaaliya caan ku yahay. Dastuurku wuxuu u wareejiyaa qaanuun gaar ah jideynta waxyaabo guud ama duruuf qarsoon oo lagu xadidayo wax muhim ah kaasoo dastuurku caddayn-karay sida xoriyaadka iyo xuquuqda asaasiga ah dhaqaalaha, arrimaha bulshada, xorriyadda bannaanbaxa, faafinta qoraallada iyo xorriyadda ra'yiga, qofku nolosha waxa uu xaqa u leeyahay iyo nabadgalyada xorriyadda shakhsiga iyo isla xiriiridda[47].

Xaddiditaanka awoodda garsoorka sida aan soo sheegnay waxaa sabab u ah wasiirka caddaaladda oo shir-guddoomiye u ahaa golaha sare ee garsoorka dalka, isaga oo wakiil ka ah awoodda fulineed, sidoo kale Madaxweynaha dalka ayaa ugu sarreeyay golaha sare ee garsoorka, dastuurkuna wuxuu siiyay awood ay ka mid ahayd in uu soo magacaabayo garsoorayaasha iyo xeer-ilaalinta iyo sidoo kale dallacsiintooda ama xil-kaqaadistooda[48].

Marka aan eegno dhanka dhaqaalaha dakhliga garsoorka aad buu u liitay oo mushaaraadka garsoorayaasha kuma uusan filnayn muddo toddobaad ah, taasi waxaa sabab u ahaa in uusan madax-banaani iyo qadarin helin. Sababaha keenay in garsoorku ku dheehmo musuq farabadan oo lasoo koobi karin iyo in aan loo hoggaansamin sharciga ayaa ka mid ahaa[49]:

1. In hoos u dhac ku yimid heerarka aqooneed iyo kan akhlaaqeed ee

---

46 · Maxamad Cali Tuuryare, Tixraac hore, Pg: 89.

47 · Qodobada. 2, 24, 25, 26, 30 ee Dastuurka 1979.

48 · Qodobka 105 iyo106 dastuurkii 1979.

49 · أحمد برخت ماح: ما يحدث في الصومال, مقدشو, دار هرجيسا للطباعة والنشر والتوزيع والصحافة سنة ١٩٨٨ ص ١٧٩. .

garsoorayaasha.

2. In ay yareed fahamka qoraallada xeerarka iyo qeexideeda.
3. In kuwa ka mid ah ay qaadan jireen laaluush.
4. In uu liitay qeybta korjoogayaasha ilaaliya qaladaadka lagu hareer maro sharciga.
5. Fara-gelinta joogtada ah oo ay ku hayeen siyaasiyiinta garsoorka si ay u hoos geeyaan rabitaankooda, taas oo keentay in eexashadu baahdo.

Maxkamadaha dastuurku tilmaamay waxaa ka mid ahaa Maxkamadda Dastuuriga ah oo shaqadeedu tahay in ay soo saarto xukuno dastuur ka dhigaya xeerarka qaar, waxaana isla sameeynayo Maxkamadda sare iyo golaha shacabka kuwa matala oo Madaxweynuhu soo magacaabayo[50], laakiin lama sameynin Maxkamadaas. Haddii la samaynlahaa xitaa waajibaadkeeda dastuuriga ah ma gudan lahayn, waayo awoodda dalka ka jirtay ayaan u ogolaaneynin in la sameeyo hey'ad madax-banaan oo awoodo ka madax-banaan xukuumadda leh.

Gunaanadka hadalka: Nidaamkii uu hoggaaminayay Gen/Maxamed Siyaad Barre wuxuu saamayn qoto dheer uga tagay bulshada dhan dhaqaale, aqoon iyo siyaasadba, isaga oo abuuray duruufo ka duwan kuwii dowladdii rayidka ahayd si uu in muddo ah ugusii nagaado xukunka. Awoodaha garsoorkana kama madax-banaanayn awoodaha fulinta, kamana duwanayn awoodda sharci-dejinta, kuwaas oo aan u adeegeyn sidii nidaamka siyaasiga ah ee Soomaaliya u hagaagi lahaa. Dhinaca kale haddii la dammaanad qaado madax-bannaanida garsoor ee heer hey'ad balse aan la dammaanad qaadin heer shaqsi, garsoorayaal gaar ah ayaa lagu qasbi karaa inay u hoggaan-samaan rabitaanka hoggaanka garsoorka, taasoo keeni karta in si aan sax ahayn loo fuliyo sharciga.Tusaale ahaan, dalalka Chile iyo Japan, heerka garsoorku ka hey'ad ahaan uu amar ku bixiyo addeecidda iyo u hoggaansanaanta xubnahooda ayaa lagu eedeeyay inay soo saareen garsoorayaal xishood badan oo aan doonayn ama aan awoodin inay xukumaan dawladda, sidaa si lamid ah, haddii la xaqiijiyo

50 · Eag Qod. 107 ee Dastuurka 1979.

madax-bannaanida garsoorka heer shakhsi, garsoorayaasha gaarka ah waxay helayaan xorriyad ay ku raacaan go'aanadooda shaqsiyeed[51].

Sidaa darteed aragtida noocan oo kale ah kaliya ma aha xadgudubka laakiin sidoo kale waxay kor u qaadaysaa suurtogalnimada in garsoorayaashu ay go'aan kaga gaaraan kiisaska siyaabo aan sharciga waafaqsanayn, oo leh saameyn wiiqaysa hannaanka caddaaladda iyo xasilloonida dalka.

Jiritaanka iyo xaqiijinta madax-bannaanida garsoorku waa in ay noqotaa arrimo la taaban karo marka ay maxkamaddu go'aan ka gaarto khilaaf ku lug leh danaha qaar ka mid ah dhinacyada dacwada ama hey'ad awood leh, si kastaba ha ahaatee astaanta awooddaas ayaa laga yaabaa inay bixiso qeyb ama dhammaan ilaalinta lagama maarmaanka ah.

Hadaba si aan u qiimeeyno heerka uu gaarsiisan yahay madax-banaanida heya'daha garsoorka soomaaliya, ayaan soo aragnay sida ay u qeexeen Dastuurada awoodaha iyo madax-banaanida heya'daha garsoorka, sidoo kale waxaa muhiim ah in la caddeeyo kala saaridda awoodaha, midkoodna uusan soo koobin fikradda madax-bannaanida, balse qeexitaankeeda ballaaran uu ka kooban yahay isgoysyada u dhexeeya dammaanaadka dabiiciga ama shaqeyneysa.

Madax-banaanida dabiiciga ah waa madax-banaanida dareenka guud, taasoo ah nidaamka sharciga (statute legal) kaasoo ka ilaaliya hey'adda garsoorka iyo garsoorayaasha wax kasta oo ah faragelin ama cadaadis kaga imaanaya dhinacya kale. Ilaalinta madax-banaanidanida waxay u baahantahay in la sameeyo xeerar lagu ilaalinayo garsoorayaasha, xeerarkani waxay si gaar ah u nidaamiyaan heerarka kala duwan ee habka shaqo ee garsoorayaasha "xuquuqda iyo xasaanada, hababka magacaabista, ammaanka shaqada, iyo ilaalinta madax-bannaanida dhaqaale" [52].

Sida aanu horay u soo xusnay Garsoorku waxa uu ka madax-bannaan yahay laamaha dowladda ee Sharci-dejinta iyo fulinta, marka ay

---

51 · https://www.britannica.com › topic › judicial-indepen.

52 · Eag warbixinta Ururka Caalamiga ah ee Garsoorayaasha November 17, 1999.

gudanayaan xilkooda. Xubnaha garsoorku waxay u hoggaansamayaan oo keliya sharciga, sidoo kale Garsoorahu laguma oogi karo dacwad ciqaab ah ama madani ah oo ka dhalatay fal la xiriira gudashada xilkiisa garsooranimo, lamana baari karo qofnimadiisa ama hoygiisa, haddii aan oggolaansho laga haysan Golaha Adeegga Garsoorka. Muhiimadda ay leedahay madax-bannaanida garsoorku maaha mid la soo koobi karo, maadaama ay xaqiijinayso sareeynta sharciga, ilaalinta xuquuqda qofka, kor u qaadaysa isla xisaabtanka iyo kobcinta kalsoonida shacabka.

Hadaba waxaa is weeydiin mudan sidee looga hadlayaa madax-banaani garsoor iyadoo uusan jirin Golaha Adeega Garsoorka ee lahaa awooda maamulida ilaalina madax-banaanida iyo hagitaanka howlaha hey'adaha garsoorka ee dalka. Sidaa si lamid ah lama dhisin maxkamadii Dastuurka ee awooda u laheed ilaalinta sarreynta Dastuurka iyo burrinta sharci ama tallaaba kasta ee maamul aan waafaqsaneyn Dastuurka sida ku xusan qodobada 4, 86 iyo 109 faqrada(2) ee Dastuurka 2012 KMG ah.

## **Maxaa laga baran karaa garsoorka Kenya.**

Cutubka tobnaad ee dastuurka 2010 Kenya, ayaa qeexaya qaabka garsoorka dalka sida; hey'adda garsoorka, madax-bannaanida garsoorka, nidaamka maxkamadaha iyo howlaha kale ee garsoorka loo igmaday. Sidoo kale Dastuurka wuxuu tilmaamay in garsoorku ay maamuli karin cid ama hey'ad kasta isla markaana uu ka madax-banaanyahay qeybaha kale ee dawlada[53].

Dastuurka Keynya, waxa uu tilmaamay in uu garsoorka ka kooban yahay; garsoorayaal lagu shaqaaleysiiyo sida uu qabo dastuurka 2010, kaasoo bixiyay heerar aad u sarreeya oo leh karti iyo baaris, sidaa darteed garsoorayaashu kuma qasbana in ay ku go'aan qaataan ama u hoggaansamaan aragtida hey'adda fulinta. Tani waxay xoojineysaa ilaalinta iyo rabitaanka madax-bannaanida hey'adaha garsoorka.

Doorashooyinkii madaxtinimada Kenya ee muranka ka dhashey, ayaa maxkamada sare ee Kenya go'aan ka gaartay doorashadii 2017 iyo 2022kii, iyadoo Maxkamadda sare ay baabi'isay natiijadii doorashadii guud ee 8-dii Agoosto 2017, taasoo keentay dareen qoto dheer oo dalka oo dhan ah! ka dib marka uu guddiga doorashada ku dhawaaqay natiijo u hiilineysa mas'uulka xilka hayay, isla markaana lagu dhawaaqay madaxweynaha la

53 Eeg qod. 160 ee Dastuurka Kenya, 2010.

doortay, kadibna ay maxkamadda sare ku sheegtay in doorashada aysan waxba ka jirin. Sidoo kale Doorashadii 2022ka ayaa aheyd doorashadii saddexaad ee guud iyo tii afaraad ee madaxweyne tan iyo markii la soo saaray dastuurka 2010.

Doorashooyinka guud ee Kenya, ayaa la qabtay, 9kii Agoosto 2022, iyadoo codbixiyayaashu ay doorteen madaxweynaha, guddoomiyeyaasha gobollada, senatarrada, xubnaha Golaha baarlamaanka iyo xubnaha golayaasha gobollada, waxaana madaxweyne loo doortay William Roto, isagoo helay 50.5% codadkii la dhiibtay, kana guuleystay Raila Odinga oo helay 48.85% codadkii la dhiibtay[54].

22kii Agoosto, Raila Odinga waxa uu dacwad u gudbiyay maxkamadda sare ee Kenya, isagoo kasoo horjeestay natiijadii uu ku dhawaaqay Wafula Chebukati, guddoomiyaha doorashooyinka madaxabanaan iyo xuduudaha[55], iyadoo maxkamada sare ay diiday 5tii Sebtembar 2022, cabashadii Raila Odinga, waxayna taageertay guusha William Ruto. Sidaa darteed goob-joogayaashu waxa ay ku tilmaameen doorashooyinka in ay ahaayeen kuwa si nabad ah oo hufan u dhacay, wuxuuna caddeyay Odinga inuu ixtiraamayo xukunka maxkamadda, inkastoo uu sheegtay inuu guuleystay[56]. Si kastaba ha ahaatee, heerkan sareeya ee madax-banaanida garsoorka ma ah mid ka baxsan nidaamka dastuuriga ee u oggolaanaya ka gar-naqidda dacwadaha, balse waxa siiyay adoodda iyo kalsoonida waa bulshada gaar ahaan siyaasiyiinta oo aqbalay go'aanada maxkamadaha. Tani waxay caddeyn u tahay heerka madax-banaanida Garsoorka Kenya waxayna mudan tahay in cashiro laga barto.

Ugu-danbeyn helidda garsoor madax-bannaan waa waajib sharci iyo mid dastuurku tilmaamay ee mudan dhaqan galin, mana jiri karto sarreyn

54 Natiijadii doorashada Kenya: William Ruto oo ku guuleystay doorashadii madaxtinimo. Wararka BBC. 15 Ogosto 2022.kaydsanlaga bilaabo asalka 15 Agoosto 2022. La soo celiyay 15 Agoosto 2022.

55 Kimeu, Caroline (22 Agoosto 2022)."Hogaamiyaha mucaaradka Kenya oo gudbiyay dacwad maxkamadeed natiijada doorashada".Ilaaliyaha. Nairobi. kaydsanlaga bilaabo asalka 23 Agoosto 2022. La soo celiyay 23 Agoosto 2022.

56 Houreld, Katharine (29 Agoosto 2022)."Odinga Kenya ayaa wali sheegay in uu ku guuleystay doorashadii, balse uu ixtiraami doono go'aanka maxkamadda".Reuters. La soo celiyay 22 Disembar 2022.

iyo ku dhaqan sharci iyadoon la helin heya'd garsoor oo dhismeheedu dhameystiran yahay lehna awoodo dastuuri ah oo ka soocan awoodaha kale ee hey'adaha Dowladda.

## QEYBTA 5AAD: TIIRARKA MADAX-BANAANIDA GARSOORKA IYO XAL U HELIDDA ISKU DHEELI TIR LA'AANTA AWOODAHA.

### Horudhac

Fuqahada qaanuunku waxay ku sababeyaan madax-banaani la'aanta heya'daha garsoorka siyaabo kala duwan, kuwa dhaqan iyo qaar la xiriira xaqiiqooyinka siyaasadeed, dhaqan dhaqaale bulsho. Haddaba, jiritaanka madax-bannaanida garsoorku waxay ka dhigaysaa caddaaladda inay si sax ah u qaadato dariiqeeda saxda ah si loo ilaaliyo xuquuqda shakhsiyaadka iyo xorriyaad-kooda. Madax-banaani la'aanta garsoorku waxa ay keentaa in cadaaladdu lunto ama khalkhal gasho, mararka qaarna aanay jirin taasi oo si xun uga tarjumeysa nidaamka dowladnimo, maadaama ay wiiqayso kalsoonida bulshada ay ku qabaan nidaamka garsoorka. Sidaa darteed dadku waxay raadsadaan habab kale oo ay ku helaan xuquuq-dooda, inta badan habab kaasina waa sharci-darro.

### Caqabadaha Haysta Garsoorka Soomaaliya.

Mid ka mid ah codsiyada ugu muhiimsan ee madax-bannaanida shaqada garsoorka ee ku saabsan xaaladda soomaaliya, waa in hey'adaha fulinta aysan hor istaagin fulinta xukunnada garsoorka.Tani waa midda keentay in dalal dhowr ah ay horumariyaan haba lagu dhaqan geliyo fulinta xukunnada ay gaaraan maxkamadaha, sida suurtagalnimada in garsooruhu uu ku soo rogo ganaaxyo shaqsiyeed saraakiisha dowladda oo ay tahay in ay fuliyaan xukunnada laga soo saarayo dowladda federaalka ama mid ka mid ah maamul goboleedyada. Sidoo kale in la isku xiro awoodda garsoorka iyo go'aanka hey'adda fulinta waxay ka dhigan tahay xad-gudub lagu sameeyo hey'adda garsoorka, tusaale marka uu garsoore soo saaro xukun mahelayo xukunkaas fulin, sababtoo ah booliska ama hey'adaha fulinta kama amar qaadanayaan maxkamadaha ama garsoorayaasha! Tani waxay keentay dhibaato marka la eego xaaladda garsoorka soomaaliya iyo gaaridda cadaaladda.

Garsoorka Soomaaliya waxaa haysta caqabado farabadan oo ay kamid yihiin kuwa siyaasadeed, maamul, dhaqaale, amni, sharci, iwm! Maadaama ay jiraan caqabadahaas ayna tahay madax-bannaanida garsoorku habka kaliya ee lagu gaari karo caddaalad, amni iyo horumar bulsho ayaan halkan ku soo gudbineynaa caqabadaha ugu waawey iyo xal u helidooda:

## 5.1 Madax-banaanida Siyaasadeed ee Hey'adda Garsoorka.

Sababaha siyaasadeed ee madax-bannaani la,aanta garsoorku waxa ay tilmaamaysaa duruufaha gaarka ah ee ku xeeran dalalka qaarkood, gaar ahaan kuwa la kulmay tobannaan sano oo ay gacanta ku hayeen maamullo keli-talis ah iyo milateri. Markii ay burbureen maamulladaas oo ay dalalkooda isu beddeleen xukun dimoqraadi ah, garsoorka waxaa soo wajahay culeys ka weeyn oo ah in garsoorku wax ka beddelo nidaamkii awoodda fulinta ama sarreynta xukunka milatari ee saameynta ku lahaa in loo beddelo hey'ado madax-bannaan oo caddaalad ah, sababtoo ah waxaa adag in si fudud wax looga badalo hab dhaqankii iyo aragtidii mudada dheer soo jiray. Sidaa darteed waa in ay noqotaa mid wax ku ool ah kor u qaadida aragtida iyo wacyiga garsoorayaasha si loo xaqiijiyo madax-banaanida garsoorka. Marka laga soo tago garsoorayaasha waxa ay wajahayaan dhibaatooyinka dembiyada khatarta ah, waxaana inta badan lala xiriiriyaa xilliyada laga guuraya nidaamyadii hore, arrimaha musuq-maasuqa maamulka iyo maaliyadda ama haddii ay sababtay is beddelka duruufaha shucuubta ay sameyaan xilliga kacdoonka si ay u helaan dimuqraadiyadda iyo xurriyadaha, balse intaas oo kaliya kuma kaaftoomaan ee waxay ku baaqaan dammaanad helidda in la xaqiijiyo xuquuqdaas oo laga dhigo wax waaciq ah oo la taaban karo[57].

Intaa waxaa dheer garsoorku in uu haysan damaanad buuxda ee ammni, sidaa aawgeed waxaa dhici karta in mararka qaar la waxyeeleeyo garsooraha, taasoo ka dhalan karta in garsooruhu ku dhiiraan waayo ka garnaqidda kiisaska qaar, isagoo u baqaya naftiisa ama in dhib lagaarsiiyo qoyskiisa.

Dastuurku ma damaanad qaadi karo xaqiijinta dimuqraadiyadda, si walba ay qoraaladiisa u qeexnaadaan ee waxaa lagama maarmaan ah in la helo qaanuun ku saleysan hannaan siyaasadeed oo dhameystiran dammaanad

57 د. محمد أنس قاسم جعفر: النظم السياسية والقانون الدستوري , القاهرة, دار النهضة العربية سنة ١٩٩٩.ص ٣٥٢ .

qaadi karana fulinta qoraallada. Sidaa aawgeed reer galbeedku wuxuu ku qoray mabda'aasi nidaamkiisa siyaasadeed si uu u raadiyo xal u helidda ku habboon bay'adaas, waxaana la sameeyay mabda'a kala saaridda awoodaha kaasi oo leh laba qeybood: mid maamul iyo qaanuun[58].

## 5.2 Madax-banaanida Maamul iyo Maaliyadeed ee Hey'adda Garsoorka

Arrimaha maamulka iyo maaliyadda:- Waxaa u qeybinta awoodaha dowladda hey'adaha kala duwan, iyadoo la siinayo hey'ad walba shaqada ay leedahay ha noqoto sharci-dejin, fulin iyo garsoor isla markaana u madax-banaan maamul iyo maaliyad. Madax-bannaanida maamul iyo maaliyadeed ee garsoorka waxay ka mid tahay hufnaanta iyo faa'iidada hawlaha maamulka ee hoos-tagga hey'adaha garsoorka, aysan cidina ku sammeyn faragelin siyaasadeed ama mid maamul iyo waliba hab-dhaqanka arrimaha shaqada maamulka garsoorka. Iyadoo laga duulayo arrimahaas oo dhan, ayaa waxaa lagama maarmaan ah in hey'adda Sharci-dejinta soomaaliya ay go'aan ka gaarto arrinta madax-bannaanida maamul iyo maaliyadeed ee hey'adda garsoorka, kana ilaaliso garsoorka faragalinta kaga timaada hey'adaha dowladda gaar ahaan laanta fulinta.

Hadaba marka la eego qaabka garsoorka Soomaaliya uu hadda ku shaqeeyo ma ahan mid leh madax-banaani maamul iyo maaliyadeed, maadaama uusan jirin golaha adeega garsoorka ee ku xusan Qodobka 109A ee Dastuurka KMG, oo ah heya'da ugu sarreeysa Garsoorka lehna awooda maamul iyo maaliyadeed ee hey'adaha garsoorka.

Marka laga yimaado maqnaanshaha golaha adeega garsoorka iyo madax-banaanida maamul iyo maaliyadeed ee hey'adaha garsoorka waxaa daciif ah doorka hey'adaha sharci-dajinta iyo fulinta, taasoo ay ugu wacan tahay habacsanaan ka jirta shaqada loo igmaday, gaar ahaan hab-dhaqanka iyo aragtida dowlad dhiska soomaaliya.

Miisaaniyadda hey'adaha garsoorku waa mid aad u yar oon ku filnayn garsoorayaasha, sidaa aawgeed garsoorku waa in uu helaa miisaaniyad ku filan oo dabooli karta baahiyaha hey'adda garsoorka. Tani waxa ay kor u qaadeysaa shaqada garsoorka iyo hufnaanteeda, balse haddii garsoorku uusan helin dhaqaale ku filan oo dabooli kara baahida lagama

58 د. سليمان محمد الطماوي: السلطات الثلاث في الدساتير العربية المعاصرة والفكر السياسي الإسلامي, القاهرة, دار النهضة العربية,ط٦ سنة ١٩٨١ ص ٤٥١ .

maarmaanka ah waxaa adkaanaysa inuu howlahiisa si wanaagsan u guto kana dhowrsanaado musuq-maasuqa, haddii uu musuq meesha soo galana waxaa meesha ka baxaya in la gaaro ujeedadii garsoorka iyo xaqiijinta caddaalad loo siman yahay. Sidaa darteed waa inuu jiraa Gole Adeeg Garsoor oo madax-bannaan xilkiisana yahay hoggaaminta siyaasadda guud, maamulka iyo maaliyada ee hey'adaha garsooka dalka, sida magacaabidda, xil ka qaadista, anshax-marinta, kala badalidda, mushaar qorista iyo gunnada hawlgabka garsoorayaasha sida ku xusan Dastuurka iyo Xeerarka garsoorka[59]. Sidoo kale hawlaha garsoorka waxaa dejiya Golaha Adeegga Garsoorka, isagoo ka madax-bannaan awooddaha sharcidejinta iyo fulinta, waxaana howlahiisa ka mid ah[60]:

1. Xaqiijinta madax-bannaanida cadaaladda iyo dhax-dhaadanimada Gasoorayaasha.

2. Maamulka garsoorka, shaqa qorista, ruqseynta iyo ka qaadis tallaabo sharci oo lid ku ah garsoorayaasha Maxkamadaha.
3. Magacaabista, dalacsiinta, bedelaadda, ruqseynta iyo anshax marinta xubin kasta oo katirsan Garsoorka ee heerka Dowladda Federaalka iyo Maxkamadda Dastuurka sida kuxusan Qod.111A ee Dastuurka iyo Xeerka Nidaamka Garsoorka ee jamhuuriyadda federaalka.
4. Go'aan kagaarista mushaharaadka iyo xaqqa hawlgabka garsoorayaasha iyo hawlwadeena
5. Wuxuu kormeeraa habsami u socodka hawlaha Xafiisyada, garsooreyaasha, xeer ilaalinta iyo Caawiyeyaasha Nidaamka garoorka.
6. Talasiinta Xukuumadda Federaalka arrimaha ku saabsan sharci kasta ama arrimaha saameeynta kuleh Garsoorka oo ay soo codsato Xukuumadda Federaalka ama isla Golaha toos u curiyo.

## 5.3 Madax-banaanida Sharci ee Hey'adda Garsoorka.

---

59 Eega Qod. 109A ee Dastuurka KMG 2012 sidoo kale qodobada. 2 , 5 ee Sharciga dhismaha golaha adeega garsoorka Lr.28 Tr.08/07/2014 iyo Xeerka Nidaamka Garsoorka 1962:

60 Eega Qod. 109A ee Dastuurka KMG 2012 sidoo kale qodobada. 2 , 5 ee Sharciga dhismaha golaha adeega garsoorka Lr.28 Tr.08/07/2014 iyo Xeerka Nidaamka Garsoorka 1962:

Waxaa loola jeeda xiriirka ka dhaxeeya hey'adaha dowladda (sharci-dejinta, fulinta iyo garsoorka) oo kala madaxbanaan, sidaa aawgeed dowladaha ku dhisan nidaanka liberalismka ah waxa ay qaateen dhowr nuuc[61].

b) Hannaanka xiriirka wada shaqeynta ka dhaxeeya labada awoodood ee sharci-dejinta iyo

fulinta, waxaa looga dhaqmaa baarlamaanka ingiriiska.

t) Hannaanka xiriirka kala madax-banaanida u dhaxeeya labada awoodood ee sharci-dejinta

iyo fulinta waxaa looga dhaqmaa nidaamka madaxtimada ee Maraykanka.

j) Hannaanka xiriirka ka dhaxeeya labada awoodood iyadoo awoodda fulinta ay hoos imaaneyso awooda sharci-dejinta waxaa looga dhaqmaaa nidaamka Iswisraland.

Haddaba dowladaha reer galbeedka waxay hal-abuureen qaabka ay u shaqeyn lahaayeen hey'adahooda oo dibadda kama keenin fikirkaas. Waxaa wax laga xumaada ah dawladaha caalamka saddexaad gaar ahaan dawladaha Carabta iyo Muslimka in ay horumarka u arkaan in looga daydo reer galbeedka nidaamka raasumaaliga ama hanti-wadaagga, iyadoo loo soo guuriyay bulshooyinka, aanan la eegin in ay ku habboontahay deegaanka laga dhaqan galinayo!

Sidaa darteed waxaa fashilmay hey'adaha ku dhisan qaabkaas natiijadana waxay noqoty kaligi-talisnimo ama in uu lumo isu- dheelitirka awoodaha hey'adaha dowladda[62]. Haddab si loo helo isu- dheelitirka awoodahaas waa in ay jirtaa hey'ad ka madax-bannaan hey'adda sharci-dejinta howsheeduna tahay korjoogteynta iyo waafajinta xeerarka dastuurka. Waxaana shaki ku jirin helidda hey'adan oo kale in ay dammaanad qaadi karto in la ixtiraamo qoraallada dastuurka iyo dhaqan gelintooda, sidoo kale isu-dheelitrka awoodaha dowladda, wuxuuna sii adkeenayaa shaqada baarlamaanka ee ah korjoogteyn iyo wax weyndiinta hey'adda fulinta. Sidoo kale dammaanad qaadka iyo korjoogteynta waxaa ka mid ah in lahelo aragti dadweyne oo xoog badan, waayo maamullada casrigan jira waxay daneeyaan rayu-caamka dadweynaha, waxayna ka baqaan in lagu

61 د. عادل ثابت : النظم السياسة – دراسة للنماذج الرئيسية الحديثة ونظم الحكم في البلدان العربية , القاهرة ,مكتبة خوارزم سنة ٢٠٠٢ ص٩٩.

62 د. أسامة أحمد العادلي: النظم السياسية المعاصرة بين الشمولية والديموقراطية, الإسكندرية سنة ٢٠٠٤ ص ٤٤.

koco, sidaa darteed waxay ku dadaalaan in aysan ka dhex bixin sharciyada dastuurka.

Dalalka dimuqraadiga ah rayu-caamka dadweynaha wuxuu ka qeyb qaataa dhisidda nidaamka siyaasiga, isagoo ka qeyb qaata saameeyana xubnaha dowladda. Haddaba in la hormariyo rayu-caamka si uu awood ugu yeesho ka qeyb qaadashada saameynta iyo korjoogteynta waxay suurta galineysaa isu-dheelitirka awodaha hey'adaha dowladda iyo kala madax-banaanidooda.

**Ahmiyada Madax-banaanida Hey'adda Garsoorka**.

Muhiimadda ay leedahay madax-bannaanida hey'adda garsoorka maaha mid la soo koobi karo, maadaama ay xaqiijinayso sarreynta sharciga, ilaalinta xuquuqda qofka, korna u qaadayso isla xisaabtanka iyo kobcinta kalsoonida shacabka, waxaana ka mid ah muhimada madax-bannaanida garsoorka iyo xoojintiisa si ay u suura gasho ka miro dhalinta himilooyinka loo abuuray, gaar ahaan kala qeybinta iyo isu-dheellitirka awoodaha hey'adaha dowladda.

**Ilaalinta sharciga:**

Xuddunta bulsho kasta oo dimuqraadi ah waxaa mabda'a u ah sareynta sharciga iyo madax-banaanida garsoorka waxayna door muhiim ah ka ciyaartaa ilaalinta mabda'a dastuuriga ah iyadoo hubinaysa in garsoorka ka madax-banaanado laamaha fulinta iyo sharci dejinta ee dawladda, garsoorayaashuna xor u ahaadaan ka tarjumida sharciga iyo dhaqan galinta shuruucda dalka, iyagoon ka cabsaneyn cadaadis siyaasadeed ama mid awoodeed. Tani hadii lahelo waxa ay xaqiijineysaa in sharcigu si joogta ah oo caddaalad ah loo dabaqo. Sidoo kale waa in ay jirtaa hey'ad ka madaxbanaan oo howsheedu tahay dib u habeynta shuruucda dalka iyo is waafajinta xeerarka iyo dastuurka. Waxaan shaki ku jirin helidda hey'adan oo kale in ay dammaanad qaadi karto in la ixtiraamo qoraallada dastuurka iyo dhaqan gelintooda, sidoo kale isu-dheelitrka awoodaha dowladda, wuxuuna sii xoojinayaa shaqada baarlamaanka ee ah korjoogteyn.

Ilaalinta xuquuqda qofka:

Ilaalinta xuquuqda shaqsigu waa arrin aasaasi u ah nidaam kasta oo sharci ku dhisan. Xaqiijinta madaxbanaanida garsoorku waxay dammaanad qaadaysaa in garsoorayaashu ay go'aano ka gaari karaan iyagoo ku

salaynaya mudnaanta kiis kasta uu leeyahay, kana madax-bannaan saamayn dhinacya kale. Tani waxay awood u siinaysaa inay ilaaliyaan xuquuqda iyo xorriyadaha shakhsi ahaaneed ee ku xusan dastuurka iyo qaab-dhismeedka nidaamka sharci ee dalka. Garsoorayaashu waxa ay u adeegayaan si dhexdhexaad ah, waxayna ilaaliyaan nidaamka caddaaladda iyagoo xaqiijinaya in ay u dhacday maxkamadaynta eedeysanaha si caddaalad ah, waxayna ka ilaaliyaan muwaadiniinta falalka sharci darrada ah ee dawladda ama danaha gaarka ah iyo cid kastaa oo takrifal awood sameeysa.

Ilaalinta hantida iyo kor u qaadida kalsoonida bulshada:

Garsoor madax-bannaan wuxuu ka shaqeeyaa ilaalinta hantida bulshada iyo hubinta ku-takri-falka awoodeed ee laamaha fulinta iyo sharci-dejinta, wuxuuna ka hortagtaa isku-ururinta awoodda, garsoorayaashu waxay ka hortagaan ku xad-gudubka hantida iyo xuquuqda muwaadiniinta ee dastuuriga ah. Sidoo kale aaminaadda iyo kalsoonida ay shacabku ku qabaan nidaamka garsoorka ayaa muhiim u ah sharciyada iyo xasiloonida bulsho kasta. Kalsoonidani waxay lagama maarmaan u tahay ilaalinta xasiloonida nidaamka dowliga ah, maadaama ay kor u qaadayso u hoggaansanaanta sharciga, wada noolaanshaha bulshada iyo ixtiraamka hey’adaha sharciga iyadoo la hubinayo in khilaafaadka lagu xaliyo hannaan hufan oo dhexdhexaad ah, sidaa darteed marka ay dadku aaminsan yihiin in garsoorayaashu ay ka madax-bannaan yihiin saamaynta dibadda, waxay u badan tahay in la xaqiijiyo caddaaladda iyo hufnaanta garsoorka.

**Horumarinta Sumcadda Caalamiga ah.**

Madax-banaanida garsoorku waxay wax ka tartaa sumcadda waddanku ku leeyahay caalamka. Waddamada muujiya go’aan adag oo ku aaddan madax-bannaanida garsoorkooda ayaa inta badan loo arkaa inay ka xasilloon yihiin dalalka kale, la iskuna halayn karo isla markaana u suura gasho soo jiidashada maalgashiga iyo iskaashiga caalamiga ah, sidoo kale waxay kor u qaadaysaa meeqaamka waddanku ku leeyahay bulshada caalamka waxayna saameeyn ku yeelan kartaa xiriirka diblomaasiyadeed iyo iskaashiga caalamiga ah.

## GUNAANAD IYO TALO-SOOJEEDIN

Qormadan waxaan kaga soo hadalnay guud ahaan awoodda hey'adda garsoorka, xeerarkii hore ee soomaalida iyo muhimadda ay leedahay madax-banaanida garsoorka iyo kala saaridda sadexda awoodood ee dowladda "Separation of power" iyo waliba ku dhaqanka sharciga ''Rule of law'' sidoo kale waxaa diirada lagu saaray caqabadaha heysta hey'adaha garsoorka iyo tiirarka aasaaska u ah madaax-banaanida hey'adda garsoorka, taasoo ah kartida uu gorsoorku kaga garnaqo arin kasta oo khilaaf ka taagan yahay oo la horkeeno, isaga oo ka madax-banaan cadaadis kaga yimaada dhinacyada dadweynaha ee dawcwadu ka dhaxeysa ama dhinaca hey'adaha dawladda.

Hadaba madax-banaanidani garsoor majiri karto hadaan la helin rabitaan siyaasadeed oo daacad ah kuna saleeysan sarreynta sharciga. Madax-bannida hey'adaha garsoorka waa u udub dhexaadka dowlad-nimada iyo dimuqraadiyadda, waxayna kor u qaadaa kalsoonida dadweynaha iyo waliba ku dhaqanka sharciga, sidaa darteed waxaan soo jeedineynaa arrimahan:

1. In la ilaaliyo sarreynta sharciga lana raaco ''rule of law''
2. In lagu dhaqmo mabda'a kala saarida awoodaha saddexda hey'adood ee dawladda"separation of power" midkastana shaqadeeda u madax-banaanaato.
3. In la dhiso Golaha Adeegga garsoorka iyo Maxkamadda Dastuurka dalka.
4. In garsoorku noqdo mid dhex-dhexaad ah oo muwaadin kastaa uu yaqiinsado in garsoorku aanu dhinac aheyn ee kiiskiisa looga garnaqi doono si cadaalad ah.
5. In garsoorayaasha, xeer ilaaliyaasha iyo howlwadeenada hey'adda garsoorka helaan mushaaraad iyo agab ku filan si ay u gutaan howlaha loo igmaday.
6. Tayaynta howlwadeenada garsoorka iyo kor u qaadida aqoontooda.
7. In garsoorka loo sameeyo boolis gaar u ah hey'adda garsoorka si xumunada kasoo baxa maxkamadaha u helaan xukunadooda fulin.

8. In la helo hey'ad ka madaxbanaan howsheeduna tahay dib u habeynta shuruucda dalka iyo is waafajinta xeerarka iyo dastuurka.

**=Dhamaad =**

## Tixraac:


1. Dastuurka KMG August 1, 2012.
2. Dastuurka 1960.
3. Dastuurka 1979.
4. Dastuurka Kenya, 2010.
5. Xeerka Nidaamka Garsoorka Soomaaliya 1962.
6. Sharciga dhismaha Golaha Adeega Garsoorka Lr.28 Tr.08/07/2014.
7. Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed (XCS)
8. Xeerka Habka Ciqaabta Soomaaliyeed (XHCS).
9. Xeerka Madaniga Soomaaliyeed (XMS)
10. Xeerka Habka Madaniga Soomaaliyeed (XHMS).
11. Abddullahi Mohamed Hassan.why we chose scienctific socialism, Mugadisho.Information and national guidance 1975.
12. Baaqa Caalamiga ah ee Xuquuqda Aadanaha ee 1948.
13. Dr. Xuseen Cabdi Cilmi. Hannaaka Dasruuriga iyo Aragtida Dowlad Dhiska Soomaaliya, daabacaada 1aad 2019.
14. Lee V. CASS Nell: the shaping of Somali social reconstruction the history of a pastoral people. 1600-1900. University of pennsylvania press philadelphia 1982.
15. Sheekh Mooge Dirir Samatar: Al ciisa, shacbun wataariikh, Alqaahira, daarul nashri wadabaaca 1996.
16. Axmed Sheikh Cali Axmed: Xeerkii Soomaalidii Hore, Wasaaradda hiddaha iyo tacliinta sare 1977.
17. Axmed Sheekh Cali, jookha jookha: Dowladdii jiniga ee Geeska, OP

18. Qaraarka Golaha Qaramada Midoobay 29-November-1985 iyo 13-December-1985.
19. See article 10 of the Universal Declaration of Human Rights. 2 See article 14/1.
20. Ee Axdiga Caalamiga ah ee Xuquuqda Madaniga iyo Siyaasadda ee 1966. Soomaaliyana ku biirtay 24-01-1990.
21. https://www.britannica.com>topic>judicial-indepen
22. Eeg Go'aankii Maxkamadda sare ee soo baxay Ref:XGMS/5/2010 Date: 01/6/2010.
23. Eeg Go'aankka Maxkamadda Sare Ref:MS/DH/09/ 2017 Tr. 16/5/2017.
24. Sharciga Maxkamadda Yurub ee Xuquuqda Aadanaha (CEDH) 25 Febraayo. 1997, Findlay c/ Royaume-Uni, Rec. 1997.
25. Shirweynihii toddobaad ee Qaramada Midoobay ee ka hortagga dembiyada iyo daawaynta dembiilayaasha oo lagu qabtay Milan 26 Agoosto ilaa 6 Sebtember 1985.
26. Dr. Maxamad Cali Tuuryare, Almujtamac almadani wataxawul aldimuquraadi fii Soomaal.
27. Axmed Barkhat Maax, Maadaa yaxduth fil Soomaal.
28. Eag warbixinta Ururka Caalamiga ah ee Garsoorayaasha November 17, 1999.
29. Natiijadii Doorashada Kenya: William Ruto oo ku guuleystay doorashadii madaxtinimo. Wararka BBC. 15 Ogosto 2022.kaydsanlaga bilaabo asalka 15 Agoosto 2022. La soo celiyay 15 Agoosto 2022.
30. Kimeu, Caroline (22 Agoosto 2022).”Hogaamiyaha mucaaradka Kenya oo gudbiyay dacwad maxkamadeed natiijada doorashada”. Ilaaliyaha. Nairobi. kaydsanlaga bilaabo asalka 23 Agoosto 2022. La soo celiyay 23 Agoosto 2022.
31. Houreld, Katharine (29 Agoosto 2022).”Odinga Kenya ayaa wali sheegay in uu ku guuleystay doorashadii, balse uu ixtiraami doono go'aanka maxkamadda”.Reuters. La soo celiyay 22 Disembar 2022.

**المراجع العربية:-2**

١- القرآن الكريم

٢- صباح فرج سعد ماضى. استقلال القضاء ووسائل حمايته دراسة في ضوء الشريعة الإسلامية والدستور الليبي: رسالة دكتورة غير منشورة , جامعة ملايا كوالالمبوررة سنة ٢٠١٧

٣ - د. محمد سعيد حسين أمين: أثر التعديلات الدستورية في مسيرة الإصلاح السياسي والاجتماعي والاقتصادي في مصر, القاهرة, دار النهضة العربية سنة ٢٠٠٨.

٤- د. أسامة أحمد العادلي: النظم السياسية المعاصرة بين الشمولية والديموقراطية, الإسكندرية سنة ٢٠٠٤

٥- د. عادل ثابت : النظم السياسة – دراسة للنماذج الرئيسية الحديثة ونظم الحكم في البلدان العربية , القاهرة, مكتبة خوارزم سنة ٢٠٠٢ .

٦- د. محمد آنس قاسم جعفر:النظم السياسية والقانون الدستورية , دار النهضة العربية سنة ١٩٩٩

٧- د. حسين عبد علمى: العلاقة بين السلطتين التشريعية والتنفيذية في الصومال, القاهرة, دار الفكري العربي ط ١ سنة ٢٠٠٨

. ٨- د. ماجد راغب الحلو: الدولة في ميزان الشريعة, دار الجامعة, القاهرة ٢٠٠٨

٩- د. عادل الطبطبائي: الحدود الدستورية بين السلطتين التشريعية والقضائية, الكويت سنة ٢٠٠٠.

٠١- محمود موسى يوسف : القبلية وأثرها في السياسة الصومالية سنة ١٩٩٩

١١- حسن محمد جوهر : الصومال, القاهرة, دار المعارف سنة ١٩٦٥

٢١- د. محمد نور شحاتة : استقلال القضاء النظرة الدولية العربية , دار النهضة القاهر.

٣١- د. سليمان محمد الطماوى : السلطات الثلاث في الدساتير العربية

***** DHAMMAAD*****

4

# U-SINAANTA IYO DAAHFURNAANTA QAADASHADA SHAQAALAHA RAYIDKA EE DOWLADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

Avv. Arafat Ali Mohamed

# TUSMO

NUXURKA DIRAASADDA . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 100

HORUDHACA DIRAASADDA . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 101

QAYBTA 1AAD: DULMAR GUUD EE MACNAHA IYO ASTAAMAHA ERAYADA MOWDUUCA DIRAASADDA . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 102

QAYBTA 2AAD: FEDERAALAYNTA SHAQAALAHA RAYIDKA EE DOWLADDA SOOMAALIYA. . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 109

QAYBTA 3AAD: MABAADI'DA GUUD EE QAADASHADA SHAQAALAHA DOWLADDA . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 116

QAYBTA 4AAD: HANNAANKA SHAQAALEYSIINTA SHAQAALAHA RAYIDKA EE DOWLADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA . . . . . . . . . . . 126

QAYBTA 5AAD: CAQABADAHA QAADASHADA SHAQAALAHA RAYIDKA EE DOWLADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA. . . . . . . . . . . . . . . . . . 132

GUNAANAD IYO TALOOYIN . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 137

## NUXURKA DIRAASADDA

Shaqaalaha rayidka ee dowladdu waa udub dhexaadka helid nidaam dowladeed oo wanaagsan. Dastuurka kumeel-gaarka ah ee Soomaaliya waxa uu u qoondeeyay cutub gaar ah si loo muujiyo muhiimadda ay u leeyihiin dowladnimada. Cutubka 11aad ee Dastuurku ayaa jideeyay mabaadi'da laga duulayo marka la dhisayo nidaam shaqaale rayid ah oo ummadda ugu adeega si hufnaan iyo amaano leh. Waxaa ka mid ah in shaqaalaha rayidka lagu qaato hannaan daahfuran, caddaalad ah, loona simanyahay. Dastuurka ayaa asaas u ah dib-u-habeyn cusub ee nidaamka adeegga rayidka ah oo horey dhowr jeer wax looga soo beddalay tan iyo markii Jamhuuriyaddu dhalatay. Dib-u-habeynta shaqaalaha rayidka Dowladda Federaalka ayaa soo billaabatay 2006, iyada oo la qoray sharcigii shaqalaaha, lana dhisay Guddiga Shaqaalaha Rayidka, iyada oo la shaqaaleeysiiyay in kabadan 5,739 shaqaale rayid ah. Daraasaddan ayaa looga golleeyahay in la qiimeeyo in qaadashada shaqaalahaas loo maray hab caddaalad ah loona simanyahay sidoo kale daahfuraan iyo in kale? Waa yartahay cilmibaarisyo ku filan kuna saabsan qaadashada shaqaalaha rayidka ee Dowladda Federaalka Soomaaliya, sidaa darteed waxaan diraasaddan diiradda ku saaraynaa isla markaana aan dabagal iyo qiimeeyn ku samaynaynaa hannaanka loo maro shaqaaleysiinta. Habka lagu gaaray natiijada ayaa isugu jira falanqayn wareysiyo lala yeeshay 7 ka-qaybgale xog-ogaal ah, dhuuxid mabaadi'da iyo habraacyada ay dhigeen Dastuurka, Sharciga Shaqaalaha Rayidka, Xeer-nidaamiyayaasha maamulka Shaqaalaha Rayidka, gaar ahaan Shaqo qorista Shaqaalaha, iyo sharciyada iyo xeerarka kale ee dowladda ee xiriirka la leh. Diraasaddan oo socotaya bilihii Oktoobar ilaa Diseembar ee 2023, ayaa lagu ogaaday: in Dowladda Federaalku aysan lahayn siyaasad mideysan ee qaadashada shaqaalaha rayidka; shaqo qorista rayidka oo aan loo marin habraaca sharcigu dhigay; in hay'adaha dowladdu qortaan shaqaale aysan baahi u qabin. Sarreynta sharciga oo aan la dhowrin, in uusan jirin isla-xisaabtan dhab ah ee hay'adaha dowladda, maqnaashiyaha guddiyo iyo hay'ado muhiim u ah isla-xisaabtanka, duugoobidda iyo inaysan dhamaystirnayn sharciyada lagu maamulo shaqaalaha rayidka, iyo faragelinta siyaasiyiinta ee hannanka shaqo qorista, ayaa loo aaneeyaa in sidaasi dhacdo. in la dhiso Guddiga La-dagaallanka Musuqa, Guddiga Xuquuqda Aadanaha, Gardoonka, Golaha Adeegga Garsoorka, Guddiga Adeegga Baarlamaanka, ayaa muhiim u ah

helid isla-xisaabtan buuxa iyo talinta sharciga. Siyaasadda guud ee adeegga rayidku waa lagama maarmaan haddii la doonayo dib-u-habeyn wanaagsan ee maamulka shaqaalaha rayidka oo mideysan. Dowrka bulshada rayidka ee la xisaabtanka hay'adaha dowladda iyo wacyigelinta dadweynuhu waa lama huraan si loo xoojiyo kaalinta bulshada ee la xisaabtanka.

## HORUDHACA DIRAASADDA

Dowladdu waa mid ka mid ah suuqa loo doonto shaqada. Walow mabaadi'da guud ee takoor la'aanta, iyo xiriir shaqo oo caadil ay kuwada fulayaan dhammaan shaqo bixiyayaasha oo dhan haddana, dowladdu waxa ay shaqo bixiyayaasha kale kaga duwantahay in ay tahay suuq shaqo la wada leeyahay oo loo simanyahay. U sinnaanshahaas oo ku dhisan in dowladdu tahay wax lawada leeyahay, adeegga ay bixisana loo simanyahay. Dowladda wanaagsani waa tan caddaalad ku dhisan, ka dhowrsan inay ku xad-gudubto xuquuqda Aadanaha ee muwaadiniinteeda iyo dadka kale ee dhulkeeda ku nool, ka ilaalisa in dhinacyo kale ku xad-gudbaan xuquuqdaas dhowrsan. Sharciga ayaa dowladda ku haga habka iyo hannaanka ay sidaas u marayso. Dastuurka oo ah sharciga ay bulshadu ku heshiiso ayaa lagu weeleeyaa labadaas ujeeddo. Xuquuqda Aadanaha iyo Awoodda Dowladda. Is-waafajintooda ayaa ah sugnaanta jiritaanka dowladnimo waarta, halka is-jiiriddooduna tahay cagsigeed, dowladda oo dunta, kala carar iyo in labadaba la waayo. Haddaba is-waafajinta awoodda dowladda iyo ilaalinta xuquuqda Aadanuhu waa dhexroorka dowladnimada.

Dastuurku waxa uu faray in shaqada rayidka ee dowladda looga mid noqdo tartan furan, caddaalad ah loo simanyahay. Saas darteed ayaa diraasaddani loo sameeyay si loo ogaado in shaqo qorista Dowladda Federaalku waafaqsantahay mabda'aas iyo in kale. Si haddaba ujeedkaas loo gaaro, marka hore diraasaddu wax ay qeexitaan ku samaynaysaa maxaa loola jeedaa "shaqaale rayid ah" si looga sooco nidaamyada shaqo qoris ee aan khuseyn. Sidoo kale, in is-barbar-dhig lagu sameeyo hannaanka sharciyadu dhigeen ee shaqaaleeysiinta iyo hababka jira si loo ogaado in sharciga la raacay iyo in kale. Ujeedka guud ee diraasaddu waa in Dowladda Federaalka iyo muwaadiniinta Soomaaliya lala wadaago talooyin la fulin karo oo lagu gaarayo shaqo qoris dowladeed oo caddaalad ah, daahfuran, ku saleysan u-qalmid.

Wareysiyo lala yeeshay khubaro ku xeel-dheer arrimaha shaqo siinta, shaqaalaha rayidka, oo ay ka mid yihiin masuuliyiin haya xilal muhiim ah, ayaa laga helay xogo asaasi ah iyo falanqayn xog-ogaalnimo leh.

Sidoo kale, Dastuurka kumeel-gaarka ah ayaa lala tashaday si loo soo bandhigo qaabka uu u nidaamiyay adeegga rayidka ah ee dowladda. Mabaadi'da dowladnimadu ku dhisantahay ee cutubka koowaad, xuquuqda shaqada, sinnaanta muwaadiniinta, ayaa si fiican loo xigtay. Cutubka 11aad ee Dastuurka oo gaar u ah mabaadi'da adeegga rayidka ah[(1)] ee dowladda, ayaa saldhig looga dhigay doodaha iyo faaqididda gaabisyada jira ee hannaanka shaqo qorista rayidka ee Dowladda Federaalka. Sharciga shaqaalaha rayidka ee lambar 11 (2006) iyo xeer-nidaamiyayaasha maamulka shaqaalaha rayidka ee 2021 ayaa loo cuskaday inay yihiin halbeegga loo barbar-dhigay waaqica shaqo qorista rayidka.

Qoraallo cilmibaariseed iyo buug laga qoray shaqaalaha rayidka Soomaaliya, warbixinno ay diyaariyeen hay'adaha Dowladda Federaalka iyo mashaariicda taageerada siiya Soomaaliya, ayaa lala kaashaday sixidda xogaha qaar, fahanka arrimaha diraasaddu faaqidday, iyo ujeeddooyin is-barbar-dhig.

Natiijooyinka lagu gaaray diraasaddaan maahin kuwo ku kooban inta la sheegay, balse waa koobis inta ugu muhiimsan ee khuseysa mowduuca diraasadda oo ku kooban "u sinnaanta iyo daahfurnaanta qaadashada shaqaalaha rayidka ee Dowladda Federaalka" taas oo aan hoos loogu daadegin arrimo badan oo la xiriira tartanka sida noocyada imtixaanaadka shaqo qorista, luuqadda, sida loo qaado tartanka xirfadaha iyo mihnadaha u baahan baraatik. Muddada diraasadda oo gaabnayd iyo koobnaanta muwduuceeda awgood ayaan arrimahaas iyo kuwo kale loo faaqidin sidaasna aan looga sameyn gungaar iyo talooyin.

Talooyinka diraasaddu waa kuwo waafaqsan Dastuurka iyo sharciyada kale ee dalka waana la dhaqangelin karaa haddii ay doonis jirto. Waayo wax aan la fulin karin lama qoran lahayn.

---

1 Diraasaddan gudaheeda, "adeegga rayidka ah" iyo "shaqada rayidka" isku macne ayaa loo adeegsaday maadaama labaduba isku macne loogu adeegsaday nidaamka sharci ee dowladda ee khuseeya.

# QAYBTA 1AAD: DULMAR GUUD EE MACNAHA IYO ASTAAMAHA ERAYADA MOWDUUCA DIRAASADDA

## 1. Micnaha erayada "Shaqaalaha Dowladda" iyo "Shaqaalaha rayidka":

In la helo qeexitaanka ama fahan guud ee dabeecadda erayada "Public servant/Shaqaalaha dowladda" iyo "Civil servant/Shaqaalaha rayidka ee dowladda" aad bay u adagtay waxaana ugu wacan adeegsiga kala duwan ee dalalka caalamku u adeegsadaan macnaha labada eray iyo kala duwanaashiyaha mowduuca loo adeegsado. Dalalka qaar sida Mareykan, labada erayba waa isugu macne oo isku ujeed ayay u adeegsadaan iyaga oo ula jeedaa shaqaalaha rayidka ee dhamaan hay'adaha dowladda. (U.S, 1926) halka dalalka qaar sida Ingiriiska iyo Jarmalka, ay labada eray tusinayaan laba ujeeddo oo kala duwan. Ingiriiska oo kale, Shaqaalaha rayidku waa inta u shaqaysa laanta fulinta waxayna soo galayaan shaqaalaha dowladda oo ay ku jiraan shaqaalaha u shaqeeya hay'ada kale ee dowladda oo ay ku jiraan ciidanka, garsoorka iyo shaqaalaha dowladda hoose. (Stanley, no date). Jarmarlka, tusaale ahaan, dowladda federaalka labada erayba waxaa loo kala adeegsadaa laba hab oo dowladdu u shaqaaleyso shaqaalaha ee sida ingiriiska kama dhigna isa soo dhexgelid. (Community, no date).

Dalalka sida Suudaan (2007 ,قانون الخدمة المدنية القومية), Masar (,قانون الخدمة المدنية 2016), Ciraaq (1960 ,قانون الخدمة المدنية), iyo Kuweyt (1979 ,الخدمة المدنية), waxa ay adeegsadaan 'موظف/عامل Shaqaale, walow ay sidaas u soo gaabiyaan, haddana qaarkood qeexitaanka farqi ayaa u dhexeeya. Masar iyo Suudaan, waa shaqaale u shaqeeya hay'ad dowladeed. Kuweyt, waa shaqaale ka shaqeeya shaqo madani ah. Halka Ciraaqna ay yihiin shaqaale ka shaqeeya dowladeed oo joogto ah. Itoobiya, shaqaalaha rayidka ah ee Dowladda Federaalka waa shaqaalaha u shaqeeya hay'ada dowladda federaalka ee ka hooseeya darajada kuxigeen agaasime guud. Waxaa ka baxaya Shaqaalaha sharci gaar ah lagu nidaamiyo, wasiirrada, agaasimayaasha guud iyo kuxigeennada agaasimayaasha guud, garsoorayaasha, xeer ilaalinta, ciidanka iyo xubnaha Golaha Wakiillada iyo Aqalka Federeshinka. (Federal Civil Servants Proclamation, 2017).

Sharciga abaal-dhuradka shaqaalaha Dowladda Federaalka Itoobiya waxa uu adeegsadaa "Shaqaalaha dowladda(public servant) oo ay ku jiraan dhammaan inta u shaqaysa hay'adaha dowladda federaalka waxaana ka mid ah xubnaha shaqaalaha rayidka, ciidanka, xubnaha baarlamaanka iyo

kuwa kale. (Public Servants' Pension Proclamation, 2011). Marka Itoobiya, waxa ay ka mid tahay dalalka qaatay fekradda ah, in dadka u shaqeeya dowladda ay yihiin shaqaale dowladeed, kuwaas oo isugu jira shaqaale rayid ah iyo shaqaale kale oo leh magacyo badan sida xildhibaanno, askar, wasiirro, agaasimayaal iyo wixii la mid ah.

Majaalka loo adeegsado erayadu xitaa waxa ay saameeyaan ujeedka iyo micnaha labadaba. Sharciyada ciqaabta marka la joogo badiba qawaaniintu waxa ay adeegsadaan sarkaal dowladeed "public official ama public officer" ama shaqaale dowladeed "Public servant" oo loola jeedo dhamaan dadka u shaqeeya dowladda. (Art. 240, Penal Code, 1962). Qodobka 111J (4) ee Dastuurka ku-meel gaarka ahi waxa uu eraygaa "sarkaal dowladeed" ku qeexay "sarkaal la soo doortey ama la magacaabey ama qof u shaqeeya hay'ad Federaal, Dawlad-goboleed iyo Dawlad Hoose, sarkaal ka tirsan ganacsi ay leedahay ama maamusho ama gacanta ugu jira Dawladda, oo ay Dawladdu wax weyn ku leedahay, ama sarkaal ka tirsan ciidamada difaaca ama booliska, laakiin sooma hoos gelayo garsoore Maxkamadda Dastuuriga ah, Maxkamadda Sare ama Maxkamad Sare, ama sarkiilkii kaleba intiiba ay cabashadu la xiriirto hawl garsoor" taa macnaheedu waa in cid kasta ee dowladda u shaqeysa ay tahay "sarkaal dowladeed", ha ahaado mid la soo doortay, mid la magacaabay, ama mid lagu shaqaaleeysiiyay u-qalmid. Waxaa ka mid ah shaqaalaha rayidka ah ee dowladda. Qodobka 111J ee dhisaya xafiiska madax bannaan ee Gardoonku wuxuu ka ballaaranyahay micnaha loo adeegsaday sarkaal dowladeed ee xeerka ciqaabta maadaama ay soo galayaan arrimo maamul iyo kuwo madani ah. Eeg faqradda 5aad ee isla qodobka hore.

Ujeedka qormadaan awgeed, waxaan adeegsanaynaa 'Shaqaalaha rayidka ee dowladda' oo leh micnaha lagu qeexay ee soo socda.

Cutubka 11aad ee Dastuurka Kumeel-gaarka ah ee 2012 waxa uu ku saabsanyahay shaqaalaha rayidka ah ee dowladda balse ma uusan qeexin cida uu u aqoonsanyahay 'shaqaale rayid ah. Qodobka 2aad ee Sharciga Shaqaalaha Rayidka ee Dowladda, wuxuuse, shaqaalaha lagu dhaqayo sharcigaas ku koobay "shaqaalaha joogtada ah" oo aysan ku jirin: madaxda lasoo doorto, shaqaalaha aan joogtada ahayn iyo kuwa heshiisleyda ah, xubnaha ciidamada amniga[2], iyo shaqaalaha gaarka ee hay'adaha aan

2 Ciidamada amnigu waa: ciidanka Xoogga, Nabadsugidda, Booliska, iyo Asluubta. Eeg

dowladdu xubin ka ahayn. Xeer Ra'iisul Wasaare ayaa ku sii daray oo "Shaqaale Rayid ah oo Dowladeed" ku qeexay "waxaa loola jeedaa qof u shaqeeya Hay'ad dawladeed oo sharciga lagu dhisay, mushaarkiisa laga bixiyo Miisaaniyadda Mideysan ee Dowladda Federaalka Soomaaliya" [3]. Labada shardi ee xeerku ku cayimay in shaqaalaha rayidka ah uu u shaqeeyo hay'ad dowladeed oo sharci lagu dhisay, iyo in uu qaato mushaar laga bixiyo miisaaniyadda Dowladda Federaalka. Ujeedka qeexitaanka sare ku xusan, hay'ad dowladeed, marka la joogo heer Federaal, waa Madaxtooyada, Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha, wasaaradaha Dowladda Federaalka, hay'adaha, xafiisyada iyo guddiyada madaxa bannaan ama hoosyimaad Xukuumadda[4]. Kuma jiraan hay'adaha kale ee Dowladda Federaalka, kuwa dowlad goboleedyada iyo dowladaha hoose waxaa nidaaminaya sharciyadooda gaarka ee khuseeya shaqaalaha rayidka.
Haddaba shaqaaluhu si uu u qaato sifada "Shaqaale rayid ah" waa in uu:

1. U shaqeeyaa Hay'ad dowladeed ee katirsan laanta fulinta ama hay'adaha iyo guddiyada maxa bannaan;

2. Ku shaqeeyo jago joogta ah ee adeegga rayidka;
3. Uusan ahayn xubnaha laga reebay ee kala ah: xubnaha doorashada ku yimid, shaqaalaha aan joogtada ahay, shaqaalaha dowladda ee heshiisleyda ah, xubnaha ciidamada amniga qaybahooda, shaqaalaha gaarka ee hay'adaha aan dowladdu xubin ka ahayn;
4. Ka mid yahay shaqaalaha dowladda ee mushaarkooda laga bixiyo miisaaniyadda Dowladda.

Sifooyinkaas sharcigu xaddiday awgood, shaqaale rayid ah waxaa ka baxaya shaqaalaha baarlamaanka, kuwa garsoorka, iyo shaqaalaha dowladda ee sharci kale oo gaar ah [5] lagu nidaamiyo isla markaasna la caddeeyo in

---

qodobka 126 (1) ee Dastuurka Kumeel-gaarka ah ee 2012.

3 ) (*qaybta 1aad ee Xeer Nidaamiyayaasha Maamulka Shaqaalaha*, 2021).

4 ) Eeg qodobka 1aad ee (*Sharciga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda*, 2006) oo lala akhriyo qodobbada 48 iyo 119 ee Dastuurka Kumeel-gaarka ah ee 2012.

5 ) Waxaa ka mid ah shaqaalaha dowladaha hoose oo lagu nidaamiyo sharciga (*Local Government Service Regulations*, 1973), shaqaalaha Bangiga Dhexe ee Soomaaliya oo lagu

aysan rayid ahayn.

Shaqaalaha rayidka, ka sokow xuquuqda shakhsiga ah, waxa ay leeyihiin mudnaan iyo ilaalin gaar ah ee ku qoran qodobka 116 ee Dastuurka iyo sharciyada shaqaalaha. Sidoo kale, waxaa saaraan masuuliyad gaar ah oo ay ku dhaqmaan sharciyada iyaga oo raacaya mabaadi'da qodobka 115 ee Dastuurka.

## 2. Adeegga Rayidka ee Dowladda

Adeegga rayidka ama shaqada rayidka "Civil service" waa shaqooyinka ama howlaha ay qabtaan shaqaalaha rayidku. Shaqaalaha rayidku, iyagoo u hoggaansamaya Sharciga Shaqaalaha Rayidka iyo xeer-nidaamiyayaasha lagu dhaqangelinayo, waxa ay fuliyaan oo maamulaan adeegyada ay bixiso laanta fulinta ee dowladdu. Qaybta 1aad ee Xeer Ra'iisul Wasaare lr. 131, iyo lr. 132 ee 2021 waxa uu adeegga rayidka ee dowladda ku qeexay "waxaa loola jeedaa adeegga ay qabtaan Shaqaalaha Rayidka Dowladda Federaalka Soomaaliya si waafaqsan qodobbada xeerka iyo Xeernidaamiyeyaasha shaqaalaha Dawladda, una qabtaan dhammaan hawlaha fulinta iyo kuwa maamul iyo adeeg-bixin dadweynaha. Cayimidda shaqada shaqaalaha rayidku waxa ay xoojinaysaa qeexitaankii shaqaalaha rayidka looga soocay shaqaalaha kale ee dowladda.

Adeegga rayidku waxa uu ka midyahay adeegga guud ee dowladda. Howlaha iyo adeegyada dowladeed ee ay bixiyaan hay'adaha kale ee dowladda sida Baarlamaanka, Garsoorka, iyo Amnigu waa adeeg guud oo dowladdu bixiso balse maahin adeeg rayid ah. Adeegyada kale ee dowladda waxaa lagu nidaamiyaa sharciyo kale oo aan ahayn kan rayidka.

Adeegga baarlamaanka oo ah shaqaalaha iyo shaqada ay labada gole ee Baarlamaanku u baahanyihiin waxaa jaangooya oo maamula Guddiga Adeegga Baarlamaanka waxaana lagu nidaamiyaa xeer-hoosaadyada labada gole ama iyo sharciyada kale ee uu Baarlamaanku soo saaro[(6)].

Adeegga amniga qaranka iyo xubnaha ciidanka amniga ee Xoogga,

---

nidaamiyo sharciga (*The Central Bank of Somalia Act*, 2012), shaqaalaha Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda Soomaaliya ((*Sharciga Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda Soomaaliyeed*, 2023).

6 ) Eeg qodobbada 68, 75, iyo 111D ee Dastuurka.

Boliiska, Nabadsugidda, iyo Asluubta, waxaa lagu nidaaminayaa mid waliba sharci gaar ah oo loo dejiyo[7]. Dastuurku waxa uu soo kordhiyay, in adeegga ammaanka ee ay ciidanku qabtaan ay hoostagaan korjoogtayn rayid. Qodobka 111H ayaa dhisaya Guddiga Ammaanka Qaranka oo ka masuul ah korjoogtaynta iyo daraasad ku sameynta baahiya shaqaalaha ammaanka Qaranka.

## 3. Qaadashada shaqaalaha Garsoorka

Adeegga garsoorku waxa uu ka koobanyahay garsoorayaasha, xeer-ilaalinta, kaaliyayaasha, gaarsiiyayaasha iyo shaqaalaha iyo howlwadeennada kale ee maamul iyo farsamo. Si loo dhowro garsoor madaxbannaan sida uu dhigayo qodobka 3 (4) ee Dastuurku, adeegg waa in laga madaxbanneeya laanta fulinta oo aan la hoos gayn shaqaalaha rayidka.

Golaha Adeegga Garsoorka oo ah hay'ad ka madaxbannaan xukuumadda iyo xakameyn siyaasadeed, ayaa ka masuul ah xaddidda baahida garsoorka, qaadashada iyo maamulka xubnaha adeegga garsoorka ee sare ku xusan. Xubnaha Golaha Adeegga Garsoorku sida hadda Dastuurku dhigayo waa: Guddoomiyayaasha Maxkadda Sare (Guddoomiyaha Golaha), Guddoomiyaha Maxkamadda Dastuurka, Xeer-Ilaaliyaha Guud ee Qaranka, Guddoomiyahha Guddiga Xuquuqda Aadanaha, 2 qareen, 3 xubnood oo ka imaanaya bulshada rayidka ah.[8] Golahaan oo ka madaxbannaan laamaha kale ee dowladda ee xeer-dejinta iyo fulinta ayaa ka masuul ah ilaalinta iyo dhowridda madaxbannaanida garsoorka. Qiimeeynta iyo jaangoynta baahiyaha garsoorka, qaadashada, maamulka iyo rukhseynta xubnaha iyo shaqaalaha garsoorka ayaa ka mid ah waajibaadkiisa [9].

Kow iyo tobanka sano oo Dastuurku dhaqangal yahay ma jiro Golaha

---

7 ) Eeg qodobka 126 iyo 130 ee Dastuurka.

8 ) Eeg qodobbada 111A, iyo 109A ee Dastuurka .

Heshiiskii Golaha Wadatashiga Qaranka ee Federaalaynta Garsoorka ee 28 Diseembar 2022, ayaa lagu soo kordhiyay: Guddoomiyayaasha Maxkamadaha Sare ee Garsoorka iyo Xeer-Ilaaliyayaasha Guud ee Dowlad Goboleedyada Dalka, Guddoomiyaha garsoorka Caasimadda. Iyadoo awooddii Golahana lagu baahiyay dalka oo idil.

9 ) Eeg (Sharciga Dhisidda Golaha Adeegga Garsoorka, 2014).

Adeegga Garsoorka oo suurtagelin lahaa madaxbannaanida garsoorka. Golaha Shacabka ayaa 16 Nofeembar 2020 ansixiyay 7 xubnood oo Golaha kamid ah kuwaas oo Madaxweynuhu wareegto ku soosaaray 30 Diseembar 2020 iyadoon Aqalka Sare ansixin. Sababtaa awgeed ayaa Madaxweyne Xasan Sheekh Maxamuud uu 9 Oktoobar 2022 kala diray xubnihii la ansixiyay isagoo xukuumadda faray in ay dedejiso dhismahiisa si waafaqsan Dastuurka iyo sharciyada dalka u yaalla.

Haddaba, yaa ka masuul ah maamulka adeegga garsoorka maadaama uu maqanyahay golihii u xilsaarnaa? Sidee lagu xaqiijinayaa madaxbannaanida garsoorka iyo hufnaanta howlihiisa? Weydiimahaas iyo kuwo kale oo badan waxaa ka jawaabi doona qormooyinka kale ee cilmibaarista, balse halkan waxaan faahfaahin kooban kaga bixinayaa habka loo qaato shaqaalaha garsoorka.

Sharciga nidaamka garsoornka 1962 waxa uu dhigayaa in qaadashada shaqaalaha garsoorku yahay tartan furan oo muwaadiniintu ka qaybgalikaraan. Marka laga reebo magacaabista xubnaha sare oo garyaqaanno iyo macallimiinta sharciga ee jaamacadaha oo imtixaan la'aan lagu qaadan karo khibraddooda awgeed. Wax-ka-beddalkii sharcigaas ee 1974 waxa uu dhigay in shaqaalaha garsoorku la mid yihiin shaqaalaha dowladda (rayidka) loona raacayo habka lamid ah.

Guddoomiyaha Maxkamadda Sare iyo Xeer-ilaaliyaha Guud ee Qaranka ayaa ka jooga xubnihii Golaha Adeegga Garsoorka iyaga ayaana sii maamula adeegga garsoorka ilaa laga dhisayo. Maamulkaas waxaa ka mid ah qaadashada shaqaalaha garsoorka oo isugu jira 30 garsoore, 20 xeer-ilaaliye, 30 kaaliyayaal garsoor, iyo 10 kaaliyayaal xeer-ilaalin, (Muxammed, 2023). Hannaanka loo maray waxa uu ahaa: jaangoynta baahida shaqaale iyo sugidda miisaaniyaddooda, magacaabista guddiga xulista iyo maamulka imtixaanka, qabashada araajida iyo qaadista imtixaannada qoraalka iyo wareysiga.

Guddoomiyaha Maxkamadda Sare ee Dalku waxa uu 12 Agoosto 2023 magacaabay guddiga kumeel-gaarka ah ee xulista iyo maamulka imtixaanka oo ka kooban shan xubnood oo ka kala yimid Xafiiska Xeer-ilaaliyaha Guud ee Qaranka, Wasaaradda Caddaaladda iyo Arrimaha Dastuurka, Ururka Qareennada, bahda jaamacadaha. Guddigaas oo uu guddoomiye u yahay garsoore sare Cabdul-Xaq Cumar Muxammed, wuxuu lahaa

guddi-hoosaadyo qaabbilsan soo saarista liiska gaaban, iyo mid kale oo qaabbilsan lambaraynta tartamayaasha si loo ilaaliyo aqoonsiga tartamayaasha imtixaanka galay.

Hannaankii loo maray ayaa dadka inta badan ku tilmaameen in uu ahaa mid daahfuran oo ku dhisan karti iyo u-qalmid. Fursadaha waxaa lagu baahiyay warbaahinta dowladda, warbaahinta garsoorka, baraha bulshada, iyo mareegaha shaqada. Shuruuduhu waxa ay ku qornaayeen afka Soomaaliga, faahfaahinnada meesha lagu dirayo iyo habka loo codsanayo oo email rasmi ahna, waa caddaayeen. Qofna uma baahan inuu masuul ama xildhibaan warsado riixid iyo garabsiin. Baahinta goorta iyo goobaha imtixaanka lagu galayo, shaacinta magacyada tartamayaasha u gudba heerarka kala duwan ee hannaanka qaadashada ayaa ahaa daahfurnaan keentay in billowga hannaanka qaadashada lagu qancay.

Kala hufidda codsiyada waafaqay shuruudaha asaasiga ah, waxaa loo yeelay guddi gaar oo soo saara liiska gaaban ee u gudbaya imtixaanka qoraalka. Sidaas oo kale, tartame kasta waxaa loo yeelay lambar aqoonsi u gaar ah si aan laysugu garan warqadda imtixanaka iyo tartamaha. Taasi waxay keentay in la sugay sixitaan caddaalad ee imtixaanka qoraalka maadaama dadka saxaya aysan aqoon warqadda ay saxayaan cidda iska leh. (Muxammed, 2023).

Imtixaanka qoraalka oo ah 70% dhibcaha guud ayaa waxaa lagu jaangooyay heerka aqoonta garsoorka loo baahanyahay, ayaa qofkii ugu sarreeyay wuxuu keenay 48.5 dhibcood halkii lagu saxayay 70 dhibcood. Iyada oo ku xiran kartida iyo aqoonta tartamayaasha, haddana imtixaanka oo ahaa mid tirabadan taabanaya badiba qaybaha aqoonta nidaamka garsoorka, aqoon guud, luuqad iyo mid garaadka qofka lagu tijaabinayay. Muddada imtixaanku waxay u qalantay in la galo dhowr maalmood oo kala duwan, balsee hadda waxaa la qaaday hal maalin.

# QAYBTA 2AAD: FEDERAALAYNTA SHAQAALAHA RAYIDKA EE DOWLADDA SOOMAALIYA

Nidaamka Federaalka ee ay Soomaaliya qaadatay waxa uu soo kordhiyay isbeddal hannaanka sharci ee shaqaalaha rayidka ee dowladda. Shaqaalaha rayidka ee Dowladda federaalka iyo kuwa dowladaha xubnaha ka ah federaalka. Maxay ka mideysanyihiin maxayse ku kala duwanyihiin? Mabaadi' noocee ah ayaa hagaysa? Sidee axkaamta xeerarka caalamiga ah loo dhowri karaa? Waa weydiimaha uu cinwaanka soo socdaahi doonayo in uu ka jawaabo.

## 1. Shaqaalaha rayidka dowladda ka hor federaalka

Midowgii Soomaaliya iyo Somaliland ee 1da Luulyo 1960 ayay ka dhisantay Jamhuuriyadda Soomaaliya. Tan iyo billowgii Jamhuuriyadda, shaqaalaha rayidku waxa uu soo maray dhowr marxaladood oo mid waliba wadatay isbedallo iyo dib-u-habeyn nidaamka shaqaaleyn. Shaqaalihii rayidka ugu horreeyay waxa ay ahaayeen kuwii u shaqeynjiray Soomaaliya iyo Somaliland xorriyadda ka hor. (Act of Union, 1961)[10]. Dastuurkii 1960 waxa uu sugay dowrka dowladda ee badbaadinta shaqada iyo nidaaminta habka qaadashada[11].

Dastuurkii 1960 waxa kale ee uu jideeyay in shaqaalaha rayidka dowladda looga mid noqon karo tartan dadweyne oo muwaadiniintu u simanyihiin marka laga reebo xaaladaha sharci gaar lagu tilmaamay. Dastuurku wax kale uu dhigay in uu jirayo guddiga shaqaalaha rayidka[12]. Dowladdii cusbeyd waxaa waqti badani kaga baxay sidii ay isu waafajin lahayd labadii nidaam-shaqaale ee ay dhaxashay iyo helitaanka shaqaale maamul oo xirfad sare leh ee joogtayn kara maamulka iyo bixinta adeeg wax-ku-ool ah. Kala duwnaanta labada nidaam shaqaale waxay isugu jireen qaab-dhismeedka maamul, darajooyinka iyo mushaarka. (Barber, 1966). Iswaafajintii waxaa laga billaabay in la dejiyo sharcigii shaqaalaha rayidka dowladda oo hagaya howlaha dowladdu ku nidaaminayso sal-u-dhigid

---

10 ) Sharcigan walow la dejiyay 31 January 1961, haddana sida uu dhigayo qodobkiisa 10aad, dhaqangalkiisu wuxuu kasoo billaabanayaa 1da Luulyo 1960.

11 ) eeg qo. 36 ee *Dastuurka Soomaaliya*, 1960).

12 ) qod. 3, 88, 89 ee *Dastuurka Soomaaliya*, 1960).

nidaam shaqaale dowladeed mideysan oo ka jawaaba baahida dowladda ee adeegga rayidka ah. Kadib ansixintii shacabka ee dastuurka iyo qaadashadii sharciga midowga ee 1961, sharcigii u horreeyay ee lagu mideeynayo laguna nidaaminayo shaqaalaha rayidka ee dowladda ayaa la dejiyay 1962. Sharcigaas ayaa dhigayay in nidaamka shaqaalaha rayidku yeelanayo afar qaybood oo kala ah A, B, C, iyo D oo mid waliba leedahay jaranjarooyin. Shuruudaha kale ee qofka looga baahanyahay kasokow, qaybta uu qofku shaqada ka billaabayo waxaa jaangoynaya heerka aqoontiisa. Sidoo kale, qaadashada shaqaaluhu in ay noqonayso hab imtixaan u furan dadweynaha oo la raacayo xeer ra'iisul wasaare. Qaadashada shaqaalaha jagooyinka qaybta (D) waxa ay ku dhameystirmeysa wareegto ra'iisul wasaare halka qaybaha kale ay ku dhameystirmayaan wareegto madaxweyne. Sharcigu waxa uu banneynayay, in darajooyinka qaar ee qaybta (A) la qaadan karo imtixaan la'aan haddii ay buuxiyaan shuruudaha shaqada[(13)].

Sharcigu waxa uu faray in dowladdu muddo hal sano gudaheed ah marka sharcigu dhaqangalo, ay jaangoyso jagooyinka iyo darajooyinka adeegga rayid joogto ah, shaqaalahana ku kala meelayso. Sidoo kale, in ay dhisto guddi kalataliya dhismaha adeegga rayidka dowladda[(14)]. Guddigaas oo ka kooban xubno Soomaali ah iyo khubaro caalami ah ayaa la dhisay Diseembar 1962 iyaga oo kadib diraaso ay ku sameeyeen nidaam shaqaaleedyadii jiray, dowladda u soo bandhigay qaab-dhismeedka maamulka dowladda, jagooyinka iyo heerarka shaqada rayidka ah. Talooyinkaas ee la qaatay waxaa ka mid ahaa dejinta qaab-dhismeedka wasaaradaha dowladda, darajooyinka shaqo ee wasaarad kasta ay u baahantahay, iyo ku meeleeynta shaqaalihii markaas jiray oo gaarayay 12,000 oo shaqaale ah. (Barber, 1966).

Sal-u-dhigista nidaamka shaqaalaha rayidka iyo meeleeynta shaqaalihii markaas jiray waxa ay qaadatay muddo ka badan tii uu sharcigu sheegay waxaana loo aaneeyaa jiritaanka sababo badan oo isbiirsaday oo ay ka mid ahaayeen dagaalkii Itoobiye iyo Soomaaliya ee 1964 oo ku soo aaday xilligii ay guddigu sameynaysay diraasadda, doorashooyinkii iyo isbeddalladii siyaasadeed. Waxaa iyadna jirtay doodo ka dhashay meeleeynta jagooyinka sare ee qaybaha adeegga rayidka ah, iyada oo jagooyinka sare ay u bateen

---

13 ) qod. 1,2, 6, 7, 9, 14, *Civil Service Law*, 1962).

14 ) qod. 35, *Civil Service Law*, 1962.

shaqaalihii kasoo jeeday Somaliland. Borofeysarrada Ahmed iyo Abdi I. Samatar, ayaa ku dooda in shaqaalihii ka yimid woqooyi ay dhiggooda Soomaaliya ka aqoon iyo khibrad wanaagsanaayeen sidaasna ay keentay in ay kaga bataan jagooyinka sare ee u baahnaa aqoonta iyo khibradda sare. (Samatar, 2008). Si kastaba, ha ahaatee muddadii uu ra'iisul wasaaraha ahaa mudane Abdirisaaq Xaaji Xuseen, 1964–1967, ayay ahayd waqtigii lagu dhiirraday in la hirgeliyo talooyinka guddiga ee meelaynta ku dhisan u qalmidda ee shaqaalaha rayidka ee markaas jiray. (Mohamed, 2021); (Samatar, 2008); (Omar M. Mohamed, 2010).

Sharcigii shaqada rayidka ee 1969 ayaa lagu rasmiyeeyay dib-u-habeyntii shaqaalaha rayidka ee dowladdii soo billaabatay curashadii jamhuuriyadda. Sharcigaas ayaa si kama dambays ah lagu qaatay qaab-dhismeedka, heerarka, iyo darajooyinka shaqaalaha rayidka dowladda.

Sharcigaas ayaa faahfaahinaya xaaladaha qaadashada, shaqo-ka-tegista, iyo xuquuqaha shaqaalaha rayidka dowladda. Sharciga ayaa waajibinaya in la dhiso guddi shaqaalaha rayidka oo dowladda kalataliya arrimaha adeegga rayidka, qaadashada shaqaalaha sare ee qaybaha A iyo B, iyo ka go'aan gaarista racfaannada shaqaalaha rayidka ee lidka ku ah go'aannada madaxda ee khilaafsan sharciga shaqaalaha rayidka ah.

Sidoo kale sharcigu waxa uu faray in la dhiso guddi hubiya u qalmidda iyo guddiga imtixaanka shaqada oo labaduba qayb ka noqonaya hannaanka qaadashada shaqaalaha rayidka ee dowladda(15).

Marxaladdii xigtay waxa ay ahayd muddadii ay ciidanku dalka xukumayeen 1969-1991, xilligaas oo isbedallo baaxad leh lagu sameeyay nidaamka shaqada iyo shaqaalaha dowladda. Dowladdii ciidanku waxa ay la yimideen nidaamka hanti wadaagga iyaga oo shaqaalihii dowladda ee aan raacin fekerkaas ku bedalay askar. (Dominik Balthasar, 2018). Kacaankii ciidanku, billowgiiba waxa ay soo saareen sharciga shaqada rayidka 1970 iyagoo baabi'iyay guddigii shaqaalaha rayidka, isbeddalna ku sameeyay qaybaha anshax marinta shaqaalaha(16). Dowladdu waxa ay shaqaalihii jiray u dirtay tababar si ay ula qabsadan nidaam-siyaasadeedka dowladdu qaadatay ee hantiwadaagga ah. Iyada oo shaqaalihii ku guul darraysta in uu la jaanqaado

15 ) (qod. 6-14, 18, 20, *Civil Service Law*, 1969).

16 ) (qod.40-42, *Civil Service Law*, 1970).

nidaamka cusub laga saarayay shaqada rayidka ah. (Metz, 1993, p.38). dhanka kale, dowladdii ciidanku waxa ay ku guuleysatay, in la mideeyo halbeegyada qaadashada heerarka shaqaalaha rayidka ee dowladda, la qoro farta Soomaaliga laguna tababaro howlwadeenka dowladda oo idil. (Mohamed, 1976). Qorista farta Soomaaliga 21 Okoobar 1972 dabadeed, waxaa la waajibiyay in shaqaalaha dowladda oo idil la geliyo imtixaan qorista farta ah oo shaqaalihii ku dhaca ay waayayaan shaqada rayidka ah. (U-shaqeynta Dawladda oo lala xiriiriyey qorista Afka Qaranka, 1972). Mideynta afka wax lagu qoro, kasokow inuu yahay horumarinta afka, haddana waxa uu mideeyay shaqaalihi ku kala shaqeynjiray afafka qalaad ee qoloba mid taqaanay. Dowladdu waxa kale oo ay aasaastay Machadka Maamul Horumarinta iyo Maaraynta Soomaaliya (SIDAM) oo ka qaybqaatay tababarka iyo tayo-dhiska shaqaalaha dowladda. (Mohamed, 2021). Mar labaad ayay dowladdii ciidanku dib-u-habeyn iyo dib-u-qaabeyn ku sameysay nidaam shaqaalaha rayidka dowladda waxa ayna soo saartay sharciga shaqaalaha dawladda 2 Febraayo 1980. Sharcigaan cusub waxa uu shaqaalaha rayidka ku soo daray shaqaalaha dowladaha hoose, shaqaalaha baarlamaanka, iyo shaqaalaha garsoorka. Dib-u-habeynta uu sharcigu soo kordhiyay waxaa ka mid ah in la badiyay qaybaha qaab-dhismeedka shaqo ee shaqaalaha rayidka oo gaarsiiyay 7 heer, halka ay markii hore ahayd 4 heer[(17)]. Isbedalkaas waxa uu yimid kadib markii la go'aamiyay in dowladdu yeelato hal xisbi oo jaangooya siyaasadaha lagu hagayo dowladda, isla markaana la mideeyay hoggaanka xisbiga iyo kan qaranka[(18)].

Wixii ka dambeeyay markii dowladdii dhexe ay dhacday, nidaamkii shaqaalaha rayidku waxa uu ka mid noqday hay'adihii dowladda ee burburku soo gaaray, shaqaalihiina waxaa dhinacooda ka saameeyay duruufihii dalku galay. Intii ka badbaaday dagaalkii sokeeye, qaar waxay ku biireen maamullada ka sameysmay qaybaha dalka, kuwo qaxooti ayay noqdeen.

Dowladdii Federaalka Kumeel-gaarka ahayd ayaa 2006 dib u soo aasaastay shaqaalaha rayidka dowladda. Bishii Diseembar 2006 ayaa la dhisay Guddiga Shaqaalaha Rayidka Dowladda oo uu jideeyay qodobka

---

17 ) qod. 7, *Sharciga Shaqaalaha Dawladda*, 1980.

18 ) qod. 7, 8, *Dastuurka Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya*, 1979.

qodobka 68 ee Axdigii Federaalka Kumeel-gaarka ee 2004 (wax-laga-beddalay 2009). Xubnaha Guddigan oo ka kooban 14 xubnood waxa ay iska dhex dooranayaan guddoomiye, gudoomiye kuxigeen iyo xoghaye, waxa uuna sharciga lagu dhisay dhigayaa inay jirayaan muddada dowladda federaalka kumeel-gaarka ah. Guddigu waa madax bannaanyahay waxa uuna u xilsaaranyahay qorista shaqaalaha rayidka dowladda iyo maamul goboleedyada, shaqo ka cayrintooda, xuquuqdooda iyo keydinta xogta shaqaalaha rayidka dowladda[19].

Isla sanadka 2006 waxaa la ansixiyay dib-u-habayn sharciga shaqaalaha rayidka dowladda, iyada oo sharcigii 1980 lagu sameeyay isbedallo kooban oo ay ka mid tahay in qorista shaqaalaha rayidka dowladda iyo qaadista imtixaanka shaqada ay maamulayaan Gudiga Shaqaalaha Rayidka Dowladda. (Sharciga Shaqaalaha Rayidka Dawladda, 2006).

Muddadii u dhexeysay markii la dhisay ilaa iyo markii la ansixiyay Dastuurka Kumeel-gaarka ee 2012, dowladdii kumeel-gaarka ahayd uma haysan miisaaniyad ku filan oo u saamaxaysa qaadashada shaqaale badan. Si kastaba, Guddigu, waxay 2007 billaabeen xayaysiin qoristii shaqaale cusub ee dowladda KMG taasoo aan helin cid kasoo jawaabta bandhigga shaqada. Markii la waayay cid soo codsata shaqooyinkii baahiyay, dowladdu waxa ay go'aansatay in la diiwaangeliyo shaqaalaha mutadacnimada kula shaqeeya hay'adaha dowladda iyo shaqaalihii hore wixii soo noqda. (Maxamed, 2023).

**2. Federaalaynta shaqaalaha rayidka ee dowladda.**

Ansixinta Dastuurka KMG ee 2012 waxa uu billow u noqday dib-u-habayntii 3aad ee shaqaalaha dowladda Soomaaliya. Cutubka 11 ee dastuurku waxa uu ku saabsanyahay shaqaalaha Rayidka ee Dowladda isaga oo markii koowaad jideeyay in ay jirayaan shaqaale rayid ah ee dowladda federaalka iyo dowlad goboleedyada. Dastuurku wuxuu dhigayaa mabaadi'da qaadashada, maamulka iyo dhaqanka shaqaalahaha rayidka ee labada heer ee dowladda. Heer waliba ee dowladeed waa u madax bannaanyahay qaabeynta nidaamka adeegga rayidka ee ay qaadanayaan isaga oo raacaya mabaadi'da dastuurka iyo sharciyada caalamiga ah ee shaqaalaha.

---

19 ) Sharciga Dhismaha Guddiga Madaxa Bannaan ee Shaqaalaha Rayidka Dowladda, 2006.

Dowlad goboleedyada hadda jira ee ay Dowladda Federaalku dhistay[20], iyo Puntland oo ka horreysay mid waliba waxa ay leedahay shaqaale rayid ah oo bixiya adeegga rayidka. Dowlad goboleedyadu waa u madax bannaanyihiin nidaaminta nidaamkooda shaqaalaha rayidka, haddana iskaashi dhexmara labada heer ee dowladda ayaa lama huraan ah si loo horumariyo adeeg bixinta rayidka ee dalka oo idil laguna xoojiyo midnimada qaranka. Guddiyada shaqaalaha rayidka ee labada heer ee dowladda iyo Gobolka Banaadir waxa ay ka wada shaqeeyaan "xoojinta wada shaqeynta iyo mideynta mabaa'dida guud ee maamulka iyo maareynta shaqaalaha rayidka" (Warbixin Sanadeedka, 2022). Wada shaqayntaan waxa ay u wanaagsantahay isu gudbinta waayo-aragnimada, mideynta mabaadi'da iyo halbeegyada asaasiga ah ee nidaamka shaqada rayidka ah.

Nidaam sharciyeedka haga nidaaminta shaqada rayidka ee heer Dowladda Federaalka waxa ay isugu jiraan Dastuurka Kumeel-gaarka ah, sharciga shaqaalaha rayidka dowladda, xeer-nidaamiyayaasha Golaha Wasiirrada, habraacyada iyo hagayaasha Guddiga Shaqaalaha Rayidka Dowlada iyo Wasaaradda Shaqada iyo Arrimah Bulshada.

Wixii siyaasadaha guud ee shaqada rayidka ah waxaa leh Wasaaradda, farsamada iyo fulintana waxaa u xilsaaran Guddiga. Wadashaqaynta labadaas hay'adood waa udub dhexaadka nidaam shaqaale rayid oo shaqeeya.

Inkastoo Dowladda Federaalku ay leedahay nidaam sharciyeed faahfaahsan, haddan ma lahan siyaasad guud ee qaadashada shaqaalaha rayidka dowladda. Siyaasaddaasi waxa ay qaabeyn lahayd aragtida guud ee dowladda ee khuseysa sida ay u wajahayso shaqaaleynta muwaadiniinta ee adeegga rayidka dowladda, hiigsiga iyo mabaadi'da guud ee qorashada shaqaalaha rayidka. Dowladdu waxa ay 2019 qaadatay siyaasadda shaqo abuurka qaranka oo dhigaysa mabaadi'da guud ee shaqaaleynta gaarka ah balse wali ma aysan dejin siyaasaddii shaqaaleynta dowladda.(Ansixinta

---

20 ) Jubaland waxaa la dhisay 2013, Koonfur Galbeed 2014, Galmudug 2015, Hirshabelle 2016. Puntland oo ay dadka bulshadu dhisteen 1998 waxa ay ka mid tahay nidaamka federaalka, halka Somaliland ay keligood ugu dhowaaqday goon isu taag billowgii sagaashameyadii. Si kastaba, sida ay dhigayaan qodobbada 49 iyo 111E, dowlad goboleedyadu wali lama rasmiyeyn. Ujeedka diraasaddani waxa ay ku koobantahay nidaamka shaqaalaha rayidka ee Dowladda Federaalka.

siyaasadda shaqo abuurka qaranka, 2019); (Maxamed, 2023). Siyaasadda shaqaaleyntu waa aragtida mideysan ee dowladda ee shaqo siinta bulshada iyo shaqooyinka adeegga rayidka ee dowladda. Sidoo kale waxa ay hage u noqon lahayd sharciyada iyo xeer-nidaamiyayaasha nidaaminaya maamulka shaqada adeegga rayidka ah. Siyaasadadda shaqo abuurka qaranka ee 2019 waxaa ku xusan in dowladdu diyaarisay soo jeedinno wax-ka-beddal sharciga shaqada, iyo sharciga shaqaalaha rayidka ah ee dowladda. Isbeddal lagu sameeyo sharciga shaqaalaha rayidku miyuu beddalayaa baahida loo qabo siyaasaddii hagi lahayd? Waa weydiin uu waqtigu ka jawaabi doono balse, waxaan qarsoonayn in maqnaashiyaha siyaasadda dowladda ee shaqaalaha rayidku uu lagama maarmaan u yahay nidaam mideysan oo dhamaystiran ee adeeg rayid wax-ku-ool ah oo loo simanyahay.

Mabaadi'da dastuurka kasokow, sharciyada shaqaalaha rayidka lagu maamulo waa sharci lr.11 ee 5 Diseembar 2006. Sharcigu waa dib-u-soo saarid sharcigii shaqaalaha dowladda ee 1980 oo isbeddal kooban lagu sameeyay. Wuxuu nidaaminayaa maamulka shaqaalaha rayidka ee dowladda oo isugu jirta, heerarka iyo darajooyinka shaqada rayidka ah, qaadashadashada shaqaalaha rayidka, masuuliyadda saaran, xuquuqdooda, anshaxmarinta, iyo dhamaashaha xiriirka shaqo ee shaqaalaha rayidka dowladda. Sharciga oo ku saleysan nidaam shaqada rayidka mideysan, ayaa hannaanka qaadashada shaqaalaha rayidka ku saleyanaya: warsashada qorista shaqaale ee hay'adaha dowladda, imtixaanka tartanka furan ee uu qaado Guddiga Qaran ee Shaqaalaha Rayidka Dowladda, iyo rasmiyeynta qaadashada. Shaqaalaha heer A iyo AY ee madaxda maamul iyo aqoonyahannada, qaadashadooda waxaa lagu rasmiyeynayaa xeer Madaxweynaha JFS, shaqaalaha heer F iyo B ee farsamayaqaannada iyo fuliyayaasha, qaadashadooda waxaa lagu rasmiyeynayaa xeer ra'iisul wasaare, halka qaadashada shaqaalaha kale ee X, C iyo D ee xirfadleyda ah waxaa lagu rasmiyeyanayaa xeer wasiirka shaqada iyo arrimaha bulshada[21].

Xeer-nidaamiyaha qorista shaqaalaha rayidka ee Dowladda oo ka mid ah 12 xeer-nidaamiye ee ay Xukuumaddu soo saartay 2021 ayaa faahfaahinaya habka loo marayo qaadashada qaybaha iyo heerarka shaqaalaha rayidka.

21 ) qod. 7-16, *Sharciga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda*, 2006.

Xeer-nidaamiyuhu waxa uu qaadashada shaqaalaha rayidka u kala saaray; u kala saarayaa meeleeynta jagooyin cusub oo soo kordhay, iyo buuxin jagooyin jiray oo bannaanaaday. Xeerku waxa uu dhigayaa in buuxinta jagooyinka dhexe iyo kuwa sare ee heer maamul laga dhex qaato tartan shaqaalaha rayidka ee jira marka laga reebo haddii laga waayo shuruudaha jagada oo markaas tartan loo furayo dadweynaha. Guddigu waa in uu yeeshaa guddi hoosaad xulista shaqaalaha rayidka ee uu Guddoomiyaha Guddigu Shaqaalaha Rayidku magacaabo. Guddiga xulista shaqaaluhu waxa uu masuul ka yahay maamulka iyo fulinta habraaca faahfaahsan ee kala saaridda tartamayaasha soo gelista shaqada rayidka ah, waxa uuna ka koobanyahay 7 xubnood oo kala imaanaya 3 Guddiga Shaqaalaha Rayidka, xubin ka imaanaysa hay'adda dowladeed ee shaqaalaha loo qorayo, xubin khabiir ku ah mowduuca jadaga la buuxinayo, xubin ka imaanaysa bahda akaadeemiyada[(22)].

## QAYBTA 3AAD: MABAADI'DA GUUD EE QAADASHADA SHAQAALAHA DOWLADDA

Qiyamka iyo mabaadi'da hagaysa shaqaadashada shaqaalaha rayidka ee dowladdu waa badanyihiin waxa ayna ku suganyihiin diinta Islaamka, xeerarka caalamiga ah, dastuurka iyo sharciyada dalka. Qaybtan waxaan faahfaahin kooban ka sameynaynaa mabaadi'da ugu muhiimsan ee saldhigga u ah shaqaaleyn wanaagsan oo sharciga iyo dantaguud waafaqsan. Qaadasho ku salaysan u-qalmid, caddaalad & dhowrid xuquuqda Aadanaha, usinnaanta fursadaha, daahfurnaanta hannaanka, hufnaanta iyo isla-xisaabtanka. Kala hormarintu ma muujineyso kala mudnaan maadaama dhamaantood ay yihiin mabaadi' lagama maarmaan ah.

### 1. U qalmid:

Adeegyada dowladdu bixiso waxaa laga filayaa in ay ahaadaan kuwo waafaqsan halbeegyada iyo shuruudaha ay jideeynayaan sharciyada khuseeya. Adeegyadaas waxaa maamula oo bixiya shaqaalaha rayidka ee

22 ) qod.8, *Xeer-nidaamiyaha Shaqo Qorista Shaqaalaha Rayidka*, 2021.

dowladda. Qofka loo shaqaaleynayo in uu qabto adeeg tayo sare laga filaayo waa in uu isagu marka hore tayo leeyahay. Murti Soomaaliyeed baa tiraahda "Qof waliba intuu cunuu ciidamiyaa". U qalmiddu waa in qofka loo qaadanayo shaqada adeegga rayidka uu leeyahay aqoonta, waayo-aragnimada, xirfadda, iyo astaamaha looga baahanyahay gudashada waajibaadka shaqo iyo masuuliyada ka dhalanaya qabashada xilka shaqaalaha rayidka. Qaadashada shaqaalaha ee ku dhisan u-qalmiddu waa hannaan maamul oo leh qaabab, farsamooyin, habraacyo lagu raadinayo laguna aqoonsanayo qofka oofin kara baahiyaha shaqo ee jirta. (Mushtaque et al., 2021). Shaqaalaha lagu qaato u qalmiddu waxa ay qayb ka noqdaan horumarka maamul ee dalalka qaata nidaamkaas. Dadka qaar waxa ayba ku doodaan in "shaqaalaha lagu qaato ama lagu dallacsiiyo hannaan u qalmiddu ay u badantahay in ay iyaguna dhaqangeliyaan mabaadi'da hufnaanta" (Morten Egeberg, Åse Gornitzka, 2019). Qofkii lagu qaato hab caddaalad iyo in uu yahay qofkii u qalmay, waxaa badan in uu ku dhaqmo mabaadi'dii isaguba uu ku yimid marka loo eego kuwa lagu qaato eexda, musuqa, iyo nintooxsiga.

### 2. U-sinnaanta fursadaha:

Qodobka 11 ee dastuurku waxa uu dhigayaa in "Muwaaddiniinta oo dhan, iyagoo aan loo eegin lab iyo dheddig, diin, xaalad bulsho ama dhaqaale, afkaar siyaasadeed, qabiil, naafannimo, xirfad, dhalasho iyo afguri toona, xuquuqda iyo waajibaadkaba waa u siman yihiin sharciga hortiisa". Marka laga reebo siyaalaha bannaan ee lagu xaddidi karo mabda'a guud ee u sinnaanta muwaadiniinta ee xuquuqda iyo waajibaadka[(23)]. haddana dastuurku wuxuu waajibiyay in aan muwaadininiinta lagu takoori karin xaaladahaas ay ku sugan yihiin. Qodobka 115 ee qiyamka guud ee shaqaalaha rayidka, dastuurku waxa uu dhigayaa in mabaadi'da shaqada rayidka ay ka mid tahay "sinnaan". Marka laga hadlayo shaqada dowladda, u sinnaanta fursaduhu waxa ay leedahay laba macne, midka koowaad waa in fursadaha shaqo ee dowladdu bixiso gaar ahaan kuwa rayidka ay yihiin kuwo dhammaan muwaadiniintu ay codsan karaan, loo qaadan karo, aan caqabad ku ahayn u tartankeeda, uu ka shaqayn karo.

Tan labaadna waa in loo sinnaado faa'iidooyinka laga helayo shaqada lagu guuleeystay oo aan qayb ka mid ah muwaadiniinta lagu takoorin xaalad

23 Qodobka 38 ee dastuurka, iyo isla qodobka 11 (4).

gaar ah oo ay ku suganyihiin. (ILO, 2011).

Heshiiska khuseeya Takoorka Shaqaaleynta iyo Shaqada[24] qodobkiisa 2aad waxa uu dowladaha xubnaha ka ah ku waajibinayaa in ay qaadato siyaasado iyo sharciyo suurtagelinaya u sinnaanta fursadaha shaqada iyo faa'iidooyinka shaqada, isla markaana mamnuucayaa takoorka shaqaaleeynta iyo shaqada. Qodobka 1aad ee Heshiiskaas oo cayimaya qaybaha uu "takoorku" saameeynayo, waxa uu la mid yahay qaybaha ku xusan qodobka 11 ee Dastuurka ku-meelgaarka Soomaaliya.

U sinnaanta horey ku xusan, marka la joogo qaadashada shaqaalaha, waxaa laga soo reebayaa saddex xaaladood: **xaaladda koowaada** waa in u sinnaanta fursaddu aysan khasab ka dhigayn in natiijada loo sinnaado. Shuruudaha iyo baahida shaqada la doonayo ciddii laga helo ayaa u siman tartanka iyo qaadashada. **Xaaladda labaad** waa muwaadiniinta fal ay gaysteen aawadeed sharcigu u reebay in ay ka qayb-qaataan tartanka shaqada. Muwaadinkii gala dembiyada lagu muteysto xayiraadda ka mid noqoshada shaqada rayidka ah lama sinnaanayo muwaadinka wanaagsan ee aan dembi gelin. **Xaaladda saddexaad** waa marka la doonayo in caddaalad loo sameeyo kooxo ama qaybo bulshada ka mid ah oo markii hore ku dulmanaa nidaamka shaqaaleeynta dowladda. Dadaallada iyo tallaabooyinka dad u horey dulmanaa lagaga daba keenayo heerarka kuwa kale gaareen ma noqonayaan takoor keenaya sinnaan la'aan. (qod. 1, 4, 5, Discrimination (Employment and Occupation) Convention, 1958). Qodobbadaas oo u dhigma mabda'a qodobka 11, 24, 119 ee Dastuurka.

Marka laga soo tago xaaladaha horey ku sheegan ee keeni kara sinnaan la'aan, kala duwanaashiyaha muwaadiniinta ee jinsi, diin, sinji, iyo naafannimo ma saameynayso qaadashada shaqaalaha rayidka ee dowladda.

### 2.1. Sinnaanta jinsiga ee shaqada rayidka ah:

Qodobka 24 (5) ee Dastuurka Kumeel-gaarka ah waxa uu dhigayaa "Qof kasta oo shaqaale ah gaar ahaan dumarka waxa ay xaq gaar ah u leeyihiin in laga ilaaliyo faraxumeyn, faquuqid iyo takoorid goobaha shaqada. Sharci kasta shaqaale iyo hab dhaqan kasta waa inuu waafaqsanaadaa sinaanshaha jinsiga ee goobaha shaqada." Taas waxaaba kasii adag in qodobka 3 (5) uu waajibinayo in dumarku ka mid noqdaan shaqaalaha rayidka "Haweenku

24 Soomaaliya waxa ay ku biirtay 8 Diseembar 1961.

waa in ay ka mid noqdaan dhammaan hay'adaha guud ee qaranka, si wax-ku-ool ah, gaar ahaan jagooyinka la isu doorto iyo kuwa la isu magacaabo ee saddexda laamood ee Dawladda iyo guddiyada Madaxbannaan ee Qaranka." Walow Soomaalidu aaminsantahay in dumarku ay ragga ka badanyihiin waxbadan, haddana qiyaastii tirakoobka ee la sameeyay 2014 waxay tusinaysaa in ragga iyo dumarku qiyaas ahaan ay isu dhowyihiin. Dadka oo guud ahaan lagu qiyaasay 12.3 milyan, 50.7% ayaa rag ah, halka dumarku yihiin 49.3% ee tirada guud ee dadka Soomaaliya. (Population estimation survey 2014 for the 18 pre-war regions of Somalia, 2014). Qiyaastii ugu dambeysay ee World Bank 2022 ee tirada dadka Soomaaliya oo lagu qiyaasay ku dhowaad 17.6 milyan, raggu waxaa lagu qiyaassay 50% halka dumarku yihiin 49.9% ee dadka guud ee Soomaaliya[25]. (Somalia Total Population, 2022).

Sida ay qortay warbixinta cududda shaqo ee Soomaaliya 2019, cududda shaqo ee Soomaaliya oo gaaraysa qiyaaastii 32.4% ee tirada guud ee dadka[26], 67.6% ayaa shaqo haysata, halka inta kalena yihiin shaqo la'aan. Ilaha shaqo waxa ay isusugu jiraan dowladda oo ay ka mid yihiin dowlad goboleedyada iyo Gobolka Banaadir, iyo suuqa shaqada ee gaarka ah. Sida warbixintu sheegtay, 2019, dadkaas shaqada haysta 37.5% waa rag halka dumarku yihiin 14.7%. Dhanka kale, dadka shaqeyn kara balse shaqo la'aanta oo dhan 21.4% ee bulshada, waxaa ku badan dumarka oo gaaraya 27.4% marka loo eego ragga oo ah 18.4% shaqo la'aan. (Statistics, 2021).

Celcelis ahaan shaqaalaha rayidka ee Dowladda Federaalka oo dhan 5,739, waxaa dumar ah 26%, halka raggu yihiin 74%. (Warbixin Sanadeedka, 2022). Ma jirto takoor gaar ah oo lagu sameeyay dumarka marka la qaadanayo shaqaalaha rayidka, balse waxaa jirta sababa badan oo isbiirsaday ayna kamidtahay saameynta waxbarashadu ku leedahay in dumarka shaqo helaan. Raggu waa kaga fursad badanyihiin qaybaha kala duwan ee heerarka iyo barnaamijyada waxbarashada. Tusaale ahaan, raggu 73.1%

---

25 Qiyaasta tirakoob waxa ay ku saabsantahay dadka joogay Soomaaliya xilliga qiimeeynta la sameynayay ee isugu jira Soomaalida iyo dadka kale ee dalka jooga ee aan Soomaali ahayn.

26 Tirakoobkan ay warbixintu xigatay ma ahan mid ka tarjumaya tirakoobka guud ee dadka Soomaaliya balse waa qiyaas intii u suurtagashay sahanka lagu baarayay cududda shaqada. Cududda shaqaduna waa dadka shaqayn kara ee 15 sano iyo wixii ka sarreeya.

waa ay yaqaaniin aqkhris qoraalka, halka dumarku 50.6% aysan aqoonin. (Employment Diagnostic: Somalia, 2019). Sababaha kale waxaa ka mid ah, aragtida bulshada ee dowrka haweenka ee korinta caruurta, saameynta qabyaaladda oo dumarku guud ahaan ku dulmanyihiin. (Lara Burger, 2014). Dadka qaar waxa ay ku doodaan, in qabyaaladdu aysan saameyn badan ku lahayn u sinnaanta ragga iyo dumarka ee shaqaalaha rayidka. (Maxamed, 2023). Si kastaba, nidaamka dhaqan-dastuuriga ah ee awood qaybsiga Soomaaliya (4.5) kama marnaan karo qaadashada aan loo marin tartan furan. Siyaasiyiintu cadaadis ayay kala kulmaan beelaha ay kursiga ugu fadhiyaan taasina ay keenayso in xubno beesha ka mid ah u raadiyaan fursado shaqo. (wareysi, 2023).

### 2.2. Sinnaanta muwaadiniinta kala diinta ah:

Muwaadiniinta Soomaaliya waa muslimiin haysta Diinta Islaamka. Waxaa guud ahaan la aaminsanyahay in 100% ay Muslim yihiin, balse waayadaan dambe waxaa soo ifbaxaya Soomaali aan Muslim ahayn. (Universal Periodic Review – The Somali Republic, 2010). Islaamku waa diinta dowladda Soomaaliya, diin aan Islaam ahayn laguma faafin karo (qod.2). Diinta Islaamka waa lagu dhigaa Dugsiyada Dowladda (qod.30"8"). Hase ahaatee, xuquuqda muwaadinnimadu kuma xirna diin, oo muwaadin waxaa ahaan kara qof aan Muslim ahayn maadaama shuruudaha muwaadinnimada aysan diintu ka mid ahayn. Haddii aan shuruudaha shaqadu shardiyin Islaamnida qofka shaqada rayidka loo qaadanayo sababo la xiriira shaqada mooyee, muwaadiniinta Soomaaliyeed, iyaga oo aan loo eegin diintooda, waa u simanyihiin fursadaha shaqada. Taas waxaa soo galaya, haddii aan shaqadu khasbeyn, in tartan qaadashada aysan ku jirin caqabad takooraysa qofka aan muslim ahayn[27].

### 2.3. Sinnaanta qaybaha dadka (beelaha):

Qodobka 119 (4) ee Dastuurku wuxuu dhigayaa "Shaqaalaha rayidka ee Dawladda Federaalka iyo Dawladaha xubnaha ka ah Dawladda Federaalka

27 Marka laga hadlayo Soomaaliga aan Muslim ahayn, dadka Soomaalidu waa kula aragti duwanyihiin. Badiba, waxa ay qabaan, in qofkii asal ahaan aan muslim ahayn uu leeyahay xuquuqda u sinnaanta marka laga reebo haddii aysan shaqadu shardin musliminnimo. (Ahmed, 2023). Haddiise uu yahay Soomaali Muslim ah ee dabadeed ka riddoobey diinta waxaa ku fulaya axkaam kale. (Haji, 2023).

waa inay ka muuqataa dheelitirnaan dadka wada deggan." Erayga "dadka wada dega" waxaa loo fasiri karaa qaybaha bulshadu u abaabulantahay oo ay ka midyihiin beeluhu. Haddaba waxaa dood mudan sida laysu waafajin karo in qaadashada shaqaalaha rayidku noqoto tartan furan (qod.118 (5)) iyo in bulshada laysu dheellitiro maadaamaa muwaadin kastaa uu xaq u leeyahay in ka-qaybgalka fursadaha shaqo ee dowladda.
Iyadoo aysan sahlanayn sida laysu waafajin karo labada mabda', haddana dowladda waxaa u bannaan in shuruudo gaar ah amase tixgelin gaar ah u sameyso qaybaha bulshada ee ku yar ama ka maqan shaqada rayidka ah sida uu dhigayo Qodobka 11 (4), iyo sida ay soo jeedisay Hay'adda Ururweynaha Shaqaalaha Adduunka. (Discrimination (Employment and Occupation) Recommendation, 1958).

## 2.4. Sinnaanta naafada ee shaqada rayidka:

Muwaadiniinta la nool naafannimada waxa ay xaq u leeyihiin in ay ka mid noqdaan shaqaalaha rayidka ee dowladda haddii aysan shuruudaha gudashada waajibaadka shaqadu ka reebayn tartanka. Qodobka 11 ee sharciga dhismaha Hay'adda Naafada Qaranku, in marka la qaadanayo shaqaalaha Hay'addaasi "...mudnaan gaar ah na la siinayo dadka naafada ah" iyo "waalidka caruurta naafada ah". (Sharciga Dhismaha Hay'adda Naafada Qaranka, 2018). Heshiiska Xuquuqda Dadka Naafada ahi waxa uu Naafo u yaqaan "Waxaa soo galaya eray cilmiyeedka (dadka naafada ah) dhamaan dadka la ildaran cillado jir ahaaneed, caqli, maskaxeed ama dareen oo mudo dheer dhantaashay, taasoo ka hor istaagikarta in ay kaalin firfircoon ka galaan bulshada ay ku dhex nool yihiin si la simman dadka aan naafada ahayn." (qod. 1, Heshiiska Xuquuqda Dadka Naafada ah, 2006)[28].

Sharciga Soomaaliya, waxa uu qeexitaanka ku sii daray "dadka naafada ah waxaa soo gelaya qof kasta oo la nool naafonimo jir ahaaneed, mid dareen ahaaneed, mid maskaxeed iyo mid dhinaca garashada ama garaadka la xiriirta, taas oo uu qabo/qabay muddo dheer, laguna daray saamaynta caqabadaha curyaaminaya ee kaga imaanaya bulshada ama deegaanka oo sababaya in qofku gaaro heer uu nolol maalmeedkiisa caadiga ah u maamuli karaynin ama u maarayn karaynin sida dadka kale." (qod.1, Sharciga Dhismaha Hay'adda Naafada Qaranka, 2018). Qeexitaannada

28 Soomaaliya kubiirtay 2019 (Sharci Lr. 11 ee 020/06/2019).

haddii lagu cabbiro bulshada Soomaalida ah waxaaba suurtagal ah in dad badan ay la nool yihiin nooc ka mid ah noocyada naafannimo ee sharciga iyo heshiisku xaddideen. Hubinta iyo xaqiijinta naafannimada waa mid ka mid ah masuuliyadaha Hay'adda Naafada Qaranka. Si kasta oo ay tahayba, qofkii loo caddeeyo in uu naafo yahay, waxa uu xaq u yeelanayaa in loo oofiyo xuquuqda dastuuriga ah ee ay dhigayaan heshiisyada caalamiga ah iyo sharciyada dalka.

U sinnaanta fursadaha shaqo ee naafadu waa in ogaashaha iyo tartanka shaqooyinka dowladda ay u suurtagelinayaan ka qaybgalka naafada. In aaladaha iyo hababka baahinta shaqooyinku aysan takoor ku ahayn, goobaha iyo xarumaha haya'adaha dowladdu u qaabeysan yihiin jawi u suurtagelinaya ka-qaybgal sahlan ee dadka naafada ah. Mararka la gelayo imtixaannada shaqada in ay helaan gargaar. In dowladdu fuliso halbeegyadaas iyo kuwo kaleba oo dadka naafadaha la simi lahaa dadka caadiga si ay ula tartamaan waxaa ka hortaagan caqabado ay ka midyihiin, awoodda dhaqaalaha sida in dhismayaasha dowladda oo dhan loo yeelo marinno ay dadka naafadu isticmaali karaan, in xogta shaqooyinka iyo shuruudahaba loogu gudbiyo laguna fahansiiyo luuqadaha ay fahmi karaan sida calaamada dhagoolayaasha, ama bareelka indhoolayasha. (Maxamed, 2023).

In ay naafadu helaan duruufo nololeed wanaagsan waa mid ka mid ah ujeeddooyinka ay Soomaaliya ugu biirtay Heshiiska Xuquuqda Dadka Naafada ah, loona dhisay Hay'adda Dadka Naafada ah.

### 3. Caddaalad & dhowrid xuquuqda Aadanaha:

Caddaaladdu waa mabda' caalami ah oo umadaha adduunku isla qirsanyihiin in ay asaas u tahay nolosha. Caddaaladdu waa xaqa in cid waliba loola dhaqmo sidii ay ahayd in loola dhaqmo, cid waliba lagu abaalmariyo sidii ay mudneyd in lagu abaalmariyo. Caddaaladdu waa mabda' ka mid ah mabaadi'da ay dowladnimadu ku dhisantahay. Caddaaladu waa waajib guud oo dadka oo idil ay faranyihiin, in ay naftooda, ehelkooda, iyo deegaanka ay ku noolyihiin, iyo Ilaahii abuuray ay kula dhaqmaan caddaalad. Diinta Islaamku, caddaalada waxa ay siisay boos weyn, aayada Quranka ee ka hadla xisaab malahan, axaadiistana sidoo kale[29].

29 ) Eeg aayadaha 58 ee suuradda Al-nisaa, 90 ee suuradda Al-naxli.

Dhowridda xuquuqda Aadanuhu waa dhowridda cadaaladda sidaa darteed ayay muhiim u tahay in nidaamka dowliga ah la dhowro xuquuqda asaasiga ah ee Aadanaha. Ilaahey wuxuu, Aayadda 44 ee suuradda Yuunus, ku yiri "Eebe kama dulmiyo Dadka wax ba, hasayeeshee Dadkaa Naftiisa Dulmiya." (Sheekh Maxamuud Maxamed Cabdi, 1984). Dulmigu waa caddaalad darro iyo xaqa oo laga bayro. Ilaahey waxa uu Quraanka u soo dejiyay, rususha u soo diray, in dadku ay caddaalad sameeyaan xitaa haddii sidaas ay ka dhalanayso dhib iyo shiddo[30].

Marka la joogo qaadashada shaqaalaha rayidka ee dowladda, caddaaladdu keliya ma aha si siman loola dhaqmo dadka oo idil maxaa yeelay baahiyahooda u suurtagelinaya tartanku ma sinna sida dadka naafada ah oo kale. Sidoo kale, cadaaladdu waa habraac iyo hannaan sida loo fuliyaya ay cid waliba qiimeeyn karto in uu ahaa xaq iyo inkale. Sidaa darteed, mabaadi'da daahfurnaanta, sinnaanta, sarreynta sharciga, isla-xisaabtanku waa mabaadi'da ka dhalanaya caddaaladda.

Jiritaanka dowladnimada Soomaaliya waxaa saldhig u ah dhowridda iyo ilaalinta xuquuqda Aadanaha ee ku jira cutubka 2 ee Dastuurka. Marka dowladdu qaadanayso shaqaalaha rayidka, xuquuqda ay dhowrayso waxaa ka mid ah: dhowridda karaamada Aadanaha (10), u sinnaanta fursadaha (11 iyo 24), qaadista tallaabooyinka looga hortagayo xad-gudbyada lid ku ah xuquuqda (12), ka ilaalin ku shaqaysi khasab ah (14), xorriyadda doorashada shaqada iyo xirfadda (23), helid xiriir shaqo oo caadil ah (24), xaqa helidda macluumaadka shaqada dowladda (32), go'aannada shaqo-siin dowladeed oo caddaalad ah (33), xaqa dacwada iyo isdifaaca, helidda garsoor madax bannaan (34). Hannaanka qaadashada shaqaalaha rayidka ee dowladda waxaa hagaya xuquuqdaas aasaasiga ah, waana in hay'adaha dowladda ee ay khuseyso dhowraan ku naalooshaha xuquuqdaas, iyo sidoo kale in ay ka ilaaliso in aan xuquuqdaas lagu xad-gudbin.

### 4. Daahfurnaanta hannaanka qaadashada shaqaalaha rayidka.

Daahfurnaantu waa mabda'a ka mid ah mabaadi'da ugu muhiimsan ee dowlad-wanaagga iyo dimuqraadiyadda. Guud ahaan, daahfurnaantu waa "Heerka macluumaadka ay heli karaan dadka nidaamka dibadda ah ee u suurtagelinaya inay qaataan go'aanno ogaal ku dhisan ama/iyo in

30 ) Eeg aayadda 25 ee suuradda Alxadiid.

ay qiimeeyaan go'aannada ay gaaraan dadka talada leh" (Florini, 2007). Laba tiir ayaa muhiim u ah, helid xog sugan oo xaqiiq ah, iyo in helista xogtaasi u suurtagelinayso in uu qaado tillaabo muhiim ah ee gaarista ama ilaasashada xaqqiisa oo ay ka mid tahay in uu la xisaabtamo dowladda. Marka laga hadlayo shaqada hay'adaha dowladda, daahfurnaantu waa in dowladdu u furantahay bulshadeeda, ay ogaan karaan tallaabooyinka ay qaadayso iyo howlaha ay waddo si ay muwaadiniintu u ogaadaan oo ula xisaabtamaan. Marka la joogo qaadashada shaqaalaha rayidka, muwaadiniintu waa in ay helaan xogta shaqooyinka dowladda, waqti ku filan ku helaan macluumaadkaas, ay awood u helaan si siman gelitaanka hay'adaha shaqada bixiya iyo warsashada wixii xog dheeri ah ee ay u baahdaan. (Murat Jashari, 2018). Qodobbada Dastuurka ee 3, 32, Heshiisyada ay Soomaaliya ku biirtay ee la-dagaallanka musuqa, intuba waxa ay waajibinayaan dowlad daahfuran si loola dagaallamo dhaqannada musuqa leh. Qodobbada 7, 10 iyo 13 ayaa si fiican u macneeyay tiirarka daahfurnaanta dowladda[31].

Qodobka 7 (1) ee Heshiiska ayaa u dhigan sidan "Dawlad kasta oo xubin ah waxay, halka ku habboon iyo si waafaqsan mabaadi'da asaasiga ah ee nidaamka qaanuunkeeda, ku dadaalaysaa in ay dejiso, sugto, oo xoojiso nidaamyada ku aaddan shaqaaleysiinta, qoridda, haynta, dallacsiinta iyo hawl-gabnimada shaqaalaha rayidka ah iyo, halka ku habboon, saraakiisha dadweynaha ee kale ee aan la dooran." Tiirarka daahfurnaanta qaadashada shaqaalaha dowladda ee Heshiisku jideeyay waxaa ka mid ah: u sinnaanta nidaamka shaqaaleysiinta wax-ku-ool ah, helitaanka xogta shaqada dowladda oo ay ku jirto hannaanka go'aan gaarista iyo tillaabooyinka maamul ee ilaalinta xogta shakhsiga. Suurtagelin in nidaamyada shaqo ee dowladdu u furan dhamaan dadweynaha si ay ugu sahlanaato gaaritaanka hay'adaha dowladda. Iyo baahinta macluumaadka ku saabsan musuqada iyo saameyntiisa maamulka dowladda. Daahfurntaanta waxaa kale oo ka mid ah, in dowladdu kala tashato dadwynaha tallaabooyinka iyo go'aannada waaweyn ee saameynaya nolosha dadka oo ay ka mid tahay habka nidaaminta fursadaha shaqo ee dowladda. (qod.10, 13, Heshiiska Qaramada Midoobey ee La-dagaallanka Musuqa, 2003).

Keliya maahin, in fursadaha shaqo lagu baahiyo warbaahinta iyo goobaha

31 Soomaaliya waxay heshiiskan ku biirtay 2020 (eeg sharci lr.38 ee 31/12/2020).

u wada suurtagal ah dhamaan qaybaha bulshada, ee sidoo kale waxaa lagama maarmaan ah in dadku ogaan karaan ujeedka fursadaha shaqada, waajibaadka layska doonayo, habka loo codsan karo iyo hannaanka kala saaridda codsadayaasha. In dadku fahmaan, waxaa ka mid ah in luuqad ay fahmayaan lagu baahiyo shaqada.

**5. Hufnaan iyo isla-xisaabtan.**

Mabda'a hufnaantu waa natiijada daahfurnaanta iyo caddaaladda howlaha iyo adeegyada dowladda. Hufnaanta iyo daahfurnaanta lama filayo in ay jiraan haddii aan la helin isla-xisaabtan dhab ah. Isla-xisaabtanku waxa uu isugu jiraa mid guud oo bulshadu kula xisaabtanto hay'adaha dowladda. Qodobka 46 (1) ayaa dhigaya "Awoodda isxukunku waxay ka bilaabataa, kuna dhammaataa shacabka, asaga oo adeegsanaya awoodda ah in mar kasta oo loo baahdo uu hay'adaha iyo wakiillada shacabka ku oogi karo laxisaabtan." Qodobka 42 (2 e) ee Dastuurku wuxuu muwaadinka ku waajibiyay "horumarinta isla-xisaabtanka iyo talinta sharciga". La xisaabtankaasi waxa uu noqon karaa mid ku yimaada habka doorashada ama dacwadaha danta guud. Shacabku xaq ayay u leeyihiin la xisaabtan cidda ay u doorteen maamulka danaha guud ee dalka iyo dowladda. La xisaabtankaasin waxa uu noqon karaa mid toos ah oo loo maro habka doorashada iyada oo shacabku xaq u leeyahay in uu kalsoonida kala laabto xubnaha iyo hay'adaha ka shaqayn waaya dantaguud. Ama mid aan toos aheyn ee hay'adaha matalaya shacabku la xisaabtamaan sida baarlamaanku ay la xisaabtamaan hay'ada maamulka guud. Sidaas darteed, baarlamaanka ayaa korjoogteyn ku leh hay'adaha haya maamulka guud ee dowladda[32]. Dastuurka ayaa xaq u siinaya in muwaadiniintu ku dacwoon karaan dantaguud[33].

Dastuurku waxa uu dhisayaa Guddiga La-dagaallanka Musuq-maasuqa, Gardoonka iyo Guddiga Xuquuqda Aadanaha. Hay'adahaan ayaa muhiim u ah hirgelinta mabaadi'da hufnaanta iyo isla-xisaabtanka, iyo ilaalinta xuquuqda asaasiga ah ee Aadanaha. Guddiga la-dagaallanka musuqa ayaa u xilsaaran ka-hortagga iyo la tacaalidda dembiyada musuqa shaqada iyo hantida dowladda ee ay gaystaan saraakiisha dowladdu. Si uu waajibkaas u

32 ) eeg qodobka 69 (2 b) ee Dastuurka.

33 ) eeg qodobbada 39 (3), 42 (2 e), 45 (2), 109 (2 d).

gutana, awood ayuu u leeyahay in uu dejiyo barnaamijyo iyo tallaabooyinka arrimaha awooddiisa khuseeya, sameeyo baaritaanno, tallaabo ka qaado isaga oo kaashanaya hay'adaha kale ee dowladda, saraakiisha dowladda ee ku eedeysan musuqa, iyo in uu taageero oo talooyin ka bixiyo nimaamyada sharci ee lagula xakameynayo howlaha musuqa. Xafiiska gardoonka ayaa ah hay'ad u xilsaaran baarista iyo sixidda xad-gudbyada xuquuqda Aadanaha ee ay ku kacaan saraakiisha dowladdu. Guddigu Xuquuqda Aadanaha oo muhiim u ah hirgelinta xuquuqda Aadanaha guud ahaan waxa uu u xilsaaranyahay baaritaanka iyo ka warbixinta xadgudubyada xuquuqda Aadanaha ee Dalka isaga oo ka talabixinaya sida ugu habboon ee loo sixi karo xad-gudubyada xuquuqda Aadanaha(34).

Dowladda Federaalka Soomaaliya wali malahan saddexdaas hay'adood ee muhiimka u ah hirgelinta mabaadi'da asaasiga ah ee u sinnaanta iyo daahfurnaanta qaadashada shaqaalaha rayidka ee dowladda. Guddiga La-dagaallanka Musuqa oo ay Dowladdu dhistay 2021 ayaa Madaxweyne Xasan Sheekh kala diray 2022 isagoo u sababeeyay in dhismaha loo maray hab aan dastuuri ahayn. Si kastaba, waxaa jira oo la ansixiyay sharciyada labada guddi ee la-dagaallanka musuqa, iyo xuquuqda Aadanaha.

## QAYBTA 4AAD: HANNAANKA SHAQAALEYSIINTA SHAQAALAHA RAYIDKA EE DOWLADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

Sharciga shaqaalaha rayidka ee dowladda iyo xeer-nidaamiyaha shaqo qorista shaqaalaha rayidka ayaa nidaamiya habka shaqaaleysiinta rayidka ee Dowladda Federaalka Soomaaliya. Sharciga ayaa jiheynaya habka guud ee muhiimka ah ee qaadashada shaqaalaha rayidka halka xeernidaamiyuhu uu faahfaahinayo tallaabooyinka lagu hirgelinayo. Ujeedka qormadaan awgeed, heerarka shaqaaleysiinta rayidka ayaa lagu soo koobay afarta heer ee ugu muhiimsan ee qofka shaqaalaha ihi maro laga soo billaabo marka uu soo galo shaqada rayidka ah ilaa marka uu dhamaado xiriirka

34 Eeg qodobbada 111C, 111J, 111B iyo 41 ee Dastuurka KMG, iyo sharciyada guddiyadaas ee (*Sharciga Dhismaha Guddiga Madaxabannaan ee La-dagaallanka Musuq-maasuqa*, 2019), (*Sharciga Dhismaha Guddiga Madaxabannaan ee Xuquuqul Insaanka*, 2016).

shaqadu.

**1. Qorshaha kheyraadka aadamiga:**

Qodobka 7aad ee sharciga shaqaalaha rayidka, iyo qodobka 5aad ee xeer-nidaamiyaha shaqo qorista ayaa tilmaamaya in qaadashada shaqaalaha rayidku ay ku timaado baahi shaqaale oo jirta oo ku timid qorsheyn kheyraadka aadamiga ah ee dowladda. Xeer-nidaamiyaha kheyraadka Aadamiga[35], ayaa faraya in uu jiro qorshe guud ee kheyraadka aadamiga dowladda kaas oo Guddiga Shaqaalaha Rayidka Dowladdu dejiyo. Qorsheynta kheyraadkaas waa in ay ku jirtaa odoroska baahida cududda shaqaale ee dowladdu baahantahay iyo awoodda miisaaniyadeed ee lagu hirgelin karo.

Sidoo kale, inta aan shaqaale la qorin, waa in ay jirtaa jago bannaan oo shaqo rasmi ah taas oo leh shaqo qeexan, faahfaahinaya dhamaan jadaga, shuruudaha, waajibaadka, mushaarka iyo habkeeda shaqo. Ma jiri karto hay'ad dowladeed oo qoran karta shaqaale aan baahiyu keenina ama aan miisaaniyada loo haynin.

**2. Habka Shaqo qorista:**

Shaqo qorista rayidku waa laba middood, qoris shaqaale cusub oo aan horey ugu jirin nidaamka shaqada, iyo dallacsiin shaqaale horey ugu jiray nidaamka shaqada. Jagooyinka loo tartamayo ayaa isugu jira, buuxin jago cusub oo la abuuray ama jago jirtay balse bannaanaatay.

Sida uu qabo qodobka 4 (3 a) ee xeer-nidaamiyaha shaqo qorista, ku biirista shaqada rayidka ee darajada billowga ah[36], waxa ay ku billaabata ka qaybgal tartan furan, halka darajooyinka aan billowga ahayn iyo buuxinta jagooyinka maamul sida madax qaybeed, agaasime, agaasime guud, maareeye iyo jagooyinka sare ee heer maamul, waxa ay u furanyihiin keliya shaqaalaha rayidka ee horey nidaamka ugu jiray. Jagooyinkaas waxaa

35 ) Xeer-nidaamiyaha 5aad ee xeerarka maamulka shaqaalaha rayidka ee 2021 (xeer RW lr.131, iyo 132 ee 2021).

36 ) Eeg qodobka 17 iyo 18 ee sharciga shaqaalaha rayidka ee dowladda. Darajooyinka billowga waxaa ah: A/8, AY/3, B/10, B/9, B/8, F/3, C/11, C/10. FG hadda darajooyinkan wali ma aysan hirgelin, ee sidaas beddalkeeda darajo waliba waxa ay u jirta hal darajo ahaan. Eeg (*Warbixin Sanadeedka*, 2022).

tartan dadweynaha u furan la gelin karaa markii gudaha laga waayo.

Qoodbka 6 ee sharciga shaqaaluhu waxa uu dhisayaa guddiga hubinta iyo qiimaynta shahaadooyinka oo hoos imaanaya Wasaaradda Tacliinta Sare. Guddigaan oo u xilsaaran in uu qiimeeyo shahaadooyinka, hubsado runnimadooda, waxa uu ka koobanyahay agaasimaha guud ee Wasaaradda Tacliinta Sare oo guddoomiye ah, guddoomiye kuxigeenka Jaamacadda Umadaa, agaasimaha waaxda qorsha ee Wasaaradda Waxbarashada (tacliinta sare ee hadda), xubin xiriirka Ururrada Shaqaalaha Soomaaliyeed, iyo wakiil ka socda Guddiga Shaqaalaha Rayidka ee Dowladda. Nasiib darro, wali guddigaan lama dhisin hubinta runnimada shahaadooyinka waxaa sameysa Guddiga Shaqaalaha Rayidka. Balse, qiimeynta isu qalmidda shahaadooyinka iyo heerarkoodu waa shaqo uu la maqanyahay guddigaasi. (Maxamed, 2023).

Habka shaqaaleysiintu waxa ay ku billaabataa warsasho shaqo qoris ay hay'adda shaqaalaha dooneysaa kaga warsato Guddigu in ay u qoraan shaqaale. Guddigu kadib marka uu xaqiijiyo in baahi shaqo jirto oo waafaqsan qorshaha kheyraadka Aadamiga ee dowladda, waxa uu hubinayaa jiritaanka miisaaniyad loo qoondeeyay.

Habraaca qabashada tartanku waxa uu noqonayaa sida ku cad (qod. 3-35, Xeer-nidaamiyaha Shaqo Qorista Shaqaalaha Rayidka, 2021):-

- Dhismaha guddi-hoosaadka xulista. Billowgiiba waa in la dhisaa guddi-hoosaad kumeel-gaar ah ee qaadashada shaqaalaha la doonayo. Xeer-nidaamiyaha shaqo qoristu waxa uu dejiyay ilaa 3 nidaam oo loo dhisayo guddi hoosaadyada xulista. Qodobka 8aad ayaa dhigaya in Guddoomiyuhu magacaabayo guddi xulis oo ka kooban 4 xubnood oo Guddiga Shaqaalaha ah, xubin ka socda hay'adda wax loo shaqaaleysiinayo, xubin xeeldheere ku ah jagada loo tartamayo. Qodobka 32 ee buuxinta jagooyinka madax qaybeedyada iyo agaasime waaxeedyada, guddiga xulistu waa 5 xubnood oo Guddiga Shaqaalaha ah oo uu ku jiro guddoomiyaha guddiga xulista ee horey ku sheegan iyo xubin dumar ah, 2 xubin ee guddiga dallacaadda ee hay'adda loo shaqaaleeysiinayo. Qodobka 33, buuxinta jagooyinka agaasime guud, maareeye guud, iyo xoghaye guud, waxaa maamulaya guddi xulis ka kooban Guddoomiyaha Guddiga Shaqaalaha Rayidka, Xoghayaha Joogtada ee Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha ama marka

jagadaas loo tartamayo, qof uu Ra'iisul Wasaaruhu soo magacaabo, xubin khabiirka ka socda hay'adda loo shaqaaleeysiinayo, 2 xubnood shaqaalaha rayidka oo midkood dumar tahay oo Guddoomiyaha Guddiga Shaqaaluhu soo magacaabo.

- Faafinta ogeysiinta jagada la doonayo in la buuxiyo. Baahinta shaqada waxaa loo adeegsanayaa warbaahinta dowladda, mida Guddiga Shaqaalaha, lagu dhejiyaa xarumaha hay'adaha dowladda, iyo warbaahinta gaarka loo leeyahay markii loo baahdo. Ogeysiintu waa in ay tahay qoraal, leedahay faahfaahinnada lagama maarmaan ah ee shaqo qeexaha. Muddada baahintu waa in aysan ka yaraan 14 maalin oo ka billaabata taariikhda la baahiyaya ogeysiinta shaqada.
- Kala hufidda codsiyada, imtixaanidda iyo xulashada tartamayaasha. Qofka shaqada soo codsaday waxaa lagu diidi karaa codsigiisa in uu dembiile hore yahay, in uu ka beensheego xogtiisa, ama aan waafaqin shuruudaha asaasiga ah ee lagu muteysto shaqada rayidka ah oo ka ay midtahay in uu Soomaali yahay. Kala hufidda codsiyada iyo soo saarista liiska gaaban waxa ay ku saleysantahay shuruudaha shaqo qeexaha ee qofka looga baahanyahay. Tartamayaasha liiska gaaban soo gala ayaa imtixaan u gudbaya. Haddii imtixaanku yahay wareysi af ah, waxaa lagu saxayaa 100 dhibcood. Haddiise uu isugu jiro qoraal iyo wareysi, qoraalku waa 40 dhibcood halka wareysigu noqonayo 60 dhibcood. Tartamayaasha hela 60% iyo wixii ka sarreeya ayaa loo qaadanayaa shaqada. Tartamayaasha ugu dhibcaha badan ayaa mudnaanta leh, kuwa baasa ee soo harana waxaa la gelinayaa sugayaasha laylinta gelaya muddo lix bil ah. Tartamayaasha jagooyinka sare ee agaasime guud iyo maareeye guud, xoghaye guud, waxaa lagu qiimeeynayaa CV, khibrad 10 shaqo oo 7 maamul tahay, bandhigga qorshihiisa, iyo wareysiyo isdaba-joog ah.

### 3. Rasmiyaynta shaqo-siinta:

Shaqaalaha rayidka ee lagu qaatay habraaca horey ku xusan waxa uu shaqada ku gelayaa tijaabo 3 bilood ah oo markii uu ku baaso lagu rasmiyeynayo jagadii loo qaatay. Jagooyinka A iyo AY waxaa lagu rasmiyeynayaa xeer Madaxweynaha JFS, jagooyinka F iyo B waa xeer Ra'iisul Wasaare, jagooyinka X, C, iyo D, waa saxiixa Wasiirka Shaqada iyo

Arrimaha Bulshada[37].

Ilaa xilliga diraasaddan, shaqaalaha rayidku malahan rasmiyeyn waafaqsan habka sare ku xusan marka laga reebo jagooyin ku soo baxa wareegtooyin oo ay tilmaamaan sharciyo kale. Guddiga Shaqaalaha ayaa qofkii la qaato ku meeleeya nidaamka shaqaalaha rayidka ah. (Maxamed, 2023). In aan shaqaalaha rayidka la rasmiyayn waxay ka dhigaysaa kuwo kumeel-gaar ah oo hannaankii qaadashadooda aan la waafajin sharciga.

**4. Cabashooyinka shaqaaleeysiinta rayidka ah iyo dowrka garsoorka:**

Cabashooyinka laga qabo go'aannada habka shaqaaleeysiinta waxaa ka furan hannaan racfaan oo 3 jaranjaro leh. Xeer-nidaamiuhu wuxuu xaq u siinayaa tartamihii aan ku qancin habka loo maamulay tartanka in uu u racfaanka qaato Guddiga Shaqaalaha Rayidka. Haddii uu iyagana go'aankooda ku qanciwaayo, waxa uu racfaan u qaadan karaa Guddiga Racfaanka Madaxa Bannaan ee Shaqaalaha Dowladda[38]. Qofkii ku qanciwaayana waxa uu racfaan u qaadan karaa Maxkamadda awoodda u leh[39].

Qodobka 33 ee Dastuurku waxa uu dhigayaa in go'aannada hay'adaha maamulku[40], oo uu Guddigu ku jir, in ay noqdaan kuwo "…ku dhisan sharci, maangal ah, go'aan-ka-gaaristoodana loo maray hannaan caaddil ah." go'aannada hay'adaha fulinta marka laga helo saddexdaas shardi waxay noqonayaan go'aanno xaq ah. Saddexda shardiba waa is-dhamaystirayaan oo keliya kuma filna in go'aanku waafaqay sharci, waa lagamamaarmaan ah in sharcigu uusan ka horimaanayn xuquuqda asaasiga ah ee qofka, sida, in hannaanka go'aannada maamulku noqdaan kuwo loo maray caddaalad iyo maangal ahaansho.

---

37 ) eeg qo.16 ee Sharciga shaqaalaha rayidka.

38 Waa Guddi aan wali la dhisin, isla markaana xeer faahfaahinaya aan wali la qaadan.

39 ) qod. 37-40, *Xeer-nidaamiyaha Shaqo Qorista Shaqaalaha Rayidka*, 2021.

40 Maamul halkan waxaa loo adeegsaday in ay la mid tahay: madaxtooyada iyo hay'adaha laanta Fulinta oo Golaha Wasiirrada ugu sarreeyo, iyo hay'adaha, xafiisyada, iyo guddiyada madax-bannaan ee leh shaqaale rayid ah. Eeg qodobbada 1 ee sharciga shaqaalaha rayidka, 97 ee Dastuurka kumeel-gaarka ah.

Go'aannada kama dambaysta ah[41] ee aan lahayn saddexdaas shardi waxaa ka furan in si sharciga waafaqsan looga dacwoodo maxkamadda awoodda u leh. Dastuurku waxa uu oggolaanayaa in la furi karo dacwad lid ku ah dowladda xitaa haddii aysan dangaar ah ugu jirin dadka oogaya[42].

Dadku waxa ay u doodi karaan dantaguud oo ay kamid tahay in la helo qaadasho shaqaale rayid ah oo loo maray hanaanka caddaalad, sarreynta sharciga, iyo oofinta xuquuqda Aadanaha, waliba dowladda waxaa waajib ku ah in dadka u doodaya dantaguud ay siiso difaac bilaash ah xitaa haddii ay go'aannadeeda lid ku tahay.

Dacwadaha lidka ku ah go'aannada iyo tallaabooyinka hay'adaha dowladdu waxa ay isugu jiraan kuwo Maamul (idaari) ah oo lid ku ah xuquuqda ama iyo danaha gaar ahaaneed dhinaca la duudsiiyay xaqqii uu lahaa. Ama dacwo dastuuri ah oo ku dhisan in tallaabo la qaaday ama sharci uusan dastuurka waafaqsanayn. Tan hore, ciddii xaq ay gaar u lahayd laga dulmiyo go'aan dowladeed awgiis, ama waayay dan uu ku lahaa tallaabo dowladi qaaday awgeed waxa uu xaq u leeyahay in uu dacwad ka furto Maxkamadda Sare ee dalka[43]. Balse markii su'aashu tahay in go'aanka amase tallaabada hay'adda dowladeed ka horimaaneyso Dastuurka, waxaa awood u leh Maxkamadda Dastuurka[44]. Qodobka 4 (2) ee Dastuurka oo u dhigan sidan "Sharci kasta ama tallaabo maamul oo ka soo horjeedda Dastuurka, maxkamadda Dastuuriga ah ayaa awood u leh burrinta sharcigaas ama tallaabadaas maamul, si waafaqsan Dastuurkan." Maxkamaduhu in ay xukun kasoo saaraan dacwadaha idaariga ah iyo kuwa dastuuriga ah ka sokow, waxa ay leeyihiin in ay tafsiir ka bixiyaan xuquuqda asaasiga ah ee Aadanaha ee uu Dastuurku jideeyay.

---

41 Go'aannada maamulku waxa ay kama dambays yihiin marka ay laystaan dhammaan tallaabooyinka racfaan qaadashada jaranjarooyinka kala sarreeya ee sharcigu tilmaamo, ama marka uusan jirin racfaan maamulka dhexdiisa ah, go'aannada kasoo baxa cidda awoodda u leh. Eeg (Haji N. A. Noor Muhammad, 1966).

42 ) Eeg qodobbada 34 (5), 109 (2 d) ee Dastuurka, iyo qodobka 4 (*Sharciga Dhismaha Maxkamadda Dastuurka*, 2016).

43 ) Eeg qodobbada 5 (3), iyo 10 (4) ee sharciga Nidaamka Garsoorka (Lr.3 ee 12 Juun 1962).

44 ) Eeg qodobka 4 (2) ee Dastuurka Kumeel gaarka Soomaaliya.

Iyada oo Dastuurka iyo sharciyada dalku ay sidaas xuquuq buuxda u siiyeen muwaadinka, haddana diraasaddan laguma ogaan cid ka cabatay go'aannada maamula ee qaadashada shaqaalaha rayidka ee dowladda. Walow ay jiraan sababo badan oo loo aaneey karo in dadka lagu dulmiyo qaadashada shaqada rayidka ah aysan u dacwoon maxkamadaha, haddana waxaa jirta dhowr sababood oo ka mid ah caqabadaha keena in aysan marinkaas marin. Waa tan koowaade, waxaa hooseeya wacyiga dadweynaha ee qaanuunka iyo dowladda. Taasi waxaa lays oran karaa waxaa yar isla-falgalka dadka iyo dowlad dimuqraadi ah oo aan jiilka hadda jiraa waayo-aragnimo badan u lahayn habka sharciga ah ee loo raadsado xuquuqda iyada oo loo marayo dariiqa maxkamadaha. (Omar, 2023). Ka aamin bixidda hay'adaha dowladda oo eedeeymaha musuqa iyo qabyaaladda awgood. Haya'adaha dowladda oo loo qaatay in ay eex sameynayaan maadaama xubnahooda aan loo tartamin. Musuqu la'aaminay maahin mid habraac rasmi ah ku sugmay balse waa aaminaad eedeeyn ku faaftay dadka dhexdiisa, taas oo keentay in xitaa hay'adaha caalamiga ah u aqoonsato Soomaaliya meelaha ugu musuqa badan adduunka. (CPI 2022 for Sub-Saharan Africa: Corruption Compounding Multiple Crises, 2023).

Waxaa iyadna jirta in Maxkamaddii Dastuuriga aysan dhisnay, kaalinteediina aysan jirin hay'ad kale oo buuxisa. Maqnaashiyaha Maxkamadda Dastuurku, waxa ay qayb weyn ka tahay dhaqangelin la'aanta xuquuqda dastuuriga ah. sidoo kale waxaa jirta caqabadaha dhaqaale ee adeegyada caddaaladda oo ay dadku badankood isu miisaamaan xaqa ka maqan qiimaha dhaqaale ee uga baxaya oogis dacwadeed laga yaabo in uusan ku guuleysan.

Sababta kale waa in Soomaalidu ay jeceshahay in xalka degdeg lagu gaaro. Ma jecla in ay hannaanka caddaaladda oo laga yaabo in uu qaato wakhti ka baqan kii ay doonayeen in ay ku helaan go'aan. Marar badanna la weydiinayo caddeymo qoraal ah iyo in ay sugaan xaqiiqooyinka ay ku doodayaan taasi oo ka horimaanaysa aragti ku dhisan warinta wax la maqlay ee aan dhabtooda la ogeyn.

Waxaa jirta dood u baahan in si qoto dheer loo lafaguro oo ah in maxkamaduhu awood u leeyihiin in ay soo saaraan awaamiir talobixin ama waajib saarid ah ee laamaha kale ee dowladda oo ku wajahan dhaqangelinta sharciga. Kala madaxbannaanida haya'ada dowladda iyo in dowrka maxkamaduhu ku koobnaadaan keliya ka garniqista codsiyada sida sharciga ah ugu yimaada ayaa dadka qaar ku doodaa. (Ali, 2023). Halka

qaar kale ay ku doodaan, in awoodda maxkamaduhu ka ballaarantahay keliya in ay xukun ridaan. "Maxkamaduhu laba siba waa ku dhaqaaqaan, in dacwad ku saabsan xaq gaar ah loola yimaad, iyo in sharciga lagu tuntay" (Omar, 2023). Aragtida dambe, waxaa lagu dhisaa isla-xisaabtanka hay'adaha dowladda oo garsoorku ka midyahay iyo mabda'a sarreynta sharciga oo markii dantaguud la joogo awood u siinaya in loo dhaqaaqi karo iyada oo aan loo eegeeyn dangaar ah.

**5. Dhamaashaha xiriirka shaqo:**

Dhamaashaha xiriirka shaqo ee shaqaaluhu waxa uu ku yimaadaa, in uu geeriyoodo, in uu gaaro da'da 65 haddii dumar yahay ama 60 haddii uu ragyahay, in uu isagu iskiis isaga tago, ama xukun maxkamadeed awgeed shaqada looga joojiyo, ama lagu ganaaxo anshax ahaan, ama sababo caafimaad awgood looga joojiyo shaqada. Qofna laguma khasbi karo in uu ku jiro shaqo uusan doonayn. Sharciga shaqaaluhu waxa uu faahfaahinaya sababaha iyo habraaca lagu waayi karo shaqaalannimada anshax marin awgeed[(45)].

## QAYBTA 5AAD: CAQABADAHA QAADASHADA SHAQAALAHA RAYIDKA EE DOWLADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA.

In aad ka hadasho caqabadaha ku gudban u-sinnaanta qaadashada shaqaalaha rayidka ee Dowladda Federaalka Soomaaliya waxa aad u baahantahay, in aad si qoto dheer u baarto dhammaan duruufaha ku xeeran nidaamka dowliga ah ee Soomaaliya. Waayo, culeysyada tirada badan ee qaar ka yimaad amniga, dhaqaala yarida, awood qaybsiga beeleysan, musuqa, aqoon yarida, habdhaqanka lala qabatimay ee ku dhisan xeer-dhaqameedka siyaasadeed ee ah meelmarinta wixii suurtagelaya, ayaa marar badan sabab u ah inbadan ee caqabadaha hoos ku sheegan. Diraasaddan oo muddadeedu gaabnayd, waxaa qoraaga u soo baxday jiritaanka caqabadadaha soo socda in ay yihiin kuwa ku gudban in aan qaadashada shaqaalaha rayidka aab loo marin hab loo simanyahay oo daahfuran.

45 ) qod. 51-56, *Sharciga Shaqaalaha Rayidka Dawladda*, 2006.

## 1. Ku-dhaqanka sharciga oo hooseeya:

Sida aan qaybaha hore ku soo qeexnay, sharciga shaqaalaha rayidku waa jiraa waana dhaqangal walow uu ku noqosho u baahanyahay[46] haddana waa uu nidaaminayaa hannaanka qaadashada shaqaalaha. Sidoo kale, waxaa xilliga diraasaddan la qoray jira oo dhaqangal ah badiba xeer-nidaamiyayaasha maamulka shaqaalaha rayidka oo uu ku jiro midka nidaaminaya "qorista shaqaalaha rayidka". Nidaam sharciyeedkaas oo jira haddana laguma dhaqmo marka la qaadanayo shaqaalaha rayidka. Sharcigu macne kuma yeesho in uu jiro keliya ee in lagu dhaqmo, la raaco mabaadi'diisa, habraacyadiisa, iyo faritaankiisa waa lama huraan markii la doonayo hirgelin nidaam dimuqraadi ah ee uu sharcigu kasarreeyo dadka xukunka haya. Qofka loo dhiibo masuuliyad waa in uu isu dhiibaa oo u hoggaansamaa sida sharcigu farayo. Tusaalooyinka ku dhaqamid la'aanta sharciga waxaa ka mid ah:-

- Jaangoyn la'aanta qaab-dhismeedka baahiyaha shaqada rayidka ee hay'adaha dowladda. Hay'adaha dowladda ee shaqada rayidku malahan tirada jagooyinka iyo heerarka shaqaale ee ay u baahantahay taas oo ka dhigaysa in hay'ad waliba qorankarto tiradii ay doonto oo shaqaale ah. Sidoo kale, ma jirto jaranjarooyinka shaqo ee shaqaaluhu uu soo maro marka la qaato ilaa uu howlgab noqonayo. Si aan waafaqsanay faritaanka sharciga iyo xeer-nidaamiyayaasha, shaqaalaha hadda waxa ay ku wada jiraan darajadii lagu qaatay.[47]
- In aan la dhisin guddiga hubinta iyo qiimeynta shahaadooyinka. Qodobka 6 ee sharciga shaqaalaha ayaa faray in la dhiso guddigaan maxaa yeelay waxay qayb lixaad leh uga jiraan qorista shaqaalaha. Guddigu waxa uu u xilsaaranyahay hubinta sugnaanta shahaadooyinka aqoonta ee ay sitaan tartamayaashu. Waxa kale ee uu qiimeeyaa isu dhigmidda shahaadooyinka kala duwan ee darajooyinka shaqada rayidka ah. Guddigaas oo dhismihiisu ay ka dhimantahay keliya magacaabis maadaama ay xubnihiisu yihiin dad jagooyinka ay hayaan

---

46 Hindisaha ku noqoshada sharciga waa la diyaariyay walise wuxuu ku jiraa hannaanka sharci-dejinta.

47 ) Tusaale heer jaamacadeed waxaa lagu qaataa A, dugsi sare B. heerkaas ayay kuwada jiraan kuwa khibradda leh iyo ku cusub intuba.

awgeed ku yimaada. (Maxamed, 2023).

- In hay'adaha dowladdu ay qortaan shaqaale iyadoo aan lamarin hannaanka shaqo qorista. Marka laga reebo xaalada kooban oo tartan furan dhacay, shaqo siinta hay'adaha dowladdu waxay badiba qortaan shaqaale aan marin habka shaqo qorista iyaga oo Guddiga Shaqaalaha u dirsada in dad ay qaateen loo diiwaangeliyo halkii ay warsan lahaayeen qoris shaqaale loo tartamo. (Maxamed, 2023). Habkaan dadban waxa uu keenaa in la qaato dad aan u qalmin shaqada rayidka
- Shaqaalaha rayidka oo aan wali la ansixin shaqo siintooda. Qodobka 16 ee sharciga shaqaaluhu waxa uu dhigayaa in shaqo qoristu ku ansaxayso xeer Madaxweyne marka la qaadanayo heer A iyo AY, xeer Ra'iisul Wasaare marka la qorayo heer F iyo B, ama saxiixa wasiirka Shaqada iyo Arrimaha Bulshada marka la qaadanayo heer X, C iyo D. hadda ma jirto shaqaale rayid ah oo qaadashadiisa lagu rasmiyeeyay habkaas marka laga reebo jagooyinka sare qaarkood ama xubno xil gaar ah loo magacaabayo. (Maxamed, 2023). Balse taa beddalkeed waxaa lagu meeleeyaa nidaamka shaqaalaha rayidka ee uu Guddiga Shaqaaluhu maamulo.

**2. Maqnaashiyaha siyaasad guud ee adeegga rayidka ah:**

Sida ay dowladdu u qaadatay siyaasadda shaqaaleysiinta guud ee shaqada gaarka ah, ma jirto siyaasad hageysa shaqaaleysiinta dowladda. Siyaasadu waxa ay la maqantahay in dowlaadu yeelato aragti mideysay ee shaqo abuurka dowladda, ujeeddooyinkiisa, hagayaasha shaqo siinta dowladda, iyo tallaabooyinka loo marayo hagaajinta nidaamka shaqada rayidka ah. Qorsha Horumarinta Qaranku waxa uu dhigayaa in dib-u-habeyn lagu sameynayo shaqada rayidka ah iyo adeeg bixinta dowladda iyada oo loo marayo hannaan ku dhisan "daacadnimo, mihnadyahannimo, u qalmid, iyo ka madaxbannaani faragelin siyaasadeed". (The Ministry of Planning, 2020). In uusan mideysnayn hannaanka shaqaalaha rayidku waxa uu keenay: in aan sharciyadii iyo xeer-nidaamiyayaashi la dhaqangeli maxaa yeelay isku aragti lagama ahan sida loo dhaqangelinayo. In aysan xaddidnayn qaab-dhismeedka heerarka iyo darajooyinka shaqo ee hay'adahadaha dowladdu taasina ay tusbax go'ay ka dhigtay qorashada shaqaalaha.

**3. Faragelinta siyaasiyiinta ee hannaanka shaqo siinta:**

Dowladda Federaalka Soomaaliya waa dowlad leh nidaam xukun oo baarlamaan u-eke ah. Baarlamaanka oo ka kooban Golaha Shacabka iyo Aqalka Sare, ayaa dhisa laamaha kale ee dowladda. Dastuurku waxa uu dhigayaa in Baarlamaanku ku yimaado doorasho qof-iyo-cod ah oo shacabku ay si xor ah ku doortaan xubnaha matalaya. Sidaas cagsigeed, kow iyo tobankii sano ee uu Dastuurku dhaqangal ahaa, Baarlamaanka waxaa lagu dooranayey nidaamka awood qaybsiga beelaha ee 4.5 oo doorasho dadban ah. Nidaamkaas oo ka midnoqday xeer-dastuureedyada dalka ayaa noqday halbeegga ugu muhiimsan ee nidaamyada dowladda oo kan shaqada rayidku ku jiro.

Siyaasiyiinta xilalka haya ayaa tartan ugu jira qorista xubno ka mid ah bulshooyinka ay matalaan si ay uga kasbadaan taageeradooda. Faragelinta siyaasiyiinta iyo xubnaha awoodda ku dhex leh dowladdu, siyaalo badan ayay u saameeyaan hannaanka shaqo qorista rayidka. Mid, waa in ay inta xilalka rasmiga ah joogaan qoraan shaqaalaha ugu badan xitaa haddii aan mushaar loo haynin. Iyaga oo cadaadiya hay'adaha dowladda ay qaabilsan in ay miisaaniyadda ku daraan. Tan kale, waa in marka lasoo xayeysiiyo shaqooyinka loo tartamayo ay cadaadiyaan hay'adaha shaqaaleeysiintu in ay qoraan dadka ay wataan. (Ibrahim Mohamed Warsame, 2023). Awoodda cadaadiska siyaasiyiintu waa in ay sameynkaraan eedeeyn siyaasadeen, xil-ka-qaadis, kalsooni kala noqosho, iyo awoodda codeynta. Taas oo masuuliyiinta hay'adaha shaqada qora culeys ku noqonaysa haddii ay siyaasiyiinta awoodda leh ka diidaan waxa ay doonayaan.

**4. Isla-xisaabtanka oo yar:**

Isla-xisaabtanku waa hannaanka lagu toosin karo markii laga leexdo marinka sharcigu tilmaamo. Xakamayn la'aanta siyaasiyiinta iyo masuuliyiinta dowladdu waxa ay keentay caadeysi baalmaridda sharciga iyo in aysan waxba u arag u gefiddiisa maadaama aanay jirin isla-xisaabtan dhab ah. Qodobka 69 (2 b) ee Dastuurku waxa uu awood u siiyay Golaha Shacabka, in uu la xisaabtamo hay'adaha dowladda "Awoodda la-xisaabtaanka iyo kor-joogtaynta hay'adaha Dawladda ee Heerka Qaranka, gaar ahaan dhinaca hubinta dhaqangelinta sharciyada dalka". Ma muuqato tusaalooyin isla-xisaabtan dhab ah oo Baarlamaanku ay ku saxeen hay'ada dowladda. Wasiir xukuumadda ka mid ah ayaa mar uu guddi baarlamaan oo la xisaabtamayey ay su'aalo ka weydiiyay qaadasho shaqaale aan sharciga waafaqsanayn ee wasaaraddiisa, in shaqaalaha rayidka lagu qaato qaab

beeleed (4.5) “mabada’a ah walaashaa ama walaalka aad qortay ama nin kugu qaraaba ah [in ay eedeeyn tahay], ninka ugu sokeeya ee aan wax siinayo waa ninka qaraabadeyda ah haddii aan u heli karo boos”, wuxuu ku daray isaga oo u jawaabaya xildhibaankii su’aasha weydiiyay “wixii aad sameyn lahayd [in aad dadka qorato] aniga ha igu eedeeyn”. (Somali Cable, 2023a). Wasiirku, walow mar dambe, ka cudurdaartay hadalkiisa uuna raalligelin ka bixiyay (Somali Cable, 2023b), haddana arrintaani waa xaqiiq jirta mana ahan mid isaga ku kooban.

Baarlamaanka oo ah hay’adda ugu muhiimsan ee leh awoodda korjoogteynta hay’adaha dowladda. Awooddaasi waxa ay ka dhalataa maadaama uu yahay hay’adda dhistay hay’adahaas isla markaana leh la xisaabtankooda oo keeni karta kalsooni kala noqoshada musuuliyiinta hay’adaha sharciga u hoggaansami waaya. Awoodda codka ee uu Baarlamaanku adeegsado oo ay ahayd in uu u adeegsado toosinta maamul wanaagga, ma muuqato in uu abbaaray ujeedkiisii. Shaqo-yarida dalka ka jirta, iyo saameeynta nidaamka awood qaybsiga ayaana ugu weyn sababaha shuuqiyay in xildhibaannadu adeegsadaan awooddii siyaasadeed ee ay ku sixi lahaayeen khaladaadka maamulka dowladda una horseedi lahaayeen xukun wanaagsan oo waxtar leh.

Hay’adihii ka qaybqaadan lahaa isla-xisaabtanka oo ay ka mid Xafiiska Gardoonka, Guddiga Xuquuqda Aadanaha, iyo Guddiga La-dagaallanka Musuqu waa maqanyihiin oo ma dhisna saas darteed, hay’adaha malaha la xisaabtan farsamo iyo mid siyaasadeed oo ka qabta khalaadaadka la xiriira shaqada rayidka ah iyo ku toosinta hannaan maamul wanaag caddaalad ah ku dhisan oo bulshadu u dhantahay.

Isla-xisaabtan hay’adaha dowladda dhexdooda ah keliya maahee waxaa furan la-xisaabtankii bulshada. Dowrkaanina waa maqanyahay maadaama aysan dalka ka qabsoomin doorasho toos ah oo bulshadu kula xisaabtami karto xubnaha ay doortaan. Hay’adaha bulshada rayidka oo iyaguna qaba maamul xumi gudaha ah, in aysan mideysanayn, iyo saameeynta siyaasadda iyo qabyaaladdu ku leedahay kaalintoodii ay ka ciyaari lahaayeen, ma aysan ciyaarin dowr muhiim ah ee in la helo nidaam hufan ee lagu maamulo adeegga rayidka ee dowladda. (Feysal Osman, 2018).

### 5. Dhamaystirnaan la’aanta iyo duugoobidda sharciyada Guddiga iyo shaqaalaha rayidka:

Marka laga soo tago gaabiska dhanka dhaqangalinta ah, sharciyada asaasiga ah ee nidaamiya shaqada rayidka ah waxaa ku xeeran caqabado ay ka mid yihiin duugoobid iyo inaysan dhamaystirnayn. Sharciga lagu dhisay Guddiga Shaqaalaha aad ayuu u koobanyahay marka loo eego maqaamka hay'adda uu dhisayo. Xeerku ma suurtagelinayo madaxbannaani buuxda ee Guddiga uu ku guto shaqadiisa. Taa beddalkeeda waxa uu hoosgeynayaa kormeerka Wasaaradda Shaqada oo iyagu qayb ka ah hay'adaha fulinta ee ku shaqada leh nidaamka adeegga rayidka. Qaab-dhismeedka Guddigu ma cadda. Guddigu oo ka kooban 14 xubnood keliya waxa uu sharcigu sheegay in ay yeelanayaan guddoomiye, guddoomiye kuxigeen, iyo xoghaye ay xubnuhu iska dhex doortaan. Ma cadda awoodaha ay leeyihiin iyo habraaca doorashadooda toona. Sharcigu wuu ka aamusay qaab-dhismeedka kale ee Guddiga. Arrinta ugu muhiimsan ee uu sharcigu ka aamusay waa habka go'aan gaarista xubnaha Guddiga, halka xuquuqdoodana loo dib dhigay in sharci kale cayimo. Gaabiska ka jira sharciga waxa uu saameeyn taban ku reebayaa Guddiga oo aan awood buuxda u yeelanayn madax bannaani shaqo oo ay natiijo waxtar leh ka dhalato.

Sharciga shaqaalaha rayidku waxa uu leeyahay nuqsaan hoos u dhigaysa nidaamintiisa hannaanka shaqosiinta rayidka. Sharciga oo looga shidaal qaatay sharcigii 1980, waxaa la qoray 2006 iyada oo xilligaas ay dowladdu kumeel-gaar tahay. Hadda oo ay dowlad goboleedyo dhismeen, la qaatay Dastuurka kumeel-gaarka ah, la dhisay hay'ado, xafiisyo iyo guddiyo madaxbannaan. Waxaa loo baahanyahay hannaan sharciyeed cusub oo qaabeeya baahiyaha shaqaale ee hay'adahaas dowladda. Sharciga cusub ee shaqaaluhu waa in uu ka tarjumaa mabaadi'da guud ee cutubka 11 ee Dastuurka, jideeya mabaadi'da xiriirka nidaamka shaqada rayidka ee heerarka dowladda, jideeyaa hannaanka iyo habraacyada guud ee lagama maarmaanka u ah qaadasho loo simanyahay oo daahfuran.

## GUNAANAD IYO TALOOYIN

Hirgelinta maamul wanaagsan oo waara waxaa saldhig u ah dhisid nidaam dowladeed oo sal-adag oo ku fadhiya mabaadi'da cadaaladda, sinnaanta muwaadiniinta, daahfurnaat iyo isla-xisaabtan. Mabaadi'daas oo lagu qoray dhammaan sharciyada dalka oo uu Dastuurku ugu horreeyo, wali lama dhaqangelin waana mid ka mid ah sababaha ay noogu istaagi waysay dowlad dimuqraadi ah oo dhidibb0 adag ku taagan. Maamulka shaqada

dowladda iyo adeeg bixinta dowladdu waa wejiga ay dadweynuhu ka arkaan dowladnimada kana qiimeeyaan inta ay la egtahay in laysku halleyn karo iyo in kale. Shaqaalaha rayidka ee dowladdu waxa ay maamulaan badiba howlaha iyo adeegyada ay dowladdu qabato. Waxa ay faranyihiin in ay ku shaqeeyaan mabaadi'daas sare ku xusan balse haddii aysan iyagu ku imaan sidee ayay ugu dhaqmayaan?! Haddii aan qaadashadooda lagu saleyn baahida rasmiga ah ee hay'adaha dowladda, loo marin hannaan caddaalad ah, daahfuran, ku saleysan isu-qalmidda shaqada iyo qofka, maxaa laga filayaa iyaguna in ay ku soo kordhiyaan. Iskaba daa in ay horumar soo kordhiyaan e ma fulin karaan howlihii iyo adeegyadii dowladda (Mahad Wasuge, 2018). Shaqaalaha ku meeleeysan A iyo AY ee heer maamul waa boqolkiiba 49% ee shaqaalaha rayidka guud ahaan, halka farsama yaqaannada iyo shaqaalihii fulintu -darajooyinka B iyo F- ka yarihiin boqolkiiba 24%. (Warbixin Sanadeedka, 2022). Isuma dheellitirna baahiyaha shaqo ee hay'adaha dowladda iyo shaqaalaha ay haysato si kasta oo ay u tira badanyihiin maxaa yeelay markii horeba laguma shaqaaleeysiin qorshe iyo baahi jirtay.

Isla-xisaabtanka hay'adaha dowladda oo hooseeya mararka qaarna aanba jirin marka loo eego qaadashada shaqaaluhu waxa uu keenay in la caadeeysto dhaqanka ku tumashada sharciga ee aan laysaga daba imaaneyn. Maqnaashiyaha hay'ado muhiim u ah isla xisaabtanka sida Guddiga La-dagaallanka Musuqa, Guddiga Xuquuqda Aadanaha iyo Xafiiska Gardoonku waa mid kamid ah sababaha jiritaan la'aanta isla-xisaabtan dhaxalgal ah.

Dowrka dadweynaha iyo kaalinta bulshada rayidka oo aan muuqan ayaa ka mid ah sababaha in aysan dowladdu dhisin nidaam adeeg rayid oo wax-ku-ool ah. Haddii la waayo isla-xisaabtan hay'adaha dowladda dhexdooda ah, waa in la helaa la xisaabtanka bulshada si loo toosiyo nidaamka. In aan la adeegsan hay'adaha iyo habraacyada jira ee lagu sixi karo dal-daloollada nidaamka shaqada rayidka sida garsoorku waa gaabis dhanka bulshada xaggeeda ah.

Caqabadaha iyo cilladaha ka jira nidaamka adeegga rayidka ah ee dowladda oo sababa in aan shaqaalaha rayidka ee dowladda loo qaadan hab daahfuran oo caddaalad ah, ee lagu ogaaday diraasaddan iyo kuwa kale ee ay xigatayba, waxaan halkan ku soo jeedinayaa talooyinka soo socda.

## 1. Talooyinka Dowladda

Dowladda Federaalka Soomaaliya waxaan u soo jeedinayaa:-

- Dejin siyaasad guud oo mideysan ee adeegga rayidka ah ee dowladda. Sida dowladdu u dejisay siyaasadda guud ee shaqo abuurka qaranka, oo aan saameyn gaar ah ku lahayn shaqo abuurka dowladda, ayaa lagama maarmaan ka dhigaysa in la helo siyaasad mideysa aragtida hay'adaha dowladda ee nidaamka shaqaalaha rayidka ah, baahiyaha, heerarka iyo darajooyinka shaqada rayidka ah. Mabaadi'da lagu saleynayo qaadashada shaqaalaha rayidka oo waafaqsan Dastuurka. Siyaasaddani waxay hagis u ahaan lahayn sharciyada iyo xeerarka kala duwan ee dowladda.
- Dhismaha iyo madaxbannaaynta hay'adaha muhiimka u ah maamul wanaagga. In la dhiso Guddiga La-dagaallanka Musuqa, Guddiga Xuquuqda Aadanaha, oo labadaba sharciyadii lagu dhisi lahaa ay jiraan. Sidoo kale in la dhiso Xafiiska Gardoonka oo ah hay'ada dadweynaha ka ilaalisa xad-gudubyada saraakiisha dowladda. Guddiyadaani waxa ay kaalin muhiim ah ku leeyihiin sarreynta sharciga iyo la xisaabtanka masuuliyiinta hay'adaha dowladda iyo sixidda gefafka maamul iyo kuwa maaliyadeed.
- Dhismaha Golaha Adeegga Garsoorka iyo Golaha Adeegga Baarlamaanka. Si ay u suurtagasho kala madaxbannaanida iyo isla-xisaabtanka uu Dastuurku waajibiyay, waa in la dhisaa labadaas Guddi oo horumarka iyo jiritaanka Baarlamaanka iyo Garsoorku aysan la'aantood dhamays ahayn. Dhismahooda waxaa ka mid ah in sharciyadii ay ku shaqayn lahaayeena loo dejiyo.
- In dib-u-habeyn lagu suubiyo sharciyada shaqaalaha rayidka. Sharciyadaan oo duug ah ayna ka maqanyihiin qodobbo muhiim u ah hannaanka shaqaalaha rayidka, waxa ay u baahanyihiin in dib-u-habeyn lagu sameeyo. Sharciga lagu dhisay Guddiga Shaqaalaha Rayidku maaha mid suurtagelinaya madaxabannaani uu ku guto waajibaadka uu sharcigu saaray. Sidoo kale, sharciga shaqaaluhu ma la socon karo nidaamka cusub ee shaqaalaha Dowladda Federaalka. Labadaas sharciba waa inay ka tarjumaan mabaadi'da Dastuurka ee ku jirta cutubka 1aad iyo kan 11aad oo lagu daray siyaasad mideysan

oo Dowladda Federaalku ka leedahay nidaamka maamulka adeegga rayidka ah ee dowladda.

- In qaadashada shaqaalaha rayidka lagu saleeyo u-qalmid, tartan furan oo caddaalad ah. adeeg dowladeed oo hufan, waxtar leh, caddaalad ah waxaa keeni kara qof karti, aqoon iyo waayo-aragnimo u leh shaqada uu qabanayo isla markaasna ku yimid nidaam caddaalad ah oo daahfuran. Habraacyada ay dhigayaan sharciga iyo xeer-nidaamiyayaasha in la raaco waa lagama maarmaan. In dowladdu la xisaabtanto saraakiisha iyo masuuliyiinta oo haddii ay raaci waayaan sharciga la tiigsato nidaamka caddaaladda si tallaabada ku habboon looga qaado.

## 2. Talooyinka bulshada rayidka:

- In ay si xoog leh uga qaybqaataan helidda sharciyo adeegga rayidka ah oo wax-ku-ool ah. Ururrada bulshada rayidka gaar ahaan kuwooda ka shaqeeya cilmibaarista iyo aqoontu in ay baaris ku sameeyaan siyaasadaha iyo sharciyada shaqaalaha rayidka si ay dowladda uga siiyaan talooyin ku salaysan xog sugan oo lagu horumarinayo sharciyadaas.
- In ay dabagal iyo la xisaabtan ku sameeyaan hay'adaha dowladda heerka dhaqangelinta sharciyada shaqaalaha. Kaalinta ururrada bulshada rayidka ee ah in ay bulshada u iftiimiyaan gefafka hay'adaha iyo saraakiisha dowladda ee la xiriira dhaqangelinta sharciyada shaqaaluhu waa lagama maarmaan waayo waxa ay matalaan bulshada waana indhaha dadweynaha.
- In ay oogaan dacwadaha dantaguud ee lagu saxayo nidaamka shaqaalaha rayidka. Sida aan qaybe hore ku soo faahfaahinnay, qof ama koox dad ah ayaa oogi kara dacwadaha dantaguud oo lagu raadinayo danguud oo uu ka midyahay in lagu dhaqmo Dastuurka iyo sharciga, haddii xitaa aysan iyaga dangaar ah ugu jirin.
- In ay ka qaybqaataan wacyigelinta shacabka si uu kaalintiisa u ciyaaro. Aqoon darrida iyo waaya-aragnima yarida bulshadu waxa ay keentaa in aysan qaadan dowrkoodii la xisaabtanka dowladda si waxtar leh. Waxaa ka mid ah in aysan aqoon hannaanka sixitaanka xad-gudubyada soo gaara markii ay ka qaybgalaan fursadaha shaqada

rayidka ah. Barnaamijyo waxbarid iyo wacyigelin guud iyo kuwo xul ah oo qaybaha suuqa shaqada ee ay khuseeyso la siiyo.

## TIXRAACYADA

1. Ahmed, D. I. O., 2023. Hormuudka Kulliyadda Dhaqaalaha iyo Maamulka ee Jaamacadda Benadir [Interview] (23 November 2023).
2. Ali, D. A. A., 2023. garsoore Maxkamadda Sare ee Dalka [Interview] (3 December 2023).
3. Haji, D. M. A., 2023. Kuxigeenka Kaaliyaha Guddoomiyaha Jaamacadda Muqdisho [Interview] (23 November 2023).
4. Maxamed, X. A., 2023. Guddoomiyaha Guddiga Shaqaalaha Rayidka Dowladda [Interview] (25 November 2023).
5. Muxammed, C. C., 2023. Guddoomiyaha Guddiga Xulista KMG ee shaqaalaha garsoorka 2023 [Interview] (24 November 2023).
6. Omar, A. A. H., 2023. Qareen [Interview] (4 December 2023).
7. wareysi, 2023. xubin ka mid ah shaqaalaha rayidka ee Dowladda Federaalka [Interview] (25 November 2023).
8. Act of Union (1961). Somalia.
9. Ansixinta siyaasadda shaqo abuurka qaranka (2019) Office of the Prime Minister. Available at: https://opm.gov.so/golaha-wasiirrada-oo-ansixiyay-hindise-sharciyeedka-difaaca-qaranka-soomaaliyeed/ (Accessed: 28 November 2023).
10. Barber, L.L. (1966) 'The Revision of the Somali Civil Service', International Review of Administrative Sciences, 32(2)(c), pp. 134–144. Available at: https://doi.org/https://doi.org/10.1177/002085236603200205.
11. Civil Service Law (1962). Somalia.
12. Civil Service Law (1969). Somalia.
13. Civil Service Law (1970). Somalia.
14. Community, F.M. of I. and (no date) The federal public service. Available at: https://www.bmi.bund.de/EN/topics/administrative-reform/federal-public-service/federal-publi-service-node.html

(Accessed: 19 November 2023).

15. CPI 2022 for Sub-Saharan Africa: Corruption Compounding Multiple Crises (2023) Transparency International. Available at: https://www.transparency.org/en/news/cpi-2022-sub-saharan-africa-corruption-compounding-multiple-crises (Accessed: 7 December 2023).
16. Dastuurka Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya (1979). Somalia.
17. Dastuurka Soomaaliya (1960). Somalia.
18. Discrimination (Employment and Occupation) Convention (1958). ILO. Available at: https://www.ilo.org/dyn/normlex/en/f?p=NORMLEXPUB:12100:0::NO::P12100_Ilo_Code:C111.
19. Discrimination (Employment and Occupation) Recommendation (1958). International Labour Organization. Available at: https://www.ilo.org/dyn/normlex/en/f?p=NORMLEXPUB:12100:0::NO::P12100_ILO_CODE:R111.
20. Dominik Balthasar (2018) 'State Making in Somalia under Siyad Barre: Scrutinizing Historical Amnesia and Normative Bias', The International Journal of African Historical Studies, 51(1), pp. 141–162. Available at: https://www.jstor.org/stable/45176419%0D.
21. Employment Diagnostic: Somalia (2019). Mogadishu.
22. Federal Civil Servants Proclamation (2017). Available at: https://www.lawethiopia.com/images/federal_proclamation/proclamations_by_number/1064.pdf.
23. Feysal Osman (2018) The role of civil society in Somalia's reconstruction: achievements, challenges and opportunities, Saferworld. Available at: https://www.saferworld-global.org/resources/news-and-analysis/post/775-the-role-of-civil-society-in-somaliaas-reconstruction-achievements-challenges-and-opportunities (Accessed: 7 December 2023).
24. Florini, A. (2007) The right to know : transparency for an open world. New York: Columbia University Press.
25. Haji N. A. Noor Muhammad (1966) 'Judicial Review of Administrative Action in the Somali Republic', Journal of African Law, 10(1). Available

at: https://www.jstor.org/stable/745042.

26. Heshiiska Qaramada Midoobey ee La-dagaallanka Musuqa (2003). Available at: https://osagsomalia.com/media/documents/bulletins-contents/legislation/2020/38_Sharciga-Heshiiska-Qaramada-Midoobey-ee-la-dagaallanka-musuqmaasuqa.pdf.

27. Heshiiska Xuquuqda Dadka Naafada ah (2006). Golaha Guud ee Qaramada Midoobey. Available at: https://www.osagsomalia.com/media/documents/bulletins-contents/agreements/2019/Heshiiska_Cahdiga_Xuquuqda_Dadka_naafada_ah.pdf.

28. Ibrahim Mohamed Warsame (2023) Interference of Politicians in the Civil Servant Recruitment Process in Somalia, africanlegalstudies.blog. Available at: https://africanlegalstudies.blog/2023/11/10/interference-of-politicians-in-the-civil-servant-recruitment-process-in-somalia/ (Accessed: 3 December 2023).

29. ILO (2011) Achieving Equal Employment Opportunities for People with Disabilities through Legislation. Available at: https://www.ilo.org/wcmsp5/groups/public/---ed_emp/---ifp_skills/documents/instructionalmaterial/wcms_162169.pdf.

30. Lara Burger (2014) The Role of Somali Women in the Private Sector. Available at: https://www.undp.org/sites/g/files/zskgke326/files/migration/so/01790-Role-of-Somali-Women-in-Private-Sect-New.pdf.

31. Local Government Service Regulations (1973). Somalia.

32. Mahad Wasuge (2018) Reforming civil service in Somalia, Somali Public Agenda. Available at: https://somalipublicagenda.org/reforming-civil-service-in-somalia/ (Accessed: 8 December 2023).

33. Metz, H.C. (ed.) (1993) Somalia: A Country Study. 4th edn, Area handbook series. 4th edn. Washington: U.S Government Printing Office. Available at: https://tile.loc.gov/storage-services/master/frd/frdcstdy/so/somaliacountryst00metz_0/somaliacountryst00metz_0.pdf.

34. Mohamed, A.M. (2021) ‘Public Management Reform and its Effectiveness on Quality Public Service Delivery in Somalia’, Somali Studies: A Peer-Reviewed Academic Journal for Somali Studies,

6, pp. 142–159. Available at: https://mu.edu.so/wp-content/uploads/2022/05/SSJ_V6_Article_6.pdf.

35. Mohamed, O.O. (1976) 'Administrative Efficiency and Administrative Language in Somalia', The Somali Institute of Development Administration & Management, September. Available at: https://arcadia.sba.uniroma3.it/bitstream/2307/1553/1/Administrative efficiency and administrative language in Somalia.pdf.

36. Morten Egeberg, Åse Gornitzka, J.T. (2019) 'Merit-based recruitment boosts good governance: How do European Union agencies recruit their personnel?', International Review of Administrative Sciences, 85(2), pp. 247–263. Available at: https://doi.org/https://doi.org/10.1177/0020852317691342.

37. Murat Jashari, I.P. (2018) 'The Role of the Principle of Transparency and Accountability in Public Administration', ACTA UNIVERSITATIS DANUBIUS, 10(1). Available at: https://core.ac.uk/reader/229465497.

38. Mushtaque, D.T. et al. (2021) 'Merit-based recruitment and its impact on employees' performance: Empirical evidence from a public company of Pakistan', International Journal of Innovation, Creativity and Change, 15(4), pp. 1153–1165. Available at: https://www.ijicc.net/images/Vol_15/Iss_4/16261_Ali_2021_E1_R2.pdf.

39. Omar M. Mohamed (2010) Abdirizak H. Hussein: The Misunderstood PM, Hiiraan Online. Available at: https://www.hiiraan.com/op2/2010/jan/abdirizak_h_hussein_the_misunderstood_pm.aspx (Accessed: 27 November 2023).

40. Penal Code (1962). Somali Republic.

41. Population estimation survey 2014 for the 18 pre-war regions of Somalia (2014). Nairobi. Available at: https://somalia.un.org/sites/default/files/2020-02/Population-Estimation-Survey-of-Somalia-PESS-2013-2014.pdf.

42. Public Servants' Pension Proclamation (2011). Ethiopia. Available at: file:///C:/Users/hp/Downloads/F1842966247_ETH89586.pdf. https://wwwex.ilo.org/dyn/natlex2/natlex2/files/download/103971/ETH103971.pdf.

43. Samatar, A.I.S. and A.I. (2008) 'Somalis as Africa's First Democrats: Premier Abdirazak H. Hussein and President Aden A. Osman', Bildhaan: An International Journal of Somali Studies, 2, p. Article 4. Available at: https://doi.org/https://digitalcommons.macalester.edu/bildhaan/vol2/iss1/4.

44. Sharciga Dhisidda Golaha Adeegga Garsoorka (2014). Somalia.

45. Sharciga Dhismaha Guddiga Madaxa Bannaan ee Shaqaalaha Rayidka Dowladda (2006).

46. Sharciga Dhismaha Guddiga Madaxabannaan ee La-dagaallanka Musuq-maasuqa (2019). Somalia. Available at: https://osagsomalia.com/media/documents/bulletins-contents/legislation/2019/Sharciga_Dhismaha_Guddiyada_Madaxabannaan_ee_La_Dagaalanka_Musuq-maasuqa.pdf.

47. Sharciga Dhismaha Guddiga Madaxabannaan ee Xuquuqul Insaanka (2016). Somalia. Available at: https://osagsomalia.com/media/documents/bulletins-contents/legislation/2016/Sharciga_Dhismaha_Guddiga_Madaxa_Bannaan_Ee_Xuquuqul_Insaanka_N8Lq11s.pdf.

48. Sharciga Dhismaha Hay'adda Naafada Qaranka (2018). Somalia.

49. Sharciga Dhismaha Maxkamadda Dastuurka (2016). Somalia.

50. Sharciga Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda Soomaaliyeed (2023). Somalia.

51. Sharciga Shaqaalaha Dawladda (1980). Somalia.

52. Sharciga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda (2006). Somalia.

53. Sharciga Shaqaalaha Rayidka Dawladda (2006).

54. Sheekh Maxamuud Maxamed Cabdi (1984) Quraanka Kariimka iyo tarjamada macnihiisa ee afka Soomaaliga. Mogadishu. Available at: https://www.qurantranslations.net/quran/pdf/so_Quraanka_Kariimka_Iyo_Tarjamada_Macnihiisa_Ee_Afka_Soomaaliga.pdf.

55. Somali Cable (2023a) Guddiga ganacsiga golaha Shacabka oo kulan la xisaab ah ugu yeeray Wasiirka Ganacsiga Soomaaliya. Available at: https://www.youtube.com/watch?v=OoBbWZM_daA (Accessed: 3 December 2023).

56. Somali Cable (2023b) JAWAAB CUSUB:-"Ma jiro hal qof oo reerkeyga ah oo aan Wasaaradda ka shaqaaleysiiyay". Available at: https://www.youtube.com/watch?v=E3bL_i8obr4 (Accessed: 3 December 2023).

57. Somalia Total Population (2022) World Bank. Available at: https://data.worldbank.

org/indicator/SP.POP.TOTL?locations=SO (Accessed: 30 November 2023).

58. Stanley, M. (no date) What is a Civil Servant? Available at: https://www.civilservant.org.uk/information-definitions.html (Accessed: 18 November 2023).

59. Statistics, S.N.B. of (2021) Labour Froce Survey Report 2019. Mogadishu. Available at: https://www.ilo.org/surveyLib/index.php/catalog/8139/related-materials.

60. The Central Bank of Somalia Act (2012). Somalia.

61. The Ministry of Planning, I. and E.D. (2020) Somalia National Development Plan (2020-2024). Available at: https://mop.gov.so/somali-national-development-plan-9-2020-2024/.

62. U-shaqeynta Dawladda oo lala xiriiriyey qorista Afka Qaranka (1972). Somalia.

63. U.S, F.G. (1926) Civil service; armed forces; uniformed services. United States of America. Available at: https://www.law.cornell.edu/uscode/text/5/2101.

64. Universal Periodic Review – The Somali Republic (2010). Available at: https://www.ohchr.org/sites/default/files/lib-docs/HRBodies/UPR/Documents/Session11/SO/OD_OpenDoors-eng.pdf.

65. Warbixin Sanadeedka (2022). Mogadishu.

66. Xeer-nidaamiyaha Shaqo Qorista Shaqaalaha Rayidka (2021).

67. Xeer Nidaamiyayaasha Maamulka Shaqaalaha Rayidka Dowladda (2021). Somalia.

.٨٦ 1979 ) الخدمة المدنية ) Kuwait. Available at: https://mesferlaw.com/wp-content/uploads/2023/07/jpg2pdf-2023-07-08T015315.141-1.pdf.

.٩٦ 6102) قانون الخدمة المدنية). Egypt. Available at: https://manshurat.org/node/13128.

.٠٧ 7002) قانون الخدمة المدنية القومية). Sudan. Available at: https://nmsf.gov.sd/assets/content/civilService2007.pdf.

.١٧ 0691)قانون الخدمة المدنية). Iraq. Available at: https://www.oil.gov.iq/upload/3380519471.pdf.

*****DHAMMAAD*****

# 5

# HANNAANKA BAARISTA DENBIYAD MAALIYADEED (FINANCIAL CRIMES INVESTIGATION)

GARSORE: CALI SH.AADAN YUSUF (CALI SOMALI)

LLB, LLM in Puplic law

# TUSMO

ERAY BIXIN: . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 150

1. . . BAARISTA DENBIYADA (CRIMINAL INVESTIGATION) . . . . . . . . . 151

2. . . DAMBIYADDA MAALIYADDA: . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 156

3. . . JAANTUSKA DACWADAHA DAMBIYADDA MAALIYADDA EE GARSOORKA YIMID 2022-2023: . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 166

4. . . HAY'ADAHA BAARISTA DAMBIYADDA MAALIYADDA IYO KAALINTOODA: . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 169

5. . . XEERARKA IYO SIYAASADAHA DOWLADDA EE DEMIYADDA MAALIYADDA: . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 174

6. . . CADAYMAHA DAMBIYADDA MAALIYADDA: . . . . . . . . . . . . . . . . . 186

7. . . DUL-DULEEDA SHARCI IYO KUWA DHAQAN-GALIN EE LA XARIIRA LA DAGALAANKA DAMBIYADDA MAALIYADDA: . . . . . . . . . . . . . . . . . 193

8. . . SOO JEEDINO: . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 196

## ERAY BIXIN:

Erayada gaagaaban ee ku jira habraacan waxaa loola jeedaa sidaan: -

A. **XCS**: Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed, X.L. 5 ee 16 Decemper 1962-dii ee dhaqan-galay, 3 apriil 1964.

**B.** **XHCS**: Xeerka Habka Ciqaabta Soomaaliyeed, X.L. 1 ee 1 juun 1963.

**C.** **AML**: Anti-Money Laundering

**D.** **CFT:** Counter-terrorism financing

**E.** **TF**: terrorism financing

**F.** **NRA:** National risk assessment.

**G.** **FATF:** Financial Action Task Force

**H.** **MENAFTF**: Middle East and North Africa

**I.** **FSRB:** Fatf style regional body

**J.** **UNSCR:** United Nations Security Council resolution.

**K.** **CDD:** Customer Due Diligence.

**L.** **EDD**: Enhanced Due Diligence

**M.** **SDD:** Simplified Due Diligence

**N.** **FIU:** Financial intelligence Unite

**O.** **FRC:** Financial Report Center.

**P.** **KYC:** know your customer

**Q.** **KYE:** Know your employee

**R.** **STR:** Suspicious transaction report.

**S.** **LCTR**: Large cash Transaction report.

**T.** **XGQ:** Xeer-ilaaliyaha guud ee Qaran

**U.** **XHG**: Xafiiska Hanti-dhowrka guud

V. **FFIU**: Foreign Financial Intelligence Unite

W. **GDP:** Gross domestic product

X. **LEA**: Law enforcement agencies

Y. **NID:** National identification.

Z. **NPOS:** Non profite Organisations.

# 1. BAARISTA DENBIYADA (CRIMINAL INVESTIGATION)

## 1.1. Hordhac:

Bulsho kasta oo meel ku nool waxaa dabiici in ay dhexdooda ka dhacaan denbiyo kala duwan, denbiyadaasi marka ay dhacaan waxaa loo maarayn jirey habab kala duwan. Inta badan wakhtiyadii hore baaritaanka denbiga waxaa loo mari jiray habab khurafaad u badan iyo in qofka looga shakiyo in denbiga gaytsya la garaaco ilaa inta uu ka qiranayo denbiga.

Dambiyada waxay la socdaan bulshada iyo hadba hormarka ay gaarto, Dalalkana waxay ku kala duwanyihiin hadba dhaqanka, Diinta, qiyamka, deegaanka iyo hormarka, sidaas darteed dambiyada ka dhaca dalalka hormaray kama dhacaan ama kuma badna dalalka ay tignooloojiyadda ku yartahay.

Maaliyadda waa laf dhabarka hormarka bulshooyinka iyo dowladaha waxaana waajib ah in laga ilaaliyo dambiyadda ka dhanka ah. Dabeecadda dambiyada iyo u jeedada loo galo dambiga waa ay kala duwantahay, sidaas darteed baaristooda iyo cadaymahooda waxay leeyihiin dabeecado gaar ah, waxaana kala duwan ilaha xogtooda iyo hababka la isticmaalo.

Baarista denbiyada, waxaa ka horreysa in denbi dhaco, ama la helo xog sheegeysa in denbi dhacay. Markaas kadib ayaa la bilaabaa baarista denbiga, si Maxkamad loogu gudbiyo qofka geystay denbiga marka la baaro kadib cadaymo ku filanna oo Maxkamad lagu horgeyn karona la helo, sidaa darteed, waxaa marka hore ka hadli doonaa xogta denbiga, iyo siyaabaha lagu ogaado in dambi maaliyadeed dhacay, inaga oo ku salayn donna Xeerarka dalka.

## 1.2. Habraac loo maray Cilmi-baarista:

Cilmibaaristaan waxaa loo maray darsidda Qoraallo ay ku jiraan Xeerarka Dalka, Heshiisyo Caalami ah, Warbixinno Dowladeed iyo diraasaad Cilmiyeed iyada oo la isticmaalayo hal-beegga falan-qaynta Qodobka iyo til-maamidda "descriptive analytical method", waxa uuna Qoraagu gaaray Natiijo ah, in Xeerarka Dambiyada Maaliyadda Soomaaliya aysan u diyaar-sanayn ka jawaabidda iyo xalinta fal-dambiyeedyada maaliyadda ee casriga ah aysana buuxin halbeegyada Caalamiga ah ee ku xusan soo jeedeeinada FATF iyo Heshiisyada UN, ayna muhiim tahay in la sameeyo wax-kabaddello wax- ku ool ah si laga fakaro xalal Xeereed fog oo ku dhisan odorasidda Mushkiladaha iyo la jaan-qaadida dunida.

### 1.3. Ilaha xogta Denbiga Maaliyadeed: (Sources of Information of financial Crime)

- **Warbixinta Denbiga ee Saraakhiisa dowladda/ Law inforcement and government agencies:**

Sarkaal kasta oo ka tirasan shaqaalaha dowladda ama qof walba oo u xilsaaran shaqo guud, isla markaana ogaadda in denbi maaliyadeed dhacay, denbigaasina uu yahay denbiyada uu qaranku dhaqaajiyo [(1)], waxaa ku waajib ah in uu sida ugu dhakhsaha badan ugu gudbiyaa Hay'adaha u xilsaaran [(2)].

---

1 ) dhaqaajinta dacwadaha ciqaabta ah, waxaa loo dhaqaajiyaa laba qaybood:

1. **Qaybta kowaad** waxaa la dhaqaajiyaa marka qofka dhibanaha ahi uu soo cabto, haddii uusan soo caban Xafiiska Xeer Ilaalinta iyo Booliska uma banana in ay baaraan isla markaana ay u gudbiyaan Maxkamadda. Waana denbiyo kooban. Tusaale waxaa ka mid ah Denbiga Amaana Lunsiga eek u xusan Qod: 502 Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed.
2. **Qaybta Labaad** waxaa la dhaqaajin karaa xili kasta, waa denbiyada ka soo hara kuwa lagu dhaqaajiyo Cabashada Dhibanaha. Xafiiska Xeer Ilaaliyaha ayaa dhaqaajin kara xataa haddii qofka dhibanaha ahi uu ka tanaasulo isagu.

2 ) Qod:18 Xeerka Habka Ciqaabta Soomaaliyeed.

Sarkaal Guud : waxaa loola jeedaa:

1. **Sarkaal Guud**: "Qofkasta oo si joogto ah ama si ku meel-gaar ah u qabta shaqo

- **Warbixinta Denbiga ee Xirfadlayaasha Hay'adaha maaliyadda:**

Sida uu waajibanayo Xeerka AML/CTF waxaa saran saraakiisha Hay'adaha maaliyadda sida Bangigiyada iyo Hay'adaha maaliyadeed ee Bangiyada ahayn marka ay helaan wax-yaabaha muujiyo shakiga (red flags) in ay la wadaagaan Hay'adda warbixinada Maaliyadda oo iyada u gudbin doonta Xafiiska XXGQ, waxaa kamid ah waxyaabah la war-galinayo dhaq-dhaqaaqyada maaliyadeed ee laga shakisanyahay (STR) iyo dhaq-dhaqaayada lacagaha cadaanka ah ee waaweyn (LCTR) iyo xisaabaadka aan lahayn xogta laga rabay [3].

- **Warbixinta Denbiga ee Hay'adaha warbixinada maaliyadeed ajnabiga:**

Hay'adaha warbixinada maaliyad (FFIU) waxaa saran waajib sida ku cad soo jeedinada FATF iyo Xeerarka Caalamiga ah, kuna cad Xeerarka gudaha ee dalka [4] waxaa ka dhaxeeya iskaashi qaanuuneed, sidaas darted maadama dambiyada maaliyadda ay kasoo bilaaban karaan ama ku dhamaan karaan dalal kale, waxaa laga heli karaa xogta dambi maaliyadeed Hay'adaha sirta

---

guud, shaqadaasi ha ahaato mid xeer-dejin, Maamul ama Garsoor, ama ha u qabto maslaxadda Dowladda ama Hay'adeheeda kala duwan, shaqadaas ha ku qaato Mushahar, Gunno, Abaalgud ama ha u qabto qaab tabaruc ah, ama waajib saaran dartii.

2. **Qofka u xilsaaran hawl guud**: " waxaa loola jeedaa: "Qofkasta oo aan ahayn sarkaalka guud ee lagu sheegay faqrada hore ee qodobkan oo si joogto ah ama si waqtiyaysan, isaga oo mushahar ama gunno ama abaalgud qaadanaya ama gudanaya waajibaad saaran, oo uu qaranku ama hay'adihiisa dawladeed u xilsaareen gudashada hawl dan guud ah".

3. **Qof fulinaya hawl baahi guud**: waxaa loola jeedaa: "Qofkasta oo rayida ah oo ku shaqaysanaya Xirfad sharci ama caafimaad ama mihnadkasta oo kale oo ku shaqaysigeeda uu sharcigu ku xiray heer aqooneed oo cayiman ama gudanaya hawl la cadeeyay in ay baahi guud tahay". Qod: 240 Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed.

3 Q. 14aad ee Xeerka lacag-dhaqista iyo maal-galinta argagixisada, Xeer Lr 01/21/02/2016.

4 Qeybta sideedaad ee Xeerka AML/CFT- tix-raac hore.

maaliyadeed ee Ajnabiga [5]

- **Warbixinada Hay'adaha ajnabiga ah ee aan maaliyadda ahayn/ Foreign Non FIU entities:**

Hay'adaha ajnabiga ah ee aan kuwa warbixinada maaliyeed ahayn sida Bangigayada, Ururada, kuwa la dagaalamo maan-dooriyaha, kuwa cuna-qabaynta cayiman, kuwa ka hortaga musuqa waxa ay keeni karaan xog maaliyadeed oo ka dhacda wadanka gudahiisa oo ay iyaga hayaan, sidaasna waxaa ku billaaban karo baaris dambi maaliyadeed [6]

- **Warbixinta Qabashada Qul-qulka cadaanka ee gudaha ama dibadda /Cross border cash/ local:**

Waxaa laga helaa xog dambi qabashada lacagaha cadaanka ee aan wadan cadaymaha kana badan xaddiga la ogalyahay oo laga qabto gudaha ama xaduudaha, taas oo ah bilowga dambi maaliyadeed [7].

- **Cabashada dhibanaha:** Qof kasta oo dhibane u ah denbi, denbiguna yahay kuwa aan Qaranku dhaqaajin, ee lagu dhaqaajiyo Ashtakada dhibanaha, waxa uu u soo gudbin karaa denbiga dhacay Hay'adaha ku shaqada leh [8].
- **Baarista Hanti-dhowrka:** Hanti-dhowrku waxa uu sameeyaa baaritaan la xariiro dakhliga iyo kharashaadka Dowladda si sanadle ah, waxa kale ee uu sameeyaa baarisyo gaar ah oo la xariira mashaariic, deeqo imw iyo baaritaan ku dhaqan-ka shuruucda maaliyadaha, waxa uuna ku ogaan karaa baaristiisa fal-dambiyeedyo maaliyadeed, una soo gudbin karaa XGQ sidaasna ay ku billaaban karto dambi maaliyadeed [9].

---

5 State of the Economy report, an annual report to the president by the National economic council on economic issues shaping Somalia's future prosperity, National Economic Council, November 2023-Volume-1.

6 State of the Economy report, tix-raac hore.

7 Qodobka 18aad ee AML/CFT –tixraac hore.

8 ) Qod: 21 Xeerka Habka Ciqaabta Soomaaliyeed.

9 Qodobka 5aad ee xeerka Xafiiska Hantidhowrka, Sh lr 14 soo baxay 10 septeeber 2023.

- **Warbixinta Hay'adaha Xirfadaha/ Reporting entity:**

Hay'adaha xirfadlayaasha madax-banaan sida Nootaayooyinka, Qareenada, Xisaabiyaasha imw waxuu sharci AML/CTF saaray masuuliyad warbixineed, waxayna kamid yihiin ilaha laga helo xog dambi maaliyadeed [10]

- **Ilaha furan/ Open sources:**

Ilaha furan waa hab xuuraan ah oo loogu helo xog dambi oo ay keenaan ilahaas, waxayna noqon karaan Shaqsiyaad caadi ah iyo kuwo kale, waxay noqon karaa warbaahinta qeybaheeda kala duwan, waxaana badanaa isticmaalo Hay'adaha sirdoonka.

## 1.4. Baarista Denbiyada

**Kow: Qeexidda Baarista Denbiyada:**

Ereyga "**Baaritaan**" Soomaali ahaan waa raadinta wax qarsoon[11]. Ereyga Englishaka ee "Investigation" asalkiisu waxa uu ka yimi ereyga "Vestigar" oo ah erey Laatiin ah, oo macnihiisu yahay dabagal [12].

**Baarista denbiyadu** "waa ururinta xog iyo cadaymo si loo ogaado denbiilayaasha lagu tuhunsan yahay in ay geysteen denbi, kadibna la soo qabto, loona maxkamadeeyo, denbiga ay galeena loogu xukumo [13].

**Labo: Ujeedooyinka Baarista:**

Ujeedooyinka Baarista denbiyada, waa

---

10 Q. 4aad ee Xeerka AML/CFT- tix-raac hore.

11 ) Qaamuuska Afka Soomaaliga, diyaarintii Annarita Puglielli iyo Cabdalla Cumar Mansuur, Daabacaadii RomaTrE-Press 2012 Bogga 50.

12 ) Criminal Investigation, Ninth edition, Kären M. Hess, Ph.D. Christine Hess Orthmann, M.S. Daabacaadda Delmar Cengage Learing, 2010. Bage 6.

13 ) FINANCIAL INVESTIGATIONS "Addressing Financial Gains Amassed through Illegal Means in Africa" INSTITUTE FOR SECURITY STUDIES ENHANCING AFRICA'S REPONSE TO TRANSNATIONAL ORGANISED CRIME (ENACT), Bage 24.

1. **Cadaynta in Denbi Dhacay:** Marka qofka baaraha ah ay soo gaarto warbixinta denbi, waxa ugu horeeya ee ay tahay in uu ogaado, waa in uu cadeeyo in ay xaqiiq tahay in denbi dhacay.

2. **Cadaynta cidda dambigaas gashay:** Baaraha marka ugu horreyso oo uu helo xogta dambiga waxuu ka fakarayaa sidii uu dambigaas ula xariirin lahaa cidda gashay, waxa uuna xooga saarayaa cadaymaha isku xiraayo dambiga iyo Qofka dambiga galay. Dambiilaha in la ogaado waa hadafka ugu weyn ee barista.

## 2. DAMBIYADDA MAALIYADDA:

Dambiyada lidka ku ah maaliyadda waa dambiyo leh dabeecado gaar ah, mana aha tiro kooban. Dalalka way ku kala duwanyihiin dambiyada maaliyadda, sababtoo ah dambiyada maaliyadda waa kuwo la socdo Hormarka Tignoolajiyadda iyo dhaqaalaha, sidaas darteed dalalka horumaray waxaa ka dhaca dambiyo la xiira internetka, Cyber Crime iyo kuwa la xariira xuquuqda maskaxeed (**Intellectual property**) sidaas darteed dambiyada waxay la socdaan hadba kobaca Science-ka, sidaas darteed maadaama ay dalalka ku kala duwanyihiin dambiyada waxaa qasab ah in ay ku kala duwanyihiin waxa dambi loo aqoonsanayo iyo siyaasadaha. In kasta oo ay jirto arrinkaas hadana waxaa jiro dambiyo caalami ah oo dunida kawada dhaca haba kala duwanaadaan siyaasaba iyo farsamooyinku.

Qoraalkaan waxaan dul-mar ku samayn doonaa Dambiyada Maaliyadda la xariiro ee Xeerka Ciqaabta guud iyo kuwa gaar ah ay til-maameen, inaga oo is dul-taagi doona kuwa ku cusub Dalka.

Xeerka Ciqaabta waxuu sheegay fal-dambiyeeyo la xariiro maaliyadda waxaana kamid ah:

### 2.1. Tuugo/ Theft ( 480 XCS):

Waa fal loo galo si faa’iido qaldan loo qaato ama cid kale loo qaado (wrong full gain) Hanti guurta ah oo cid kale. Sida uu qorey Qoraaga reer Mareykan Martin 1969 ee sharaxayey XCS, tuugada waa mid kamid ah

dambiyada ugu badan ee ka dhaca Soomaaliya[14], waxay leedahay saddex tiir oo kala ah:

- In Hantida laga wareejiyo booskeeda si qaldan (purpose of dreiving wrong full gain).
- In waxa la qaatay tahay Hanti guurta ah (Takes movable property of another).
- In Hantida booskeeda laga qaado (by depriving him of the possession there of).

Tuugada waa mid kamid ah dambiyada lidka ku ah dhaqaalaha ee soo jireenka ah, walina ah number culus sida aan ku muujin doona tira-koobka, waana mid kamid ah ilaha loo isticmaalo Hantida laga qaado lacag dhaqis.

### 2.2. Dhac/ Robbery ( 484 XCS):

Dhaca asal ahaan waa tuuganimo loo isticmaalayey awood ama handadaad, sidaas darteed waa fal ka kooban tuugo iyo khatar (Theft and Threat) tiirar ahaan waxa ay la wadaagtaa tuugada waxa dheeraad ku ah in awood lagu qaatay ama handadaad. Dhaca ama burcadnimada waa fal-dambiyeed lid ku ah Hantida sidoo kale waxa khatar-galiyaa amniga guud, waana mid kamid ah fal-dambiyeedyada Maaliyadeed ee ugu badan. Hantida lagu helay dhaca waa mid kamid ah ilaha loo isticmaali lacag dhaqis iyo dambiyo kale.

### 2.3. Amaano lunsi/ misappropriation ( 502 XCS):

Amaano lusni si qaldan uu qof u isticmaalo am acid kale uga faa'iideyo Hanti cid kale oo uu ku hayey jago nooc kasta ay tahay, waana mid kamid ah dambiyad lidka ku ah dhaqaalaha.

### 2.4. Taruufo/ Cheating ( 496 XCS):

Taruufada waa qeyb kamid ah (**Fraud**) lana xariirto Hantida, waa mid kamid ah dambiyada ugu badan ee lidka ku ah dhaqaalaha ee Dalka ka

14 Buugga the penal code of the Somalia Democratic Repuplic wthi cases, commentary and examples by Martin R. Ganzglass bogga 545, daabacaadda Rutgers University press, new Brunswick, New Jesrsey.

dhaca, waana mid ay fududahay galidiisa ayna ku lunto Malaayiin Doollar. Khiyaanada waa in Qofka lagu hogaamiyo in uu aamino wax aan jirin sidaasna looga lunsado Hanti sida in wax loo maal-galino oo ay jiraan Mashaariic sidaasna looga qaado Hanti. Hantida lagu helo khiyaanada waa mid kamid ah ilaha loo adeegsado lacag-dhaqis iyo dambiyo kale.

### 2.5. Lunsi Hanti-dadwayne/ Peculation ( 241 XCS):

Lunsi Hanti-dadwayne ama booli-qaran waa mid kamid ah dambiyada maaliyadda ee lidka ku ah hantida ee ay galaan saraakiisha Dowladda. XC waxa uu ku daray lunsiga Hantida dadwaynaha dambiyada ay galaan Saraakiisha guud maadama ay shardi tahay Sarkaalka galaya falkaan in lagu aaminay adeeg guud. Si loo cadeeyo dambigaan waxaa shardi ah in la sugo in Hantida lacagta ah ama guurtada kale ee la qaatay ay leedahay Dowladda, Sarkaalka guudna ay ahayd shaqadiisa in uu maamulo Hantidaas la qaatay iyo in si gaar ah uu sarkaalka guud ugu tasarufay am acid kale u siiyey.

### 2.6. Laaluush qaadasho /Bribery (245 XCS):

Laaluush qaadashada waa mid kamid ah dambiyada lidka ku ah dhaqaalaha ee ay sameeyaan saraakiisha Dowladda ee haayo shaqo guud, waa fal-dambiyeed u adeega lacag-dhaqidda.

### 2.7. Canshuur la fakasho/ Tax evasion:

Canshuurta waa waxa dowladda ay ku qabato adeegyada Bulshada, waana wax aanan fadhin oo hadba isla badalo qiimaha iyo sicirka. Sida ku cad Q. 42aad faqradiisa 2aad xarafka "I" ee DKMG-JFS waajibaadka muwaadinka ayey kamid tahay canshuur bixinta haddii uu kasoo bixi waayana waxaa ka dhalanayo in lagula xisaabtamo.

Canshuur la-fakashada sababha keeno iyo hababka loo isticmaalo waxaa ka faalooda Culimada dhaqaalaha maadaama ay mushkilada tahay canshuurta lafteeda, waxaana jiro habab sharci sida ka faa'ideysiga canshuur dhaafka iyo cafisyada ama hibeynta hantida shirkadda si looga fakado canshuurta tarikada am aka faa'ideysiga qiima-dhimista maal-gashiga iyo kuwa aan sharci ahayn oo looga faa'ideysto canshuur lafakashada sida dhimista

tirada ama qarinta nooca hantuida [15] balse waxaa muhiim ah in aan tilmaamo in canshuur la fakashada ay tahay fal-dambiyeed isla-markaasna il u ah lacag-dhaqidda.

### 2.8. Dhoofinta & Ka ganacsiga Maan-dooriyaha/ Drug Trafficking (342, 416):

Mid kamid ah dambiyada caalamiga ah iyo ganacsi sharci-darro ah dhibaato wayne ku ah dunida, aadna usii kordhayaa Qul-qulkiisa [16]. Hantida maan-dooriyaha laga helo waa isha ugu muhiimsan ee lacag-dhaqista waana dambigii ugu horreyey ee lagu baraarugay xariirka uu la leeyahay lacag-dhaqista.

### 2.9. Khiyaano/ Fraud (334- 336 XCS) :

Khiyaanada waa mid kamid ah dambiyada dhaqaalaha kuwa ugu halista badan meelo badan galo, loona galo habab kala duwan. Qodobadaan waxay ka hadlayaan khiyaanada ka dhanka ah nabad-galyada guud sida wasaqeynta Biyaha iyo cuntada iyo faafinta cudurada, Khiyaanada waa mid u adeego lacag-dhaqista.

### 2.10. Dambiyada lidka ku ah Dhaqaalaha guud iyo wax-soosaarka / Crimes against National Economy (387-391 XCS):

Dambiyadan waxay lid ku yihiin wax-soosaarka dhaqaale sida ku ciyaarista suuqa, faafinta cudurada xayawaanka iyo baab'inta wax-soosaarka, kuwaas ka dhigayo dhaqaalaha mid aanan fadhin.

### 2.11. Lacag-dhaqidda iyo Maal-galinta argagixisadda/ ML:

Lacag dhaqidda waxaa lagu tiriyaa mid kamid ah dambiyada curyaamiyey dhaqaalaha adduunka, warbixinta Hay'adaha Qaramada midoobey ee la xariirta lacag dhaqista waxaa lagu sheegay in cel-celis lacagaha dhaqo sannadkii ay u dhaxeeyaan 2-5 % ee korarka Golobal GDP taas u dhiganta **1.6** ilaa **4 Trillion** sanadkii [17].

---

15 التهرب الضريبي، فضيلة عائية، رسالة ماجستير.

16 World Drug report 2023, UNODC.

17 Weeks-Brown, Rhoda. "Cleaning Up: Countries are advancing efforts to stop criminals

Warbixinta Qiimeynta qataraha Soomaaliyeed (**NRA**) ee ML/TF ay ay sameystay Hay'adda warbixinada Maaliyadeed FRC 2020, 20222 waxaa lagu shegay in heerka lacag dhaqista Soomaaliya ay tahay mid aad u sarreeya (High) [18].

Taariikh ahaan si cad looma yaqaano markii ugu horreysay ee uu dhacay fal-lacag dhaqid ah, waxaa la sheegaa meelo badan oo loo celiyo sida Shiineyskii hore ee qarin jirey Hantida, Burcad-badeedka imw balse waxaa la isku raacsanyahay in lacag-dhaqis tahay mid kamid ah dambiyada halista ee dunida gadaal ka ogaatay.

Lacag dhaqista waxaa lagu qeexi karaa siyaabo badan balse sida ugu kooban waa: **Qarinta ilaha Hanti si sharci-darro ah lagu helay si loogu ekeysiiyo mid sharci ah [19]**.

## I. Xeerka AML/TF ee Soomaaliya ee soo baxay 2016 waxuu ku qeexay:

Qof ama hay'ad kasta waxay gelayaan dembiga lacag dhaqidda hadduu qofka ama hay'addu, kaaliyaan qof ama hay'ad kale oo ku jira fal dambiyeedkan in uu ka baxsado raadka falkaa, haddii:

1. Uu ogyahay ama ogaado in maalgelin ama hanti ay tahay ama qayb ka tahay hanti laga dheefay dembi qofka ama hay'addu galeen:

    a. Uu beddelo, qariyo, raadtiro ama xawilo malgelinta ama hantida,

    b. Uu qariyo ama raadtiro asalka sharci-darrada ah ee maalgelinta ama hantida, ama

    c. Uu helo, isticmaalo ama uu gacanta ku dhigo dhaqaalaha ama hantida.

2. Ka qayb qaato, fal lala xiriirin karo gelidda, ama isku dayga, gacansiinta, gargaarka, fududaynta ama kula taliya qof in uu galo mid ka mid ah falalka kor ku xusan.

---

from laundering their trillions." *Finance & Development*, vol. 55, no. 4, Dec. 2018.

18 NRA on ML/TF 2020, 2022.

19 Certified anti-money laundering specialist study guide, version 6.48, ACAMS.

3. **Galo dembi hodmid sharci darro ah** islamarkaana hantiya, haysta, beddela, qariya, daboola, isticmaala ama xawila lacag lagu helay sifo sharci darro ah ama asalkadhaqaalaha ama hantidu sharci darro yahay (naftiisa u dhaqid lacag).

## II. Ilaha lacag dhaqidda:

Lacag dhaqidda waa lacag lagu helay sifo sharci-darro ah (**illegal activities**) oo la rabo in la qariyo ilahaas, waxa ay ka yimaadaan waxa loo yaqaano dambiga asalka ah (**Predicate crimes**) sidaas darteed waa in marka hore uu dhacaa dambi hore.

Fiqhiga waxa uu ka doodaa sida loo xadidi karo dambiga ilaa saddex arragti balse heshiisyada Caalamiga ah ee kala duwan waxaa ku jirto wadar dambiya ah oo la isku raacsanyahay in ay yihiin ilaha lacag-dhaqista ama dambiga hore oo ay tahay in la cadeeyo ka hor lacag-dhaqista waxaana kamid ah, **dambiyada abaabulan, dhoofinta maandooriyaha, Tuugada, dhaca, laaluusha, musuqa, tahriibinta iyo ka ganacsiga dadka, canshuur la fakashada, khiyaanada canshuurta, af-duubka, soo galida sharci-darrada, ka ganacsiga iyo haysashaa hubka sharci-darrada ah imw.**

Taariikh ahaan waxay soo martay marxalado badan lacag-dhaqista balse hadda waxaa la isku raacsanyahay saddex-marxalo oo muhii ah kuwaas oo kala ah:

- **Marxaladda koowaad: Meelaynta (Placement):**

Marxaladaan waa midda ugu adag sababtoo ah waa marka koowaad ee qofka lacag-dhaqaha ah uu rabo in uu lacagta dhigo Hay'adaha dhaqaalaha, marxalaadaan waxaa la sameeyaa si loo dhigo lacagta sharci-darrada ah isku dubaridka lacagaha ama isku dhafka sida in lacagta sharci-darrada ahayd la galiyo maqaayada ama la qaato amaahda dib u bixinta (muraabaxo micro-finance ) ama sarifka lacaga qalaad iyo in lacagtii loo qaybiyo xaddiyo ay fududahay in la dhigo si looga fogaado shuruudaha warbixinta (Threshold), loona xareeyo lacagta sharci-darrada ahayd [20].

- **Marxaladda labaad: lakabaynta ama Nidaaminta (leyering):**

20 Certified anti-money laundering specialist study guide tix-raac hore.

Marxaladaan waa abuuridda lakabyo adag si loo raad-tiro lacagahii la dhaqay sida xawiladda lacagaha ama u dirida Hay'ad kale oo maaliyadeed ama xisaab kale, maal-gashiga Hanti maguurta ah (**real estate**) ama gancsi imw [21].

Marxaladaan waxaa adeegsadaa waxa loo yaqaano Shirkadaha Qolofka (**Shell companies**) si loo qariyo mulkilaha faa'iidada ugu weyn ama hantida (**Ultmate beneficial owner**).

- **Marxaladda saddexaad: dhex-galinta dhaqaalaha (Integration):**

Marxalada saddexaad waa isticmaalka lacagtii la dhaqay oo u muuqato wax-kala badalasho caadi ah, marxaladaan aad ayey u adagtahay in lakal saaro lacagaha sharciga ah iyo kuwa kale, wayna adagtahay in la aqoonsado [22].

## III. Masuuliyadda Hay'adaha maaliyadda ee ka hortaga marxaladaha hore:

Hay'adaha maaliyadda waa meesha ugu horreyso oo la keenayo lacagta sharci-darrada waxaana saran masuuliyad caalami ah iyo mid gudaha ah in ay qaadaan tallaabooyin ka hortag ah ee ku jiro Xeerka AML/CTF iyo soo jeeedinada FATF.

Hay'adaha maaliyadda waxa ay masuuliyad ka saarantahay marka koowaad in ay yaqaanaan macmilkooda waxa loo yaqaano (**KYC**) oo laga wado in macmiilka uu buuxiyo xog dhameystiran oo ay ku jirto ilaha daqliga islamarkaasna ay la socdaan dhaq-dhaqaaqiisa, sidoo kale ay u tababaranyihiin  shaqaalaha hore, qeybta Complience iyo Hanti-dhowrka gudaha (Internal Audite) uuna la socdo shaqaalihiisa (**KYE**).

Sidoo kale ay sameeyaan baaris iyo xog raadin la xariirta Macmiilka ee loo layaqaano Customer dua diligence (**CDD**) taas oo ah in la baaro khataraha, Dukumiintiyada iyo xogaha iyada oo la marayo labada hab **SCDD** (Simple Customer dua diligence) iyo Enhanced Customer dua diligence (**ECDD**) iyaga oo si xoog leh u baarayo iliha Hantida, dukumiintiya dheeraad ahna warsanayo, sidoo kalana Hay'adaha maaliyadda waa in ay baaraan Liisaska

21 Certified anti-money laundering specialist study guide tix-raac hore.

22 Certified anti-money laundering specialist study guide tix-raac hore.

cunaqataynada cayiman (**Monitoring targeted Sanction screening**) ay soo saaraan **UNCC, EU, OFAC**.

Sida ku cad Q. 4aad faqrada 1aad iyo Q 14/1C ee Xeerka AML/CFT 2016 (23) Hay'adaha ku waajibinayaa in ay war-galiyaan Hay'adda warbixinada Maaliyadda FRC dhaq-dhaqaaqyada shakiga leh (Suspicious and unusual transaction monitoring report) (STR) iyo dhaq-dhaqaaqyada waawayn (**large cash transactions**) iyada oo la raacayo tilmamaaha loo yaaqaano Red Flags iyo Hagaha STR. (24).

## IV. Farsamooyinka casriga ee la isticmaalo (AMLTypologies):

Dambiilaasha lacagta dhaqalaha si ay u qariyaan raadadkooda mar kasta waxa ay sameeyaan habab casri oo horumarsan waxaana kamid ah hababkaas, yareynta lacagaha iyo u qaybinta qaybo gali karo wareeg si looga wareego xaddiga shakiga keeni karo ama System-ka uu soo qaban karo (**To ascape reporting threshold and detection by system**). Sidoo kale waxay abuuraan kambaniyada Qolofka ee loo yaqaano (**Shel company schemes**) oo ah kambaniyo loo furto oo kali ah in xisaabaad Banks lagu sameeyo, waaqic ahaana aan ahayn kuwo shaqeeyo oo leh jiritaan iyo wax-soosaar midna (**With no genuine business activities**), u jeedada waa in lacagaha loo muujiyo kuwo sharciyad leh.

Ilaha lacagaha la dhaqay lagu qariyo waxaa kamid ah Off-shore Bank Accounts and Tex Havens: oo ah Bangiyo sameeyo waxa la dhaho qarsoodida lacagta iyo yareynta canshuurta (**Financial secrecy**) taas oo ay lacag-dhaqasha ka saaraan dalka lacagaha si halkaas ay u gaystaan una abuuraan mushkilad qaanuuneed maadaama Hay'adaha LEA aysan baari karin awoodna u lahayn.

Sidoo kale waxa ay isticmaalaan lacagaha danabeysan (**Digital Currencies**) sida Bitcoin iyo Litecoin iyaga oo isticmalayaa Cryptocurrencies taas oo u saamaxayso in ay diraan lacagaha iyada oo aan la ogaan Heybtooda, aysana awoodin Hay'adaha LEA in ay korjoogteeyaan (25).

---

23 Xeerka AML/CFT tix-raac hore

24 Hagitaan ku saabsan Dhaqdhaqaaqa Shakiga leh ee Hay'adaha Maaliyadeed July 2018.

25 Docoding AMl Typologies: What no one talks about, August 18,2023, Tookitaki.

Sidoo kale waxa ay isticmaalan shirkadaha loo yaqaano **Front Compny** kuwaas oo ah magac-u yaal balse lagu qabto lacag-dhaqis sida Travel agancies, maqaayadaha imw, waxaa kaloo kamid ah maal-galinta dhulalka (Real estate) iyo dhex-marka ganacsiga (**Trade based money laundering**).

### 2.12. Dambi Maalgelin argagasixannimo:

Waa bixinta ama ururinta dhaqaale ujeeddidiisu tahay in loo isticmaalo ama la ogyahay in loo isticmaalaayo mid ka mid ah arrimahaan:

- fulinta fal argagixiso
- Urur argagixiso.
- Maalgelin safar dagaalyahan argagaxiso

**Xeerka AML/CFT waxuu ku qeexay:**

Qof kasta iyo hannaan kasta, si toos ah ama si dadban, u bixiya ama u ururiya dhaqaale, ama isugu daya inuu sidaas sameeyo, iyada oo ujeeddadu tahay in loo isticmaalo ama ogyahay in loo isticmaalayo guud ahaan ama qayb ahaan ujeeddooyinka hoos ku xusan

Waxa uu galagaa dambi:

a) Si loogu fuliyo fal argagixiso; ama

b) Argagixiso; ama

c) Urur argagixiso.

d) Maalgelin safar dagaalyahan argagaxiso oo ajnebi ah

**2. Dembiga ku xusan faqradda (1) waa lagalay:**

a) Xataa haddii falka argagixiso aanu dhicin ama aan la isku dayin;

b) Xataa haddii dhaqaalaha aan loo isticmaalin in lagu galo ama la isku dayo falargagixiso;

c) Iyada oo aan la eegayn dalka ama dhulka falka argagixiso loogu talo galay inuu ka dhaco.

**3. Waxaa dembi ah:**

a) In laga qayb qaato iyada oo gacan siin ah dembi ku xusan faqradda (2);

b) In la abaabulo ama lagu hago cid kale in ay galaan dembi ku xusan faqradda (2); ama

c) In si ku talogal ah loogu qaaraan darsado si ay u galaan dembiga ku xusan

Farqada (2) koox dad ah oo leh, ujeeddo guud marka qaaraankaas loo sameeyo si loo sii kordhiyo dembi ku xusan faqradda (2) ama qaaraanka la sameeyey iyada oo la ogyahay in kooxdu ay gelayso dembi ku xusan farqada (2).

Maal-galinta argagixisada u jeedada waa in fal-dambiyeed lagu sameeyo ee shardi ma aha in dambi ay tahay asalka sida lacag-dhaqidda waxa ayna martaa saddex marxaladood:

- **Marxaladda koowad: Lacag aruurin/funding:** dhinac saddexaad ayaa lacag u aruurinayo argagixisada.
- **Marxaladda labaad: Gaarsiin/ Delivery:** lacagtii ayaa la gaarsiiyey argagixisada si ay ugu gataan hub ama agab.
- **Marxladda saddexaad: Fulin fal argagixiso/ Terrorism:** waa fulinta falka argagixisada aha.

### V. Hal-beegyada Caalamiga ah ee la dagaalanka AML/CFT:

Maadaama dambiyadaan yihiin kuwo Caalami ah kana gudbo xuduudaha, sidoo kale isu-mari kara dalal badan waxaa la sameeyey Hay'ado u xil-saaran la dagaalankooda iyo Halbeegyo Caalami ah. Dowladaha waxay fuliyaan siyaasadaha iyo Halbeegyada loo dajiyey, waxaana lagu sameeyaa imtixaano kala duwan (**Mutual evalutions**) si loo hubiyo fulinta farsamo (**Tichnical compliance**) ama wax-ku oolnimada fulinta (**Effectiveness assessment**).

Markii ugu horreysay Dowladaha dhaqaalaha leh G-7 waxay sameeyeen Hay'adda Financial Action force (**FATF) 1989**), waxayna noqotay Hay'ad

gobaleedka u xil-saaran arrimaha AML/CFT, Shaqadeeda ay tahay horumarinta fariinta AML/CFT, daba-galka fulinta soo jeedinteeda, caawinta farsamo iyo wax-ku oolnimo.

FATF waxa ay soo saartay waxa loo yaqaano 40 soo jeedin (**FATF 40 Recommendation 1990**), kuwaas oo ah kuwa ay ka qalin-daartaan Xeerka gudaha, waxaana kamid ah meelaha ay dabooleen helista khataraha AML/ CFT (**Identification of risk**), abuurista iyo horumarinta siyaasadaha AML/CFT, Nidaamka cadaaladda iyo fulinta, Nidaamka Maaliyadeed iyo xeerarkooda, Hufnaanta, shaqsiyaadka qaanuuniga ah iyo iskaashiga Caalamiga ah, waxaana wax ku kordhino lagu sameeyey 2003 iyo 2012.

Sidoo kale waxay soo saartay 11 Qodob oo la dhaho (**11 immediate outcome**).


FATF waxay leedahay Urur gobaleedyo shaqada u fuliya kuwaas oo kooxo isu raacsan sida ASIA Pacific Group on ML (**APG**), Caribbean Fanancial action task force (**CFATF**), Financial action task force on latin America (**GAFILAT**), Soomaaliya waxay kamid tahay kooxda Middle East and Noth Africa financial action task force (**MENAFATF**).


Waxaa jiro sidoo kale Ururka Bangiga dhexe oo dalal badan qayb-ka yihiin soona saaro siyaasado iyo xeer-nidaamiyaal la xariira, waxaana loo yaqaanaa (**The Basel committee on banking supervision**). Sidoo kale Hay'adaha wax soo saara waxaa ka mid ah Midowga Yurub waxa ayna soo saaraan jihayn (**European Union Directives on Money laundering**), waxa ayna gaaraan ilaa toddobo. Waxaa kale iyagana qayb ka ah dajinta siyaasadaha iyo la dagaalanka AML/CFT Guddiga Mareykanka ee xakamaynta maan-dooriyaha (**CICAD**) , kooxda ku bahowday **Egmont Group of financial intelligence Unites** oo ay ku mideysanyihiin Hay'adaha warbixinada maaliyaadeed **FIU, Wolfsberg Group** oo Ururada Bangiyada ku mideysanyihiin, Hay'adaha maaliyadda ee kale sida **IMF, World Bank** imw.

## JAANTUSKA DACWADAHA DEMBIYADDA MAALIYADDA 2022


| Lmr | Noocyada dambiyada | Galalka la furay | Socda | Xafiiska xiray | Go'aan maxkamadeed | Xukun | |
|---|---|---|---|---|---|---|---|
| | | | | | | Bari | Dambiile |
| 1 | Amaano Lunsi | 67 | 29 | 6 | 32 | 17 | 15 |
| 2 | Tuugnimo | 145 | 72 | 9 | 64 | 23 | 41 |
| 3 | Dhac | 259 | 97 | 26 | 136 | 24 | 112 |
| 4 | Turufo/Qiyaano | 78 | 34 | 9 | 35 | 6 | 29 |
| 5 | Maandooriyaha | 77 | 37 | 8 | 32 | 4 | 28 |
| 6 | Tahriibin | 27 | 8 | 7 | 12 | 3 | 9 |
| 7 | Ka ganaacsi jir | 12 | 2 | 5 | 5 | 4 | 1 |
| 8 | Afduub | 8 | 2 | 2 | 4 | 2 | 2 |
| 9 | Musuq-maasuq | 4 | 2 | 1 | 1 | 1 | 0 |


# 3. JAANTUSKA DACWADAHA DAMBIYADDA MAALIYADDA EE GARSOORKA YIMID 2022-2023:



| Jaantuska Dacwadaha dembiyadda maaliyadda 2023 | | | | | | | |
|---|---|---|---|---|---|---|---|
| **Lmr** | **Noocyada dambiyada** | **Galalka la furay** | **Socda** | **Xafiiska xiray** | **Go'aan maxkamadeed** | **Xukun** | |
| | | | | | | **Bari** | **Dambiile** |
| 1 | Musuq maasuq | 48 | 20 | 9 | 19 | 7 | 12 |
| 2 | Dhac | 228 | 82 | 34 | 112 | 25 | 87 |
| 3 | Tuugnimo | 139 | 43 | 17 | 79 | 28 | 51 |
| 4 | Ka ganacsiga | 192 | 69 | 51 | 72 | 9 | 63 |
| 5 | Afduub | 20 | 7 | 6 | 7 | 3 | 4 |
| 6 | Tahriibinta iyo ka ganaacsiga adoonisga | 69 | 37 | 9 | 23 | 7 | 16 |
| 7 | Isticmaalka | 128 | 49 | 18 | 61 | 17 | 44 |
| 8 | Kalluumaysiga sharci darrda | 36 | 17 | 0 | 19 | 3 | 16 |
| 9 | Iibinta cuntoooyinka dhacay | 18 | 5 | 6 | 7 | 2 | 5 |
| 10 | Khiyaanada maciishada suuqa dadweynaha | 5 | 2 | 1 | 2 | 0 | **2** |




## JAANTUSKA DACWADAHA AMI/CFT 2023

| Nooca Dambiga | Kiisaska FRC | Kiisaska NISA | Xafiiska Inta uu baaris ku helay | Wadarta Guud | Jinsiga Tuhunsanayaasha | |
|---|---|---|---|---|---|---|
| | | | | | Dumar | Rag |
| Lacag dhaqid iyo maal-galin argagixiso | 113 | 13 | 10 | 136 | 40 | 96 |

# 4. HAY'ADAHA BAARISTA DAMBIYADDA MAALIYADDA IYO KAALINTOODA:

## 4.1. Hordhac:

Baaris fal-dambiyeed waa meel marin la xariirta barashada xaqiiqaha, waxaana loo isticmaala in lagu aqoonsado, lana cadeeyo dembiga qofka galay.

Baarista Dembiga dhameystiran waxaa ka mid ah **raadinta, wareysiga, xog ka dhalinta, aruurinta cadeymaha, xafididooda**, iyo hababka kale oo kala duwan ee baarista ka mid ah.

Baarista dembiyada casriyeysan ee xiligaan waxaa la isticmaala forensic ama baaris cilmiyeed, iyada oo u jeedadu tahay Saddex hadaf:

1. **In lo ogaado dembiga,**
2. **In la helo eedeysanaha**
3. **In cadeyn loo helo dembigiisa.** Hadii sadexda hadaf la gaaro, waxaa lagu tilmaami karaa dembiga mid la xaliyey, waxaana ka dhalan kara in shaqsiyaadka kale ka baqaan in dembiga u bareeraan.

Hay'adaha Baarista sida ku cad XHCS [26] waa: **Hay'ad kasta oo sharciga u xil-saaray barista iyo xog ka keenista dambiyo gaar ah, waxayna ku**

26 Q. 23aad Xeerka Habka Ciqaabta Soomaaliyeed

**xadidanyihiin hadba sida uu Sharciga u tilmaamo dabeecadooda**([27]).

Soomaaliya waxay leedahay Hay'ado baariseed oo badan kuwaas oo xil-saaran fal-dambiyeedyo gaar ah, hadaba dambiyada maaliyadda waxay leeyihiin dabeecado gaar ah, taas oo keentay in Hay'ado badan ka shaqeeyaan fal-dambiyeedyada Maaliyadda la xariiro, taas oo u baahan in lakala qeexo awoodahooda iyo habka wada-shaqayntooda.

Hay'adaha barista Maaliyadda ee dalku leeyahay waxaa ka mid ah: Hoggaanka Baarista dambiyada (**CID**) ee Ciidanka Booliska, Hoggaanka Baarista ee Hay'adda Nabad Sugidda iyo sirdoonka Qaranka (**NISA**), Xafiiska Hanti-dhowraha Guud ee Qaranka, Hay'adda warbixinada Maaliyadeed (**FRC**) iyo Guddiga madax-bannaan ee la-dagalaanka musuq-maasuqa.

## 4.2. Shaqooyinka Hay'adaha baara dambiyada Maaliyadda:

### 1 - Hay'adda Nabad-sugidda & Sirdoonka Qaranka:

Sida ku cad Xeerka la dagaalanka argagixisada Xeer Lr 07.20.03.2023 iyo Xeer Lr 81.09.11.1975 wax-ku kordhinta Xeerka Habka Jinaa'iga, Hay'adda sirdoonka qaranku waxay ku jirtaa hay'adaha fuliya sharciga, waxayna leedahay awood baaris gudaha ah ee la xaiirta dambiyada argagixisada, sidoo kale waxa ay leedahay uruurinta iyo gorfeynta xogaha sirta ah ee la xariira lacag-dhaqidda , waxayna baristooda la wadaagayaan hay'adaha baarista dembiyada oo leh awoodda baarista dembiga, soo qabashada iyo horkeenidda eedeysanaha ee maxkamadda.

### 2 - Xafiiska Hanti-Dhawrka Guud ee Qaranka:

Dastuurka KMG-JFS gaar ahaan Qod.114aad waxa uu si mabd'ayan ah u tilmaamayaa in ay jirayaan Labo Xafiis Hanti- dhawr oo kala ah: heer federaal iyo Dowlad xubin ka ah Dowladda Federalka isaga oo aan faah-faahin.

Xafiiska Hanti-Dhowrka Guud ee Qaranka hadda waxa uu ku shaqeeyaa Sharci **L.14 ee soo baxay 10 September 2023**, Waxaa uu mas'uul ka yahay

---

27 Q.1aad ee Sharci L 81 soo baxay 9 November 1975 wax ku kordhin Xeerka Habka Jinaaiga ah, faafinta rasmiga ah, sannadka 3aad, Muqdisho 30 November 1975 L4, R, 11, Madbacadda Muqdisho, Bogga 939.

dhammaan baarista dakhliga, kharashaadka, mashaariicda, heshiisyada, hantida (guurtada iyo ma guurtada) iyo daymaha ee dawladda, bixinta tallooyinka la xariira ku dhaqanka sharciga, hufnaanta, xoojinta isla xisaasabtanka iyo dhowrista shuruucda Maaliyadeed, waxa uu diiwan-galiyaa awood siinta qarash bixinta FI6 .

XHG Waxa uu baaris sannadle ah mid wax-qabad iyo mid gaar ah ku samayn karaa Xafiisyada iyo Hay'adaha Dawladda iyo wakaaladaha madaxabannaan, Tignooloojiyadda dowladda (**ICT Audit**) isaga oo raacsiin kara baaristiisa warbixin dambi maaliyadeed una soo gudbinayaa Xafiiska Xeer-ilaaliyaha guud.

### 3 - Hoggaanka Baarista Dembiyada (CID)

Qod.18 aad ee Xeer L.2 ee 23/12/1972 Xeerka Ciidanka Booliska Soomalaiyeed iyo XHCS , Hoggaanka Baarista Dembiyadu waa waax Farsamo oo ka mid ah qaybaha Booliska Soomaaliya, sida uu qeexayo Xeerka Nidaamka Booliska, waxa uuna ka mid yahay fadhiyada madaxa bannaan oo taliska ku xiran , waajibaadka iyo xilalka Hoggaanka Baarista Dembiyada (CID) waxaa ka mid ah, Baarista dembiyada, ururinta & isku dubbaridka tirada dembiyada dalka ka dhaca, kaydinta faraha, Raadka, sawirrada & tilmaamaha dembiilayaasha, bixinta shahaadooyinka dembi la'aanta & warbixinnada ku saabsan shahaadooyinka aadaabta & Akhlaaqda.

### 4 - Booliska Ilaalada Canshuuraha (Fiscal police):

Booliska Ilaalida Canshuuraha waxa ay kamid yihiin Qeybaha Baarista Booliska waxa ayna si gaar ah u baaraan ku xad-gudubka xeerarka maaliyadda ee arrimaha Canshuuraha Dowladda iyo Dowladaha-hoose, Kastamyada (Customs) iyo Sarifka qalaad (Foreign exchange) sida ku cad Qodobka 9aad Xeerka Booliska, ee Xeer Lr 2, 23 Decemper 1972 iyo Q. 23aad ee XHCS iyo Sharciga Baarista iyo Xakameynta ku xad-gudbidda Shuruucda Maaliyadda, Sh I 12. Soo baxay 1dii August 1966.

### 5 - Hay'adda warbixinada Maaliyadeed (FRC):

Hay'adda warbixinada maaliyadeed waa Hay'ad lagu aas-aasay Qodobka 20aad ee sharciga ka hortaga lacag-dhaqista iyo maal-galinta argagixisada, Sharci **Lr 01 soo baxay 21 bisha 2aad 2016**, Shaqadadeeda waa xog uruurinta dambiyada AML/TF (FI) helitaanka dhaq-dhaqaaqyada laga shakisanyahay (**STR**), xoghaynta guddiga la-dagaalanka lacag-dhaqidda iyo

maal-galinta argagixisada (**NAMLC**) isaga ayeyna u gudbisaaa qorshaheeda iyo warbixinadeeda.

Sida ku cad Q. 21aad Sharciga AML/CFT waxaa kamid ah shaqooyinkeeda, in ay masuul ka tahay helidda xogaha iyo dhaq-dhaqaayada ML/TF ee dalka ay ku jiraan warbixinada dhaq-dhaqaayada laga shakisanyahay iyo lacagaha cadaanka ee isaga gudbayo xaduudaha iyo la socodka macamilka dadka iyo Hay'adaha ku jiro liiska cuna-qabataynta cayiman, hakinta dhaq-dhaqaaqyada laga shakisanyahay iyada oo raacaysa habraaca shariga, falanqaynta xogaha iyo dhaq-dhaqaaqyada laga shakisanyahay, samaynta cil-mibaariyada AML/CFT iyo soo saarista Xeer-nidaamiyaasha, Hagayaasha.

### 6 - Guddiga la-dagaalanka Musuq-maasuqa:


Guddiga la dagaalanka musuq-maasuqa waxa uu kamid yahay Hay'adaha barista dambiyada maaliyadda, waxaa lagu dhisay Sharci **lr 12** soo baxay **21.09.2019** guddigaas waana guddiga Dastuuri ah oo oo uu farayo DKMG-JFS gaar ahaan Q. **111/C ee DKMG-JFS**.

Sida ku cad Q. 6aad ee Sharciga lagu dhisay Guddiga waxaa kamid ah masuuliyaadkiisa, in **uu baaro cadaymaha musuq-maasuqa ee lagu ooga saraakiisha dowladda iyo barista musuq-maasuqa marka ay cabasho u timaado,** sidoo kale waxuu masuul ka yahay dhiira-galinta hufnaanta iyo halbeegyada la dagaalanka musuq-maasuqa.

Sidoo kale sida ku cad Qodobka **7-aad** ee Sharciga guddiga waxaa kamid ah in uu **xayiro, la wareego soo celiyo faa'iidada faldambiyeedka laga helay iyo barista leexsashada Hantida dowladda**.

### 7 - Guddiga Qaran ee la dagalaanka lacag-dhaqidda iyo maal-galinta argagixisada:

Guddigaan oo ka kooban Hay'adaha ku cad shaxda hoose (Q.26 AML/CFT) waxaa lagu aas-aasay Q. 24 Xeerka AML/CFT waxa uuna qabtaa fududeynta is dhaafsiga xogaha iyo iskaashiga Hay'adaha xubnaha ka ah, taageerida kobcinta aqoonta AML/CFT ee Hay'adaha. Hubinta fulinta siyaasadaha iyo istaraatijiyada AML/CFT iyo dejinta hortabinta Hay'adda FRC.




## 5. XEERARKA IYO SIYAASADAHA DOWLADDA EE DEMIYADDA MAALIYADDA:

Xeerka sidiiba waa agabka ay dowladda u isticmaasho xakamaynta bulshada (**Social control**) iyo wax-kabaddelka Bulshadda (**social change**).

Indheergaradka iyo cullimadda waaweyn ee qaanuunka intooda badani waxa ay isku raacsan yihiin in sharcigu door dahabiya ka ciyaaro isbadalada bulsho, marka aynu ka hadleyno dawladnimadda casriga ah, sharcigu waxa uu awood u leeyahey qorsheynta, fulinta, agaasinka iyo ujeedo kasta oo lagu hirgalinayo isbadal bulsho.

Marka la rabo in wax laga qabto caaddooyinka iyo dhaqamada xunxun ee

soo-jireenka waxa muhiim ah in la sameeyo shuruuc dadka ka reebeysa dhaqamadaa taban, isla markaana dhigaysa waajibaad iyo ciqaab lagu cidhibtiri karo.

### 5.1. Xeerka Ciqaabta guud:

**XC, X.L. 5 ee 16 Decemper 1962**-dii ee dhaqan-galay, **3 apriil 1964**, Waxa uu nidaamiyey dambiyo badan oo la xariira maaliyadda kuwaas oo isugu jiro kuwo Sarkaal guud uu sameeyo iyo kuwo dadka caadiga ah ay sameeyaan, waxaana ku jiro dambiyo kala-duwan oo meelo kala duwan ku jiro oo ay kamid yihiin kuwo aan kor kusoo xusnay.

### 5.2. Xeerka Nabad-galyada guud:

Xeerka Nabadgalyada Guud XLr **w21**, waxa uu ka mid yahay Xeerarka ciqaabta ee dalku leeyahay Gaar ahaan Xeerarka Gaarka ah oo Nidaaminaaya Mowduuc Gaar ah. Xeerkaan oo ka koobnaa78 qoddob waxaa la meel-mariyey **28/8/1963**. Xeerka nabadgalyada guud waxa uu nidaaminayaa arrimo kala duwan oo dhammaantood khuseeya xakamaynta nabadgalyada guud, waxaana kamid ah, **samayn uruuro**, kullamo iyo, **haysashada hubka** si guud iyo sharci darrada ah, soo rogidda xaalado amni iyo kuwa nabadgalyo imw.

### 5.3. Xeerka lacag-dhaqista iyo maal-gelinta Argagixisada :

Xeerkaan Waxaa lagu magacaabaa Xeerka lacag-dhaqista iyo maalgelinta argagaxisannimada, ee **Xeer Lr 01 soona baxay 21/2/2016**. Waxa uu ka kooban yahay 54 qoddob.

Arrimaha ugu muhimsan ee Xeerku ka hadlaayo Waxaa ka mid ah, dambi lacag-dhaqis, maal-galin argagaxiso, hababka ka hortagga dambiyada ML/TF, ka warbixinta lacagta ka gudbaysa xuduudaha, xawilaadda habka elektoroonikada ah, habka xariraadaha iyo lawareegidda hantida dambiga laga helay, Hay'adaha shaqada ku leh AML/CFT iyo Iskaashiga Caalamiga ah iyo noocyadiisa.

### 5.4. Sharciga cuna-qabataynta Maaliyadeed ee cayiman:

Sharciga cuna-qabataynta Maaliyadeed ee cayiman sharci **lr 004/2023** waxa uu ka koobanyahay **16 Qodob**, waxa uu ka hadlayaa xayiraadda Hantida ee shaqsiyaadka iyo shirkadaha la asteeyey iyo asteeynta waxa ay

tahay, dib-u eegista, go'aannada NAMLC iyo kaalinta Maxkamadda Sare ee dalka ee dib- u eegista go'aannadaas iyo mabaad'aadaha ay tix-galinayso.

### 5.5. Sharciga la-dagaalanka Argagixisada:

Sharciga la-dagaalanka Argagixisada, sharci **lr 007/2023, 20 March 2023** waxa uu ka koobanyahay 58 Qodob waxa uuna ka hadlayaa noocyada dambiyada argagaxiso iyo ciqaabtooda, la wareegidda iyo xayiraada Hantida argagixisada, Habka barista iyo Hay'adaha shaqada ku leh, cadaymaha dambiyada argagaxisada iyo iskashiga Caalamiga ah ee dambiyada la xariiro argagixisada.

### 5.6. Xeer-nidaamiyaha Sharciga cuna-qabataynta Maaliyadeed ee cayiman:

Xeer-nidaamiyahan lagu meel-mariyey Xeer-ra'iisul-wasaare **Lr 136**, waxaa lagu faah-faahiyey sharcigaas waana 15 qodob oo si faah-faahsan u sharaxayo u jeedada iyo fulinta sharcigaas.

### 5.7. MOBILE MONEY REGULATIONS 2020:

Xeer-nidaamiyahan uu soo saaray Gudoomiyaha Bangiga dhexe waxa uu ka koobanyahay 66 Qodob iyo 6 lifaaq, waxa uuna ku saabsanyahay lacagta danabaysan.

### 5.8. Anti-money laundering and countering the financing of terrorism Governance and compliance regulations.

Xeer-nidaamiyahan AML/CFT Regulations waxaa lasoo saaray October 2019 waxaana soo saaray Wasiirka maaliyadda waxa uuna ka koobanyahay 10 Cutub. Waxa uu ka hadlaa arrimaha awoodaha guddiga la-dagalaanka lacag-dhaqista iyo maal-galinta argagixisada NAMLC , Hay'adaha ka shaqeeya AML/CFT, Hay'adda warbixinada maaliyadeed, kaalinta Bangiga dhexe iyo axkaamta la xariirta daba-galka iyo cabashada.

### 5.9. Hagitaan ku saabsan Dhaq-dhaqaaq Shaki leh ee Hay'adaha maaliyadda July 2018:

Hagahaan waxaa soo saartay Hay'adda FRC waxayna ugu tala-gashay Hay'adaha maaliyadda, waxa uuna sharaxayaa sida loo soo gudbiyo dhaq-dhaqaayada shakiga leh (STR/LCTR), Calaamadaha lagu garto qofka lacag-

dhaqaha ah (Red flags), sharaxaad kooban oo ku saabsan fahanka Xeerka AML/CTF iyo masuuliyaadka Hay'adaha.

### 5.10. Heshiiska Midawga Africa ee Ka Hortagga iyo Ladagaalanka Musuq-Maasuqa:

Heshiisyada la dagaalanka Musuq-maasuqa ee ay Soomaaliya qaybta ka noqotay laga dhigay sharciyada Gudaha waxaa kamid ah, **Sharci LR 36** Soo baxay **31-12-2020; Heshiiska Midawga Africa** ee Ka Hortagga iyo Ladagaalanka Musuq-Maasuqa. Heshiiskan waxaa ku bohoobay Dalalka xubnaha ka ah midawga Africa, waxa uuna soo baxay taariikhdu markii ay ahayd **11 July 2003** waxaana lagu meel-mariyay kal-fadhiga labaad ee caadiga ah ee Golaha Guud ee Midawga Africa oo ku ku qabsoomay magaalada Maputo ee Caasimadda Dalka Mozambique.

- **MABAADI'DA HESHIISKA:**

Heshiiskaan oo ka koobany **28 qodob** waxa uu ku dhisan yahay mabaadi'da aad u muhuum ah sida ku qeexan **Qodobka 3aad sheshiiskan**, waxa ayna tahay in Qaramada Xubnaha ka ah heshiiskan ay fulinayaan ayna dhaqan-geliyaan mabaadi'da, dimuqraadiyada iyo Hay'adaha, ka-qeyb-galka shacbiga, talinta sharciga iyo dawlad-wanaagga, bini'aadanimada iyo xuquuqda dadka si waafaqsan Axdiga Midowga Afrika oo ku aaddan Bini'aadanka iyo Xuquuqda dadka iyo Heshiisyada kale ee Xuquuqda aadanaha, daah-furnaanta iyo isla-xisaabtanka ee maareynta Arrimaha Dadweynaha, xoojinta Cadaaladda bulshada si loo xaqiijiyo isku dheelitinnaanta horuminta dhaqaale-bulsheedka, dhaleecaynta iyo diidida falalka musuq-maasuqa ah, xad-gudubyada la xiriira iyo dembi-qabad-la'aanta.

- **WAXYAABAHA UU DAAWAYNAYO HESHIISKAN:**

**1 - ISKAASHIGA ISU CELINTA DANBIILAYAASHA IYO EEDAYSANAHA MUDUQA:-**

Heshiiskan waxa uu ku qeeaxayaa Qodobka **15-aad** dib u celinta danbiilayaasha iyo eedaysanaha musuq-maasuqa asaga oo dhigaya " **Xubin Qaran kasta waxay fulinaysaa in ay celiso qof kasta lagu soo eedeeyey ama lagu helay xad-gudubyo musuq-maasuq iyo xad-gudubyo la xiriira, oo laga fuliyey xuduuda Xubin Qaran oo kale oo dib-u-centiisa**

**uu codsaday Xubinta Qarankaas, si waafaqsan sharcigooda gudaha, heshiis kasta oo dib-u-celin oo ku dabaqmaya, ama is-af-garadyo dib-u-celin ama qorsheyaal jira oo ka dhexeeya ama u dhexeeya Xubnaha Qaran**". Arintaan waxay xal wanaagsan u noqonaysaa in cadaaladda la horkeeno eedaysanaha iyo danbiilayaasha musuq-maasuqa ee baxsadka ka ah hay'adaha cadaaladda dal ka mid ah dalabka dalabka saxiixay heshiiskan ee ku sugan Xukuumada dal kale oo asna saxiixay heshiiskan.

**2 - ISKAASHIGA LA WAREEGIDDA:-**

Heshiiskan waxa uu ku qeeaxayaa Qodobka **16-aad** ee heshiiskan La-wareegidda iyo Hantidda & Hab-raacyadda la Xiriira, waxa uuna farayaa Dowladaha, in ay baaraan, aqoonsadaan, raad-raacaan, maamulaan, xayiraan ama qabtaan qalabkii iyo waxyaabihii musuq-maasuqu ku xirnaa inta la sugayo xukunka kama-dambaysta ah iyo la-wareegidda faa'iidooyin ama hanti, qiimaha u dhigmo faa'iidooyinkaas, laga dhaxlay, si waafaqsan xad-gudubyada lagu sheegay heshiiskan.

**3 - ISKAASHIGA BAARISTA:-**

Heshiiskan waxa uu ku qeexayaa Qodobka 18-aad ee heshiiskan iskaashi iyo gargaar Qaanuun ee wadajir ah ee arrimaha musuq-maasuqa.

- **XEERARKA UU FARAYO HESHIISKAN IN LASOO SAARO:-**

Sida uu qeexayo qodobka **11-aad** Heshiiskan wuxuu farayaa Dawladaha xubinta ka ah in:-

1. Ay qaadaaan tallabooyinka sharci-dejinta iyo talaabooyinka kale oo looga hortagayo la-dagaallanka falalka musuq-maasuqa iyo xad-gudubyada la xiriira ee ay geystaan hay'adaha qeybta gaarka loo leeyahay.

2. Ay abuuraan aalado lagu dhiirri-gelinayo ka-qeyb-qaadashadooda hay'adaha gaarka loo leeyahay ee la-dagaallanka tartanka caddaalad-darrada, iyada oo la ixtiraamayo hannaanka qandaraasyada iyo xuquuqda hantida gaarka loo leeyahay.
3. Ay qaadaan talaabooyinkaas kale ee laga yaabo inay lagama-maarmaan u yihiin ka-hortagga shirkadaha inay bixiyaan laaluush si ay ugu guuleystaan qandaraasyadooda.

- **HAY'ADAHA UU DHISAYO HESHIISKAN:**

Qodobka 22-aad ee Heshiiskan waxa uu dhisayaa Guddi Farsamo dabo-gal oo ah sida, **guddi la-talin arrimaha musuq-maasuqa Ururka Midowga Afrika dhexdiisa** oo ka koobanaanaya 11 xubnood oo Golaha Fulinta Ururka laga dooran doono liis xeer-dheerayaal ah lehna hufnaan iyo hawl-karnimo ku aaddan la-dagaallanka musuq- maasuqa iyo xad-gudubyada xiriirka la leh..

### 5.11. Heshiiska Carbeed ee Ka Ladagaalanka Musuq-Maasuqa:

Heshiiska Carbeed ee la dagaalanka musuq-maasuqa waxa uu kamid yahay Heshiisyada Caalamiga ah ee ay Soomaaliya qaybta ka noqotay lagana dhigay sharciyada Gudaha, **Sharci LR 37** Soo baxay 31-12-2020.

**Heshiiskan waxa uu soo baxay** taariikhdu markii ay ahayd **21/12/2010** waxaana lagu meel-mariyay kulan wada jir ah oo ay yeesheeyn Wasaaradaha Cadaaladda iyo Wasaaradaha Arimaha Gudaha Dawladaha Carabta oo ka dhacay Xarunta Jaamacadda Carabta ee Magaalada Qaahira Taariikhdu markay ahayd 21/12/2010, waxa uuna dhaqangal noqday Tr; **29/06/2013**.

- **MABAADI'DA HESHIISKA:**

Heshiiskan waxa uu ku dhisan yahay mabaadi' aad u muhuum ah sida ku qeexan Qodobka 3-aad sheshiiskan, waxa ayna tahay in Qaramada Xubnaha ka ah heshiiskan ay fulinayaan ayna dhaqan-geliyaan mabaadi'da dimuqraadiyada iyo Hay'adaha, ka-qeyb-galka shacbiga, talinta sharciga iyo dawlad-wanaagga, daah-furnaanta iyo isla-xisaabtanka ee Maareynta Arrimaha Dadweynaha, xoojinta Cadaaladda Bulshada si loo xaqiijiyo isku dheelitinnaanta horuminta Dhaqaale-bulsheedka, dhaleecaynta iyo diidida falalka musuq-maasuqa ah, xad-gudubyada la xiriira iyo dembi-qabad-la'aanta.

- **WAXYAABAHA UU DAAWAYNAYO HESHIISKAN:**
- **TALLAABOOYINKA KA HORTAGGA IYO LA DAGAALLANKA MUSUQMAASUQA :**

Talaabooyinka laga rabo Xubin Qrana kasta oo si waafaqsan xeerarkeeda gudaha in ay qaadaan waxaa ka mid ah:-

1. In ay dejiyaan, hirgaliyaan islamarkaana adkeeyaan nidaam asaasi

ah iyo siyaasado wax ku ool ah si looga hortago loona dagaallamo musuqmaasuqa. (**Shuruuc iyo siyaasado**)

2. In aay ku dadaalaan in ay dejiyiyan qaab wax ku ool ah oo loga hortago musuqmaasuqa (**Hanaan Fulin**)
3. In uu ku dadaalaa in ay sameeyaan qiimeyn xilliyeed ah shuruucda quseeya iyo tillaabooyinka maamul iyada oo looga gol leeyahay in lagu soo bandhigo wax qabadkooda ku aadan ka hortagga iyo la dagaallanka musuqmaasuqa (**Warbixinta Hanti-dhowrka**).
4. In ay hirgaliyaan, xoojiyaan, taagyeeraan nidaamyo muujinaya daah-furnaan iyo ka hortagga khilaafaadka danaha u dhexeeya shaqaalaha iyo loo shaqeeyaha. ( **Danaha isdiidan ama Conflict of interest**)
5. In ay tixgaliyaan dejinta tallaabooyin iyo nidaamyo si loo fududeeyo soo gudbinta warbixin ay soo gudbinaayaan u shaqeeyaasha dadweynanah loona gudbinaayo hey'ad Dowladeed, fal walba ee musuqmaasuq ah ee ay ogaadaan inta ay gudanayaan waajibaadkooda. (**Soo Gudbinta Xogta Danbiga**).
6. In ay qaadaan tallaabooyinka lagama maarmaanka u ah abuurida nidaamyo ku saleysan daah furnaan iyo tartan wanaag, iyada oo hadafku yahay dejin nidaam sahlan oo laxiriira wax soo iibsiga dowladeed iyo hanaanka istiraatiijiyadda iyad oo ujeedku yahay ka hortagga musuqmaasuqa. (**Tartan mashaariiceed oo loo simanyahay**).
7. In ay qaadaan tallaabooyinka lagama maarmaanka ah, iyada oo la raacayo qaanuunkooda gudaha iyo qawaaniinta xukuma diiwaan haynta, shaacinta xogta maaliyadeed, heerarka xisaabinta iyo dib-u-eegista xisaabaadka, (**Miisaaniyada Iyo Xisaabaad Celinta**). **Qod. 10aad**

- **BAARITAANO WADAJIR AH:**

Maadaama musuq-maasuqa loo aqoonsaday in uu yahay danbi caalami ah Xubnaha Qaramadda ayaga oo tixgelinaaya heshiisyada laba geesood ama heshiisyo dhinacyo badan leh adeegsanayana mas'uuliyiinta karti u leh inay sameystaan guddiyo baaritaan wada jir ah ka sameeya arrimaha baaritaanka ee hal ama dhowr dowladood, hadii aan heshiisyadaas wax

ay ku fuliyaan baaritaanada wada jirka ah iyaga oo u maraya heshiisyo waafi ah oo ay markaas galayaan.

- **CAAWINAADA GARSOORKA EE WADAAGA AH:**

Xubnaha Qaraamadda waxey midba midka kale u fidiyaan inta ugu badan ee suurtagalka ah ee caawinta garsoorka wadaagga ah ee baaritaanka, dacwad-ku qaadista iyo habraacyada garsoorka ee la xiriira dembiyada sida ku xusan Heshiiskan. **Qodobka 20aad**.

- **MADAXBANNAANIDA GARSOORAYAASHA IYO XEER ILAALINTA.**

Iyada oo la tixgalinayo muhiimadda aay leedahay madaxbanaanida garsoorka iyo doorkeeda muhiimka ah ee la dagaalanka musuqmaasuqa, Xubin Qaran kasta waa in ay, si waafaqsan Qaanuunka u dagsan, qaadataa dhamaan dammaanad qaadyada iyo xoojinta madaxbanaanida garsoorka iyo xeer ilaaliyaasha, taageerida daacadnimadooda iyo in la siiyo ilaalin lama huraan ah. ***Qod. 12aad***

- **ILAALINTA WARBIXIYASHA, MARKHAATIYADA, KHUBARADA IYO DHIBANAYAASHA**

Xubnaha Qaramadda waa inay u fidiyaan badbaadada sharciga ee lagama maarmaanka u ah, warbixiyaasha markhaatiyada, khabiirada iyo dhibbanayaasha, kuwaas oo bixinayaan caddeyn laxiriirta ficillada dembi ee la geeystay ee ku xusan Heshiiskan. Badbaadada waxaa ka mid ah in laga ilaaliyo ehelkooda iyo kuwa ku dhow ehelkooda ficil kasta oo aargudasho ah ama cabsi gelin ah. Talaabooyinkaas oo ay ka mid yihiin, in iyaga oo lagu siinaya difaac meelaha ay deggan yihiin, in aan la bixin macluumaadka la xiriira aqoonsigooda ama meesha ay ku sugan yihiin, in warbixiyaasha, marqaatiyaasha, khubarada iyo dhibanayaashu oo bixiyaan caddeyn waa in aay u bixiyaan hab sugaayo amnigooda, sida adeegsiga teknolojiyadda is-gaarsiinta iyo  qaadista tilaabooyin ciqaab ah qofkasta oo kashifa macluumaadka la xiriira aqoonsiga ama goobta ay ku sugan yihiin warbixiyaasha, markhaatiyada, khabiirada ama dhibbanayaasha ***Qodobka 14aad.***

- **ISKAASHI QABSASHADA IYO LA WEREGISTA HANTIDA: -**

Heshiiskan waxa uu si faah faasan u qeexayaa hanaanka iskaashiga iskaashi

qabsashada iyo la weregista hantida waxa uuna farayaa; - intii suurto gal ah, dowlad kasta Heshiiskan xubin ka ah in ay qaado iyada oo la raacayo qawaaniinteeda gudaha, dhammaan tallaabooyinka lagama maarmaanka u ah in ay awood u yeeshaan la wareeggan:

b) **Macaashk**a ka soo baxda fal dembi ah sida ku xusan Heshiiskan hadda jira, ama hantida qiimahoodu u dhigmayo qiimaha fa'iidada laga helay falka dembiga ah.

t) **Hanti, qalab** loo adeegsaday ama loogu talagalay in lagu isticmaalo komishanka dambiga. ***Qod. 7aad* & 21aad.**

Heshiiskan waxa uu u arkaa Soo celinta hantida inay tahay **mabda'a aasaasiga ah ee Heshiiskan** hadda jira iyo Xubnaha Qaramada waxay isku siin doonaan midba midka kale caawinaad iyo taageero arrinkaas aawgeed. ***Qod. 27aad.***

- **ISKAASHIGA DIB-U-CELINTA DEMBIILAYAASHA;**

Qodobada ugu muhiimsan ee iskaashiga dib-u-celinta dembiilayaasha ee dambiyada ku xusan heshiiskan.

- **XEERARKA UU FARAYO HESHIISKAN IN LASOO SAARO:-**

Heshiiskan wuxuu farayaa dawladaha xubinta ka ah in: - in ay dejiyaan, hirgaliyaan oona adkeeyaan nidaam asaasi ah iyo siyaasado wax ku ool ah si looga hortago loona dagaallamo musuqmaasuqa. **(Shuruuc iyo siyaasado) Qod. 10aad.**

### 5.12. Heshiiska Qaramada Midoobay ee La-dagaalanka Musuq-Maasuqa:

Heshiiska Qaramada Midoobay ee La-dagaalanka Musuq-Maasuqa waxa uu kamid yahay Heshiisyada Soomaaliya ay qaybta ka tahay oo la ansixiyay lagana dhigay sharciyada Gudaha, **Sharci LR 38** Soo baxay **31-12-2020**, waxuu soo baxay sanadkii **2003** waxaana lagu meelmariyay Qaraarka Golaha loodhanyahay ee Qaramada Midoobay ee lanbarkiisu yahay 4/58 ee ku taariikayshan 31, Ogtoobar 2003.

- **UJEEDOOYINKA HESHIISKAN**:

Ujeeddada Heshiiskan waa: (**a**) Kor u qaadidda iyo xoojinta tallaabooyinka looga hortagayo la- dagaallanka musuq-maasuqa si hufan oo wax-ku-

ool ah. (**b**) Kor u qaadidda taageerada, iskaashiga caalamiga ah iyo farsamada Caawinta ka hortagga iyo la-dagaallanka musuq-maasuqa, oo ay ku jirto dib u soo-celinta hantida; iyo (**c**) Kor u qaadidda hufnaanta, isla-xisaabtanka iyo maareyn hab-sami leh ee arrimaha dadweynaha iyo hantida dadweynaha. Qod. 1aad.

- **SOO KOOBIDDA HESHIISKAN:**

Heshiiska waxa uu ka kooban **71 qodob**, waxaana loo qeybiyay (8) sideed cutub, Waxa la odhan karaa waxa uu ka kooban yahay (4) afar qaybood oo ah afar cutub oo asaasi ah, iyo Afar cutub oo kal e oo kala ah axkaamta guud.

- **Qaybta koowaad**; waa "**KA-HORTAGGA MUSUQ-MAASUQ**" oo macneheedu yahay diyaarinta dhammaan halbeegyaha ka hortagga musuq-maasuq ee kala ah A) **soo saarista dhamaan shuruucdii** iyo habraacyadii uu waddan kastaa ku shaqayn lahaa si loo helo hufnaan, kormeer, isla xisaabtan iyo xakameyn dhicitaanka falalka musuqmaamuqa, **Xeerarka** Anshaxa Saraakiisha Dadwaynaha, Soo gadashada guud, Maaraynta Dhaqaalaha Dadwaynaha iyo ka Hortagga lacag Dhaqista. B) **Dhisidda Guddi Ka-Hortegid & La-Dagaallan** Musuq-Maasuq iyo Dhamaan Hay'adihii kale ee dhuruucdaas fulinlahaa, C) **Hirgalinta tilaabooyin Adag** oo ka dhigaaya inay adag tahay in lagu kaco fal musuq-maasuq ah iyo in dadka musuq-maasuqaystayaasha ah ay fuliyaan hawlo musuq-maasuq sida xisaab celin iyo qiimeyn-xilliyeed Adag oo shuruucda khuseysa iyo tallaabooyin maamul, oo looga gol-leeyahay ka ka-hortagga iyo la-dagaallanka musuq-maasuqa. D) *Ka qayb galka Bulshada* rayidka ah iyo Lawadaagidda Dadwaynaha ee warbixinta Dawladda.. **Qod. 5 ilaa Qod 14**.
- **Qaybtii labaad**; waa "**DANBIYAYNTA FICILADA MUSUQA-MAASUQA**" "Criminalization and Law Enforcement" oo macneheedu yahay in **dambi laga dhigo ficilada musuqmaasuqa ee ugu muhiimsan**, sida laaluushka, wax-is-daba-marinta, Lunsashada lacagta, dhaqidda, kala wareejinta, Qarinta, ka hodmidda sharci-darrada, ka faa'iidaysiga lacag lagu helay faldanbiyeed, Eexda iyo ku Xadgudubka Shaqooyinka iyo boosaska shaqada, ka faa'iidaysiga mansabka, iyo ku xaddudubka Dastuurka iyo Shuruucda aasaasiga

ah ee dawladda, ka qaybqaadashada iyo isku dayga danbiyadaas oo dhan iyo falalka kale ee dembiyada musuqmaasuqa, kadibna **go'aaminta ciqaabta Adag** ee lagama maarmaanka ay tahay in lagu soo rogo kuwa ku kaca ficiladaas , iyo abuurista habab gacan ka geysanaya kadabataga dambiilayaashaas iyo in dacwad lagu soo oogo hay'adaha garsoorka hortooda caqabad la'aan sida xasaanadda.

Sidoo kale qodobada Heshiiska ee ku jira qaybtan waxa ay ku waa jibinayaan dawlad kasta in ay samayso si waafaqsan shuruucdeeda halbeegyo ku haboon oo u jeedadoodu tahay; ilaalinta Shakhsiyaadka Warbixiyeyaasha, ilaalinta Markhaatiga, Khubaradda iyo Dhibaneyaasha, mag-dhaw-ka-bixinta waxyeellada ka dhalata Fal danbiyeedyada musuqmaasuqa. **Qod.15 ilaa Qod42.**

- **Qaybta saddexaad**; waa "**ISKAASHI CAALAMI AH**" (International cooperation" Maadaamada musuqmaasuqu uu yahay danbi caalami ah oo mararka qaar xuduudaha ka gubi kara, sidoo kalana dadka musuq-maasuqa ku kaca ay u carari karaan meel ka baxsan dalka ay danbiyadaas ku galeen, dambiyada musuqmaasuqa laftooda ay ku lug yeelan kara dad badan ama shirkado dhowr ah oo leh jinsiyado kala duwan, heshiiskan waxa uu Qeybtaan ku jidaynayaa halbeegyo kala duwan oo dalalka siinaaya tashiilaad iyo habab cad oo dal walba u suurtagelinaya in uu ka codsado kaalmo sharci iyo mid garsoor oo uu ka helo dalalka kale haddii uu u baahdo, isla markaana u sahlaysa waddamada heshiiska la galay in ay ka wada shaqeeyaan arrimaha musuqmaasuqa si guud, halbeeg yadaasna waxaa ka mid ah:

**Iskaashiga Caalamiga ah.**

Arrimaha ay iska kaashayanaan waxaa kamid ah; wareejinta Dacwadaha, wareejinta danbiilayaasha, wareejinta xukunsanayaasha, iskaashiga sharci ee wadaaga ah ee ay ka mid tahay kaalmado sharci ee ujeedadeydu tahay : (**a**) helidda caddeymo ama marag-fur dad; (**b**) gaarsiinta dokumentiyada Garsoorka, (**c**) fulinta hawlaha baaritaan, xannibaad, iyo xayiraad, (**d**) baaritaanka walxaha iyo goobaha, (**e**) bixinta xogaha, caddeymaha iyo qiimeynta xeel-dheereyaasha; (**f**) bixinta asalka iyo nuqulada la xiriira oo ay ku jiraan diiwaanada dawladda, kuwa maaliyada iyo bankiyada diiwaanada shirkadaha, xarumaha ganacsiga; (**g**) caddeynta faa'iidooyinka laga helay fal-dembiyeedyada, hantida, walxaha, agabyada kale, ama waxyaabaha kale

ee ujeeddada tahay in wax lagu caddeeyo, (**h**) caddeynta faa'iidooyinka fal-dembiyeedka, (**i**) dib-u-soo-celinta Hantida, (**K**) hab walba oo iskaashi ah oo aan ka hor-imaanayn shuruucda gudaha ee dawladda xubinta ah ee laga codsaday, iyo samaynta Baaritaano wadaag ah iyo aasaasidda hay'ado baaritaan oo wadaag ah oo lagu fulinaayo Heshiisyo dhexdooda ah. **Qod.43 ilaa qod. 50**.

- **Qaybta afraad** waa "**QABASHADA, SOO CELINTA IYO LAWAREEGIDDA HANTIDA" "Asset recovery**" soo celinta Hantidu waa mabda' aasaasi u ah heshiiskan Dawlaha xubnaha ka ah sheshiiskan waxay iska kaashanayaan dhammaan siyaabaha uu dal kasta ula socon karo, u qabsan karo, u xayiri karo, ula wareegi karo, una soo celin karo lacagaha iyo hantida laga musuq maasuqay ee ay heleen dadka musuqmaasuqlayaasha ah iyo faa'iido kasta oo ka dhalatay ayada oo la raacayo tilaabooyinka uu jidaynaayo Heshiiskan. **Qod. 51 ilaa59**.

**Nuxurka Asaasiga ah ee Heshiiskan ayaa lagu soo koobi karo Afarta eray** kala ah**: Kahortag... > dambi kadhigid... > iskaashi... > Lasoo wareegid.**

- **XEERARKA UU FARAYO HESHIISKAN IN LASOO SAARO: -**

Waxuu farayaa Heshiiskan dowlad kasta in ay soo saaroto dhamaan shuruucda iyo habraacyada loo baahanyahay si loo helo; **hufnaan**, **kormeer**, isla **xisaabtan**, xakameynta dhicitaanka falalka musuqmaamuqa, ka hortagga iyo ladagaalanka musuqmaasuga,, **Xeerarka Anshaxa Saraakiisha Dadwaynaha(Xeerka Shaqaalaha Dawladda), Xeerka Soo gadashada guud (Sharciga Qandaraasyada), Maaraynta Dhaqaalaha Dadwaynaha (Xeerka Maaraynta Maaliyadda Guud ee Dawladda) iyo xeerka ka Hortagga lacag Dhaqista.**

- **HAY'ADAHA UU DHISAYO HESHIISKAN:**

**GUDDI MADAXA BANAAN EE KA-HORTEGID Iyo LA-DAGAALLAN MUSUQ-MAASUQ: -**

Heshiikan waxa uu ku waajibinayaa Dawlad kasta oo Xubin ah:

1. In ay xaqiijiso si waafaqsan mabaadi'da asaasiga ah ee nidaamka qaanuunkeeda, jiritaanka Guddi ama Guddiyo sida ugu habboon, uga hortaga musuq-maasuqa, ayna siiso madax-bannaani iyo in ay

gaarsiisaa Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay magaca iyo cinwaanka Hay'adda ama Hay'adaha hay'adda ama mas'uuliyiinta laga yaabo in ay ka caawiyaan dawladaha kale ee xubnaha ka ah heshiiskan hormarinta iyo hirgelinta tallaabooyinka gaarka ah oo looga hortagayo musuq-maasuqa.

### 5.13. Shuruucda Maandooriyaha:

Maan-dooriyaha waa kiimikooyin iyo walxo saameeya jirka iyo maskaxda, waana mid kamid ah dambiyada caalamiga ah khatarta ku ah wax-soosaarka iyo dhaqaalaha. Dhoofinta Maandooriyaha waa dambigii ugu horreeyey ee lagu baraarugay Caalamka in uu il u yahay lacag-dhaqista, lagana soo saaray Heshiis caalami ah. Dowladda Soomaaliya waxay Qayb ka tahay Heshiisyo lagula dagaalamayo maan-dooriyaha iyo Sharciyo gudaha ah, waxaana kamid ah:

- Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed oo Buug u sameeyey dambiyo dambiyada lidka ku ah Akhlaaqda (**Crimes Against morals**.)
- Sharci Lr 58 ee 10 October 1975, Sharciga Khamri diidka.
- Sharci Lr 59 ee 10 October 1975 Awoodda sameynta, soo dajinta iyo ganacsiga khamrada oo la siiyey wakaalad dowladeed.
- Sharci Lr 5 soo baxay 18 Maarso 1984, Dembiyada Mukhaadaraadka.
- Sharci lr 46 soo baxay 3 Maarso 1970 Xeer-nidaamiye ku saabsan soo saaridda, Ganacsiga iyo isticmaalka waxyaabaha maandooriska keena.
- Cahdiga Caalamiga ah ee Maandooriyaha 1961, lagu ansixiyey Sh Lr 53 soo baxay 10 Maarso 1970 (Convention on narcotic Drugs).
- Cahdiga Caalamiga ah QM ee mukhaadaraadka 1971, lagu ansixiyey Sh Lr 20 soo baxay 10 luulyo 1986 (Convention psychotropic substances).

### 5.14. Xeerarka Canshuur-la fakashada:

Dambiga Canshuur la fakashada waxa uu dhib wayn ku hayaa dhaqaalaha Dalka iyaga oo la isticmaalaya hababkii aan soo xusnay, markii la fiiriyo Siyaasadda Dowladda waxaa jiro Xeerar loo dajiyey in lagu ciqaabo dadka

gala fal-dambiyeedkaas, waxaana ka mid ah:

- Sharci Lr 3 soo baxay 1985 ee Canshuurta wax soo saarka.
- Sharci Lr 2 soo baxay 7 Janaayo 1984, Canshuuraha Gadidda.
- Sharci Lr 12 soo baxay 1 bisha 8aad 1966, Sharciga Baarista iyo Xakameynta ku xad-gudubka Shuruucda Maaliyadda.
- Sharci Lr 13 soo baxay 27 bisha 10aad 2019, Sharciga dakhliga gudaha.

## 6. CADAYMAHA DAMBIYADDA MAALIYADDA:

Marki dembi la galo qof dembiga galaya waxa uu ka tagayaa raad sida faraha, marqaatiga, agabka wax lagu geystay, taas oo Hay'adaha barista inta badan is ku dayaan inay helaan.

Hadii qofka dembiga galaya uu yareeyo xadiga warbixinta laga heli karo ama Hay'adaha baarista ay awoodi wayaan inay helaan Cadeymo cadeynaya dembiga dembiilaha, lama awoodi karo in dembiilaha la soo qabto,. Hadii Hay'adaha baarista ay awoodaan in ay soo aruuriyaan xogta dembiilaha, dembiilaha waxa uu noqonaya mid la aqoonsado.

Baaraha marka hawshiisa gudanaya waa in uu raadiya lixda su'aal ee baarista:

1. dembi noocee ah ayaa  la galay
2. Sidee dembiga loo galay
3. yaa galay dembiga
4. Xage dembiga ka dhacay
5. Waqtige la galay dembiga
6. Maxaa loo galay dembiga

Guud ahaan buugga Sadexaad ee caddaymuhu waxa uu u xusay in waxa la caddaynayaa ay noqan karaa keliya laba arrimood, sida ku cad qodobka **135aad ee XHCS**:

- **Fact in Issue** oo ah dhacdada lagu muransanyahay, taas oo ah dhacdada uu qofku ku eedaysanyahay, iyo dhamaan tiirarka danbiga

uu qofku ku eedaysanyahay oo idil.  Tusaale ahaan haddii qofka loo haysto Lunsasho hanti dadweyne, waxaa **fact in issue** ah in la caddeeyo dhamaan tiirarka faldanbiyeedkaas oo ay ka mid yihiin; **Hanti-dowladeed ma tahay waxa la lunsaday, Eedaysanaha ma yahay shaqaale dawladeed oo xoolo lagu aaminay, hadduu yahayna ma lunsaday xoolahaas, lunsashadaasina si kas ah maku dhacday.**

- **Relevent Facts** oo ah dhacdooyin aan ahayn kuwii lagu muransanaa kana mid ahayn tiirarka danbiga ee eedaysanaha loo haysto, laakiinse uu xeerku si cad u sheegay in ay tixgelin mudanyihiin oo ay caddayn u noqon karaan dhacdadaas lagu muransanyahay ee eeddu ku dhisantahay.

Dhamaan arrimahan oo dhami haddi aan ku fiirino erey bixinta fiqiga islaamiga ah iyo qawaaniinta asalka carbeed leh waxaa soo dhaweynayo ereyga ah "**Qariino**", halka waddamada **Common Law** gu ay ugu yeeraan relevant fact, walow sida ay ereyada ukala adeegsadan ay kala duwantahay oo qolyaha Common Law gu dhammaan wax kastoo aan fact in issue-ga taabanaynin ay qariino u yaqaanan, halka qolyaha kale ay wax intaas ka kooban ay qariino ku magacaabaan.

Haddaba **Fact In issue-ga** waxaa lagu caddayn karaa, dhamaan waddooyinka sugista oo dhan ha noqoto dhukumiintiyo, sida {**Physical document or electronic document**, oo ay ka mid yihiin sawirada iyo video yadu}, ama marag iyo markhaati ka marag fura in uu isagu arkayay ama maqlayay markii eedaysanuhu uu geysanayay faldanbiyeedka. Sidoo kale relevant facts ka iyana waxaa lagu sugaa intaas oo kale.

Laakinse maadama danbiyadu guud ahaan gaar ahaana kuwa Maaliyadda ay ku dhacaan si qarsoon oo qofku uu raad tiranayo, sidoo kalena uu isku dayayo in uu baabi'iyo wax kastoo caddayn ah oo uu reebi karayay, waxaa adag in Fact in Issue ga la sugo oo la helo dhukumiinti ama marag si cad u sheegaya in fal danbiyeed dhacay, eedaysanuhuna uu yahay qofkii falkaas galay  Laakinse waxa inta badan la cuskadaa ayna tahay in hay'adaha baadhistu xoogga saran waa **relevant factska** ama qariinooyinka, oo iyaga marka la isu geeyo noqda caddayn la isku halayn karo oo sheegaysa in faldanbiyeed dhacay eedaysanuhuna uu yahay kii falkaas galay, maxkamadduna ay go'aankeeda danbi ku helidda ku dhisi

karto.

**Haddaba maxaa relevant facts ah oo lagu sugi karaa dacwadaha ciqaabta ah:**

Caddaymaha xariirka la leh ah ee la adeegsan karo maxkamadda horteeda, xilliga baadhistana u baahan in xoogga la saaro, waxaa ka mid ah oo aan ka xusi karnaa:

1. **Diyaar garow dambi (Preparation of the crime):**

Q. **138/1/A XHC**, waxa ay sheegaysa in wax kastoo qofku uu u isticmaalay in uu ugu diyaar garoobo in uu faldanbiyeed ku galo in ay noqon karto, caddayn isaga ku lid ah, waxaa tusaale ahaan waxaa danbiyada musuqa haddii qofku uu soo daabacdo tiro badan oo ka mid ah **Vouchers** ka iibka ee shirkadaha, isagoo ka dhigaya in ay yihiin caddayn lagu caddeeyo in uu shirkado sax la tacaamulay oo lacagta uu bixiyay ay sifo sharci ah ku baxday.

Haddaba haddii eedaysanaha gurigiisa laga helo dhukumiintiyo noocaas ah, ama shaanbado iyo tiimbarooyin loo adeegsado dhukumiintiyadaas, waxa ay ka dhigantahay in uu jiray diyaargarow uu u diyaargaroobay falkaas hadda loo haysto ee lunsashada hantiyeed ah, waxaana la mid ah dhammaan wax kasta oo marag muujin ah (Exhibit) ah oo eedaysanaha ka dhan ah kuwaas oo muujiniya in eedaysanuhu uu u diyaargaroobay dhamaan wax kasta oo faldanbiyeedkiisa ku fulin lahaa, ama marka uu fuliyo ku raad tiran lahaa ([28]).

2. **Hab-dhaqanka iyo hab-noolaeedka (Previous and Subsequent Condact Q. 138/1/B):** waxaa kaloo caddayn noqon kara hab dhaqanka iyo hab nololeedka qofka ka hor iyo kadib falka.

Haddii qofku intaan shaqadan iyo xoolahan lagu aaminay ka hor uu ku noolaa nolol iska caadi ah laakinse muddo kadib la arkay isaga oo noloshiisi isbadashay oo dhaqaale xoog leh ka muuqdo, dhammaan arrimahaas oo dhan waxa ay noqonayaan caddayn isaga ku lid ah, waxaana caddayn ahaan loo adeegsan karaa **Bank Statements** kiisa si loo muujiyo in dakhliyo badan soo galeen, sidoo kale waxaa la adeegsan karaa wax kasta oo muujinaya

28 Law of Evidence Applicable to british India, Woodroffe & Amir Ali, 6ed1925, P:286

in uu leeyahay hanti guurto ah ama maguurto ah, waxaana lagu caddayn karaa arrimahaas dhukumiintiyo ama markhaatiyo. Eedaysanahana waxaa saran in uu caddeeyo meesha hantidaasi ay ka timid maadama shalay intii aanu shaqadan qaban ka hor uusan haysan hantidan awoodna u lahayn[29]. (من اين لك هذا؟.)

3. **U badin galid dambi (High probability of the commission of the crime 141/1/B)**:

haddii la caddeeyo in qasnadda dawladda lacagi ka maqantahay, sidoo kalena eedaysanuhuna yahay qofkii maamulayay qasnaddaas, qof kale oo la maamulayay oo hantidaas lunsan karayana uusan jirin, waxa ay u badantahay in cidda hantidaas qaadatay ay eedaysanaha tahay, sidaa darteed arrintaasi waa caddayn xoogleh oo eedaysanaha ka dhan noqon karaysa. Sida ay caddayn u noqon kartaba haddii 4 qof oo qoryo wadata Saddex ka mid ah ay **Ak47** wadato, midna uu wato qori faal ah, kadibna ay qof xabbado kuwada furaan qofkiina ay hal xabbo ku dhacdo, oo uu dhinto qofkii, kadibna la caddeeyo xabbada qofka ku dhacday in ahayd faal, taas oo ka dhigan in ay suurtagalnimadeedu sarreyso in qofka wax dilay uu yahay qofkii faalka watay ([30]).

4. **Qiraalka Eedaysanaha kale (Co- accused Confession Q. 146):**

haddii eedaysanayaal badan si wadajir ah loogu wada haysto in ay wada lunsadeen lacag, oo midkood uu bixiyo qiraal uu ku faahfaahinayo sida isaga iyo saaxibadiis lacagta u wada lunsadeen. Qiraalkaasi keligiis kuma koobnanayo ee wuxuu noqonayaa caddayn ku lid ah, xitaa kuwa kale.

5. **Arrimaha laga helay la wadaagayaasha (Things said or done by Conspirator, Q. 140):**

haddii eedaysanayaal badan loo wada haysto in ay maleegeen shirqool lagu lunsanayo hanti dadweyne, ayna dhaceen hantidaas, wax kasta oo midkood dhaho ama uu sameeyo waxa ay noqonaysaa caddayn lid ku ah

---

29 Sarkar, Law of Evidence 21ed 2006, P:905.

30 Law of Evidence by Ratanlal & Dhirajlal, 11ed 1949, P:89

kuwa kale. Tusaale ahaan haddi midkood laga helo taleefankiisa isagoo whatsappka kala hadlaya ka kale oo ay is waydaarsanayan xog ku saabsan lacagahaas, ama habkii ay uga raad tiran lahaayeen danbigaas, iyo wixii la mid ah, waxa ay noqonaysaa arrintaasi caddayn ku lid ah dhamaantood.

6. **Qiraalka (Confession Q. 149 & 68)**

Haddii Eedaysanuhu uu garsoorka hortiisa ka qirto in faldanbiyeedkaas geystay, iyaduna waa caddayn isaga lid ku ah. Waxaa kaloo oo la caddayn karaa haddii uu qof caadiya u qirtay in uu faldanbiyeedkaas geystay. Tusaale haddii uu qof caadiya isaga oo u faanaya uu u qirto in uu xafiiska ka hodmay oo ka tacbaday hanti badan, maantana uu leeyahay guryo iyo gawaadhi farabadan, qofkaasi Maxkamadda horteeda waa ka marag kici karaa arrintaas, caddayntaasina waa mid hoos imaanaysa qiimeynta maxkamadda. Sidoo kale waxaa la mid ah haddii uu baraha bulshada intuu soo fadhiisto uu arrintaas ka qirto, waxaa maxkamadda horteeda caddayn ahaan qiraalkiisas loo adeegsan karaa Video uu duubay ama Post uu qoray ([31]).

7. **Xoojin caddeyn (Accomplice Witness Q. 199):**

Haddii Eedaysanayaal badan loo wada haysto in ay faldanbiyeedka wada galeen, laakinse markii lasoo gaarey marxaladda difaaca ee ku xusan qodobka 116XHCS uu eedaysane ka mid ah eedaysanayasha uu sheego, in uusan isagu danbiga gelin laakinse uu ka marag kacayo in hebel iyo hebel ay lacagtaas qaateen, ayna u qaateen sidaas iyo sidaas, kuna isticmaaleen waxaas iyo waxaas, xilligaas caddaynta iyo maragfurka eedaysanahaasi uu bixiyo maxkamaddu waa qaadan kartaa, waxa ayna noqonaysaa caddayn ku lid ah eedaysanayasha kale ee uu ku maragfuray, walow caddayntaasi ay tahay mid daciif ah oo aan keligeed istaagi karin oo kabid iyo xoojin markasta u baahan.

8. **Aqbalaadda (Admission Q. 147):**

31 Fiiri:

Confessions under the Indian Evidence Act, by Viveka Kumar, P: 18

Admission and confession, by Javaid Talib, p:23.

Haddii eedaysanuhu uusan danbiga qiran laakinse uu si uun u bixiyo xog laga fahmi karayo in uu danbiga galay ama qariino ku tusinaysa in uu danbiga galay, xaaladdaas arrintaas waxaa loo tixgelinayaa caddayn isaga ku lid ah.

9. **Keydka Guud (Public Record, Q.152):**

Dhammaan dhukumiintiyada iyo xogaha ay kaydiyaan hay'adaha dawladda ee ku shaqada leh waxa ay noqon karaan caddaymo lagu caddeeyo dambi maaliyadeed, waxaana ka mid ah dhukumiintiyadaas dhammaan xogaha lagu keydiyo System yada ay hay'adaha maaliyaddu ku shaqeeyan, sida kuwa dakhli aruurinta ee Wasaaradda Maaliyadda iyo Bangiga Dhexe ama kuwa hay'ad kasta goonideeda u leeyahay ee quseeya maaliyadda. Waxaa kale oo ka mid ah xogaha rasmiga ee uu soo saaro Xafiiska Hanti Dhawraha Guud ee qaranku, iyo dhamaan xog kasta oo leh dabeecad maaliyadeed, oo ay saarto hay'ad awood u leh. Inta badan dhukumiintiyadana waxaa loo adeegsadaa keliya in lagu caddeeyo in danbi dhacay, oo lacagi maqantahay, laakinse ma sheegaan qofkii ay lacagtaasi ku maqantahay, sidaa darteed waxaa loo cuskan karaa caddayn ka dhan ah eedaysanaha si loo caddeeyo in danbi dhacay, laakinse dhinaca ah eedaysanuhu ma yahay kii danbigaas galay ee lacagta maqan qaatay iyada waxaa loo cuskadaa caddaymaha kale ([32]).

10. **Aragtida Khabiirka (Expert Opinion, Q. 157):**

Maadama danbiyada Maaliyadda ay la xiriiraan xisaabaad, garsoorkuna uusan khibrad u lahayn dhinacaas, sidoo kalena uusan lahayn awood cilmiyeed oo uu ku fahmo caddaymaha ku saabsan maaliyadda iyo xisaabaadka, waxaa marar badan lagama maarmaan ah in la cuskado khubaro dhinaca maaliyadda iyo xisaabaadka ah, si ay u caddeeyaan marka hore in lacagi maqantahay iyo qasnadda ay lacagtaasi ka maqantahay, si loo ogaado cidda masuuliyadeeda iska leh, sidoo kalena mararka qaar laga yaabo in ay maxkamadda u caddeeyan in eedaysanuhu uu isticmaalay waddooyin khiyaamo ah si uu uga dhigo lunsashada mid martay dhammaan waddooyinkii saxda ahaa.

Aragtida Khabiirka farsamo maxkamaddu waxa ay ku dhegaysan kartaa

32 Law of Evidence Applicable to british India, Woodroffe & Amir Ali, 6ed1925, P:357.

sidii marag ahaan oo kale, sidoo kalena mararka qaar waxa ay ku kaaftoomi kartaa qoraalka uu sameeyo ([33]). Dadkaas waxay noqon karaa kuwa AML khabiiro ku ah oo ka diiwan-gashan **ACAMS (Certified AML Specialist ama CPA, CFA).**

11. **Dabeecadda Eedaysanaha (Bad Character, Q.162):**

Sumcad xumada eedaysanaha iyo in uu yahay mid ku caanbaxay musuqa iyo wax isdaba marintu laftigeedu waa qariino iyo caddayn ku lid ah, oo loo cuskan karo mararka qaar, sida qodobku sheegayo. Tusaale haddii eedaysanaha hadda loo haysto in uu lunsaday hanti dadweyne, ay horey ugu caddaatay in uu shirkad gaar loo leeyahay oo uu u shaqayn jiray uu ka lunsaday hanti, laguna caddeeyo xukun maxkamadeed oo arrintaas ku helay (qodobada **145 iyo 13/3 XHC**), ama waddo kale sida in shirkaddaasi ay caddayso in ay shaqada uga eriday sababtaas darteeda, dhamaan arrimahaas oo dhan waa caddayn isaga ku lid ah, oo muujinaysa in eedaysanuhu uu leeyahy habdhaqan hore oo dambi maaliyadeed, haddana ay suurta gal ka tahay in uu falkan ku kaco ([34]).

Dhammaan arrimahaas oo dhami waa caddaymo qariino ah (**Relevent Facts**) oo ay tahay baarayaasha iyo Xeer Ilaaliyuhu in ay xoogga saaran marka ay ku guda jiraan marxaladda caddaymo uruurinta iyo baarista. Sidoo kale dhammaan arrimahaas waxaa lagu sugi karaa, dhukumiinti ahaan ama marag maxkamadda horteeda yimaadda oo ka marag kaca jiritaanka qaraa'intaas.

Danbiyada Maaliyadda waa sahlantahay in la caddeeyo in danbi dhacay oo lacag la lunsaday, lacagtaasina ay ka maqantahay qasnadda dawladda, laakinse waxaa markasta culayska ugu badan ka yimaadda in la caddeeyo in eedaysanaha maxkamadda hortaagan uu yahay qofkii danbigaas galay ee lacagta lunsaday. Maxkamadduna mid kamida qaraa'intaas keligeed

33 Fiiri buugta kala ah:

Treatise on the Anglo-American System of Evidence in Trials at Common Law/ Wigmore J/ Third Edition 1940/ V: 3 P: 628.

Sarkar, Law of Evidence 21ed 2006, P:846

34 Law of Evidence by Ratanlal & Dhirajlal, 11ed 1949, P:139.

kuma go'aan gaari karto mana cuskan karto ee waxaa ku waajib ah in ay hesho caddaymo kale oo is kabaya ama is xoojinaya (**Corroboration**).

Qodobada **110 iyo 163 XHCS** waxa ay sheegaan in ay qasab tahay in markasta la caddeeyo **si aan shaki macquul ahi ku jirin (Beyond Reasonable Doubt)** in faldanbiyeed dhacay eedaysanuhuna uu yahay kii faldanbiyeedkaas galay, haddaba maxaa loola jeedaa si aan shaki macquul ahi ku jirin?

Xeerku ma uusan fasirin waxa uu ula jeedo shaki macquul ah, sidoo kalena ma aanan helin go'aan garsoor oo garsoorkeenu uu horey arrintaas ugaga hadlay, laakinse maadama xeerkena Habka Ciqaabta gaar ahaan buuggiisa sadexaad ee caddaymuhu uu kasoo jeedo xeerkii caddaymaha ee Hindiya 1872 ([35]), kaas oo asalkiisuna ah mid kasoo jeeda Ingiriiska oo gumeystihii Ingiriisku uu u qoray xilligii uu waddankaas joogay, innaga soomaali ahaana uu ku dhaqayay Gobolada waqooyi markii uu joogay, sidaa darteed waxaan dib ugu laabtay garsoorka Hindida iyo Ingiriisku sida ay u fasireen arrintan iyo waxa ay ula jeedaan shaki macquula, waxaana arkay in Hindiya iyo Ingiriiska iyo inta badan waddama Common Law-ga ahi uu arrintan saldhig ugu yahay dacwadda uu horey uga garnaqay garsooraha Ingiriiska ah ee **Lord Denning** markii uu ka garnaqayay dacwadda **Miller Vs Minister of Pensions** [1947] ALL ER 372 ([36]) kaas oo yidhi:

**" In la caddeeyo si aan shaki macquul ahi ku jirin kama dhigna lamana macne ahan in loo caddeeyo si aan wax shaki ahi ku jirin oo gebi ahaanba meesha laga saaro shakiga oo dhan, waayo haddii la dhaho shaki kasta intuu doonaba hala ekaadee hala aqbalo, waxa ay noqonaysaa in shakiyo liita la cuskado, sidaasna sharciga iyo xeerarku ay ku guuldaraysanayaan in ay bulshada badbaadiyaan oo ka qabtaan**

35 Fiiri: Commentary on the Criminal Procedure Code, Iqbal Singh & Mohamed Hassan Said, P: VI.

36 Fiiri buugta kala ah:

Treatise on the Anglo-American System of Evidence in Trials at Common Law/ Wigmore J/ Third Edition 1940/ V: 3 P: 416.

Sarkar, Law of Evidence 21ed 2006, P:1745.

Cross on Evidence, 4Th Edithion 1974 P: 184.

**danbiga iyo danbiilayaasha, laakinse haddii caddaynta eedaysanaha ka dhanka ahi ay tahay mid xoog badan, taas oo shakiga keliya ee jira uu yahay mid suurtagalnimadiisu aad u fogtahay, goortaas waxaa la odhan karaa dacwaddaas waxaa la caddeeyay si aan shaki macquul ahi ku jirin, laakinse marnaba intaa wax ka yar lama aqbali karo kumana filla in qof danbi loogu helo”.** Halbeeggan ayaana noqday midka loo cuskado fasiraadda shakiga macquulka ah.

Haddaba marka ay maxkamaddu ka go’aan gaarayso dacwadaha Maaliyadda waxa ay u baahantahay oo keliya in ay si aan shaki macquul ahi ku jirin ugu qanacdo in faldanbiyeed maaliyadeed ahi uu dhacay sidoo kalena eedaysanuhu u yahay qofkii falkaas galay, iyada oo cuskanaysa caddaymaha iyo qaraa’inta lasoo hordhigay. Sidoo kale markasta oo baarista danbiyada Maaliyadeed waxaa lagama maarmaan ah in meesha ka saaran shaki kasta oo macquul ah.

## 7. DUL-DULEEDA SHARCI IYO KUWA DHAQAN-GALIN EE LA XARIIRA LA DAGALAANKA DAMBIYADDA MAALIYADDA:

Xeerarka Maaliyadda waxay la xariiraan dambiyo dabeecado gaar ah, isla-markaasna baaristooda iyo xukunadooda ay leeyihiin axkaam gaar ah sida soo celinta hantida dambiga laga faa’iidey, maamulka hantida ee marxladaha kala duwan waana dambiyo caalami ah oo u baahan halbeegyo iyo wadar xeereed oo wada socda, sidaas darteed intii aan barista ku jirey waxaa isoo baxay dul-duleelo sharci oo la xariira mowdca, waxaa kamid ah:

### 7.1. Xeerka Ciqaabta guud:

Ma jiro Buug gaar ah oo XCS uu si gaar ah ugu nidaaminayo dambiyada maaliyadda laga galo, waxa uuna xeerka ku kala asteyey meelo kala duwan sida dambiyada uu galo Sarkaalka guud sida lunsashada hantida, laaluushka iyo dambiyada lidka ku ah dhaqanka iyo akhlaaqda sida ka ganacsiga maan-dooriyaha iyo Amniga sida qeybo kamid ah khiyanada, kuwo Hantida lid ku ah sida tuugada iyo dhaca, sidaas darteed ma fududa in isku si loo akhriyo waana sababta keentay kuwo gaar ah loo arko in ay yihiin dambi asal ah (Predicate crmes).

## 7.2. Xeerka AML/CFT 2016:

Xeerka ma qeexaya lacagaha danabeysan (**Digital Currencies**) sida Bitcoin iyo Litecoin iyagoo isticmalayaa Cryptocurrencies taas oo u saamaxayso in ay diraan lacagaha iyada oo aan la ogaan Heybtooda, aysana awoodin Hay'adaha **LEA** in ay korjoogteeyaan, sidoo kale kuma xusna dhammaan hababka casriga ah ee lacag-dhaqista.

Sidoo kale Xeerka **AML/CFT** laguma nidaamin arrimaha la xariira Real estate sector iyo Ururada aan faa'iido doonka ahayn (NPOS) kuwaas oo muhiim u ah la dagaalanka **ML/FT**.

Sidoo kale Tarjumaadda Af-ka Soomaaliga ah waxaa ku jiro qaladaad dhanka erey bixinada taas oo sababtay is qab-qabsiga awoodeed ee Hay'adaha sida Freezing oo lagu fasirey xayiraad, luuqadda uu ku qoranyahay ma aha mid sharci.

Xeerka la dagaalanka lacag dhaqida iyo ka hortaga maal-galinta argagixisada **AML/CFT** iyo Xeerka Cunaqabataynta maaliyadeed cayiman waxay awoodaha shaqada siinayaan Maxkamadaha rayidka halka isla awoodaas uu Xeerka la dagaalanka argagixisada ay siinayaan Maxkamadaha Maxkamadda Ciidanka, taas oo ah in Xeerarka yihiin kuwo iska hor imaanaya.

Awoodaha Xeerka lagu dhisay Guddiga madaxa-banaan ee la dagaalanka musuq-maasuqa ee maamulka hantida dambiga la helay waxay iyagana ka hor-imaanayan Xeerka AML/CFT oo Xeer-ilaaliyaha siinaya awoodahaas iyo dhisidda Xafiiska Xafiiska maamulka Hantida (**Asset recovery management office**). Sidoo kale Xeerka la dagaalanka argagaxisada waxaa ku jiro Hay'ada baariseed oo aan qeyb ka noqon karin dambi argagixiso.

Dowladda Soomaaliya malaha qeybo kamid ah Xeerarka muhiimka ah dhaqan-galinta Xeerka AML/CFT, Heshiisyada la xariira ciribtirka musuqa iyo Dhammaan Heshiisyada caalamiga ah ee la-dagaalanka dambiyada maaliyadda iyo soo jeedinada FATF, waxaana kamid ah Xeerarkaas:

1. Xeerka isu-celinta maxaabita iyo dambiilayaasha oo Dastuurka farayo Dastuurka KMG-JFS (**Extradition of the accused and criminals Q. 36/2-aad DKMG**).

2. Xeerka Xakameynta ka ganacsiga iyo dhoofinta Hubka

3. Xeerka mamnuucidda ganacsiga hubka waaweyn (**Weapon of mass destruction (WMD)**
4. Sharciga kaalmada iskaashiga sharci (**Matual legal assistance- MLA** -).
5. Sharciga dambiyada Internetka ama danabaysan (**Cyber crime law**).

### 7.3. Dul-duleedyada dhanka dhaqan-galinta ah Xeerarka Maaliyadda:

Dul-duleedyadaan ma aha kuwo sharciga la xariira balse waxay la xariiraan dhaqan-galintiisa waxaana kamid ah:

1. Kala duwanaanshaha Luuqadda iyo la akhrin la'aan Xeerka asalka ah waxuu sababay dhaqan-galinta fahan iyo dabaqitaan aan sax ahayn gaar ahaan Xeerarka Habka Ciqaabta. Tusaale fasiraada erayada (pleed guilty/ confession) iyo u caddeynta si aanu ku jirin shaki macquul ah Q. 163 XHC.

2. Dabaqitaan la'aanta la wareegidda Hantida iyo maamulka hantida (**consifiction & asset recovery**) ee Xukunada iyo go'aanada Garsoorka, waxuu meesha ka saaray jiritaanka kobaca Qaanuuneed iyo yareynta qataraha dambiyada maaliyadda.
3. Ku soo koobista dambiyada lacag dhaqidda ee dambiyo gaar ah ee Xeerka Ciqaabta, gaar ahaan XXG waxuu sabababay in dambiyo gaar ah loo fahmo dambi asal ah.
4. Is waydaarsi la'aanta xogta ee Hay'adaha dowladda waxay keentay qaladaad waxaana tusaale u ah **NRA** ee ay sameysay Hay'adda FRC.
5. Muwaadiniinta oon lahayn xog keydsan (**NID**) waxay sahashay in Qofka aan laga hayn xog sugan, uuna samayn karo dhowr dukumiinti.
6. Hay'adda FRC awood uma laha ay kula socoto dhaq-dhaqaayada Maaliyadeed, waxay ku egtahay waxii loo soo gudbiyo.

# 8. SOO JEEDINO:

Baaritaan kooban ee ku saabsan dambiyada maaliyadda waxaan soo jeedinaynaa:

1. In wax-kabaddel lagu sameeyo Xeerarka la xariira dambiyada maaliyadda la is waafajiyo iyaga lana waafajiyo Heshiisyada Caalamiga ah iyo halbeegyada Hay'adaha maaliyadda.

2. In lasoo saaro Xeerarka Muhiimka u ah dhaqan-galinta iyo ciribtirka dambiyda AML/CFT iyo musuq-maasuqa ee aan kor kusoo sharaxnay.
3. In si mideysan lagu tababaro AML/CFT saraakiisha Maxkamadaha iyo Hay'adaha barista.
4. In Hay'adaha dowladda ee ay kamid yihiin is gaarsiinta, arrimaha dibadda, Maxkamadaha ay qayb-noqdaan kulmada NAMLC ee xog is dhaafsiga.
5. In la kobciyo cil-baarisyada iyo doodaha, Tababarrada la xariira dambiyada AML/CFT.

## Tix-raac:

Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed, X.L. 5 ee 16 Decemper 1962-dii ee dhaqan-galay, 3 apriil 1964.

1. Xeerka Habka Ciqaabta Soomaaliyeed, X.L. 1 ee 1 juun 1963.

2. Sharci L 81 soo baxay 9 November 1975 wax ku kordhin Xeerka Habka Jinaaiga ah, faafinta rasmiga ah, sannadka 3aad, Muqdisho 30 November 1975 L4, R, 11, Madbacadda Muqdisho.

3. Xeerka lacag-dhaqista iyo maal-galinta argagixisada, Xeer Lr 01/21/02/2016.

4. Xeerka Xafiiska Hantidhowrka, Sh lr 14 soo baxay 10 septeeber 2023.

5. Hagitaan ku saabsan Dhaqdhaqaaqa Shakiga leh ee Hay'adaha Maaliyadeed July 2018.

6. .State of the Economy report, an annual report to the president by the National economic council on economic issues shaping Somalia's future prosperity, National Economic

Council, November 2023-Volume-1.

7. Qaamuuska Afka Soomaaliga, diyaarintii Annarita Puglielli iyo Cabdalla Cumar Mansuur, Daabacaadii RomaTrE-Press 2012.

8. Criminal Investigation, Ninth edition, Kären M. Hess, Ph.D. Christine Hess Orthmann, M.S. Daabacaadda Delmar Cengage Learing, 2010.

9. FINANCIAL INVESTIGATIONS "Addressing Financial Gains Amassed through Illegal Means in Africa" INSTITUTE FOR SECURITY STUDIES ENHANCING AFRICA'S REPONSE TO TRANSNATIONAL ORGANISED CRIME (ENACT).

10. The penal code of the Somalia Democratic Repuplic wthi cases, commentary and examples by Martin R. Ganzglass bogga 545, daabacaadda Rutgers University press, new Brunswick, New Jesrsey.

11. Certified anti-money laundering specialist study guide, version 6.48, ACAMS.

12. Law of Evidence Applicable to British India, Woodroffe & Amir Ali, 6ed 1925, P:286.

13. Confessions under the Indian Evidence Act, by Viveka Kumar, P: 18

14. Admission and confession, by Javaid Talib, p: 23.

15. Treatise on the Anglo-American System of Evidence in Trials at Common Law/ Wigmore J/ Third Edition 1940/ V: 3.

16. Commentary on the Criminal Procedure Code, Iqbal Singh & Mohamed Hassan Said.

17. Weeks-Brown, Rhoda. "Cleaning Up: Countries are advancing efforts to stop criminals from laundering their trillions." Finance & Development, vol. 55, no. 4, Dec. 2018.

18. World Drug report 2023, UNODC

19. NRA on ML/TF **2020, 2022**

20. Docoding AMl Typologies: What no one talks about, August 18,2023, Tookitaki.

التهرب الضريبي، فضلية عائيشة، رسالة ماجستير ١٢.

*****DHAMMAAD*****

## CILMI-BAARAYAASHA

- Garsoore. Maxamed Cumar Axmed
- Dr. Ahmed Ali M. Khayre, PhD
- Dr. Xuseen Cabdi Cilmi
- Avv. Arafat Ali Mohamed
- Garsoore. Cali Sh. Aadan Yusuf
  ( Cali Somaali )